Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Hantidhawrka Guud

# Warbixinta Sannadlaha ee Baarista u Hoggaansanaanta Sharciga ee Sannad Maaliyadeedka Dhammaaday 31da Diseembar 2020

Nofeembar, 2021

# Warbixinta Sannadlaha ee Baarista u Hoggaansanaanta Sharciga ee Sannad-maaliyadeedka Dhammaaday 31da Diseembar 2020

Nofeembar, 2021

# Tusmo


Liiska Shaxda ..... iii

Ereyada la soo Gaabiyey ..... ix

Farriinta Hantidhawraha Guud ..... xi

Gogoldhig ..... xiii

Dulmar Guud ..... 1

Hordhac ..... 7

Waxyaabaha la Baaray ..... 9

Ujeeddooyinka iyo Baaxadda Baarista ..... 11

Qodobbada Baarista ..... 13

Hubinta Gudaha ..... 15

Khaladaadka Baarista & Talo soo jeedinnada ..... 17

**I. HAY'DAHA MAAMULKA ..... 19**

1. Xafiiska Madaxweynaha ..... 21
2. Golaha Shacabka ..... 25
3. Aqalka Sare ..... 33
4. Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha ..... 41
5. Wasaaradda Arrimaha Dibadda ..... 51
6. Wasaaradda Maaliyadda ..... 61
7. Xafiiska Xisaabiyaha Guud ..... 71
8. Xarunta Warbixinnada Maaliyadeed ..... 75
9. Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga, iyo Horumarinta Dhaqaalaha ..... 81
10. Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed ..... 91

**II. HAY'ADAHA AMNIGA ..... 95**

11. Wasaaradda Gaashaandhigga ..... 97
12. Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed ..... 105

13. Wasaaradda Amniga Gudaha ....... 111
14. Ciidanka Booliiska Soomaaliyeed ....... 121
15. Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka ....... 129
16. Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda ....... 135

**III. HAY'ADAHA DHAQAALAHA ....... 139**

17. Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta ....... 141
18. Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska ....... 143
19. Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka ....... 149
20. Wasaaradda Howlaha Guud, Dib-u-dhiska iyo Guryeynta ....... 153
21. Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada ....... 161
22. Hay'adda Duulista Rayidka Soomaaliyeed ....... 165

**IV. HAY'ADAHA ADEEGGA BULSHADA ....... 171**

23. Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare ....... 173
24. Wasaaradda Dhalinyarada iyo Ciyaaraha ....... 181

**V. MAAMULKA GOBOLKA BANAADIR ....... 189**

25. Maamulka Gobolka Banaadir ....... 191

**VI. SAFAARADAHA ....... 197**

1. Safaradda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee Pretoria, Koonfur Afrika ....... 199
2. Safaaradda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee Ankara, Turkiga ....... 211
3. Safaaradda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee Kampala, Uganda ....... 223

Gunaanad ....... 231

# Liiska Shaxda


**Shax:** Qodobbada iyo waxyaalaha la baaray 13

**1. Xafiiska Madaxweynaha** **21**

**Shaxda 1.1** Qandaraasyada aan laga soo diiwaangelin XHGQ 22

**Shaxda 1.2** Khaladaadka baarista sannadkii 2019 23

**Shaxda 1.3** Khaladaadka baarista sannadkii 2018 23

**2. Golaha Shacabka** **25**

**Shaxda 2.1** Kharashaadka socdaalka aan lahayn caddeymo ku filan 25

**Shaxda 2.2** Kharashaadka caafimaadka ee aan lahayn caddeymo ku filan 26

**Shaxda 2.3** Diiwaannada la xiriira iibka oo aan baarista loo soo bandhigin 28

**Shaxda 2.4** Furashada koontooyin bangi oo aan hay'addu oggolaansho u haysan 29

**Shaxda 2.5** Khaladaadka baarista sannadkii 2019 31

**Shaxda 2.6** Khaladaadka baarista sannadkii 2018 31

**3. Aqalka Sare** **33**

**Shaxda 3.1** Kharashaadka aan lahayn caddeymo ku filan 33

**Shaxda 3.2** Kharashaadka caafimaadka ee aan lahayn caddeymo ku filan 33

**Shaxda 3.3** Diiwaannada la xiriira iibka oo aan baarista loo soo bandhigin 35

**Shaxda 3.4** Furashada koontooyin bangi oo aan hay'addu oggolaansho u haysan 38

**Shaxda 3.5** Khaladaadka baarista sannadkii 2019 40

**Shaxda 3.6** Khaladaadka baarista sannadkii 2018 40

**4. Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha** **41**

**Shaxda 4.1** Kharashaadka aan lahayn caddeymo ku filan 41

**Shaxda 4.2** Kharashaadka safarka ee aan lahayn caddeymo ku filan 42

**Shaxda 4.3** Xaddiga iibka oo aan loo raacin sida sharciga iibku qabo 43

**Shaxda 4.4** Heshiisyada aan laga soo diiwaangelin XHGQ 45

**Shaxda 4.5** Gaadiidka hay'adda la baaray 47

**Shaxda 4.6** Furashada koontooyin bangi oo aan hay'addu oggolaansho u haysan 48

Shaxda 4.7 Deeqaha hay'addu dibadda ka heshay oo aan la marin nidaamka maaliyadda dowladda 50

Shaxda 4.8 Khaladaadka baarista sannadkii 2019 50

Shaxda 4.9 Khaladaadka baarista sannadkii 2018 50

**5. Wasaaradda Arrimaha Dibadda 51**

Shaxda 5.1 Kharashaadka aan lahayn caddeymo ku filan 52

Shaxda 5.2 Miisaaniyad la kala wareejiyey oggolaansho la'aan 52

Shaxda 5.3 Diiwaannada la xiriira iibka oo aan baarista loo soo bandhigin 54

Shaxda 5.4 Heshiisyada aan laga soo diiwaangelin XHGQ 55

Shaxda 5.5 Furashada koontooyin bangi oo aan hay'addu oggolaansho u haysan 57

Shaxda 5.6 Deeqaha hay'addu dibadda ka heshay oo aan la marin nidaamka maaliyadda dowladda 58

Shaxda 5.7 Khaladaadka baarista sannadkii 2019 59

Shaxda 5.8 Khaladaadka baarista sannadkii 2018 60

**6. Wasaaradda Maaliyadda 61**

Shaxda 6.1 Kharashaadka aan lahayn caddeymo ku filan 61

Shaxda 6.2 Kharashaadka safarka ee aan lahayn caddeymo ku filan 62

Shaxda 6.3 Hab dukaamaysi oo baalmarsan nidaamka Iibka Qaranka 63

Shaxda 6.4 Heshiisyada aan laga soo diiwaangelin XHGQ 64

Shaxda 6.5 Qandaraasyo si sharciga baalmarsan loo bixiyay 66

Shaxda 6.6 Gaadiidka hay'adda la baaray 67

Shaxda 6.7 Khaladaadka baarista sannadkii 2019 69

Shaxda 6.8 Khaladaadka baarista sannadkii 2018 70

**7. Xafiiska Xisaabiyaha Guud 71**

Shaxda 7.1 Kharashaadka aan lahayn caddeymo ku filan 71

Shaxda 7.2 Gaadiidka hay'adda la baaray 73

Shaxda 7.3 Khaladaadka baarista sannadkii 2019 74

Shaxda 7.4 Khaladaadka baarista sannadkii 2018 74

**8. Xarunta Warbixinnada Maaliyadeed 75**

Shaxda 8.1 Kharashaadka safarka ee aan lahayn caddeymo ku filan 75

Shaxda 8.2 Heshiisyada aan laga soo diiwaangelin XHGQS 77

9. **Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga, iyo Horumarinta Dhaqaalaha** **81**

**Shaxda 9.1** Kharashaadka aan lahayn caddeymo ku filan 82

**Shaxda 9.2** Heshiisyada aan laga soo diiwaangelin XHGQ 84

**Shaxda 9.3** Furashada koontooyin bangi oo aan hay'addu oggolaansho u haysan 87

**Shaxda 9.4** Deeqaha hay'addu dibadda ka heshay oo aan la marin nidaamka maaliyadda dowladda 88

**Shaxda 9.5** Khaladaadka baarista sannadkii 2019 89

**Shaxda 9.6** Khaladaadka baarista sannadkii 2018 89

10. **Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed** **91**

**Shaxda 10.1** Kharashaadka aan lahayn caddeymo ku filan 91

**Shaxda 10.2** Heshiisyada aan laga soo diiwaangelin XHGQ 93

**Shaxda 10.3** Khaladaadka baarista sannadkii 2018 94

11. **Wasaaradda Gaashaandhigga** **97**

**Shaxda 11.1** Kharashaadka safarka ee aan lahayn caddeymo ku filan 97

**Shaxda 11.2** Heshiisyada aan laga soo diiwaangelin XHGQ 99

**Shaxda 11.3** Gaadiidka hay'adda la baaray 101

**Shaxda 11.4** Furashada koontooyin bangi oo aan hay'addu oggolaansho u haysan 102

**Shaxda 11.5** Khaladaadka baarista sannadkii 2019 104

**Shaxda 11.6** Khaladaadka baarista sannadkii 2018 104

12. **Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed** **105**

**Shaxda 12.1** Kharashaadka aan lahayn caddeymo ku filan 105

**Shaxda 12.2** Kharashaadka safarka ee aan lahayn caddeymo ku filan 105

**Shaxda 12.3** Hab dukaamaysi oo baalmarsan nidaamka Iibka Qaranka 107

**Shaxda 12.4** Heshiisyada aan laga soo diiwaangelin XHGQ 108

**Shaxda 12.5** Khaladaadka baarista sannadkii 2019 110

**Shaxda 12.6** Khaladaadka baarista sannadkii 2018 110

13. **Wasaaradda Amniga Gudaha** **111**

**Shaxda 13.1** Kharashaadka aan lahayn caddeymo ku filan 111

**Shaxda 13.2** Xaddiga iibka oo aan loo raacin sida sharciga iibku qabo 113

**Shaxda 13.3** Heshiisyada aan laga soo diiwaangelin XHGQ 115

**Shaxda 13.4** Gaadiidka hay'adda la baaray 116

**Shaxda 13.5** Furashada koontooyin bangi oo aan hay'addu oggolaansho u haysan 117

**Shaxda 13.6** Deeqaha hay'addu dibadda ka heshay oo aan la marin nidaamka maaliyadda dowladda 118

**Shaxda 13.7** Khaladaadka baarista sannadkii 2019 120

**14. Ciidanka Booliiska Soomaaliyeed** **121**

**Shaxda 14.1** Kharashaadka safarka ee aan lahayn caddeymo ku filan 121

**Shaxda 14.2** Khaladaadka baarista sannadkii 2019 127

**Shaxda 14.3** Khaladaadka baarista sannadkii 2018 128

**15. Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka** **129**

**Shaxda 15.1** Kharashaadka aan lahayn caddeymo ku filan 129

**Shaxda 15.2** Heshiisyada aan laga soo diiwaangelin XHGQ 131

**Shaxda 15.3** Khaladaadka baarista sannadkii 2019 133

**Shaxda 15.4** Khaladaadka baarista sannadkii 2018 133

**16. Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda** **135**

**Shaxda 16.1** Kharashaadka safarka ee aan lahayn caddeymo ku filan 135

**Shaxda 16.2** Gaadiidka hay'adda la baaray 137

**Shaxda 16.3** Khaladaadka baarista sannadkii 2019 138

**Shaxda 16.4** Khaladaadka baarista sannadkii 2018 138

**17. Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta** **141**

**Shaxda 17.1** Khaladaadka baarista sannadkii 2019 142

**18. Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska** **143**

**Shaxda 18.1** Kharashaadka aan lahayn caddeymo ku filan 144

**Shaxda 18.2** Kharashaadka safarka ee aan lahayn caddeymo ku filan 144

**Shaxda 18.3** Heshiisyada aan laga soo diiwaangelin XHGQ 146

**19. Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka** **149**

**Shaxda 19.1** Heshiisyada aan laga soo diiwaangelin XHGQ 150

**20. Wasaaradda Howlaha Guud, Dib-u-dhiska iyo Guryeynta** **153**

**Shaxda 20.1** Kharashaadka aan lahayn caddeymo ku filan 153

**Shaxda 20.2** Heshiisyada aan laga soo diiwaangelin XHGQ 155

**Shaxda 20.3** Gaadiidka hay'adda la baaray 157

**Shaxda 20.4** Deeqaha hay'addu dibadda ka heshay oo aan la marin nidaamka maaliyadda dowladda 158

**21. Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada 161**

**Shaxda 21.1** Khaladaadka baarista sannadkii 2019 163

**Shaxda 21.2** Khaladaadka baarista sannadkii 2018 163

**22. Hay'adda Duulista Rayidka Soomaaliyeed 165**

**Shaxda 22.1** Kharashaadka aan lahayn caddeymo ku filan 165

**Shaxda 22.2** Kharashaadka safarka ee aan lahayn caddeymo ku filan 165

**Shaxda 22.3** Diiwaannada la xiriira iibka oo aan baarista loo soo bandhigin 167

**Shaxda 22.4** Heshiisyada aan laga soo diiwaangelin XHGQ 168

**Shaxda 22.5** Khaladaadka baarista sannadkii 2019 169

**Shaxda 22.6** Khaladaadka baarista sannadkii 2018 169

**23. Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare 173**

**Shaxda 23.1** Kharashaadka aan lahayn caddeymo ku filan 174

**Shaxda 23.2** Diiwaannada la xiriira iibka oo aan baarista loo soo bandhigin 175

**Shaxda 23.3** Heshiisyada aan laga soo diiwaangelin XHGQ 177

**Shaxda 23.4** Khaladaadka baarista sannadkii 2019 179

**Shaxda 23.5** Khaladaadka baarista sannadkii 2018 179

**24. Wasaaradda Dhalinyarada iyo Ciyaaraha 181**

**Shaxda 24.1** Kharashaadka aan lahayn caddeymo ku filan 182

**Shaxda 24.2** Kharashaadka safarka ee aan lahayn caddeymo ku filan 182

**Shaxda 24.3** Lacago la bixiyey 182

**Shaxda 24.4** Heshiisyada aan laga soo diiwaangelin XHGQ 184

**Shaxda 24.5** Furashada koontooyin bangi oo aan hay'addu oggolaansho u haysan 186

**Shaxda 24.5** Deeqaha hay'addu dibadda ka heshay oo aan la marin nidaamka maaliyadda dowladda 187

**25. Maamulka Gobolka Banaadir 191**

**Shaxda 25.1.A** Kharashaadka aan lahayn caddeymo ku filan 191

**Shaxda 25.1.B** Kharashaadka aan lahayn caddeymo ku filan 192

**Shaxda 25.2** Kharashaadka safarka ee aan lahayn caddeymo ku filan 192

**Shaxda 25.3** Heshiisyada aan laga soo diiwaangelin XHGQ 194

**Shaxda 25.4** Khaladaadka baarista sannadkii 2019 196

**Shaxda 25.5** Khaladaadka baarista sannadkii 2018 196

**1. Safaradda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee Pretoria, Koonfur Afrika 199**

**Shaxda 1.1** Kharashaadka aan lahayn caddeymo ku filan 202

**Shaxda 1.2** Heshiisyada aan laga soo diiwaangelin XHGQ 203

**Shaxda 1.3** Gaadiidka hay'adda la baaray 205

**Shaxda 1.4** Furashada koontooyin bangi oo aan hay'addu oggolaansho u haysan 206

**2. Safaaradda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee Ankara, Turkiga 211**

**Shaxda 2.1** Heshiisyada aan laga soo diiwaangelin XHGQ 215

**Shaxda 2.2** Gaadiidka hay'adda la baaray 216

**Shaxda 2.3** Miisaaniyad la kala wareejiyey oggolaansho la'aan 217

**3. Safaaradda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee Kampala, Uganda 223**

**Shaxda 3.2** Miisaaniyad la kala wareejiyey oggolaansho la'aan 226

# Ereyada la soo Gaabiyey

| Soo-gaabin | Ujeeddo |
|---|---|
| AFROASAI | African Organization of Supreme Audit Institutions |
| AFROSAI-E | African Organization of English-speaking Supreme Audit Institutions |
| ARABOSAI | Arab Organization of Supreme Audit Institutions |
| BFS | Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya |
| BJFS | Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya |
| DFS | Dowladda Federaalka Soomaaliya |
| DXDF | Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka |
| INTOSAI | International Organization of Supreme Audit Institutions |
| ISSAI | International Standards of Supreme Audit Institutions |
| JFS | Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya |
| Lr. | Lambar |
| TCC | Tax Compliance Certificate |
| TIN | Tax Identification Number |
| Tr. | Tirsi |
| TSA | Treasury Single Account |
| XHGQ | Xafiiska Hantidhawrka Guud ee Qaranka |
| XXG | Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud |

# Farriinta Hantidhawraha Guud



"Dhaqan-galinta wax-ku-oolka ah ee shuruucda, xeerarka iyo hannaanka la isku waafaqsan yahay ee la xiriira maareynta hantida guud waxa ay keenaysaa in sida ugu habboon loo adeegsado kheyraadka dalka taas oo ay ka dhalan karto ku guulaysiga Yoolasha Horumarka Waara (Sustainable Development Goals)."

**Md. Maxamed M. Cali "Afgooye"**
Hantidhawraha Guud, JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

Xafiiska Hantidhawrka Guud

جمهورية الصومال الفيدرالية

ديوان المراقبة العامة

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

Office of the Auditor General

Tixraac: XHG/HG-172/2021 Taariikh: 10/11/2021

Xafiiska Madaxweynaha
Jamuuriyadda Federaalka Soomaaliya,
Madaxtooyada Soomaaliya,
Muqdisho, Soomaaliya

Mudane Madaxweyne,

Waxaan ku faraxsanahay in aan kuu soo gudbiyo Warbixinta Baarista Sannadlaha ee u Hoggaansanaanta Sharciga taas oo lagu sameeyay 25 hay'adood iyo saddex (3) safaaradood ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya sannadkii dhammaaday 31da Diseembar 2020. Waa sannadkii 3aad oo aan soo saarayno Warbixinta Baarista u Hoggaansanaanta Sharciga. Waxaa sidoo kale muhiim ah in aan Baarista u Hoggaansanaanta Sharciga ku sameeyay qeyb ka mid ah Safaaradaha dalka uu dibadda ku leeyahay.

Baarista u Hoggaansanaanta Sharciga waxaa loo sameeyay si waafaqsan Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee soo baxay 2019, Sharciga Xafiiska Hantidhawrka Guud, iyo Heerarka Baarista Hay'adaha Hantidhawrista Guud ee Caalamiga ah (ISSAIs). Xafiiska Hantidhawrka Guud ee Qaranka (XHGQ) waxaa uu xubin ka yahay Hay'adaha Hantidhawrrada Guud ee Caalamiga ah (INTOSAI), Hay'adaha Hantidhawrrada Guud ee Qaaradda Afrika (AFROSAI), Hay'adaha Hantidhawrrada Guud ee Afrika kuwooda ku hadla luuqadda Ingiriiska (AFROSAI-E) iyo Hay'adaha Hantidhawrrada Guud ee Dalalka Carabta (ARABOSAI).

Warbixintan Sannadlaha ee Baarista u Hoggaansanaanta Sharciga waxaa dib u dhac ku keenay cudurka saf-marka ah ee COVID—19 taas oo ahayd arrin awooddeenna ka baxsan. Waxaa intaas dheer, in aanay noo suura galin in aan baarista ku wada samaynno dhammaan hay'adaha dowladda. Sidaas darteed, waxaan xulannay 25 hay'adood iyo saddex (3) safaaradood ee ugu muhiimsan iyada oo aan ku saleynay qiimaynta khataraha uu Xafiisku sameeyay.

Baaristan waxa ay muujinaysaa hubanti macquul ah *(reasonable assurance)*, taas oo xaqiijinaysa in ay jirto isla-xisaabtan iyo daah-furnaan lagu maamulo hantida dalka iyada oo si dhab ah loo dhaqangalinayo shuruucda iyo xeerarka ay dowladdu u diyaarisay maamulka hantida.

Warbixintaan waxaan ku caddeeyay khaladaadka aan ku soo ogaaday Baarista u Hoggaansanaanta Sharciga kuwaas oo ka kooban liidasho ka jirta dhinacyo kala duwan sida; hubinta kharashaadka, maamulka hantida, maamulka iibka, diiwangelinta heshiisyada, ka shaqaalaysiinta safaaradaha dibadda shaqaale aan ku habboonayn, dakhliga ka soo xarooda safaaradaha oo loo isticmaalo

Xafiiska Hantidhawrka Guud, Muqdisho, Soomaaliya
oag@oag.gov.so | www.oag.gov.so

kharash ahaan, qaar ka mid ah deeqaha dibadda oo aan lagu darin Miisaaniyadda qaranka sidoo kalena aan la marsiin Nidaamka Maareynta Xogta Maaliyadda Dalka (SFMIS), nidaamka maamulka, isla-xisaabtanka iyo soo saarista shatiyada hubka iyo kuwa ay isticmaalaan hay'adaha gaarka loo leeyahay ee ka shaqeeya arrimaha amniga iyo khaladaad kale. Dhacdooyinkan waxay si cad u tilmaamayaan in ay meesha ka maqan tahay hawshii Hubinnada Gudaha *(Internal Controls)* ee hay'adaha la baaray.

Warbixintan waxaa kale oo hay'ad kasta meesha ugu danbaysa kaga xusan qeyb u gaar ah dabagalka khaladaadka baarista *(audit follow-up)* iyo fulinta talo soo-jeedinno la xiriira baarista sannadihii hore ee 2018 iyo 2019. Run ahaantii waa arrin dhibaatadeeda leh in talo soo jeedinnadii hore in badan oo ka mid ah aan wali la fulin taas oo u baahan waxqabad dag-dag ah.

Haddaba, waxaan aad ugu rajo waynahay in wax laga qaban doono cilladaha aan tilmaamay ee ka jira hay'adaha aan baarnay, mas'uuliyiinta u xilsaaran maamulka hay'adaha aan baarista ku tilmaamay waa in ay awoodda saaraan horumarinta arrimaha la xiriira hubinta gudaha taas oo caawin doonta hufnaanta maamulka hantida dowladda.

Mudane Madaxwayne, waxaan u mahad celinayaa adiga, mas'uuliyiinta wasaaradaha iyo dhammaan hay'adaha kale ee dowladda ee aan baarista ku sameynnay oo garab nagu siiyay gudashada waajibaadkeenna. Waxaan si gaar ah ugu mahad celinayaa shaqaalaha kala duwan ee hay'adaha oo nala wadaagay macluumaadkii aan baarista uga baahnayn intii aan baarista wadnay.

Qadarin,



Maxamed M. Cali "Afgooye"
Hantidhawraha Guud, JFS

Og: Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya,
Guddoomiyaha Golaha Shacabka, BJFS,
Guddoomiyaha Aqalka Sare, BFS

# Dulmar Guud

**Intii ay socotay baaristu, waxaan xiriirro kala duwan la sameynnay maamulka hay'adaha la baaray. Sababta aan xiriirradan kala duwan ula sameynnay maamulka hay'adaha waxa ay ahayd in aan fursad u siinno si ay u saxaan khaladaadka baarista lagu ogaaday. Xiriirradan waxaan ku soo gudbinnay Warqadaha Maamulka (Management Letters) iyo weydiimaha baarista (audit queries) oo aan la wadaagnay hay'ad kasta oo la baaray.**

Warbixintan Baarista Sannalaha ee u Hoggaansanaanta Sharciga waxay ka kooban tahay 25 hay'adood iyo saddex Safaaradood kuwaas oo baarista lagu sameeyay sannad maaliyadeedka dhammaaday 31da Diseembar 2020. Baarista waxaa diiradda lagu saaray u hoggaansanaanta shuruucda, xeerarka iyo hannaanka la isku waafaqsan yahay (best pactice) ee waxyaabaha la baaray (subject matters):

1. Hubinta kharashaadka;
2. Maamulka iibka iyo heshiisyada;
3. Furashada koontooyinka bangiyada;
4. Deeqaha dibadda oo lagu maamulo nidaamka maaliyadda dalka;
5. Diiwaangalinta iyo bixinta shatiyada hubka shakhsiyaadka iyo shirkadaha amniga ee gaarka loo leeyahay;
6. Maamulka shaqaalaha iyo fulinta adeegyada ee safaaradaha;
7. Maamulka dakhliga iyo isla-xisaabtanka;
8. Maamulka hantida;
9. Maamulka canshuur-dhaafka; iyo
10. Maamulka mushaaraadka.

Khaladaadka baarista lagu ogaaday ee ka dhex muuqda warbixintan waa waxyaabaha aan xalka loo helin intii baaristu socotay kuwaas oo u baahnaa xal wada jir ah. Sidoo kale, warbixintu waxay ka kooban tahay talo soo-jeedin baarista la xiriirta kuwaas oo loogu talagalay si wax looga qabto khaladaadka baarista lagu helay.

Qeybta hoose waxaa lagu soo koobay khaladaadka ugu waawayn ee baalmarsan shuruucda, xeerarka iyo hannaanka la isku waafaqsan yahay:

## 1. Hubinta kharash bixinta & kharashka aan lagu lifaaqin caddeymo ku filan

### KHALADKA

Intii baaristu socotay waxaan ogaanay in la bixiyay kharash dhan **US $9,173,213.58** kaas oo hay'adaha isitcmaalay aysan ku lifaaqin caddeymo ku filan. Waxaa kharashkan isticmaalay 22 hay'adood oo ka mid ah 25-ka hay'adood iyo hal (1) safaarad ee la baaray sannadkii dhammaaday 31da Diseembar 2020.

### TALO SOO JEEDIN

Waa in dhammaan lacag bixinnada hay'aduhu ay ku salaysnaadaan ama lahaadaan caddeymo dhammaystiran, si sax ahna ay u oggolaadaan saraakiisha sare ee mas'uulka ka ah iyo in hawlaha loo guddoomo iyadoo loo eegayo ama la raacayo shuruudo cayiman.

## 2. Maamulka iibka iyo heshiisyada

### KHALADKA

Waxaa baarista lagu ogaaday in 25kii hay'adood iyo saddexda (3) safaaradood ee la baaray aysan lahayn qorshaha iibka kaas oo la waafajiyay miisaaniyadda qaranka.

Midda labaad, Saraakiisha Idman ee dhowr ka mid ah hay'adaha la baaray ma aysan sameyn qeyb u qaabilsan arrimaha iibka si ay u fuliyaan dhammaan hawlaha iibka hay'adda.

Intaas waxaa dheer, in dukumintiyada iib dhan **US $11,042,178.76** oo ay hay'aduhu sameeyeen aysan si dhammaystiran ula wadaagin Xafiiska Hantidhawrka Guud si uu u baaro.

Ugu danbeyntii, heshiisyo qiimahoodu dhan yahay **US $31,715,921.22** oo la xiriira iib iyo maamulka guud ayaan laga soo diiwaan gelin Xafiiska Hantidhawka Guud.

### TALO SOO JEEDIN

Sida uu sheegayo Sharciga Iibka, hay'aduhu waa in ay yeeshan qorshaha iibka sannadka oo la ansixiyay kaas oo waafaqsan qorshaha miisaaniyadda qaranka si waafaqsan sharciga.

Waa in hay'ad waliba ay  hirgelisaa qaybta iibka iyadoo loo astaynayo shaqaale ku filan si waafaqsan sharciga.

Si waafaqsan sharciga maamulku waa in ay kaydiyaan dhammaan diiwaannada iyo dukumiintiyada iibka la sameeyay sannadka.

## 3. Furitaanka iyo isticmaalka koontooyinka bangiyada

### KHALADKA

Waxaa baarista lagu ogaaday in ay jiraan 11 hay'adood iyo saddex (3) safaaradood, kuwaas oo isticmaalayay bangiyo ka baxsan Khasnadda Midaysan ee Dowladda (Treasury Single Account) iyagoo aan oggolaansho iyo ansixin uga haysan Xisaabiyaha Guud iyo Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda. Lacag dhan **US $5,076,149.82** ayaa lagu shubay koontooyin si sharci-darro ah ay hay'adaha la baaray u hawl-galiyeen.

### TALO SOO JEEDIN

Waa in hay'adaha la baaray dhammaantood ay ogalaansho iyo ansixin ka haystaan Xisaabiyaha Guud iyo Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda ka hor inta aysan furin koonto bangi maxalli ah ama caalami ah, ha ahaato Bangiga Dhexe ee Soomaaliya ama bangiyo gaar ah.

Waa in la sharciyeeyaa dhammaan koontooyinka ay sida sharci-darrada ah u isticmaalaan hay'adaha dowladda, si waafaqsan Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud.

## 4. Isticmaalka nidaamka maaliyadda dalka (SFIMS) ee ku aaddan lacagaha deeqaha dibedda

### KHALADAADKA

Sannad baariseedkan, siddeed (8) hay'adood iyo hal (1) safaarad oo ah kuwa la baaray ayaa waxaa loo qoondeeyay deeq miisaaniyadeed dhan **US $17,978,413.15** taas oo ka kala timid dalal kala duwan iyo hay'ado caalami ah si ay u fuliyaan mashaariic iyo hawlo. Qoondadaan ayaan ku jirin miisaaniyadda qaranka. Miisaaniyadda kor lagu xusay, dhab ahaan waxaa hay'aduhu ka heleen **US $12,042,096.92**.

Si kastaba ha noqotee, deeqaha ay hay'aduhu heleen oo dhan **US $12,042,096.92** ayaan lagu darin miisaaniyadda qaranka ee la ansixiyay, sidoo kalena aan la marsiin nidaamka maaliyadda dalka.

**TALO SOO JEEDIN**

Waa in dhammaan deeqaha ay helaan hay'adaha lagu daraa miisaaniyadda iyadoo lacagaha loo soo marinayo Khasnadda Dhexe ee Dowladda lana isticmaalayo nidaamka maaliyadda dalka.

Waa in sida ugu dhakhsaha badan sharciga loo waafajiyaa qoondaynta miisaaniyadda deeqaha dibedda ee aan la soo marin nidaamka maaliyadda dalka iyadoo macluumaadka lala wadaagayo Xafiiska Xisaabiyaha Guud iyo Wasaaradda Maaliyadda.

Dakhliga iyo kharashaadka waa in sidoo kale lagu maamulo nidaamka Maareynta Maaliyadda ee Soomaaliya (SFMIS).

Maamulka hay'adaha la baaray waa in ay Wasaaradda Maaliyadda ku wargaliyaan kharashka haraaga ee aan la isticmaalin sidoo kalana si loogu daro miisaaniyadda sannadka xigta iyadoo la soo marinayo nidaamka maaliyadda dalka.

## 5. Diiwaan-galinta iyo bixinta shatiyada hubka shaqsiyaadka iyo shirkadaha amniga ee gaarka loo leeyahay

**KHALADAADKA**

**A. Maqnaanshaha shuruuc iyo xeerar dhammaystiran oo qeexaya habraaca bixinta shatiyada, diiwaangelinta iyo maareynta hubka iyo shirkadaha amnigga ee gaarka loo leeyahay**

Inta lagu guda jiray baarista ayaa waxaa lagu ogaaday in Wasaaradda Amnigga aysan laheyn shuruuc iyo xeerar dhammaystiran kuwaas oo qeexaya siyaasadaha iyo habraacyada soo saaridda shatiyada, diiwaangelinta iyo maamulka hubka iyo shirkado amni oo gaar loo leeyahay.

**B. Maqnaanshaha nidaamka keydka xogta**

Sidoo kale ma jirin nidaamka keydka xogta (database system) kaa oo lagu uruuriyo xogta dhammaan hubka loo oggolaaday shakhsiyaadka iyo shirkadaha amni ee gaarka loo leeyahay.

**C. Maqnaanshaha habka kala shaandheynta ama hubinta shaqsiyaadka iyo shirkadaha amnigga ee la siiyay ruqsadaha**

Intii baarista socotay, waxaa la ogaaday in aysan jirin caddeymo muujinaya in la kala shaandheeyo ama lagu hubiyo shaqsiyaadka iyo shirkadaha amniga ee la siiyo ruqsadaha.

Haddii aan la helin hab hubin oo wax ku ool ah iyo caddeymo muuqda in la sameeyo talaabooyin hubin iyo kala shaandeeyn waxaa dhici kara in uu hubku gacanta u galo shakhsiyaad aan u qalmin in la siiyo.

**D. Maqnaanshaha hannaanka daba-galka iyo kor-joogteynta**

Waxaa kale oo la ogaaday in aanu jirin nidaam daba-gal kaas oo lagu kor joogteeyo isticmaalka hubka gaarka loo leeyahay. ma jirin warbixinno dabagal oo loo soo bandigay baaritaanka.

Intaa waxaa dheer in aan ogaannay in 32 shirkadood oo ay ka dha- ceen shatiyada oggolaashaha hubku, dibna aan u cusboonaysiin, wax tallaabo ah oo hay'adda arrintaas u xil-saarnayd ay ka qaaddayna aanay jirin.

**TALO SOO JEEDIN**

Golaha Fulinta iyo Baarlamaanku waa in ay dejiyaan shuruuc iyo xeerar dhammaystiran oo lagu maamulo hubka iyo adeegsigiisa.

Wasaaradda Amniga Gudahu waa in ay sameysaa nidaam xog-uruuriye (database system) kaa oo lagu keydiyo dhammaan shirkadaha iyo shakhsiyaadka loo oggolaaday in ay qaataan hub.

Waa in la sameeyaa lana fuliyaa nidaam hubin oo wax ku ool ah si loola socdo shakhsiyaadka iyo shirkadaha amnigga ee gaarka loo leeyahay ee doonaya ama qaata hub.

Wasaaradda Amniga Gudahu waa in ay sameysaa nidaam ay ku daba-galayso isticmaalka hubka la sharciyeeyay.

## 6. Maamulka shaqaalaha iyo fulinta addeegyada ee safaaradda

### KHALADAADKA

Waxaan baarista ku ogaannay in diblomaasiyiin loo magacaabay safaaraddaha Safaaradaha la baaray iyaga oo aan buuxin shuruudihii uu sheegayay Sharciga Shaqada Arrimaha Dibadda.

Intaa waxaa dheer, in ay jiraan lix (6) diblomaasi oo sidoo kala ka shaqeeya safaaraddaha Soomaaliya ee dalalka Turkiga iyo Uganda aan ka soo shaqayn xarunta Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee Muqdisho ugu yaraan labo (2) sano ka hor inta aan shaqo dibedda loogu dirin sida uu qeexayo Sharcigu Shaqada Arrimaha Dibedda.

Waxaan sidoo kale baarista safaaradaha ku ogaanay in maamulka safaaradahu ay ku guul-dar-eysteen in ay tiro-koob iyo diiwaan-galin ku sameeyaan bulshada Soomaaliyeed ee ku nool dalka Koonfur Afrika, Turkiga, Uganda iyo dalal kale ay Safaaradahan u matalaan Dowladda Federaalka Soomaaliya *(non-resident mission)*.

### TALO SOO JEEDIN

Wasaaradda Arrimaha Dibaddu waa in ay hubisaa in shaqsiyaadka loo magacaabay hawl-gallada safaaradaha ay buuxiyaan shuruudaha ku xusan sharciga iyo in laga diiwaan-galiyo Guddiga Qaranka ee Shaqaalaha Rayidka Dowladda.

Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshadu waa in ay hubiyaan in shaqsiyaadka loo maga-caabay hawlgallada safaaradaha ay buuxiyaan shuruudaha ku xusan sharciga iyo in laga dii-waan-galiyo Guddiga Qaranka ee Shaqaalaha Rayidka Dowladda.

Wasaaradda Arrimaha Dibadda oo kaashaneysa Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda waa in ay sida ugu horaysa u bilaaban diiwaanagalinta muwaaddiniinta Soomaaliyeed ee ku nool dalalka shisheeye.

## 7. Maamulka dakhliga iyo isla-xisaabtanka

### KHALADKA

Waxaan baarista ku ogaannay in aysan safaaradaha Soomaaliya ee ka hawl-gala dalalka South Africa, Uganda iyo Turkey aysan haysan xeerka dakhli qabashada.

Dakhli dhan **US $277,925.46** ayaa waxaa isticmaalay Safaaradaha Soomaaliya ee ka hawl-gala dalalka Koonfur Afrika, Turkiga iyo Uganda iyada oo aan wax isla-xisaabtan ah aysan ka hayn Xafiiiska Xisaabiyaha Guud iyo Wasaaradda Maaliyadda.

### TALO SOO JEEDIN

Wasaaradda Maaliyadda oo la tashanaysa Wasaaradda Arrimaha Dibedda waa in ay abuurto Xeerka arruurinta dakhliga dibedda ee Safaaradaha iyo in la xaqiijiyo in dakhligaas loo soo wareeejiyo Wasaaradda Maaliyadda iyadoo si waqtiyaysan la iskala xisaabtamayo.

Waa in Wasaaradda Arrimaha Dibeddu ay sida ugu dhaqsaha badan ula wadaagto safaarada-ha xeerka la ansiyay, waa in safaaraduhuna ay ka fogaadaan in ay urruuriyaan lacag ka badan ama ka duwan midda ku qoran xeerka.

Waa in maamulku ay xaqiijiyaan in ay lacagaha dakhliga lagu shubo koontoyin Wasaaradda Maaliyadda iyo Xisaabiyaha Guud ansixiyeen, waana in aysan dakhliga isticmaalin ka hor inta aan lagu shubin Bangiga Dhexe ee Soomaaliya.

## 8. Maamulka hantida

### KHALADAADKA

Waxaan baarista ku ogaannay in Wasaaradda Maaliyaddu aysan hirgelin siyaasadda iyo habraaca maamulka hantida oo la ansixiyay si loogu maamulo hantida hay'adaha dowladda iyo safaaradaha.

Sidoo kale ma jirin diiwaanka hantida ee dhexe oo ay hirgalisay Wasaaradda Maaliyadda kaas oo la cusboonaysiiyay.

Sidoo kale, qaar ka mid ah hay'adaha iyo safaaradaha la baaray ma wada hayn diiwaanka hantida.

Intaas waxaa dheer, muuqaal ahaan, markaan baaris ku sameynay hantida ayaan ogaanay in aan hantida lagu dhajin lamberka tixraaca hantida *(tag numbers)* si hubin iyo korjoogteyn loogu sameeyo mustaqbalka.

Waxaa sidoo kale baarista lagu ogaaday in hay'adaha la baaray aysan magaca hay'adda ku diiwaan-galin gaadiidka, taas oo gaadiidka ka dhigaysa in ay u nugul yihiin in si khaldan loo maamulo.

Ugudanbayntii, dhammaan hay'adaha la baaray hantidooda kama aysan soo diiwaan gelin Xafiiska Hantidhawrka Guud.

### TALO SOO JEEDIN

Waa in hay'aduhu hirgaliyaa sidoo kalana meel mariyaan tilmaamo iyo siyaasado dhammaystiran ee maamulka, hubinta iyo ka warbixnta hantida.

Waa in Wasaaradda Maaliyadda ay dhaqan galisaa diiwaan hanti dhexe ama diiwaanno u gaar ah hay'adaha dowladda kaas oo leh tilmaamo cadcad si loogu diiwaan geliyo hantida DFS sidoo kalena loo cusboonaysiiyo waqti cayiman.

Waa in hay'adaha ay diyaariyaan diiwaan dhammaystiran ee hantida oo leh tilmaamo cad si loo xaqiijiyo in dhammaan hantida hay'adda lagu diiwaan galiyo diiwaanka, sidoo kalana loo cusboonaysiiyaa xilliyo go'an ama cayiman.

Waa in hay'adaha dowladda ay xaqiijiyaan in gaadiidka Dowladda lagu diiwaan geliyo magaca hay'adda waana in maamulka hay'aduhu ay baaris u soo bandhigaan buugaagta iyo dhammaan macluumaadka kale ee gaadiidka.

Waa in waqtiga ugu dhow ay hay'adaha dowladda iyo safaaraduhu hantidooda ka soo diiwaan-galiyaan Xafiiska Hantidhawrka Guud si waafaqsan sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud.

## 9. Maamulka canshuur-dhaafka

### KHALADAADKA

**A. Shirkado dhowr ah oo loo sameeyay canshuur-dhaaf iyada oo aan la shaacin**

Intii lagu gudo jiray baarintaanka ayaan ogaannay in Wasaaradda Maaliyadda ay shirkado siisay canshuur-dhaaf ayadoo canshuur-dhaafka ay Wasaaraddu bixisay aan si guud loogu soo bandhigin dadweynaha ama aan la shaacin.

**B. Wasaaradda Maaliyadda oo ku guuldareysatay in ay diyaariso warbixinta canshuur-dhaafka lana wadaagto golayaasha Baarlamaanka**

Baarista Wasaaradda Maaliyadda waxaan ku ogaannay in Wasaaraddu aanay diyaarin lana wadaagin warbixinta canshuur-dhaafka Labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya sida uu sharcigu sheegayo.

**C. Wasaaradda Maaliyadda waxa ay ku guuldareysatay in ay kaydiso macluumaadka canshuur-dhaafka kadibna shaaciso**

Baarista ayaa lagu ogaaday in aysan maamulka Wasaaraddu si dhammaystiran u keydin macluumaadka canshuur-dhaafka la sameeyay, sababaha loo sameeyay canshuur-dhaafka iyo canshuur-dhaafyada la sameeyay oo aan lagu shaacin faafinta rasmiga ah sida sharcigu sheegayo.

### Talo soo jeedin

Waa in Wasiirku diyaariyo warbixinta canshuur-dhaafka sidoo kalana loo diro Labada Aqal ee Baarlamaanka Soomaaliya ka hor 30ka Maarso, 30ka Juun, 30ka Sebteembar iyo 31ka Diseembar ee sannad kasta.

Waa in maamulka Wasaaraddu ay diyaariyaan nidaam kaydin oo gacanta iyo elektaroonik ahba (manually and digitally) si dukumintiyada loo hayo iyagoo xafidan.

Waa in Wasiirka uu xaqiijiyaa in canshuur-dhaafka la sameeyay lagu shaaciyaa faafinta rasmiga si loo horumariyo hufnaanta, isla xisaabtanka iyo dowlad-wanaaga.

## 10. Maamulka mushaarka

**KHALADAADKA**

**A. Kala duwanaansho ka jirta nidaamka keydka xogta**

Intii aan baarista ku guda jirnay ayaan ogaannay in nidaamka SFMIS-ka lee laga diyaariyo mushaaraadka ciidanka uusan si toos ah ugu xirnayn Nidaamka Xogta Keydka Ciidanka Booliska Soomaaliyeed. Waxaa aad u adkaatay in hubinno dhammaystiran oo wax ku ool ah lagu sameeyo mushaaraadka maadaama ay kala duwan yihiin qaab qoraalka magaca iyo in labonidaam (system) ay kala isticmaalayaan (bixinayaan) labo (2) lambar aqoonsi kala duwan, baarayaasha ma hubin kareen in mushahar iyo lacagaha kale la siiyay cidda xaqa u laheyd.

**TALO SOO JEEDIN**

Waa in baaritaan lagu sameeyaa lana saxaa is-maandhaafka labada nidaam ee Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Dalka (SFMIS) iyo kan Xogta Keydka Ciidanka si loo yareeyo halista ka imaan karta musuqa mushaaraadka iyo khaladaadka kale ee dhici kara, iyo in la xaqiijiyo in mushaaraadka la siiyo ciidanka booliska ee ku habboon.

Waa in labada nidaam isku xiran yihiin si maamulka mushaaraadka si habsami leh ugu hirgalo.

Waa in la isku xiraa keydka xogta ciidanka si loo hubiyo in xuquuqdooda la siiyo ciidanka ku habboon.

Waa inay jiraan hubinta gudaha si looga hortago khaladaadka iyo qiyaano loo qasday in ay ka dhacaan mushaaraadka Bangiga Dhexe ee Soomaaliya.

# Hordhac

**Mas'uuliyadaha Wasiirka Maaliyadda, Xisaabiyaha Guud, Saraakiisha Idman iyo Hantidhawraha Guud ee la xiriirta maamulka hantida Dowladda, ka warbixinta iyo isla-xisaabtanka waxay ku xusan yihiin Sharciga Maaraynta Maaliyadda Dowladda. Hantidhawraha Guud waxaa uu mas'uul ka yahay baarista dhammaan Hantida Dowladda iyo in uu ka soo saaro warbixin.**

Qodobadda 6 ,7, 8, 9, 13 iyo 17 ee Sharciga Xafiiska Hantidhawrka Guud (Sharci Lr. 34) waxa uu sharciyad buuxda u siinayaa Xafiiska Hanitdhawrka Guud in uu baaris ku sameeyo hantida iyo hawlaha Dowladda Federaalka Soomaaliya, Intaas waxaa dheer, Hantidhawraha Guud in uu baaro hawlaha, buugaagta, xisaabaha iyo macluumaadka kale ee dhammaan hay'adaha Dowladda iyo lacagaha ay Dowladda ka helaan hay'adaha aan faa'iido doonka ahayn (non-profit organizations) kuwaas oo ay ka mid yihiin hay'adaha caalamiga ah. Intaas waxaa dheer Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud (Sharciga Lr. 17 ee soo baxay 25ta Diseembar 2019) wuxuu awood u siinayaa Xafiiska Hantidhawrka Guud in uu sameeyo baarista kor ku xusan.

Warbixintan Baarista Sannadlaha ee u Hoggaansanaanta Sharciga ee 25ta hay'adood iyo 3da Safaaradood oo loo xushay baarista sannad maaliyadeedka dhammaaday 31 Diseembar 2020 waxaa loo fuliyay si waafaqsan Heerarka Baarista Hay'adaha Hantidhawrista Guud ee Caalamiga ah (ISSAIs, Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud iyo Sharciga Xafiiska Hantidhawrka Guud iyo).

Baarista u Hoggaansanaanta Shariciga waxay la xiriirtaa ka warbixinta dhacdooyinka baalmarsan shuruucda iyo xeerka. Warbixinta sannadlaha waxaa ku jira talooyin ku socda maamulka hay'adaha si ay u qaadaan talaabooyinka ku habboon si wax looga qabto khaladaadka la ogaaday. Ujeedada ugu muhiimsan ee talo soo jeedinnadan ayaa ah in la xaqiijiyo u hoggaansanaanta shuruucda si loo xoojiyo nidaamka maaliyadda dalka iyo guud ahaan u gaarsiinta/bixinta addeegyo tayo leh.

Baaristan Sannadlaha ee u Hoggaansanaanta Sharciga ee lagu sameeyay hay'adaha iyo safaaradaha JFS ee la xushay waxaa la fuliyay iyada oo lagu saleynayo qiimayn lagu sameeyay khataraha iyadoo la isticmaalayo haga lagu ogaaday Baaristii Sannadlaha ee u Hoggaansanaanta Sharciga ee sannadihii hore.

# Waxyaabaha la Baaray

Baaristan Sannadlaha ee u Hoggaansanaanta Sharciga waxaa lagu fuliyay toban waxyaabood kuwaas oo kala ah:

1. Hubinta kharashaadka;
2. Maamulka iibka iyo heshiisyada;
3. Furashada koontooyinka bangiyada;
4. Deeqaha dibadda oo lagu maamulo nidaamka maaliyadda dalka;
5. Diiwaangalinta iyo bixinta shatiyada hubka shakhsiyaadka iyo shirkadaha amniga ee gaarka loo leeyahay;
6. Maamulka shaqaalaha iyo fulinta adeegyada ee safaaradaha;
7. Maamulka dakhliga iyo isla-xisaabtanka;
8. Maamulka hantida;
9. Maamulka canshuur-dhaafka; iyo
10. Maamulka mushaaraadka.

# Ujeeddooyinka iyo Baaxadda Baarista

**Ujeeddada ugu muhiimsan ee baaristan waxay tahay in lagu helo caddeymo baariseed ku habboon kuna filan si Hantidhawraha Guud uu u soo saaro warbixin hubanti macquul ah (reasonable assurance) taas oo ku saabsan in hay' adaha iyo Safaaradaha la xushay ay u hoggaansameen shuruucda iyada oo la tixraacayo waxyaabaha la baaray (subject matters) ee sannad maaliyadeedka dhammaaday 31da Diseembar 2020.**

Si loo gaaro ujeeddooyinkan, waxaan baarista ku helnay caddeymo dhammaystiran iyada oo loo maray tijaabinta hubinnada iyo hannaanka kale ee ku habboon baarista.

Baaxadda baaristan waxaa lagu fuliyay hawlaha hay'adaha laga soo billaabo 1da Janaayo 2020 ilaa iyo 31da Diseembar 2020. Sidoo kale, baaristan u hoggaansanaanta sharciga waxaan ku eegnay meelmarinta talo soo-jeedinnadii Hantidhawrku soo saaray labadii sano ee la soo dhaafay.

# Qodobbada Baarista

Baaristan waxaa la fuliyay iyada oo la tixgalinayo qodobbo laga xushay shuruucda iyo hannaanka la isku waafaqsan yahay ee jaantuuska hoose ku xusan kuwaas oo la xiriira waxyaabaha la baaraay:

| WAXYAALAHA LA BAARAY | QODOBBADA |
|---|---|
| **Hubinta Kharashaadka** | Qodobbada 31aad (1), 32aad (4), 33aad (1) (b), (t), iyo 45aad (2) ee Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud ee 2019 |
| **Maamulka hantida** | Qodobka 11aad (1), (j) Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud ee 2019 iyo hannaanka la isku waafaqsanyahay (ISSAIs) |
| **Maamulka iibka iyo heshiisyada** | Qodobbada 14aad, 27aad (1), (4), Shaxda 3aad (1) 31aad (1) & (9), 33aad (2), (g), 61aad (1), (2), iyo 69aad (2) ee Sharciga Iibka Qaranka ee 2016, iyo Qodobka 14aad (wax-ka-beddelka Qodobka 84aad) ee Sharciga Iibka Qaranka ee 2020<br><br>Qodobbada 11aad (j), 12aad (2), (r, s & sh) iyo 38aad (5) ee Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud ee 2019 |
| **Furashada koontooyinka bangiyada** | Qodobbada 9aad (7) iyo 42aad (3) ee Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud ee 2019 |
| **Deeqaha dibedda oo lagu maamulo nidaamka maaliyadda dalka** | Qodobbada 15aad (1) iyo 38aad (1), (2) ee Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud ee 2019 |
| **Maamulka canshuur-dhaafka** | Qodobka 5aad (2), (3), (4) iyo (5-b, t, j & x) ee Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud ee 2019 |
| **Diiwangalinta, shati-siinta hubka, ciidamada iyo shirkadaha amniga ee gaarka loo leeyahay** | Hannaanka la isku waafaqsan yahay |
| **Maamulka dakhliga iyo isla-xisaabtanka** | Qodobbada 4aad (2), (3) (b & sh), 9aad (6), 27aad (6), 42aad (4) ee Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud ee 2019 iyo 50aad (d) ee Dastuurka Ku-meel gaarka Soomaaliya |
| **Maamulka shaqaalaha iyo fulinta adeegyada ee safaaradaha** | Qodobbada 3aad (6), (c), 4aad (1), (2) iyo (3), 5aad (I-2 iyo 4), (IIaad-1, 2, 3 & 4) ee Sharciga Shaqada Arrimaha Dibedda ee 2013 iyo Hannaanka la isku waafaqsanyahay (ISO 3.3.0& 1.4.9 |
| **Maamulka mushaaraadka** | Qodobka 12aad (2), (t, j, d, r & s) ee Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud ee 2019 iyo hannaanka la isku waafqsan yahay |

**Shax:** Qodobbada iyo waxyaalaha la baaray

# Hubinta Gudaha

**Warbixintan waxaa si gaar ah looga hadlay liidasho ka jirta dhinacyo kala duwan sida; hubinta kharashaadka, maamulka hantida, maamulka iibka, diiwangelinta heshiisyada, ka shaqaalaysiinta safaaradaha dibadda shaqaale aan ku habboonayn, dakhliga ka soo xarooda safaaradaha oo loo isticmaalo kharash ahaan, qaar ka mid ah deeqaha dibadda oo aan lagu darin Miisaaniyadda Qaranka sidoo kalena aan la marsiin Nidaamka Maareynta Xogta Maaliyadda Dalka (SFMIS), sharci iyo xeer la'aan ee maamulka, shatiyada hubka iyo kuwa ay isticmaalaan hay'adaha gaarka loo leeyahay ee ka shaqeeya arrimaha amniga iyo khaladaad kale.**

Dhacdooyinkan waxay si cad u tilmaamayaan in ay jirto liidasho ama dabacsanaan dhinaca hubinta gudaha ee hay'adaha Dowladda.

# Khaladaadka Baarista & Talo soo jeedinnada

**Warbixintan waxaa lagu faahfaahiyay khaladaadkii baarista lagu ogaaday ee hay'adaha iyo safaaradihii la baaray iyo talo bixintii ku habboonayd si loo saxo khaladaadka.**

Waxaa sidoo kale warbixintan ku qoran jawaabaha ay bixiyeen hay'adihii iyo safaaradihii la baaray kuwaas oo aan la xallin illaa inta warbixintan laga soo saaray. Jawaabaha ay soo bixiyeen hay'adaha iyo safaaradihii la baaray ayaa ah kuwa ku qoran ama ku calaamadaysan *farta jiiftada ah (italic)*.




# I. HAY'DAHA MAAMULKA

# 1. Xafiiska Madaxweynaha

## 1.1 Maamulka iibka iyo heshiisyada

### 1.1.1 SHARCIGA

Qodobka 27 (1) iyo (4) ee Sharci Lr. 22 ee Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka oo soo baxay 2016, ayaa sheegaya sidaan:

> 27(1) Dhammaan Hay'adaha qandaraaska iibka ayaa sameynaya qorshaha qandaraaska Iibka ee sannadlaha, ee looga gol leeyahay si lagu gaaro in qiimaha ugu badan ee kharashka guud iyo waxyaabaha kale ee sharcigan. Qorshaha qandaraaska iibsiga wuxuu taageerayaa barnaamijka iyo miisaaniyadda ay ansixisay hay'adda qandaraaska iibka.
>
> 27(4) Qorshaha qandaraaska iibka waxaa la diyaarinayaa sannad walba iyadoo lagu saleynayo miisaaniyadda sannadka Xukuumadda, iyado la xisaabinayo miiisaaniyad sannadeedka Xukuumadda.

### Khaladka

**A. Maqnaanshaha diyaarinta qorshaha iibka sannadka**

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in Xafiiska Madaxweynaha JFS uusan lahayn qorshe sannadle ah ee iibka sannad maaliyadeedka dhammaaday 31da Diseembar 2020 kaas oo ku salaysan miisaaniyadda qaranka.

### Talo soo jeedin

Waa in Xafiiska Madaxweynaha JFS uu yeeshaa qorshe sannadle ah oo ku aaddan iibka kaas oo ku saleysan miisaaniyadda la ansixiyay ee hay'adda.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Waan fulinaynaa talo soo jeedinta XHGQ ee Qorshaha Miisaaniyadda laga billaabo sannadka 2021.*

### 1.1.2 SHARCIGA

Qodobka 38aad (5) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud waxa uu leeyahay "Dhammaan heshiisyada deeqaha Hay'adaha Dawladda, Maamul Goboleedyada iyo hay'adaha ganacsiga ee Dawladda waa in laga diiwan geliyaa Hantidhawraha Guud".

Intaa waxaa dheer, Qodobka 11aad (c) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee 2019 wuxuu awood u siinayaa Hantidhawrka Guud inuu diiwaangeliyo qandaraasyada iyo heshiisyada ay galaan hay'adaha Dowladda. Qodobka 14aad (wax-ka-beddelka Qodobka 84aad) ee Sharciga Iibka Qaranka 2020 wuxuu sheegayaa in dhammaan hay'adaha dawliga ah ay qandaraasyada iyo heshiisyada ka diiwaan-galiyaan XHGQ.

### Khaladka

**A. Qandaraasyo qiimahoodu gaarayo US $1,080,037.04 oo aan laga soo diiwaan gelin XHGQ**

Waxaan ku soo ogaannay baarista in 11 qandaraas oo qiimahoodu gaaraayo **US $1,080,037.04** aan laga soo diiwaangelin Xafiiska Hantidhawrka Guud. Sidaas darteed, Shaxda hoose ayaa muujinaya faahfaahinta qandaraasyadaas:

| TR. | CIDDA LALA GALAY HESHIISKA | UJEEDADDA | MUDDADA | QIIMAHA QANDARAASKA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1. | 2020 CA-BPC-205 | Shidaal iyo Saliid | 3 bilood | 93,495.00 |
| 2. | 2020 CA-BPC-205 | Shidaal iyo Saliid | 3 bilood | 93,495.00 |
| 3. | 2020 CA-BPC-205 | Shidaal iyo Saliid | 3 bilood | 93,495.00 |
| 4. | 2020 CA-BPC-205 | Shidaal iyo Saliid | 3 bilood | 93,495.00 |
| 5. | 2020 CA-BPC-205 | Shidaal iyo Saliid | 3 bilood | 93,495.00 |
| 6. | 2020 CA-BPC-206 | Raashin/cunno | 3 bilood | 99,945.00 |
| 7. | 2020 CA-BPC-206 | Raashin/cunno | 3 bilood | 99,945.00 |
| 8. | 2020 CA-BPC-206 | Raashin/cunno | 3 bilood | 99,945.00 |
| 9. | 2020 CA-BPC-206 | Raashin/cunno | 3 bilood | 99,945.00 |
| 10. | 2020 CA-BPC-206 | Raashin/cunno | 3 bilood | 99,945.00 |
| 11. | 2020 CA-BPC-207 | Dhismo | 1 bil | 112,837.04 |
| **TOTAL** | | | | **1,080,037.04** |

**Shaxda 1.1** Qandaraasyada aan laga soo diiwaangelin XHGQ

### Talo soo jeedin

Waa in dhammaan qandaraasyada iyo heshiisyada laga diiwaangaliyaa Xafiiska Hantidhawraha Guud si waafaqsan shuruucda iyo xeerarka.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Xafiiska Madaxweynaha wuxuu diyaar u yahay hadda wixii ka danbeeya in uu ka diiwaangaliyo dhammaan qanadaraasyada iyo heshiisyada la galay Xafiiska Hantidhawraha Guud si waafaqsan shuruucda iyo xeerarka.*

### 1.1.3 SHARCIGA

Sharci Lr. 22 ee Sharciga Iibka Qaranka oo soo baxay 9 Agoosto 2016, Qodobkiisa 14aad ayaa waxa uu farayaa in qandaraasyada iyo heshiisyada caalamiga ah lagu qoro luuqadaha kala ah Ingiriis iyo Carabi halka kuwa gudaha/maxaliga ahna lagu qoro Af-Soomaali.

### Khaladka

**A. Heshiisyada gudaha oo aan lagu qorin luuqadda Soomaaliga**

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in Xafiiska Madaxweynaha JFS uu heshiisyada gudaha/maxalliga ah ku qoray luuqadda Ingiriiska taas oo lid ku ah sharciga.

### Talo soo jeedin

Waa in maamulka hay'addu uu heshiisyada gudaha/maxalliga ah ku qoraa luuqadda Soomaaliga si waafaqsan sharciga. Sidoo kale, waxaa ay diyaarin karaan mid ku qoran luuqadda Ingiriisiga haddii ay u baahan yihiin dhinaca kale ee qandaraaslaha.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Waxaan ku qori doonnaa Afka-Soomaaliga heshiisyada maxalliga ah.*

## 1.2 Dabagalka baarista

### 1.2.1 KHALADAADKA WARBIXIN BAARISEEDKII 2019

Shaxdaan hoose waxaa ka muuqda marxaladda khaladaadka baarista sannadkii hore lagu sameeyay hay'adda inta la fuliyay, qayb laga fuliyay ama aan waxba laga fulin.

| TR. | KHALADAADKA | MARXALADDA |
|---|---|---|
| 1. | 1.1.1 Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka hantida | Waa la fuliyay |
| 2. | 1.1.2 Diiwaanka hantida oo aan joogto loo cusboonaysiin | Waa la fuliyay |
| 3. | 1.2.1 Heshiisyo aan laga soo diiwaangalin XHGQ | La ma fulin |
| 4. | 1.2.1 Heshiisyada gudaha aan lagu qorin afka Soomaaliga | La ma fulin |
| 5. | 1.3.1 Maqnaanshaha baarista gudaha | Qayb ayaa laga fuliyay |

**Shaxda 1.2** Khaladaadka baarista sannadkii 2019

### 1.2.2 KHALADAADKA WARBIXIN BAARISEEDKII 2018

| TR. | KHALADAADKA | MARXALADDA |
|---|---|---|
| 1. | 18.3.1 Ma jirin diiwaanka hantida | Qayb ayaa laga fuliyay |
| 2. | 18.3.2 Ma jirin siyaasadda maamulka hantida | La ma fulin |
| 3. | 18.4.1 Maqnaanshaha baaraha gudaha sidoo kalana baarista gudaha lama samayn | Qayb ayaa laga fuliyay |

**Shaxda 1.3** Khaladaadka baarista sannadkii 2018

# 2. Golaha Shacabka

## 2.1 Hubinta kharash bixinta

### 2.1.1 SHARCIGA

Sida ay qabaan Qodobbada 31[aad] (1) iyo 32[aad] (4) ee Sharci Lr. 17 ee Maaraynta Maaliyadda Guud ee soo baxay 25 Diseembar 2019:

> 31(1) Wax kharash ah lagama bixin karo Miisaaniyadda qaranka, haddii aysan jiirin, qaansheegto ama caddeyn kale oo dheeraad ah oo looga baahan yahay sida ku xusan xeer-nidaamiyaha ama nidaamka xisaabaadku sheegayo.
>
> 32(4) Kharash bixin walba ee la oggolaaday waa in ay ku lifaaqan yihiin dhammaan dukumiintiyada kaabaya sida ku qeexan Xeer-nidaamiyaha Wasiirku soo saaray.

### Hannanka la isku waafaqsan yahay

Dukumiintiyada caddeymaha way kala duwan yihiin iyadoo ay ku xiran tahay nooca lacag bixinta, waxaana ka mid ah; dalabka iibka, heshiis saxiixan, warqadaha qaansheegashada, lacag qabashada, iwm.

### Khaladaadka

**A. Kharashaad dhan US $377,748.00 oo aan lahayn caddeymo dhammaystiran**

Waxaa baarista lagu oggaaday in maamulka Golaha Shacabku ay bixiyeen lacag dhan **US $377,748.00** iyada oo aan lahayn caddeymo ku filan, kharashaadkan ayaa la siiyay seddex (3) shirkadood iyo shaqsiyaad waxaana iyadoona lagu bixiyay hawlo kala duwan ee Golaha Shacabka taas oo lid ku ah sharciga. Arrinkan ayaa sababay in la xaqiijin waayo sax ahaanshaha lacag bixintan. Sida ku xusan shaxda hoose:

| TR. | MADAX-XIGE | CIDDA LA SIIYAY | BISHA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1. | 2216 | Shaqsiyaad | Jan 2020 | 29,000.00 |
| 2. | 2216 | 2020 CA-BPC-001 | Mar 2020 | 46,166.00 |
| 3. | 2216 | 2020 CA-BPC-002 | May 2020 | 85,773.00 |
| 4. | 2216 | 2020 CA-BPC-003 | Apr 2020 | 37,583.00 |
| 5. | 2216 | 2020 CA-BPC-003 | Jun 2020 | 24,891.00 |
| 6. | 2216 | 2020 CA-BPC-001 | Jun 2020 | 24,415.00 |
| 7. | 2216 | 2020 CA-BPC-001 | Jun 2020 | 34,920.00 |
| **WADAR** | | | | **282,748.00** |

**Shaxda 2.1** Kharashaadka socdaalka aan lahayn caddeymo ku filan

| TR. | MADAX-XIGE | CIDDA LA SIIYAY | BISHA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1. | 2251 | 2020 CA-BPC-004 | Jan - Dec 2020 | 95,000.00 |
| **WADAR** | | | | **95,000.00** |

**Shaxda 2.2** Kharashaadka caafimaadka ee aan lahayn caddeymo ku filan

### Talo soo jeedin

Waa in dhammaan lacag bixinnadu ay ku salaysnaadaan ama lahaadaan caddeymo dhammaystiran, si sax ahna ay u oggolaadaan saraakiisha sare ee mas'uulka ka ah iyo in hawlaha loo guddoomo iyadoo loo eegayo ama la raacayo shuruudo cayiman.

Waa in dhammaan dukumiintiyadda lacag bixinnada lagu tiimbareeyaa "la bixiyay" isla marka lacagahooda la bixiyo si looga hortago in mar kale loo isticmaalo kharash bixin kale.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Galka ay baareen baarayaashana way ku jireen caddeeymaha shirkadaha kala duwan ee la siiyey. Waxaa meeshaa ka muuqata in baarayaasha aysan fiirin documentiga loo keenay caddeymaha uu watay.*

*Lacagta Habeen dhaxa ah inta danbe qofka baxaya ayeey Wasaaradda Maaliyadu Xisaabtiisa Gaarka ah ugu shubtaa.*

*Boarding Pass ma keenaan Xildhibaandu markay soo noqdaan. Anagu boqol jeer Ayaan weydiinay laakiin waan ka quusanay oo waa arrin sanad walba taagan.*

*Lacagta dhan $95,000 ee aad kor ku soo xusteen waa run in ay caddeymihii looga baahnaa aanay wadan. Tan waa dhib na haysata sababtoo ah Xildhibaanka marka Guddoomiye Xigeenka 1aad u soo amro in la siiyo qadar lacag ah oo isku soo daaweeyo marnaba ma dhacin in ay keenaan waraaqihii looga baahnaa. Guddoonka waa isku dayey in ay adkeeyaan laakiin wali laguma guuleysan.*

*Lacagtan $90,000 waxaa ku jirta $20,000.00 (Labatan kun dollar kaliya) oo Wasaaradda Maaliyadu siisay laba Xildhibaan oo buka hase ahaataa toos loogu shubay 2 xildhibaan accounkooda sida ku cad caddeymaha ku jira Galka ay soo baareen baarayaasha.*

*Waxaan sanadkii 2020/21 ka codsanay Wasaaradda Maaliyadda in Xildhibaanada la Galiyo Caymiska Takaaful ee ay ku juraan Hay'ado ay ka mid yihiin Bankiga Dhexe laakiin Wasaaradda ayaa ku cudurdaaratay lacag la'aan. Bishii waxaa noo qoondaysan M/Xigahan $25,000, waxaan ka codsanay Wasaaradda in $25,000 kale ama ka yar lagu daro isla markaana Wasaaraddu tartan galiso oo ay caymis galiso Xidhibaanada. Waa kari weyday wasaaradu*

*Sanadka 2020 oo aan u fiicnayn waxaan heley saddex bil kaliya, taas baana keenaysa Xildhibaano muddo dheer sugayey in qof walba qoonda yar la siiyo inta kalana isagu ku darsado. Waxay Xildhibaanadu ku doodaan aniga oo Turki ama India isu soo daweeyey $20,000 ayaad $5,000 oo aad bixiseen waraaqo idiin keenaa. Hadaad waraaqo rabtaan inta aan isu soo daweeyey bixiya.*

## 2.2 Maamulka iibka iyo heshiisyada

### 2.2.1 SHARCIGA

Qodobka 27aad (1) iyo (4) ee Sharci Lr. 22 ee Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka oo soo baxay 2016, ayaa sheegaya sidaan:

27(1) Dhammaan Hay'adaha qandaraaska iibka ayaa sameynaya qorshaha qandaraaska Iibka ee sannadlaha, ee looga gol leeyahay si lagu gaaro in qiimaha ugu badan ee kharashka guud iyo waxyaabaha kale ee sharcigan. Qorshaha qandaraaska iibsiga wuxuu taageerayaa barnaamijka iyo miisaaniyadda ay ansixisay hay'adda qandaraaska iibka.

27(4) Qorshaha qandaraaska iibka waxaa la diyaarinayaa sannad walba iyadoo lagu saleynayo miisaaniyadda sannadka Xukuumadda, iyado la xisaabinayo miiisaaniyad sannadeedka Xukuumadda.

Sidoo kale, Qodobka 61[aad] (1) iyo (2) ee Sharciga Iibka Qaranka, 2016 ayaa sheegaya sidaan:

61(1) Hay'ad kasta oo Iibin waa in ay dhistaa Waax Iib Qandaraas si waafaqsan Sharcigan.

61(2) Sarkaalka Xisaabaha ayaa go'aaminaaya inta xubnood ee ka mid noqoneysa Waaxda Qandaraaska Iibka, waana in laga shaqaaleyaa ugu yaraan hal (1) qof oo u tababaran aqoonna u leh Qandaraaska Iibka.

Qodobka 31[aad] (1) (9) ee Sharciga Iibka Qaranka, 2016 uu sheegayo sidaan:

31(1) Hay'adda Iibinta Qandaraaska ayaa keydineysa dhammaan dhokumiintiyada la xiriira heshiis kasta ee qandaraas iib iyo habraacyadeeda si waafaqsan xeerarka lagu dabaqi karo ee ku saabsan diiwaangelinta qoraallada Xukuumadda, laakin ugu yaraan dokumiintiyada waa in la hayaa muddo lix (6) sano ah ee soo raacda taariikhda ugu dambeysa ee dhammaadka heshiiska qandaraaska iibka ama laga soo billaabo taariikhda dhammaan la wada diido tartanka dalabka qandaraaska ama la baabi'iyo habraaca, ama sideey xaaladdu noqotaba.

31(9) Hay'adda Iibka waa in ay soo bandhigtaa:

Warbixinnada iyo dokumiintiyada ay kaydiyaan Hay'adaha Qandaraaska Iibka si waafaqsan Sharcigan waa inay heli karaan markii ay u baahdaan Maamulka, Guddiga La Dagaallanka Laaluushka, iyo Hantidhawraha Guud si ay u baaraan, Guddiga Baarlammanka uga wakiilka ah kormeerka fulinta shuruucda qaranka iyo xafiis dawladeed kasta ee lagu aaminay mas'uuliyaddaas marka la codsado.

Intaa waxaa dheer in Qodobka 69[aad] (2) ee Sharciga Iibka Qaran 2016, uu sidaan sheegaayo:

69(2) 2. Heshiisyada Qandaraasyada Iibka lama kala qaybin karo iyadoo qasadku yahay si looga leexdo xayeysiinta ka qaybgalka tartanka furan ee looga baahan yahay dhammaan heshiisyada lagu qiyaasay in qiimohoodu ka badan yahay qaddarka lacageed ee lagu sheegay Xeer-nidaamiyaha Sharcigan.

## Khaladaadka

### A. Maqnaanshaha diyaarinta qorshaha iibka sannadka

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in Golaha Shacabku uusan lahayn qorshe sannadle ah ee iibka sannad maaliyadeedka dhammaaday 31[da] Diseembar 2020 kaas oo ku salaysan miisaaniyadda qaranka.

### B. Xafiiska iibka ee hay'adda oo aan dhisneyn

Waxaa baarista lagu ogaaday in sarkaalka idman ee Golaha Shacabka uusan dhisin xafiiska iibka ee hay'adda, taas oo xadgudub ku ah Sharciga Iibka Qaranka, 2016.

### C. Ka gaabinta in la ilaaliyo lana dhamaystiro diiwaanka iyo dukumeentiyada wax soo iibsiga

Maamulka hay'adda ayaa sameeyay iib la xiriira adeeg iyo alaabo qiimahoodu dhanyahay **US $1,107,849.00** kuwaas oo aan loo soo gudbin baaris. Sida ku xusan shaxda hoose:

| TR. | SHIRKADDA | NOOCA | MUDDADA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1. | 2020 CA-BPC-005 | Alaab | Jan - Dec 2020 | 104,434.00 |
| 2. | 2020 CA-BPC-006 | Alaab | Jan - Dec 2020 | 131,200.00 |
| 3. | 2020 CA-BPC-006 | Adeeg | Jan - Dec 2020 | 110,493.00 |
| 4. | 2020 CA-BPC-005 | Alaab | Jan - Dec 2020 | 104,434.00 |
| 5. | 2020 CA-BPC-006 | Shidaal | Jan - Dec 2020 | 157,201.00 |
| 6. | 2020 CA-BPC-007 | Alaab | Jan - Dec 2020 | 71,515.00 |
| 7. | 2020 CA-BPC-008 | Alaab | Jan - Dec 2020 | 174,824.00 |
| 8. | 2020 CA-BPC-001 | Alaab | Jan - Dec 2020 | 105,501.00 |
| 9. | 2020 CA-BPC-002 | Alaab | Jan - Dec 2020 | 85,773.00 |
| 10. | 2020 CA-BPC-003 | Alaab | Jan - Dec 2020 | 62,474.00 |
| **WADAR** | | | | **1,107,849.00** |

**Shaxda 2.3** Diiwaannada la xiriira iibka oo aan baarista loo soo bandhigin

## Talo soo jeedin

Waa in Golaha Shacabku uu yeeshaa qorshe sannadle ah oo ku aaddan iibka kaas oo ku saleysan miisaaniyadda la ansixiyay ee hay'adda.

Waa in sarkaal idman uu dhisaa xafiiska iibka ee hay'adda si waafaqsan sharciga.

Maamulka hay'addu waa in ay faahfaahin ka bixyaan sababta adeegga iyo alaabta qiimaheedu gaareyso **US $1,107,849.00**, uusan u waafaqsanayn sharciga Iibka Qaranka, 2016.

Maamulka waa in ay baarayasha la wadagaan dhammaan diiwaannada iyo dukumiintiyada iibka la sameeyay sannadka.

## Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Waxaan u sameyn weyney Qorshe iib waxaa sabab u ah Miisaaniyadda oo marka horeba aad u yar hadana aan la helayn wakhtigii la rabay. Sideedana miisaaniyad marka horeba wax lagu iibsan karo maba nala siin oo xataa Matoor dab Dhaliya ah ma iibsan karno (Matooradda aan haysano Gaalada ayaan ka soo baryaa).*

*Markii la gaaro miisaaniyad la isku haleyn karo helitaankeed isla markaana baahdayda ka turjumaysa ayaan sameyn doonaa qorshe iib. Tusaale Madax-xigaha safaradda Golaha Shacabku wuxuu codsaday $4,000,000 sanadkii taas oo dabooli karta baahida runta ah ee jirta. Waxaa naloo ogolaaday $400,000 miisaaniyad ah oo aan la wada heleyn. Inta Golaha Safaradiisa ku filan iyo waxaa is le'eg dalka dhan qoondada sahay safarkiisa.*

*Sida aan horay ula wadaagnay baarayaashii noo yimi filalkaas ma heli karno waxaa la geeyaa Xafiiska Iibka si uu u hubiyo dibna nooguma soo celin.*

### 2.2.2 SHARCIGA

Sharci Lr. 22 ee Sharciga Iibka Qaranka oo soo baxay 9 Agoosto 2016, Qodobkiisa 14[aad] ayaa waxa uu farayaa in qandaraasyada iyo heshiisyada caalamiga ah lagu qoro luuqadaha kala ah Ingiriis iyo Carabi halka kuwa gudaha/maxalliga ahna lagu qoro Af-Soomaali.

### Khaladka

**A. Heshiisyada gudaha oo aan lagu qorin luuqadda Soomaaliga**

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la oggaaday in Golaha Shacabka ee Baarlamaanka JFS uu heshiisyada gudaha/maxalliga ah ku qoray luuqadda Ingiriiska taas oo lid ku ah sharciga.

### Talo soo jeedin

Waa in maamulka hay'addu uu heshiisyada gudaha/maxalliga ah ku qoraa luuqadda Soomaaliga si waafaqsan sharciga. Sidoo kale, waxaa ay diyaarin karaan mid ku qoran luuqadda Ingiriisiga haddii ay u baahan yihiin dhinaca kale ee qandaraaslaha.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Heshiisyada maxaliga oo aan samayno dhammaantood waa kuwo loogu tala-galay in loo isticmaalo iibka qaranka sidaa awgeed Xafiiska iibka ayaa na siiyay habkan aan isticmaalnay. Hay'adaha dowladda dhammaantood oo uu ku jiro Xafiiska Hantidhawaraha Guud sidaa ayeey u isticmaalaan kan Af-Ingriiska ku qoran. Wasaaradda maaliyadu waxay ku doodaysaa in IMF iyo World bank sidan rabaan. Hadii qorshe kale oo kan ka duwan la keenaayo waxa ay u baahan tahay in mas'uuliyiintii keentay kan af-Ingriiska ku qoran ay noo keenaan mid Af-Soomaali ku qoran si aan u isticmaalno inkastoo aan sanadaha 2020/21 aan dhamaan ka dhigay afsoomaali una soo diray diiwaan-galin.*

## 2.3 Furitaanka iyo isticmaalka koontooyinka bangiyada

### 2.3.1 SHARCIGA

Qodobbada 42aad (3) iyo 9aad (7) ee Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud (Sharci Lr. 17) ee soo baxay 25 Diseembar 2019 wuxuu sheegayaa sida soo socota:

> 42(3) Hay'adaha Dowladda in aysan furi karin koonto bangi maxalli ah ama mid caalami ah iyada oo aan oggolaansho qoraal ah laga haysan Xisaabiyaha Guud.
>
> 9(7) Wasiirka (Wasiirka Maaliyadda) waa in uu ansixiyo furitaanka xisaab bangi ee hay'adaha Dowladda iyo qaabeynta saxiixa koontoyinka bangi.

### Khaladka

**A. Koonto bangi oo la furay iyadoo aan oggolaansho loo haysan**

Intii baaristu socotay waxaan ogaannay in Golaha Shacabku uu ka furatay koonto Bangiga Dahabshiil iyada oo aan oggolaansho qoraal ah laga haysan Xisaabiyaha Guud iyo walibana uusan ansixin Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.

| TR. | BANGIGA | KOONTO LR. | LACAGTA SOO GASHAY US $ | HARAA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1 | Dahabshiil International Bank | 104100764 | 417,625.00 | 83,823.00 |
| **WADAR** | | | **417,625.00** | **83,823.00** |

**Shaxda 2.4** Furashada koontooyin bangi oo aan hay'addu oggolaansho u haysan

### Talo soo jeedin

Waa in hay'addu ay oggolaansho iyo ansixin ka hesho Xafiiska Xisaabiyaha Guud iyo Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda si loogu oggolaado koontada bangiga sare ku xusan.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Sida aan horeyba idinkuugu caddeynay xilligii baaritaankan, ma jirto Xisaab cusub oo Golaha Shacabka BJFS ka furtay Bankiyadda Gaarka loo leeyahay, balse sida ku cad, qoraalka Xafiiska Hantidharwka Qaranka ee ku saabsan Xisaabta ka furan Dahabshiil International Bank ee 104100764, waxaa la furay 2013, waa xisaab gaar ah oo ay UNDP kor ka maamusho. laga soo*

*bilaabo markii la furay xisaabtaas, sannad walba waxaa baaritaan ku sameyn jiray Xafiiska Hantidharwka Qaranka, mana jirto amar ama talo ay ku bixiyeen in laga soo diwaan geliyo Xisaabiyaha Guud. Sidoo kale waxaa sanad walba baara Shirkad Hantidhawre Caalami ah oo ay soo kireysato UNDP kaas oo baara dhammaan mashaariicda kala duwan ee ay maalgaliso UNDP.*

*Wakhtigan Xaadirka ah, waxaan idinku wargelinaynaa in xisaabtaas gebi ahaanba UNDP ay joojisay kaalmadii ay soo marsiin jirtay, haddana uu yahay Zero Balance.*

*Waxaan qoraalkan ku caddeynayaa in aysan jirin Hay'ad ama Dowladda deeqa gaara ah siisa Golaha Shacabka BJFS, Heshiiskaan kula jirnay UNDP-wuu uu dhammaaday.*

## 2.4 Isticmaalka nidaamka maaliyadda dalka (SFIMS) ee ku aaddan lacagaha deeqaha dibedda

### 2.4.1 SHARCIGA

Qodobka 38aad (1) iyo (2) ee Sharciga Maareynta Miisaaniyadda (Sharci Lr. 17) ee soo baxay 25 Diseembar 2019 ayaa sheegaya sida soo socota:

> 38(1) Dhammaan deeqaha hay'ad Dowladeed ka hesho deeq bixiye ama cid kale waa in lagu daro Miisaaniyadda qaranka.
>
> 38(2) Looma oggola hay'ad Dowladeed iyo mid Shirkad ama Wakaalad Dowladdu leedahay toona in ay galaan heshiis ay ku helayaan deeq, taas oo ay ku jiraan deeqaha aan lacagta ahayn oo ka timid deeq bixiye ama shakhsiyaad gaar ah, iyada oo uu Wasiirku (Waasiirka Maaliyadda) la saxiixin.

Sidoo kale, Qodobka 15aad (1) ee Sharciga Maareynta Miisaaniyadda waxa uu leeyahay sida soo socota:

> 15(1) Dhammaan kharashyada hay'adaha Dowladda iyo mashaariicda dibadda laga maalgeliyo waa in lagu oggolaadaa Miisaaniyadda qaranka.

### Khaladaadka

**A. Deeqaha hay'addu dibadda ka heshay oo dhan US$417,625.00 ayaan la marin Nidaamka Maaliyadda Dowladda**

Intii baaristu socotay waxan ogaannay in Golaha Shacabka ee Baarlamaanka JFS uu deeq ka helay UNDP si loogu caawiyo Baarlamaanka DFS iyo Baarlamaanada Dowlad Goboleedyada lacagahaas oo hal sano ahaa **US $417,625.00**.

Si kastaba ha noqotee, Golaha Shacabka waxa uu isticmaaslay lacag **US 333,802.00** sannad maaliyadeedka dhammaaday 31da Diseembar 2020 iyadoo dukumiintiyada lacag bixinnadan aysan usoo gudbin baaris. Lacagahaas laguma darin miisaaniyadda qaranka sidoo kalena lama soo marin nidaamka maaliyadda dalka.

### Talo soo jeedin

Waa in maamulka ay qaadaan tilaabooyin ku habboon iyadoo kaashanaysa Wasaaradda Maaliyadda, UNDP, iyo deeq bixiyayaasha kale si loo hubiyo in deeqaha mustaqbalka logu isticmaalo Nidaamka Maareynta Xogta Maaliyadda Dalka (SFMIS).

Waa in dhammaan heshiiyada hay'adda ay gasho oo la xiriira helitaanka deeq uu qeyb ka saxiixaa Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda sidoo kalena laga soo diiwaan galiyaa Xafiiska Hantidhawrka Guud.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Sida aan horey idiinku sheegney Xisaabtan waa xisaab la furay ka hor Sharciga Lr. 17. Wakhtiga la*

*furay oo ah 2013 UNDP iyo Hay'adaha kale wax ay soo marsiiyaan Miisaaniyadda Dawladda ma jirin sababtoo ah maba dhisnayn hab maamul lacageed la isku haleyn karo wakhtigaas.*

*Wakhtigan hada la joogo oo sharcigan LR. 17 uu dhaqan-galay waxaan u sheegaynaa Hay'ada UNDP in wax walba oo wax heshiisa uuna hada naga dhaxeyn. Hadiiba ay dhacdo in markale la cusboonaysiiyo heshiiskan waxaan u sheegaynaa in wixii ay ku deeqayso soo marsiiso Wasaaradda Maaliyadda. In ay yeelaan iyo in ay joojiyaan deeqaha gabi ahaanba iyaga ayeey u taallaa.*

## 2.5 Dabagalka baarista

### 2.5.1 KHALADAADKA WARBIXIN BAARISEEDKII 2019

Shaxdaan hoose waxaa ka muuqda marxaladda khaladaadka baarista sannadkii hore lagu sameeyay hay'adda inta la fuliyay, qayb laga fuliyay ama aan waxba laga fulin.

| NO | KHALADAADKA | MARXALADDA |
|---|---|---|
| 1 | 2.1.1 Lacagbixin aan lahayn caddaymo dhammeystiran - kharashaadka | Waa la fuliyay |
| 2. | 2.1.2 Kharashaadka Gudiga Baarlamaanka oo caddeymo la'aan ah | Waa la fuliyay |
| 3. | 2.1.3 Kharashaadka caafimaadka oo aan lahayn caddeymo ku filan | La ma fulin |
| 4. | 2.1.4 Lacagbixin aan lahayn caddaymo dhammeystiran - kharashaadka safarka | La ma fulin |
| 5. | 2.2.1 Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka hantida | Waa la fuliyay |
| 6. | 2.2.2 Diiwaanka hantida oo aan joogto loo cusboonaysiin | Waa la fuliyay |
| 7. | 2.3.1 Heshiisyo aan laga soo diiwaangalin XHGQ | Waa la fuliyay |
| 8. | 2.3.2 Heshiisyada gudaha aan lagu qorin afka Soomaaliga | La ma fulin |
| 9. | 2.4.1 Maqnaanshaha baarista gudaha | La ma fulin |

**Shaxda 2.5** Khaladaadka baarista sannadkii 2019

### 2.5.2 KHALADAADKA WARBIXIN BAARISEEDKII 2018

| TR. | KHALADAADKA | MARXALADDA |
|---|---|---|
| 1. | 19.2.1Kharashaadka caafimaadka oo aan lahayn caddeymo ku filan | La ma fulin |
| 2. | 19.2.2Miisaaniyad la kala Wareejiyay Oggolaansho la'aan | La ma fulin |
| 3. | 19.2.4Kharashaadka socdaalka oo aan lahayn caddeymo ku filan | La ma fulin |
| 4. | 19.3.1Ma jirin diiwaanka hantida | Qayb ahaan ayaa la fuliyay |
| 5. | 19.3.2Ma jirin Siyaasadda maamulka hantida | La ma fulin |
| 6. | 19.4.1Heshiisyada oo aan laga soo diiwaan-galin XHG | La ma fulin |
| 7. | 19.5.1Malahayn baaraha gudaha sidoo kalana baarista gudaha lama samayn | La ma fulin |

**Shaxda 2.6** Khaladaadka baarista sannadkii 2018

# 3. Aqalka Sare

## 3.1 Hubinta kharash bixinta

### 3.1.1 SHARCIGA

Sida ay qabaan Qodobbada 31aad (1) iyo 32aad (4) ee Sharci Lr. 17 ee Maaraynta Maaliyadda Guud ee soo baxay 25 Diseembar 2019:

> 31(1) Wax kharash ah lagama bixin karo Miisaaniyadda qaranka, haddii aysan jiirin, qaansheegto ama caddeyn kale oo dheeraad ah oo looga baahan yahay sida ku xusan xeer-nidaamiyaha ama nidaamka xisaabaadku sheegayo.
>
> 32(4) Kharash bixin walba ee la oggolaaday waa in ay ku lifaaqan yihiin dhammaan dukumiintiyada kaabaya sida ku qeexan Xeer-nidaamiyaha Wasiirku soo saaray.

### Hannanka la isku waafaqsan yahay

Dukumiintiyada caddeymaha way kala duwan yihiin iyadoo ay ku xiran tahay nooca lacag bixinta, waxaana ka mid ah; dalabka iibka, heshiis saxiixan, warqadaha qaansheegashada, alaab-keenidda, guddoonka alaabta, lacag qabashada, iwm.

### Khaladka

**A. Kharashaad dhan US $109,400.00 oo aan lahayn caddeymo dhammaystiran**

Waxaa baarista lagu ogaaday in la bixiyay lacag dhan **US $109,400.00** iyada oo aan lahayn caddeymo ku filan, lacagta ayaa lagu bixiyay kharashaadka hawlmaalmeedka iyo caafimaadka ee Aqalka Sare. Arrinkan ayaa sababay in la xaqiijin waayo sax ahaanshaha lacag bixintan. Faahfaahinta kharashaadka ayaa ku xusan shaxda hoose:

| TR. | MADAX-XIGE | CIDDA LA SIIYAY | BISHA | LACAGTA US $ | FAAHFAAHIN |
|---|---|---|---|---|---|
| 1. | 2211 | 2020 CA-BPC-010 | Jan - Apr 2020 | 29,990.00 | Ma lahayn warqadda lacag-qabashada |
| **WADAR** | | | | **29,990.00** | |

**Shaxda 3.1** Kharashaadka aan lahayn caddeymo ku filan

| TR. | MADAX-XIGE | CIDDA LA SIIYAY | BISHA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1. | 2251 | 2020 CA-BPC-010 | Jan - Apr 2020 | 22,500.00 |
| 2. | 2251 | 2020 CA-BPC-012 | May - Oct 2020 | 45,000.00 |
| **WADAR** | | | | **67,500.00** |

**Shaxda 3.2** Kharashaadka caafimaadka ee aan lahayn caddeymo ku filan

### Talo soo jeedin

Waa in dhammaan lacag bixinnada ay ku salaysnaadaan ama lahaadaan caddeymo dhammaystiran, si sax ahna ay u oggolaadaan saraakiisha sare ee mas'uulka ka ah iyo in hawlaha loo guddoomo iyadoo loo eegayo ama la raacayo shuruudo cayiman.

Waa in dhammaan dukumiintiyadda lacag bixinnada lagu tiimbareeyaa "la bixiyay" isla marka lacagahooda la bixiyo si looga hortago in mar kale loo isticmaalo kharash bixin kale.

#### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Qarash bixinta howlaha guud ee aan idinla wadaagnay waxaa ku dhammeystiran dokumiintiyada caddaymaha sida; dalabka iibka, heshiis saxiixan, warqadaha qaansheegashada, alaab-keenidda iyo guddoonka alaabta. Waraqadda lacag qabashada ee lifaaqii aanu idinla wadaagnay ku jirin, waxaa baddalkeeda caddayn buuxda u noqon kara in lacagtaas khasnadda dowladda si toos ah looga wareejiyay, laguna shubay koontada shirkadda ee bangiyada maxalliga ah, waxaana laga dheehan karaa nidaamka isticmaalka maaliyadda dalka (SFMIS).*

*Dhanka kale, Waxaan aqbalnay talo soo jeedinta Hantidhawraha ee ahayd in dhammaan dukumiintiyada lacag bixinnada si taariikhaysan loogu tiimbareeyaa "LA BIXIYAY".*

*Kharaashaadka caafimaadka ee aan la wadaagnay baaraha waxaa ku jiray warqadda qaansheegadka iyo caddaynta lacag qabashada, waxaa adkaata in la helo foomka iyo warbixinadda caafimaadka.*

*Sida aan baarayaashaba la wadaagnay waxaa uu mumulka Aqalka Sare wadaa qorshe lagu galinayo caymis caafimaad dhamaan xubnaha golaha, talada Hantidhawrahana waan aqbalnay.*

*Qoraalka baaraha waxaanan lagu sheegin in aanu la wadaagnay qodobbadan hoos ku cad:*

- *Warqadaha qaansheegashada; iyo*
- *Caddeyn lacag qabashada.*

*Ugu dambeyn waxaanu rajaynaynaa waxii xog iyo caddeymo muuqda oo la la wadaago baaraha inay ka muuqdaan warbixnta si looga fogaado warbixin qabyo ah oo keeni karta marin habaabin.*

## 3.2 Maamulka iibka iyo heshiisyada

### 3.2.1 SHARCIGA

Qodobka 27aad (1) iyo (4) ee Sharci Lr. 22 ee Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka oo soo baxay 2016, ayaa sheegaya sidaan:

> 27(1) Dhammaan Hay'adaha qandaraaska iibka ayaa sameynaya qorshaha qandaraaska Iibka ee sannadlaha, ee looga gol leeyahay si lagu gaaro in qiimaha ugu badan ee kharashka guud iyo waxyaabaha kale ee sharcigan. Qorshaha qandaraaska iibsiga wuxuu taageerayaa barnaamijka iyo miisaaniyadda ay ansixisay hay'adda qandaraaska iibka.
>
> 27(4) Qorshaha qandaraaska iibka waxaa la diyaarinayaa sannad walba iyadoo lagu saleynayo miisaaniyadda sannadka Xukuumadda, iyado la xisaabinayo miiisaaniyad sannadeedka Xukuumadda.

Sidoo kale, Qodobka 61aad (1) iyo (2) ee Sharciga Iibka Qaranka, 2016 ayaa sheegaya sidaan:

> 61(1) Hay'ad kasta oo Iibin waa in ay dhistaa Waax Iib Qandaraas si waafaqsan Sharcigan.
>
> 61(2) Sarkaalka Xisaabaha ayaa go'aaminaaya inta xubnood ee ka mid noqoneysa Waaxda Qandaraaska Iibka, waana in laga shaqaaleyaa ugu yaraan hal (1) qof oo u tababaran aqoonna u leh Qandaraaska Iibka.

Qodobka 31aad (1) (9) ee Sharciga Iibka Qaranka, 2016 uu sheegayo sidaan:

> 31(1) Hay'adda Iibinta Qandaraaska ayaa keydineysa dhammaan dhokumiintiyada la xiriira heshiis kasta ee qandaraas iib iyo habraacyadeeda si waafaqsan xeerarka lagu dab-

aqi karo ee ku saabsan diiwaangelinta qoraallada Xukuumadda, laakin ugu yaraan dokumiintiyada waa in la hayaa muddo lix (6) sano ah ee soo raacda taariikhda ugu dambeysa ee dhammaadka heshiiska qandaraaska iibka ama laga soo billaabo taariikhda dhammaan la wada diido tartanka dalabka qandaraaska ama la baabi'iyo habraaca, ama sideey xaaladdu noqotaba.

31(9) Hay'adda Iibka waa in ay soo bandhigtaa:

Warbixinnada iyo dokumiintiyada ay kaydiyaan Hay'adaha Qandaraaska Iibka si waafaqsan Sharcigan waa inay heli karaan markii ay u baahdaan Maamulka, Guddiga La Dagaallanka Laaluushka, iyo Hantidhawraha Guud si ay u baaraan, Guddiga Baarlammanka uga wakiilka ah kormeerka fulinta shuruucda qaranka iyo xafiis dawladeed kasta ee lagu aaminay mas'uuliyaddaas marka la codsado.

Intaa waxaa dheer in Qodobka 69[aad] (2) ee Sharciga Iibka Qaran 2016, uu sidaan sheegaayo:

69(2) Heshiisyada Qandaraasyada Iibka lama kala qaybin karo iyadoo qasadku yahay si looga leexdo xayeysiinta ka qaybgalka tartanka furan ee looga baahan yahay dhammaan heshiisyada lagu qiyaasay in qiimohoodu ka badan yahay qaddarka lacageed ee lagu sheegay Xeer-nidaamiyaha Sharcigan.

## Khaladaadka

### A. Maqnaanshaha diyaarinta qorshaha iibka sannadka

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in Aqalka Sare uusan lahayn qorshe sannadle ah ee iibka sannad maaliyadeedka dhammaaday 31[da] Diseembar 2020 kaas oo ku salaysan miisaaniyadda qaranka.

### B. Xafiiska iibka ee hay'adda oo aan dhisneyn

Waxaa baarista lagu ogaaday in sarkaalka idman ee Aqalka Sare uusan dhisin xafiiska iibka ee hay'adda, taas oo xadgudub ku ah Sharciga Iibka Qaranka, 2016.

### C. Dukumintiyada iyo warbixinnada iibka oo aan baaris loo soo bandhigin - US $232,041.00

Maamulka Aqalka Sare waxay fuliyeen iib lacagtiisu dhantahay **US $232,041.00** balse, maamulku intii baarista lagu guda jiray ma soo bandhigin dukumiintiyada iyo warbixinnada iibka la sameeyay.

| TR. | SHIRKADDA | NOOCA ALAABTA/ADEEGGA | MUDDADA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1 | 2020 CA-BPC-012 | Kiro | Jan - Oct 2020 | 104,500.00 |
| 2 | 2020 CA-BPC-012 | Kharashaad kale | July - Oct 2020 | 68,298.00 |
| 3 | 2020 CA-BPC-012 | Qalab xafiiseed | Aug - Oct 2020 | 17,997.00 |
| 4 | 2020 CA-BPC-013 | Shidaal | Aug - Oct 2020 | 41,246.00 |
| **WADAR** | | | | **232,041.00** |

**Shaxda 3.3** Diiwaannada la xiriira iibka oo aan baarista loo soo bandhigin

## Talo soo jeedin

Waa in Aqalka Sare yeeshaa qorshe sannadle ah oo ku aaddan iibka kaas oo ku saleysan miisaaniyadda la ansixiyay ee hay'adda.

Waa in Sarkaalka Idman uu sameeyaa qeybta iibka si sharciga waafaqsan.

Waa in maamulka hay'adda la baaray ay XHGQ la wadaagaan dhammaan dukumiintiyada la xiriira iibka ee sannadka la sameeyay.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Maamulka Aqalka Sare ayaa aqbalay muhiimada ay leedahay diyaarinta qorshe wax soo iibsi oo sanadle ah oo ku saleysan Miisaaniyadda qaranka.*

*Baarayasha waxa aan la wadaagnay qaab dhismeedka hay'adda Aqalka Sare waxaana ku cad mudnaanta qeybta iibka, hadda aqalku malaha madaxa qeybta iibka, shaqaalaho yari ka jirta Aqalka awadeed, balse waxaan leenahay hawladweeno ka shaqeeya.*

*Waxaan caddeyneynaa in aan baarayaasha la wadaagnay galalalka iibka, iyo galalka kharash bixinta hey'adda oo ay ku jiraan kuwa ku xusan qeybta kore.*

*Waxaan kaloo la wadaagnay heshiisyada aan guuleystayaasha la galnay, anagoo qaar ka mid u kordhinay waqtiga heshiiska ka dib markaan ka dalbanay qiimeyn sida ku cad dukumintiyada heshiiska ee aan idinla wadaagnay.*

#### 3.2.2 SHARCIGA

Sharci Lr. 22 ee Sharciga Iibka Qaranka oo soo baxay 9 Agoosto 2016, Qodobkiisa 14aad ayaa waxa uu farayaa in qandaraasyada iyo heshiisyada caalamiga ah lagu qoro luuqaddaha kala ah Ingiriis iyo Carabi halka kuwa gudaha/maxalliga ahna lagu qoro Af-Soomaali.

### Khaladka

**A. Heshiisyada gudaha/maxalliga oo aan lagu qorin luuqadda Af-Soomaaliga**

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in maamulka Aqalka Sare ee Baarlmaanka Federaalka Soomaaliya uu heshiisyada gudaha/maxalliga ah ku qoray luuqadda Ingiriiska taas oo lid ku ah sharciga.

### Talo soo jeedin

Waa in maamulka hay'addu uu heshiisyada gudaha/maxalliga ah ku qoraa luuqadda Soomaaliga si waafaqsan sharciga. Sidoo kale, waxaa ay diyaarin karaan mid ku qoran luuqadda Ingiriisiga haddii ay u baahan yihiin dhinaca kale ee qandaraaslaha.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Maamulka Aqalka Sare ayaa aqbalay soo jeedintii Xafiiska Hantidhawrka Guud ee ahaa in dhammaan heshiisyada maxalliga ah lagu qoro Af -Soomaali si sharciga waafaqsan.*

## 3.3 Maamulka hantida

#### 3.3.1 SHARCIGA

Qodobka 11aad (1) (j) ee Sharciga Maamulka Maaraynta Maaliyadda Guud ee 2019 ayaa dhigaya in Xafiiska Hantidhawrka Guud uu mas'uul ka yahay diiwaangelinta dhammaan sharciyada iyo heshiisyada, diiwaangalinta waarannada (F16), hantida guurtada iyo maguurtadda, kala wareejinta miisaaniyadda, deeqaha, iyo dhacdo dhaqaale kasta oo kale sida ku cad sharcigan.

### Hannaanka la isku waafaqsan yahay

Waxaa jirta siyaasad, hagayaal iyo habraac loo ansixiyay in lagu maamulo hantida (guurto iyo ma-guurto) ee dhammaan hay'adaha kala duwan ee dowladda. Siyaasadda hantidu waa in ay ka kooban tahay xaaladda, isticmaalka, waxqabadka iyo dhaqan-ka-baxa.

Waxaa jira diiwaan guud oo lagu keydiyo hantida dowladda oo ay hayaan hay'adaha kala duwan. Diiwaanka waa in lagu sheego hanti waliba lamberka u gaarka ah, meesha lagu isticmaalo, xaaladda muuqaal ahaaneed IWM.

### Khaladaadka

**A. Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka hantida**

Waxaa baarista lagu ogaaday in Aqalka Sare uusan lahayn habraacyada iyo siyaasadda lagu maamulo lagu lana socdo hantida.

**B. Diiwaanka hantida oo aan joogto loo cusboonaysiin**

Maamulka hay'adda ayaa ku guul dareystay in ay cusboonaysiiyaan diiwaanka hantida kaas oo ka kooban macluumaadka, lambarka aqoonsiga, qiimaha lagu iibiyay xaaladda hantida IWM.

Hubinta muuqaal ahaaneed ee hantida ayaa lagu ogaaday in hantida hay'addu aysan wada lahayn lambarka aqoonsiga hantida (tag number) kaas oo ah lambar lagu aqoonsado oo gaar u ah si loo hubiyo loona dabagalo.

Intaas waxaa dheer, sida uu qabo Sharciga Maareynta Maaliyadda Dowladda Hantida lagama soo diiwaangalin XHGQ.

### Talo soo jeedin

Waa in la hirgaliyaa lana meel mariyaa tilmaamaha iyo siyaasadda dhammaystiran ee maamulka, hubinta iyo ka warbixnta hantida.

Waa in maamulka hay'addu ay diyaariyaan diiwaan dhammaystiran ee hantida oo leh tilmaamo cad si loo xaqiijiyo in dhammaan hantida hay'adda lagu diiwaan galiyo diiwaanka, sidoo kalana loo cusboonaysiiyaa xilliyo go'an ama cayiman.

Waa in hay'adda la baaray iyo Wasaaradda Maaliyadda ay hantida hay'adda ku sameeyaan tirakoob waqtiyaysan isla markaana ay cusboonaysiiyaan diiwaanka hantida.

Waa in maamulka hay'adda ay hantida ka soo diiwangeliyaan Xafiiska Hantidhawrka Guud si waafaqsan Sharciga Maamulka Maaliyadda.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Maamulka Aqalka Sare wuxuu aqbalay muhiimadda siyaasadda maareynta hantida iyo habraacyadiisa wuxuuna ku guda jiraa dejinta siyaasad maareyn oo dhammaystiran, hubinta, iyo ka warbixinta hantida.*

*Maamulka Aqalka Sare ayaa diyaariyey oo la wadaagay Hantidhawrka diiwaanka hantida iyo tirooyinka hantida oo dhammaystiran, kaas oo lahaa tilmaamo cad oo la xaqiijin karo in dhammaan hantida hay'addu ku qoran tahay diiwaanka, Hantidhawrkuna hubiyay. Caddaynta ka eeg Lifaaqa 2aad.*

*Waxaa kaloo xusid mudan in Aqalka Sare uu si joogto ah u cusbooneysiiyo Diiwaanka Hantida.*

*Dhinaca kale, iyadoo la tixgelinayo talooyinkii hore, Wasaaradda Maaliyadda ayaa diiwaangelisay oo isku dubaridday liiska hantida Qaranka ee Aqalka Sare waxayna mid walba siisay lambar summad. Caddaynta ka eeg Lifaaqa 3aad.*

### Jawaabta XHGQ

Xafiisku wuxuu si qoto dheer u eegay lifaaqa 2aad ee aad soo raaciseen jawaabtiina oo aad timaamteen in ay ku jiraan xogta dhammaystira ee hay'adda. Kadib qiimaynti lifaaqa Xafiisku

waxaa usoo ifbaxay in uusan dhammaystirnayn diiwaanka hantida maadaama ay ka maqan yihiin xog muhiim oo ay ka mid yihiin cidda ka mas'uulka ah hantida iyo qiimaha hantida.

## 3.4 Furitaanka iyo isticmaalka koontooyinka bangiyada

### 3.4.1 SHARCIGA

Qodobbada 42aad (3) iyo 9aad (7) ee Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud (Sharci Lr. 17) ee soo baxay 25 Diseembar 2019 wuxuu sheegayaa sida soo socota:

> 42(3) Hay'adaha Dowladda in aysan furi karin koonto bangi maxalli ah ama mid caalami ah iyada oo aan oggolaansho qoraal ah laga haysan Xisaabiyaha Guud.
>
> 9(7) Wasiirka (Wasiirka Maaliyadda) waa in uu ansixiyo furitaanka xisaab bangi ee hay'adaha Dowladda iyo qaabeynta saxiixa koontoyinka bangi.

### Khaladka

**A. Koonto bangi oo la furay iyadoo aan oggolaansho loo haysan**

Intii baaristu socotay waxaan ogaannay in Aqalka Sare ka furatay koonto Bangiga Amal iyaga oo aan oggolaansho qoraal ah ka haysan Xisaabiyaha Guud sidoo kalana uusan ansixin Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.

| TR. | BANGIGA | KOONTO LR. | TIRADA LACAGTA SOO GASHAY US $ | HARAA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1. | Amal Bank | 1012346300 | 25,000.00 | 15,040.00 |
| **WADAR** | | | **25,000.00** | **15,040.00** |

**Shaxda 3.4** Furashada koontooyin bangi oo aan hay'addu oggolaansho u haysan

### Talo soo jeedin

Waa in hay'addu ay oggolaansho iyo ansixin ka hesho Xafiiska Xisaabiyaha Guud iyo Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda si loogu oggolaado koontada bangiga sare ku xusan.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Koontada Aqalka Sare uga furan Amal bank (1012346300) waxaa si gaar ah loogu talagalay deeqaha UNDP ee Caawinta arrimaha Baarlamaanka (Parliamentary Support Project), waxaana la furay Maarso 2018 taas oo ka horreysay ansixinta sharciga maaraynta maaliyadda gaar ahaan Qodobka 42aad (3), ee Sharci Lr. 17 Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud ee Dowladda soona baxay 25ta Diseembar 2019, sadaas darteed koontadan waxaa lagu furay hannaan iyo habraac sax ah oo dhammeystiran oo aanan jabineyn sharciga.*

*Waxaan baarayaasha Hantidhawrka la wadaagaynay dhaqdhaqaaqa koonta lambar 1012346300 muddadii uu furnaa (saddexdii sano) laga soo billaabo baaristii 2018, 2019 iyo 2020. (Caddaynta furitaanka ka eeg lifaaqa 4aad).*

*Guud ahaanna shacigu gadaal uma laabto ee waxaa lagu dhaqaa waxii sharciga ka dambeeyay, taas oo ka dhigan in Koontadan la furay 2 sano ka hor ansixinta sharciga, labadaas Sano na lala wadaagay Xafiiska Hantidhawrka dhaqdhaqaaqyadii iyo warbixinnadii (Yearly Reports).*

### Jawaabta XHGQ

Hay'addu waa in ay qaado tillaabooyinka ku habboon si oggolaansho iyo ansixin ay uga Xafiiska Xisaabiyaha Guud iyo Wasaaradda Maaliyadda akoonnada ay bangiga Amal.

## 3.5 Isticmaalka nidaamka maaliyadda dalka (SFIMS) ee ku aaddan lacagaha deeqaha dibedda

### 3.5.1 SHARCIGA

Qodobka 38aad (1) iyo (2) ee Sharciga Maareynta Miisaaniyadda (Sharci Lr. 17) ee soo baxay 25 Diseembar 2019 ayaa sheegaya sida soo socota:

> 38(1) Dhammaan deeqaha hay'ad Dowladeed ka hesho deeq bixiye ama cid kale waa in lagu daro Miisaaniyadda qaranka.
>
> 38(2) Looma oggola hay'ad Dowladeed iyo mid Shirkad ama Wakaalad Dowladdu leedahay toona in ay galaan heshiis ay ku helayaan deeq, taas oo ay ku jiraan deeqaha aan lacagta ahayn oo ka timid deeq bixiye ama shakhsiyaad gaar ah, iyada oo uu Wasiirku (Waasiirka Maaliyadda) la saxiixin.

Sidoo kale, Qodobka 15aad (1) ee Sharciga Maareynta Miisaaniyadda waxa uu leeyahay sida soo socota:

> 15(1) Dhammaan kharashyada hay'adaha Dowladda iyo mashaariicda dibadda laga maalgeliyo waa in lagu oggolaadaa Miisaaniyadda qaranka.

### Khaladaadka

**A. Deeqaha hay'addu dibadda ka heshay oo ah US $97,079.00 ayaan la marin nidaamka maaliyadda dowladda**

Intii baaristu socotay waxaan ogaannay in maamulka Aqalka Sare ay hay'adda UNDP ka heleen deeq loogu talagalay in lagu caawiyo awood siinta siyaasadda haweenka lacagtaas oo ahayd **US $ 97,079.00** lacagta oo loogu talagalay muddo hal sano ah.

Waxaa kaloo la ogaaday in Aqalka Sare uu isticmaalay lacag dhan **US $25,000.00** illaa iyo waqtigii baarista la fuliyay. Lacagtan laguma darin miisaaniyadda Dowladda ee la ansixiyay ee sannadka dhammaaday 31 Diseembar 2020 sidoo kalena lama marin nidaamka maaliyadda dalka.

### Talo soo jeedin

Waa in dhammaan deeqaha hay'addu hesho ay ku wargelisaa Wasiirka Maaliyadda si loogu daro Miisaaniyadda qaranka ka hor inta aan aysan ansixin Baarlamaanka. Sidoo kale, waa in dhammaadan lacagahaas la soo mariyaa Nidaamka Maareynta Xogta Maaliyadda Dalka (SFMIS).

Waa in dhammaan heshiiyada hay'adda ay gasho oo la xiriira helitaanka deeq uu qeyb ka saxiixaa Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda si waafaqsan sharciga sidoo kalena laga soo diiwaan galiyaa Xafiiska Hantidhawrka Guud.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Miisaaniyadda Aqalka Sare ee sannadka 2020 waxaa loo gudbiyay waaxda miisaaniyadda ee Wasaaradda Maaliyadda 23 Sabteembar 2019, taas oo ka dhigan in la gudbiyay ka hor ansixinta sharcigan oo faraya arrinkan.*

*Waxaa kale oo xusid mudan in is afgaradka heshiiska (LoA) ee aanu la wadaagnay Baarayaasha la saxiixay Maarso 23, 2020, waqtiqaas oo Miisaniyadda Qaranku meel-mar-saneyd, dhaqangalna ahayd.*

*Mararka qaar waxaa adkaata in la oddoroso lacag deeq ah oo aanan la hubin in la helayo iyo in kale, sidoo kalena ka turjumeyn Dakhliga Dalka iyo Lacagta Dowladda.*

*Waxaa xusid mudan in Heshiiskan laga soo diiwaan-geliyay Xafiiska Hantidhawrka Guud ee Qaranka..*

## 3.6 Dabagalka baarista

### 3.6.1 KHALADAADKA WARBIXIN BAARISEEDKII 2019

Shaxdaan hoose waxaa ka muuqda marxaladda khaladaadka baarista sannadkii hore lagu sameeyay hay'adda inta la fuliyay, qayb laga fuliyay ama aan waxba laga fulin.

| TR. | KHALADAADKA | MARXALADDA |
|---|---|---|
| 1. | 3.1.1 Kharashaadka caafimaadka oo aan laheyn caddeymo dhammaystiran | La ma fulin |
| 2. | 3.1.2 Kharashaadka socdaalka oo aan laheyn caddeymo dhammaystiran | La ma fulin |
| 3. | 3.2.1 Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka hantida | La ma fulin |
| 4. | 3.2.2 Diiwaanka hantida oo aan joogto loo cusboonaysiin | Qayb ayaa laga fuliyay |
| 5. | 3.3.1 Heshiisyo aan laga soo diiwaangalin XHGQ | Waala fuliyay |
| 6. | 3.3.2 Heshiisyada gudaha aan lagu qorin afka Soomaaliga | La ma fulin |
| 7. | 2.4.1 Maqnaanshaha baarista gudaha | Qayb ayaa laga fuliyay |

**Shaxda 3.5** Khaladaadka baarista sannadkii 2019

### 3.6.2 KHALADAADKA WARBIXIN BAARISEEDKII 2018

| TR. | KHALADAADKA | MARXALADDA |
|---|---|---|
| 1. | 20.2.2Shaqaalaha Aqalka Sare oo aan ka diiwaan gashanayn Guddiga Qaranka Shaqaalaha Rayidka | Lama fulin |
| 2. | 20.2.3kharashaadka socdaalka oo aan lahayn caddemo ku filan | Lama fulin |
| 3. | 20.2.4Kharashaadka Socdaalka oo aan lahayn caddeymo ku filan | Lama fulin |
| 4. | 20.3.1Ma jirin diiwaanka hantida | Qayb ayaa laga fuliyay |
| 5. | 20.3.2Ma jirin siyaasada maamulka hantida | Lama fulin |
| 6. | 20.4.1Heshiisyada oo aan laga soo diiwaan-galin XHG | Lama fulin |
| 7. | 20.5.1Malahayn baaraha gudaha sidoo kalana baarista gudaha lama samayn | Qayb ayaa laga fuliyay |

**Shaxda 3.6** Khaladaadka baarista sannadkii 2018

# 4. Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

## 4.1 Hubinta kharash bixinta

### 4.1.1 SHARCIGA

Sida ay qabaan Qodobbada 31[aad] (1) iyo 32[aad] (4) ee Sharci Lr. 17 ee Maaraynta Maaliyadda Guud ee soo baxay 25 Diseembar 2019:

> 31(1) Wax kharash ah lagama bixin karo Miisaaniyadda qaranka, haddii aysan jiirin, qaansheegto ama caddeyn kale oo dheeraad ah oo looga baahan yahay sida ku xusan xeer-nidaamiyaha ama nidaamka xisaabaadku sheegayo.
>
> 32(4) Kharash bixin walba ee la oggolaaday waa in ay ku lifaaqan yihiin dhammaan dukumiintiyada kaabaya sida ku qeexan Xeer-nidaamiyaha Wasiirku soo saaray.

### Hannanka la isku waafaqsan yahay

Dukumiintiyada caddeymaha way kala duwan yihiin iyadoo ay ku xiran tahay nooca lacag bixinta, waxaana ka mid ah; dalabka iibka, heshiis saxiixan, warqadaha qaansheegashada, alaab-keenidda, guddoonka alaabta, lacag qabashada, iwm.

### Khaladka

**A. Kharashaad dhan US $735,802.15 oo aan lahayn caddeymo dhammaystiran**

Intii ay baaristu socotay ayaa waxaa la oggaaday in maamulka Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha uu isticmaalay kharashaad kala duwan iyadoo aysan lahayn caddeymo dhammaystiran. Lacag bixinnadan oo dhan **US $735,802.15** ma aysan ku lifaaqnayn caddeymo dhammaytiran. Lacagta kor ku xusan waxaa ku jiray saddex (3) lacag bixinno caddaan ah oo aan la cayimin shakhsiyaadka la siiyay taas oo dhan **US $500,000.00** iyadoo aysan lahayn caddeymo dhammaystiran.

Qaabka loo isticmaalay lacag bixinnada aan lahayn caddeymo dhammaystiran ayaa ah sida ku taxan shaxda hoose:

| TR. | MADAX-XIGE | CIDDA LA SIIYAY | BISHA | LACAGTA US $ | FAAHFAAHIN |
|---|---|---|---|---|---|
| 1 | 2212 | 2020 CA-BPC-016 | 12/16/2020 | 23,280.00 | Lacag bixintu ma wadan caddayn ku filan |
| **WADAR** | | | | **23,280.00** | |

**Shaxda 4.1** Kharashaadka aan lahayn caddeymo ku filan

| TR. | MADAX-XIGE | CIDDA LA SIIYAY | BISHA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1. | 2216 | Lacag caddaan ah oo la siiyay shaqsiyaad | Nov 2020 | 150,000.00 |
| 2. | 2216 | Lacag caddaan ah oo la siiyay shaqsiyaad | Nov 2020 | 200,000.00 |
| 3. | 2216 | Lacag caddaan ah oo la siiyay shaqsiyaad | Nov 2020 | 150,000.00 |
| 4. | 2216 | 2020 CA-BPC-011 | Nov 2020 | 39,327.68 |
| **WADAR** | | | | **712,522.15** |

| TR. | MADAX-XIGE | CIDDA LA SIIYAY | BISHA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 5. | 2216 | 2020 CA-BPC-017 | Dec 2020 | 56,540.33 |
| 6. | 2216 | 2020 CA-BPC-011 | Aug 2020 | 27,969.30 |
| 7. | 2216 | 2020 CA-BPC-011 | Sep 2020 | 12,042.55 |
| 8 | 2216 | 2020 CA-BPC-011 | Feb 2020 | 76,642.29 |
| **WADAR** | | | | **712,522.15** |

**Shaxda 4.2** Kharashaadka safarka ee aan lahayn caddeymo ku filan

### Talo soo jeedin

Waa in dhammaan lacag bixinnada ay ku salaysnaadaan ama lahaadaan caddeymo dhammaystiran, si sax ahna ay u oggolaadaan saraakiisha sare ee mas'uulka ka ah iyo in hawlaha loo guddoomo iyadoo loo eegayo ama la raacayo shuruudo cayiman.

Waa in dhammaan dukumiintiyadda lacag bixinnada lagu tiimbareeyaa "la bixiyay" isla marka lacagahooda la bixiyo si looga hortago in mar kale loo isticmaalo kharash bixin kale.

Lacagaha caddaanka ah oo dhan **US $500,000.00** kuwaas oo la siiyay shakhsiyaadka waa in la baaro oo wixii khasaare ah oo ka dhasha waa in laga soo celiyo sarkaalka mas'uulka ka ah.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Waxaan ku soo lifaaqnay dhammaan caddeymaha ka dhimanaa kharash bixinta kor ku xusan.*

*Waxaan halkaan ku soo lifaaqnay mar labaad caddeymaha ka dhimmanaa kharash bixinta socdaalka ee kor ku xusan.*

### Jawaabta XHGQ

XHGQ markuu qiimeeyay jawaabta iyo macluumaadka laga bixiyay arrinkan wuxuu caddeynayaa in aan lagu qanci karin jawaabtaan.

## 4.2 Maamulka iibka iyo heshiisyada

### 4.2.1 SHARCIGA

Qodobka 27aad (1) iyo (4) ee Sharci Lr. 22 ee Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka oo soo baxay 2016, ayaa sheegaya sidaan:

> 27(1) Dhammaan Hay'adaha qandaraaska iibka ayaa sameynaya qorshaha qandaraaska Iibka ee sannadlaha, ee looga gol leeyahay si lagu gaaro in qiimaha ugu badan ee kharashka guud iyo waxyaabaha kale ee sharcigan. Qorshaha qandaraaska iibsiga wuxuu taageerayaa barnaamijka iyo miisaaniyadda ay ansixisay hay'adda qandaraaska iibka.
>
> 27(4) Qorshaha qandaraaska iibka waxaa la diyaarinayaa sannad walba iyadoo lagu saleynayo miisaaniyadda sannadka Xukuumadda, iyado la xisaabinayo miiisaaniyad sannadeedka Xukuumadda.

### Khaladaadka

**A. Maqnaanshaha diyaarinta qorshaha iibka sannadka**

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in Xafiiska Ra'iisul Wasaaruhu uusan lahayn qorshe sannadle ah ee iibka sannad maaliyadeedka dhammaaday 31da Diseembar 2020 kaas oo ku salaysan miisaaniyadda qaranka.

### Talo soo jeedin
Waa in Xafiiska Ra'iisul Wasaaruhu yeeshaa qorshe sannadle ah oo ku aaddan iibka kaas oo ku saleysan miisaaniyadda la ansixiyay ee hay'adda.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray
*Waa aqbalnay in aan fulinno talo soo jeedinta XHGQ.*

#### 4.2.2 SHARCIGA
Sida uu qabo sharciga Iibka Qaranka lifaaqiisa 3aad tirsigiisa 1aad ayaa dhigaya:

**(A)** ***Dariiqooyinka dukaameysiga waxaa la isticmaalayaa marka qiimaha lagu qiyaasay qandaraaska iibka uu ka hooseeyo:***

| | | |
|---|---|---|
| I. | Hadduu yahay heshiisku mid qandaraas iib ee badeecad | US $ 40,000 |
| II. | Hadduu yahay heshiisku mid qandaraas iib ee adeeg | US $ 40,000 |
| III. | Hadduu yahay heshiisku mid qandaraas iib ee shaqo | US $ 50,000 |

**(B)** ***Tartan maxalli ah waxaa la isticmaali karaa hadii qiimaha lagu qiyaasay qandaraaska iibka uu ka hooseeyo:***

| | | |
|---|---|---|
| I. | Hadduu yahay heshiisku mid qandaraas iib ee badeecad | US $ 100,000 |
| II. | Hadduu yahay heshiisku mid qandaraas iib ee adeeg | US $ 40,000 |
| III. | Hadduu yahay heshiisku mid qandaraas iib ee shaqo | US $ 200,000 |

**(C)** ***Tartan caalami ah waxaa la qaban karaa marka qiimaha lagu qiyaasay qandaraaska Iibka uu ka badan yahay***:

| | | |
|---|---|---|
| I. | Hadduu yahay heshiisku mid qandaraas iib ee badeecad | US $ 100,000 |
| II. | Hadduu yahay heshiisku mid qandaraas iib ee adeeg | US $ 40,000 |
| III. | Hadduu yahay heshiisku mid qandaraas iib ee shaqo | US $ 200,000 |

### Khaladka
**A. Maqnaanshaha u hoggaansanaanta xaddiga wax soo iibsiga**

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in la sameeyay iib alaab iyo adeeg qiimahoodu dhan yahay **US $755,525.50** iyada oo aan loo marin hannanka sare ee wax soo iibsiga. Halkii laga isticmaali lahaa tartan furan ee iibka alaabta iyo adeegyada intii lagu guda jiray sanadka, iyadoo la isticmaalay dukaamaysi toos ah taas oo si cad uga hor imaaneysa Sharciga Iibka Qaranka.

Shaxda hoose waxa uu muujinaxyaa faahfaahin kooban ee dukaamaysiga tooska ah ee la sameeyay halka laga samayn lahaa tartan furan.

| TR. | QANDARAASLAHA | UJEEDDADA | MUDDADA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1. | 2020 CA-BPC-020 | Dayactir gaadiid | 1 sano | 182,250.00 |
| 2. | 2020 CA-BPC-025 | Raashin iyo qudaar | | 99,177.50 |
| 3. | 2020 CA-BPC-026 | Adeegga nadaafadda | 10 bilood | 89,098.00 |
| 4. | 2020 CA-BPC-027 | Lacag gaari lagu soo gaday | | 385,000.00 |
| **WADAR** | | | | **755,525.50** |

**Shaxda 4.3** Xaddiga iibka oo aan loo raacin sida sharciga iibku qabo

### Talo soo jeedin

Hay'addu waa in ay xaddiga saxda ah ee iibka ay u isticmaashaa dhamman iibka si waafaqsan Sharciga Iibka Qaranka.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Waan aqbalnay in aan fulinno talo soo jeedinta XHGQ.*

#### 4.2.3 SHARCIGA

Sharci Lr. 17 ee Maareynta Maaliyadda Guud ee Dowladda oo soo baxay 25 Diseembar 2019, Qodobka 38[aad] (5) wuxuu dhigayaa dhammaan heshiisyada deeqaha hay'adaha Dowladda, Maamul Goboleedyada iyo hay'adaha ganacsiga ee Dowladda waa in laga diiwaan geliyaa Xafiiska Hantidhawrka Guud.

Sidoo kale, sida ku cad Qodobka 11[aad] (c) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, Xafiiska Hantidhawrka Guud wuxuu leeyahay awoodda diiwaan galinta heshiisyada iyo qandaraasyada ay galeen hay'adaha Dowladda. Qodobka 14[aad] ee Wax-ka-Beddelka Qodobka 84[aad] Sharciga Iibka Qaranka wuxuu sidoo kale caddeeyay in ay waajib ku tahay hay'adaha Dowladda in ay soo diiwaan galiyaan heshiisyadda iyo qandaraasyadda ay galaan ka hor inta aysan dhaqan galin.

### Khaladka

**A. Heshiisyo qiimahoodu dhanyahay US $4,740,667.65 oo aan laga soo diiwaangalin XHGQ**

Waxaa baarista lagu ogaaday in heshiisyo qiimahoodu sare ku xusan yihiin aan laga soo diiwaangalin XHGQ. XHGQ waqtigii lagu guda jiray baarista sannadlaha waxaa laga yaabaa in uusan caddeyn karin waxyaabaha heshiisyada ku xusan ee la xiriira wixii hanti ah maadaama aan laga soo diiwaangalin Xafiiska. Xafiiska Hantidhawrka Guud ma sheegi karo in la fuliyay qodobbada heshiiska lagu galay, sidoo kalana in heshiisyadaas ay ku jiraan danaha Dowladda Federaalka Soomaaliya. Faahfaahinnada heshiisyada ayaa ka muuqda shaxda hoose:

| TR. | QANDARAASLAHA | UJEEDDADA | MUDDADA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1. | 2020 CA-BPC-018 | Hawlo xiriirka guud | 12 bilood | 30,000.00 |
| 2. | 2020 CA-BPC-018 | Agab koronto iyo kombuyuutarro | 10 bilood | Lama sheegin |
| 3. | 2020 CA-BPC-018 | Hawlo xiriirka guud | 1 bil | 28,000.00 |
| 4. | 2020 CA-BPC-018 | Adeeg raashin | 10 bilood | Lama sheegin |
| 5. | 2020 CA-BPC-019 | Cunto iyo jiif | 10 bilood | 29,954.50 |
| 6. | 2020 CA-BPC-020 | Farsamada gaadiidka | 12 bilood | 182,250.00 |
| 7. | 2020 CA-BPC-022 | Raashin iyo qudaar | 6 bilood | 5,328.00 |
| 8. | 2020 CA-BPC-011 | Adeegga socdaalka | 12 bilood | Lama sheegin |
| 9. | 2020 CA-BPC-036 | Adeegga socdaalka | 12 bilood | Lama sheegin |
| 10. | 2020 CA-BPC-024 | Dayactir ceel | 1 bil | 45,450.00 |
| 11. | 2020 CA-BPC-015 | Agab iyo adeeg | 12 bilood | 7,500.00 |
| 12. | 2020 CA-BPC-025 | Raashin iyo qudaar | 1 bil | 99,177.50 |
| **WADAR** | | | | **4,740,667.65** |

| TR. | QANDARAASLAHA | UJEEDDADA | MUDDADA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 13. | 2020 CA-BPC-026 | Dayactir dhisme | 1 bil | 50,075.00 |
| 14. | 2020 CA-BPC-026 | Raashin iyo qudaar | 10 bilood | 89,098.00 |
| 15. | 2020 CA-BPC-031 | Adeeg raashin | 12 bilood | Lama sheegin |
| 16. | 2020 CA-BPC-032 | Adeegga socdaalka | 10 bilood | Lama sheegin |
| 17. | 2020 CA-BPC-033 | Adeegga socdaalka | 10 bilood | Lama sheegin |
| 18. | 2020 CA-BPC-034 | Farsamada gaadiidka | 12 bilood | Lama sheegin |
| 19. | 2020 CA-BPC-034 | Iib gaadiid | 1 bil | 385,000.00 |
| 20. | 2020 CA-BPC-028 | Kiro gaadiid iyo shidaal | 6 bilood | 23,500.00 |
| 21. | 2020 CA-BPC-015 | Adeeg internet | 12 bilood | 7,500.00 |
| 22. | 2020 CA-BPC-013 | Adeeg shidaal iyo saliid | 10 bilood | 23,400.00 |
| 23. | Support to Aid Management and Coordination in Somalia | Hormarinta iyo hirgelinta shirarka iyo tababarada caalamiga oo ay qayb ka yihiin dowladda federaalka iyo dowlad gobaleedyada Soomaaliya si loo tayeeyo wax qabadka iyo aqoonta. | 12 bilood | 973,265.06 |
| 24. | Preventing and Countering Violent Extremism (PCVE) | Ka hortagga fakarka xagjirka ee la dagaalanka argagixasa ayadoo ay qaby ka yihin dowladda Soomaaliya iyo maamul goboleedyada | 12 bilood | 1,338,44000 |
| 25. | Social Sector Roadmap | Xoojinta iyo dib-u-habaynta waaxyaha Arrimaha Bulshda ee dowladda si la iskugu hormariyo isla xisaabtanka hay'adaha dowladda dhinacyda la xariira arimaha bulshada iyo hormarintooda. | | 366,650.0 |
| 26. | Cross-cutting Capacity Development (CCCD) | Xoojinta Awoodaha Qaran iyo Ka-qayb-qaadashada Waajibaadka Caalamiga ee Deegaanka. | 12 bilood | 300,087.00 |
| 27. | Integrated Water Resource Management (IWRM) | Mashruuca Caawinta Maamulka Biyaha ee Beeraleyda iyo Xoolo-dhaqatada | 10 bilood | 55,000.00 |
| 28. | Nationally Determined Contributions (NDC) | Dadaallada lagu yaraynayo wasakhaynta hawada ee keenta isbeddelka cimilada | 10 bilood | 167,000.00 |
| 29. | Government-UN Joint Program for Sustainable Charcoal Reduction and Alternative Livelihoods (PROSCAL) | Taageeridda Qaraarka Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay ee 2063 (2012) ee Mamnuucaya Dhoofinta Dhuxusha Soomaaliya iyo Yaraynta Isticmaalka Gudaha | 1 month | 103,200.00 |
| 30. | Joint Security Sector Governance Program (JSSGP) | Sare-u-qaadidda Hannaanka Demoqoraadiyadda iyo Xoojinta Isla-Xisaabtanka Laamaha Amniga | 11 bilood | 390,500.0 |
| 31. | Institutional Strengthening for the Implementation of the Montreal Protocol | U Hoggaansanaanta Hab-maamuuska Montreal | | 40,292.00 |
| **WADAR** | | | | **4,740,667.65** |

**Shaxda 4.4** Heshiisyada aan laga soo diiwaangelin XHGQ

### Talo soo jeedin

Waa in dhammaan qandaraasyada iyo heshiisyada laga diiwaangaliyaa Xafiiska Hantidhawraha Guud si waafaqsan shuruucda iyo xeerarka.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Horey ayaan uga diiwaangelinnay inta badan qandaraasyada Xafiiska Hantidhawrka Guud kuwa harsanna waan ka soo diiwaan gelin doonaa.*

#### 4.2.4 SHARCIGA

Qodobka 14aad ee Sharciga Iibka Qaranka ee 2016, ayaa waxa uu farayaa in qandaraasyada iyo heshiisyada caalamiga ah lagu qoro luuqadaha kala ah Ingiriis iyo Carabi halka kuwa gudaha/maxalliga ahna lagu qoro Af-Soomaali.

### Khaladka

**A. Heshiisyada gudaha oo aan lagu qorin luuqadda Soomaaliga**

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha uu heshiisyada gudaha/maxalliga ah ku qoray luuqadda Ingiriiska taas oo lid ku ah sharciga.

### Talo soo jeedin

Waa in maamulka hay'addu uu heshiisyada gudaha/maxalliga ah ku qoraa luuqadda Soomaaliga si waafaqsan sharciga. Sidoo kale, waxaa ay diyaarin karaan mid ku qoran luuqadda Ingiriisiga haddii ay u baahan yihiin dhinaca kale ee qandaraaslaha.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Waxaan hirgalinnay talooyinkii ka soo baxay XHGQ, waxaana ku qornay qandaraasyada Af -Soomaali.*

## 4.3 Maamulka hantida

#### 4.3.1 SHARCIGA

Qodobka 11aad (1) ( j) ee Sharciga Maamulka Maaraynta Maaliyadda Guud ee 2019 ayaa dhigaya in Xafiiska Hantidhawrka Guud uu mas'uul ka yahay diiwaangelinta dhammaan sharciyada iyo heshiisyada, diiwaangalinta waarannada (F16), hantida guurtada iyo maguurtadda, kala wareejinta miisaaniyadda, deeqaha, iyo dhacdo dhaqaale kasta oo kale sida ku cad sharcigan.

### Hannaanka la isku waafaqsan yahay

Waxaa jirta siyaasad, hagayaal iyo habraac loo ansixiyay in lagu maamulo hantida (guurto iyo ma-guurto) ee dhammaan hay'adaha kala duwan ee dowladda. Siyaasadda hantidu waa in ay ka kooban tahay xaaladda, isticmaalka, waxqabadka iyo dhaqan-ka-baxa.

Waxaa jira diiwaan guud oo lagu keydiyo hantida dowladda oo ay hayaan hay'adaha kala duwan. Diiwaanka waa in lagu sheego hanti waliba lamberka u gaarka ah, meesha lagu isticmaalo, xaaladda muuqaal ahaaneed IWM.

### Khaladaadka

**A. Maamulka gaadiidka oo ah mid liita**

Muddadii lagu guda jiray baarista Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha waxaa nalala wadaagay liiska gaadiidka. Sideed (8) gaari oo ka mid ah laguma diiwaangalin magaca XRW sidoo kalena ma aysan lahayn buugaagta lahaanshiyaha. Sidoo kale saddex (3) ka mid ah gaadiidka lama keenin si muuqaal ahaan loogu xaqiijiyo. Faahfaahinta gaadiidka ayaa lagu muujiyay shaxda hoose:

| TR. | NOOCA GAARIGA | CIDDA BIXISAY | CAQAAYAD LR. | FAAHFAAHIN |
|---|---|---|---|---|
| 1. | TOYOTA HILUX | CIP | MROF22G900736863 | Gaariga lama keenin si muuqaal ahaan loogu xaqiijiyo |
| 2. | TOYOTA HILUX PROOF | Maamulka Gobolka Banaadir | MROHX8CD2G0895367 | Gaariga lama keenin si muuqaal ahaan loogu xaqiijiyo |
| 3. | TOYOTA HILUX | CIP | MR0HX8CD9M0938256 | Gaariga lama keenin si muuqaal ahaan loogu xaqiijiyo |
| 4. | TOYOTA V8 | XRW | 7X4500-P PRE | Ma lahan taargada iyo buugga lahaanshaha gaadiidka dowladda. |
| 5 | TOYOTA V8 | XRW | JTMHX01L5081724 | Ma lahan taargada iyo buugga lahaanshaha gaadiidka dowladda. |
| 6 | TOYOTA V8 | XRW | JTMHX01J3G5076248 | Ma lahan taargada iyo buugga lahaanshaha gaadiidka dowladda. |
| 7 | TOYOTA HILUX | Agaasimaha Bey'ada | MRODP9CP50498499 | Ma lahan taargada iyo buugga lahaanshaha gaadiidka dowladda. |
| 8. | TOYOTA HILUX | Agaasimaha Bey'ada | 95693 | Ma lahan taargada iyo buugga lahaanshaha gaadiidka dowladda. |
| 9. | TOYOTA HILUX | CIP | MROHX8CD0L0937741 | Ma lahan taargada iyo buugga lahaanshaha gaadiidka dowladda. |
| 10. | TOYOTA SURF | XRW | TRN2-15-0018880 | Ma lahan taargada iyo buugga lahaanshaha gaadiidka dowladda. |
| 11. | TOYOTA SURF | XRW | TRN215-0004993 | Ma lahan taargada iyo buugga lahaanshaha gaadiidka dowladda. |

**Shaxda 4.5** Gaadiidka hay'adda la baaray

### Talo soo jeedin

Waa in dhammaan gaadiidku ay lahaadaan buugaagta lahaanshiyaha gaadiidka oo ku diiwaan gashan magaca hay'adda, uuna sarkaalka sare ee mas'uulka ka ah u keydiyo si xafidan.

Waa in maamulka hay'adda ay saddex (3) gaadiid ee aan la keenin xiligii baaritaanku socday la keenaa si muuqaal ahaan loogu xaqiijiyo.

Waa in maamulka hay'adda ay hantida ka soo diiwangeliyaan Xafiiska Hnatidhawrka Guud si waafaqsan Sharciga Maamulka Maaliyadda.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Dhammaan gaadiidka Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha waxay ku jiraan diiwaanka rasmiga ah ee hantida Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha si waafaqsan habka diiwaangelinta. Intaa waxaa dheer, waxaan u gudbinnay liiska baabuurta uu Xafiisku leeyahay Wasaaradda Gaadiidka si loo bixiyo buugaagta lahaanshaha baabuurta.*

## 4.4 Furitaanka iyo isticmaalka koontooyinka bangiyada

### 4.4.1 SHARCIGA

Qodobbada 42$^{aad}$ (3) iyo 9$^{aad}$ (7) ee Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud (Sharci Lr. 17) ee soo baxay 25 Diseembar 2019 wuxuu sheegayaa sida soo socota:

> 42(3) Hay'adaha Dowladda in aysan furi karin koonto bangi maxalli ah ama mid caalami ah iyada oo aan oggolaansho qoraal ah laga haysan Xisaabiyaha Guud.
>
> 9(7) Wasiirka (Wasiirka Maaliyadda) waa in uu ansixiyo furitaanka xisaab bangi ee hay'adaha Dowladda iyo qaabeynta saxiixa koontoyinka bangi.

### Khaladaadka

**A. Koonto bangi oo la furay iyadoo aan oggolaansho loo haysan**

Intii baaristu socotay waxaan ogaannay in Xafiiska Ra'iisul Wasaaruhu ka furatay koontooyin bangiyada Dahabshiil iyo Amal in kasta oo aanu oggolaansho qoraal ah ka haysan Xisaabiyaha Guud iyo walibana uusan ansixin Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.

| TR. | BANGIGA | KOONTO LR. | TIRADA LACAGTA SOO GASHAY US $ | HARAA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1. | Dahabshiil Bank International | 104109386 | 366,650.60 | 32,515.00 |
| 2. | Amal Bank | 1012913455 | 165,910.00 | 0.00 |
| 3. | Amal Bank | 1013179247 | 144,890.00 | 0.00 |
| 4. | Amal Bank | 1013647995 | 29,000.00 | 38,000.00 |
| **WADAR** | | | **706,450.60** | **70,515.00** |

**Shaxda 4.6** Furashada koontooyin bangi oo aan hay'addu oggolaansho u haysan

### Talo soo jeedin

Waa in hay'addu ay oggolaansho iyo ansixin ka hesho Xafiiska Xisaabiyaha Guud iyo Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda si loogu oggolaado koontada bangiga sare ku xusan.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Waxaan aqbalnay talo bixinta HHG, waxaana dhammeystiri doonnaa dhammaan hannaanka xisaabaadka uu XRW.*

## 4.5 Isticmaalka nidaamka maaliyadda dalka (SFIMS) ee ku aaddan lacagaha deeqaha dibedda

### 4.5.1 SHARCIGA

Qodobka 38$^{aad}$ (1) iyo (2) ee Sharciga Maareynta Miisaaniyadda (Sharci Lr. 17) ee soo baxay 25 Diseembar 2019 ayaa sheegaya sida soo socota:

> 38(1) Dhammaan deeqaha hay'ad Dowladeed ka hesho deeq bixiye ama cid kale waa in lagu daro Miisaaniyadda qaranka.
>
> 38(2) Looma oggola hay'ad Dowladeed iyo mid Shirkad ama Wakaalad Dowladdu leedahay toona in ay galaan heshiis ay ku helayaan deeq, taas oo ay ku jiraan deeqaha aan lacagta ahayn oo ka timid deeq bixiye ama shakhsiyaad gaar ah, iyada oo uu Wasiirku (Waasiirka Maaliyadda) la saxiixin.

Sidoo kale, Qodobka 15$^{aad}$ (1) ee Sharciga Maareynta Miisaaniyadda waxa uu leeyahay sida soo socota:

> 15(1) Dhammaan kharashyada hay'adaha Dowladda iyo mashaariicda dibadda laga maalgeliyo waa in lagu oggolaadaa Miisaaniyadda qaranka.

## Khaladka

### A. Deeqaha hay'addu dibadda ka heshay oo aan la marin nidaamka maaliyadda dowladda

Intii baaristu socotay waxan ogaannay in XRW uu fuliyay (9) mashruuc oo lacagahooda ay gaarayaan **US $3,734,434.65** kuwaas oo aan lagu darin miisaaniyada Qaranka sidoo kalana aan la soo marin nidaamka maaliyadda dalka. Xafiiska ayaa lacagta ka isticmaalay lacag dhan **US $1,498,711.00** oo ka mid ah guud ahaan lacagta. Faahfaahin dheeriga ah ayaa ku xusan shaxda hoose:

| TR. | MASHRUUCA | MAAL-GALIYAHA / DEEQ-BIXIYAHA | UJEEDDADA MASHRUUCA | KA FAA'IDAYSTAHA | MUDDADA | LACAGTA LOO QORSHEEYAY US $ | LACAGTA LA ISTICMAALAY US $ |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| 1. | Support to Aid Management and Coordination in Somalia (ACU) | Norway, Sweden, Switzerland, the United Kingdom, USAID, the UNDP/UN Integrated Office, and the World Bank | Hormarinta iyo hirgelinta shiraarka iyo tababbarrada caalamiga oo ay qayb ka yihiin dowladda federaalka iyo dowlad gobaleedyda Somalia si loo tayeeyo waxqabadka iyo aqoonta. | Dhinacyo kala duwan | 12 bilood | 973,265.65 | 711,261.00 |
| 2. | Preventing and Countering Violent Extremism (PCVE) | Nederland, Sweden & UNDP | Ka hortagga fakarka xagjirka ee la dagaalanka argagixasa ayadoo ay qayb ka yihiin Dowladda Soomaaliya iyo Maamul Goboleedyadu. | Hay'adaha Amniga ee DFS iyo Maamul-Goboleedyada | 12 bilood | 1,338,440.00 | Direct Payment |
| 3. | Social Sector Roadmap | UNICEF & WFP | Xoojinta iyo dib-u-habaynta waaxyaha arrimaha bulshda ee dowladda si la iskugu hormariyo isla-xisaabtanka hay'adaha dowladda dhinacyda la xariira arrimaha bulshada iyo hormarintooda. | Hay'adaha dowladda kuwooda la xariira arrimaha bulshada iyo hormarintooda | 12 bilood | 366,650.00 | 366,650.0 |
| 4. | Cross-cutting Capacity Development (CCCD) | GEF UNDP Co-Financing | Xoojinta awoodaha qaran iyo ka-qayb-qaadashada waajibaadka caalamiga ee deegaanka. | Dhinacyo kala duwan | 12 bilood | 300,087.00 | 165,910.00 |
| 5. | Integrated Water Resource Management (IWRM) | GEF UNDP Co-Financing | Mashruuca Caawinta Maamulka Biyaha Beeraleyda iyo Xoola-dhaqatada | Hay'adaha dowladda kuwooda la xariira arrimaha bulshada iyo hormarintooda | 10 bilood | 55,000.00 | 55,000.00 |
| 6. | Nationally Determined Contributions (NDC) | GEF UNDP Co-Financing | Dadaallada lagu yaraynayo wasakhaynta hawada ee keenta isbeddelka cimilada | Dhinacyo kala duwan | 10 bilood | 167,000.00 | 144,890.00 |
| 7. | Government-UN Joint program for sustainable Charcoal reduction and Alternative livelihoods (PROSCAL) | Sweden, Italy, and EU | Taageeridda Qaraarka Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay ee 2063 (2012) ee Mamnuucaya Dhoofinta Dhuxusha Soomaaliya iyo Yaraynta Isticmaalka Gudaha. | Dhinacyo kala duwan | 1 bil | 103,200.00 | 29,000.00 |
| **WADAR** | | | | | | **3,734,434.65** | **1,498,711.00** |

| TR. | MASHRUUCA | MAAL-GALIYAHA / DEEQ-BIXIYAHA | UJEEDDADA MASHRUUCA | KA FAA'IDAYSTAHA | MUDDADA | LACAGTA LOO QORSHEEYAY US $ | LACAGTA LA ISTICMAALAY US $ |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| 8. | Institutional Strengthening for the implementation of the Montreal Protocol | Compliance with the Montreal Protocol | U Hoggaansanaanta hab maamuuska Montreal | Laamaha Amniga | | 40,292.00 | 26,000.00 |
| 9. | Joint Security Sector reform program (JSSGP) | EU & UK | Sare-u-qaadidda Hannaanka Demoqoraadiyadda iyo Xoojinta Isla-Xisaabtanka Laamaha Amniga | Dhinacyo kala duwan | 11 bilood | 390,500.00 | Direct Payment |
| **WADAR** | | | | | | **3,734,434.65** | **1,498,711.00** |

**Shaxda 4.7** Deeqaha hay'addu dibadda ka heshay oo aan la marin nidaamka maaliyadda dowladda

## Talo soo jeedin

Waa in dhammaan deeqaha hay'addu hesho lagu daraa Miisaaniyadda qaranka sidoo kalana la soo mariyaa nidaamka maaliyadeed ee dalka.

Waa in dhammaan heshiiyada hay'adda ay gasho oo la xiriira helitaanka deeq uu qeyb ka saxiixaa Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda si waafaqsan sharciga sidoo kalena laga soo dii-waan galiyaa Xafiiska Hantidhawrka Guud.

Waa in maamulka XRW uu ku wargaliyo Wasaaradda Maaliyadda dhammaan deeqa ay heleen inta harsan oo ah lacag caddadkeedu yahay **US $2,235,723.65**.

## Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Waxaan kala shaqayn doonnaa Wasaaradda Maaliyadda hirgelinta talooyinka XHGQ.*

# 4.6 Dabagalka baarista

### 4.6.1 KHALADAADKA WARBIXIN BAARISEEDKII 2019

Shaxdaan hoose waxaa ka muuqda marxaladda khaladaadka baarista sannadkii hore lagu sameeyay hay'adda inta la fuliyay, qayb laga fuliyay ama aan waxba laga fulin.

| TR. | KHALADAADKA | MARXALADDA |
|---|---|---|
| 1. | 4.1.1 Lacagbixin aan lahayn caddaymo dhammeystiran - kharashaadka | Qeyb ayaa laga fuliyay |
| 2. | 4.2.1 Diiwaanka hantida oo aan joogto loo cusboonaysiin | Waa la fuliyay |
| 3. | 4.2.2 Maamulka gaadiidka oo ah mid liita | Lama fulin |
| 4. | 4.3.1 Heshiisyo aan laga soo diiwaangalin XHGQ | Lama fulin |

**Shaxda 4.8** Khaladaadka baarista sannadkii 2019

### 4.6.2 KHALADAADKA WARBIXIN BAARISEEDKII 2018

| TR. | KHALADAADKA | MARXALADDA |
|---|---|---|
| 1 | 17.3.1Ma jirin diiwaanka hantida | Qeyb ayaa laga fuliyay |
| 2 | 17.3.4Hubinta gaadiidka oo ahayd mid liidata | Qeyb ayaa laga fuliyay |

**Shaxda 4.9** Khaladaadka baarista sannadkii 2018

# 5. Wasaaradda Arrimaha Dibadda

## 5.1 Hubinta kharash bixinta

### 5.1.1 SHARCIGA

Sida ay qabaan Qodobbada 31aad (1) iyo 32aad (4) ee Sharci Lr. 17 ee Maaraynta Maaliyadda Guud ee soo baxay 25 Diseembar 2019:

> 31(1) Wax kharash ah lagama bixin karo Miisaaniyadda qaranka, haddii aysan jiirin, qaansheegto ama caddeyn kale oo dheeraad ah oo looga baahan yahay sida ku xusan xeer-nidaamiyaha ama nidaamka xisaabaadku sheegayo.
>
> 32(4) Kharash bixin walba ee la oggolaaday waa in ay ku lifaaqan yihiin dhammaan dukumiintiyada kaabaya sida ku qeexan Xeer-nidaamiyaha Wasiirku soo saaray.

Qodobka 33aad (1) (b & t) ee Sharci Lr. 17 ee Maaraynta Maaliyadda Guud ee soo baxay 25 Diseembar 2019:

> 33(1) Iyada oo aan wax laga beddelin wadarta qoondada ee Hay'ad Dawladeed, Wasiirku waa uu kala wareejin karaa, marka codsi uga yimaado Sarkaalka Idman, kala wareejinta.
>
> b) Lacag ku jirta qoondada hay'adda ee kharashyada joogtada ah oo laga wareejiyo looguna wareejiyo isla kharsahyada kale oo joogtada ah ama kharashyada Ra'sumaalka; iyo
>
> t) Kharashyada Ra'asumaalka ayaa loo wareejin karaa isla kharashyada kale ee ra'asumaal.

### Hannanka la isku waafaqsan yahay

Dukumiintiyada caddeymaha way kala duwan yihiin iyadoo ay ku xiran tahay nooca lacag bixinta, waxaana ka mid ah; dalabka iibka, heshiis saxiixan, warqadaha qaansheegashada, lacag qabashada, dukumiintiyada safarka iwm..

### Khaladaadka

**A. Kharashaad dhan US $213,482.74 oo aan lahayn caddeymo dhammaystiran**

Waxaa baarista lagu ogaaday in la bixiyay lacag dhan **US $213,482.74** iyada oo aan lahayn caddeymo ku filan taas oo lid ku ah sharciga. Kharashaadkan ayaa lagu bixiyay hawlo kala duwan ee Wasaaradda Arrimaha Dibedda. Arrinkan ayaa sababay in la xaqiijin waayo sax ahaanshaha lacag bixintan. Faahfaahin dheeri ah eeg jaantuska hoos ku xusan:

| TR. | MADAX-XIGE | CIDDA LA SIIYAY | BISHA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1. | 2216 | 2020 CA-BPC-043 | Jan – Apr 2020 | 116,432.00 |
| 2. | 2216 | 2020 CA-BPC-044 | Jan 2020 | 4,250.74 |
| 3. | 2216 | 2020 CA-BPC-045 | Dec 2020 | 40,000.00 |
| **WADAR** | | | | **213,482.74** |

| TR. | MADAX-XIGE | CIDDA LA SIIYAY | BISHA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 4. | 2216 | 2020 CA-BPC-046 | Dec 2020 | 50,000.00 |
| 5. | 2216 | 2020 CA-BPC-046 | Dec 2020 | 2,800.00 |
| **WADAR** | | | | **213,482.74** |

**Shaxda 5.1** Kharashaadka aan lahayn caddeymo ku filan

**B. Miisaaniyad la kala wareejiyay oggolaansho la'aan - US $54,000.00**

Waxaa baarista lagu ogaaday in lacago ku jiray madax-xigaha 2231 ee miisaaniyadda hay'adda oo loogu tala-galay la taliyayaasha xirfadaha ayaa waxaa lagu bixiyay wax ka duwan wixii loo qorsheeyay.

| TR. | ORIGINAL MADAX-XIGE | KA FAA'IDAYSTAHA | BISHA | LACAGTA US $ | FAAHFAAHIN |
|---|---|---|---|---|---|
| 1. | 2231 | Agaasimayaal | Nov 2020 | 54,000.00 | Waxaa loogu tala-galay in lagu bixiyo adeegga lataliyeyaasha laakiin waxaa lagu bixiyay dhiirigelin agaasimeyaal. |
| **WADAR** | | | | **54,000.00** | |

**Shaxda 5.2** Miisaaniyad la kala wareejiyey oggolaansho la'aan

### Talo soo jeedin

Waa in dhammaan lacag bixinnada ay ku salaysnaadaan ama lahaadaan caddeymo dhammaystiran, si sax ahna ay u oggolaadaan saraakiisha sare ee mas'uulka ka ah iyo in hawlaha loo guddoomo iyadoo loo eegayo ama la raacayo shuruudo cayiman.

Waa in dhammaan dukumiintiyadda lacag bixinnada lagu tiimbareeyaa "la bixiyay" isla marka lacagahooda la bixiyo si looga hortago in mar kale loo isticmaalo kharash bixin kale.

Waa in la joojiyaa kala wareejinta lacagaha madax-xigayaasha iyadoo uusan oggolaan Wasiirka Maaliyadda.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Sida muuqata waxaa kaliya oo dukumiintiyada ka maqan lacag qabashada oo xilli danbe timaadda marka ay lacata si toos ah ay Wasaaradda Maaliyaddu u siiso shirkadaha, in muddo ah kaddib. Waxaa dhacay khalad farsamo oo la sixi doono. Khaladkaas oo ah inaan lagu lifaaqin dukumiinyada lala wadaagay Baarayaasha Warqadihii lacag qabashada maaddama aan isku xilli la diyaarin oo si gooni ah loo soo ururiyo marka ay shirkaduhu lacagta ay ka helaan Wasaaradda Maaliyadda.*

*Anagoo qaadanay taladii hantidhawrka guud waxaanu sixi doonaa khaladaadyadii hore u dhacay ee kusaabsan kala wareejinada lacagaha, anagoo hadda ka dib ilaalin doona nidaamka miisaaniyadda dawladda.*

## 5.2 Maamulka iibka iyo heshiisyada

### 5.2.1 SHARCIGA

Qodobka 27aad (1) iyo (4) ee Sharci Lr. 22 ee Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka oo soo baxay 2016, ayaa sheegaya sidaan:

27(1) Dhammaan Hay'adaha qandaraaska iibka ayaa sameynaya qorshaha qandaraaska Iibka ee sannadlaha, ee looga gol leeyahay si lagu gaaro in qiimaha ugu badan ee kharashka guud iyo waxyaabaha kale ee sharcigan. Qorshaha qandaraaska iibsiga wuxuu taageerayaa barnaamijka iyo miisaaniyadda ay ansixisay hay'adda qandaraaska iibka.

27(4) Qorshaha qandaraaska iibka waxaa la diyaarinayaa sannad walba iyadoo lagu saleynayo miisaaniyadda sannadka Xukuumadda, iyado la xisaabinayo miiisaaniyad sannadeedka Xukuumadda.

Sidoo kale, Qodobka 61aad (1) iyo (2) ee Sharciga Iibka Qaranka, 2016 ayaa sheegaya sidaan:

61(1) Hay'ad kasta oo Iibin waa in ay dhistaa Waax Iib Qandaraas si waafaqsan Sharcigan.

61(2) Sarkaalka Xisaabaha ayaa go'aaminaaya inta xubnood ee ka mid noqoneysa Waaxda Qandaraaska Iibka, waana in laga shaqaaleyaa ugu yaraan hal (1) qof oo u tababaran aqoonna u leh Qandaraaska Iibka.

Qodobka 31aad (1) (9) ee Sharciga Iibka Qaranka, 2016 uu sheegayo sidaan:

31(1) Hay'adda Iibinta Qandaraaska ayaa keydineysa dhammaan dhokumiintiyada la xiriira heshiis kasta ee qandaraas iib iyo habraacyadeeda si waafaqsan xeerarka lagu dabaqi karo ee ku saabsan diiwaangelinta qoraallada Xukuumadda, laakin ugu yaraan dokumiintiyada waa in la hayaa muddo lix (6) sano ah ee soo raacda taariikhda ugu dambeysa ee dhammaadka heshiiska qandaraaska iibka ama laga soo billaabo taariikhda dhammaan la wada diido tartanka dalabka qandaraaska ama la baabi'iyo habraaca, ama sideey xaaladdu noqotaba.

31(9) Hay'adda Iibka waa in ay soo bandhigtaa:

Warbixinnada iyo dokumiintiyada ay kaydiyaan Hay'adaha Qandaraaska Iibka si waafaqsan Sharcigan waa inay heli karaan markii ay u baahdaan Maamulka, Guddiga La Dagaallanka Laaluushka, iyo Hantidhawraha Guud si ay u baaraan, Guddiga Baarlammanka uga wakiilka ah kormeerka fulinta shuruucda qaranka iyo xafiis dawladeed kasta ee lagu aaminay mas'uuliyaddaas marka la codsado.

Intaa waxaa dheer in Qodobka 69aad (2) ee Sharciga Iibka Qaran 2016, uu sidaan sheegaayo:

69(2) 2. Heshiisyada Qandaraasyada Iibka lama kala qaybin karo iyadoo qasadku yahay si looga leexdo xayeysiinta ka qaybgalka tartanka furan ee looga baahan yahay dhammaan heshiisyada lagu qiyaasay in qiimohoodu ka badan yahay qaddarka lacageed ee lagu sheegay Xeer-nidaamiyaha Sharcigan.

## Khaladaadka

### A. Maqnaanshaha diyaarinta qorshaha iibka sannadka

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in Wasaaradda Arrimaha Dibaddu aysan lahayn qorshe sannadle ah ee iibka sannad maaliyadeedka dhammaaday 31da Diseembar 2020 kaas oo ku salaysan miisaaniyadda qaranka.

### B. Xafiiska iibka ee hay'adda oo aan dhisneyn

Waxaa baarista lagu ogaaday in sarkaalka idman ee Wasaaradda Arrimaha Dibedda uusan dhisin xafiiska iibka ee hay'adda, taas oo xadgudub ku ah Sharciga Iibka Qaranka, 2016.

### C. Diiwaannada la xariira iibka oo aan baaris loo soo gudbin, kuwaas oo qiimahoodu ahaa US $693,280.00

Maamulka hay'adda ayaa sameeyay iib la xiriira adeeg iyo alaabo qiimahoodu dhan yahay **US $693,280.00**, kuwaa oo aan loo soo gudbin baarista XHGQ. Diiwannada la soo gudbiyay XHGQ ayaa haa heshiis saxiixan oo keliya. Sidaas darteed waxay mamulka Wasaaraddu ku xadgudbeen qodobka 31 (1 & 9) ee sharciga Iibka Qaranka. Faahfaahin dheeriya, eeg jaantuska hoose:

| TR. | SHIRKADDA | NOOCA ALAABTA/ADEEGGA | MUDDADA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1. | 2020 CA-BPC-047 | Qalab xafiis | Apr – Jul 2020 | 32,500.00 |
| 2. | 2020 CA-BPC-047 | Dayactir | Apr – Jul 2020 | 32,320.00 |
| 3. | 2020 CA-BPC-048 | Shidaal | Jan – Apr 2020 | 32,000.00 |
| 4. | 2020 CA-BPC-042 | Kiro | Jan – Apr 2020 | 19,000.00 |
| 5. | 2020 CA-BPC-042 | Dayactir | Jan – Apr 2020 | 32,320.00 |
| 6. | 2020 CA-BPC-042 | Qalab xafiis | Jan – Apr 2020 | 32,500.00 |
| 7. | 2020 CA-BPC-042 | Alaab | Jan – Apr 2020 | 31,320.00 |
| 8. | 2020 CA-BPC-041 | Alaab | Mar – Dec 2020 | 31,320.00 |
| 9. | 2020 CA-BPC-049 | Dhismo | Mar – Dec 2020 | 450,000.00 |
| **WADAR** | | | | **693,280.00** |

**Shaxda 5.3** Diiwaannada la xiriira iibka oo aan baarista loo soo bandhigin

## Talo soo jeedin

Waa in Wasaaraddu yeelataa qorshe sannadle ah oo ku aaddan iibka kaas oo ku saleysan miisaaniyadda la ansixiyay ee hay'adda.

Waa in sarkaal idman ee hay'adda uu dhisaa xafiiska iibka ee hay'adda si waafaqsan sharciga.

Maamulka hay'addu waa in ay faahfaahin ka bixyaan sababta adeegga iyo alaabta qiimaheedu gaareyso **US $693,280.00**, uusan waafaqsanayn sharciga Iibka Qaranka, 2016.

Maamulka waa in ay baarayasha la wadagaan dhammaan diiwannada iyo dukumiintiyada iib-ka la sameeyay.

## Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Waxaan qaadanay taladii hantidharka guud, waxaana sixi doona qaladaadkii hore u dhacay, waxaana samayn doonaa qorshe iib sanadka 2021.*

*Waaxda Maamulka & Maaliyadda ee Wasaaradda Arrimaha Dibedda & Iskaashiga Caalamiga ah waxay si xushmad leh idiinla socodsiinaysaa in aan weynay koobiga nidaamkii loo maray bixinta qandaraasyada kharashaadka joogta ah (Running Cost) 2020 ee aad na soo weydiiseen.*

### 5.2.2 SHARCIGA

Sida uu qabo Qodobka 38[aad] (5) ee Sharci Lr. 17 ee Maareynta Maaliyadda Guud ee soo baxay 25 Diseembar 2019, dhammaan heshiisyada deeqaha hay'adaha Dowladda, Maamul Goboleedyada iyo hay'adaha ganacsiga ee Dowladda waa in laga diiwaan geliyaa Xafiiska Hantidhawrka Guud.

Sidoo kale, sida ku cad Qodobka 11aad (c) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, Xafiiska Hantidhawrka Guud wuxuu leeyahay awoodda diiwaan galinta heshiisyada iyo qandaraasyada ay galeen hay'adaha Dowladda. Qodobka 14aad ee Wax-ka-Beddelka Qodobka 84aad Sharciga Iibka Qaranka wuxuu sidoo kale caddeeyay in ay waajib ku tahay hay'adaha Dowladda in ay soo diiwaan galiyaan heshiisyadda iyo qandaraasyadda ay galaan ka hor inta aysan dhaqan galin.

### Khaladka

**A. Heshiisyo qiimahoodu dhanyahay US $693,280.00 ayaan laga soo diiwaan galin XHGQ**

Waxaa baarista lagu ogaaday in heshiisyo qiimahoodu gaarayo **US $693,280.00** aan laga soo diiwaangalin XHGQ. Xafiiska Hantidhawrka Guud waqtigii lagu guda jiray baarista sannadlaha waxaa laga yaabaa in uusan caddeyn karin waxyaabaha heshiisyada ku xusan ee la xiriira wixii hanti ah maadaama aan laga soo diiwaangalin Xafiiska. Xafiiska Hantidhawrka Guud ma sheegi karo in la fuliyay qodobbada heshiiska lagu galay, sidoo kalana in heshiisyadaas ay ku jiraan danaha Dowladda Federaalka Soomaaliya. Faahfaahinnada heshiisyada ayaa ku xusan shaxda hoose.

| TR. | QANDARAASLAHA | UJEEDDADA | MUDDADA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1. | 2020 CA-BPC-047 | Qalab xafiis | 4 bilood | 32,500.00 |
| 2. | 2020 CA-BPC-047 | Dayactir | 4 bilood | 32,320.00 |
| 3. | 2020 CA-BPC-048 | Adeeg shidaal iyo saliid | 4 bilood | 32,000.00 |
| 4. | 2020 CA-BPC-042 | Kiro | 4 bilood | 19,000.00 |
| 5. | 2020 CA-BPC-042 | Dayactir | 4 bilood | 32,320.00 |
| 6. | 2020 CA-BPC-042 | Qalab xafiis | 4 bilood | 32,500.00 |
| 7. | 2020 CA-BPC-042 | Raashin | 4 bilood | 31,320.00 |
| 8. | 2020 CA-BPC-041 | Raashin | 10 bilood | 31,320.00 |
| 9 | 2020 CA-BPC-049 | Dhismo | 10 bilood | 450,000.00 |
| **WADAR** | | | | **693,280.00** |

**Shaxda 5.4** Heshiisyada aan laga soo diiwaangelin XHGQ

### Talo soo jeedin

Waa in dhammaan qandaraasyada iyo heshiisyada laga diiwaangaliyaa Xafiiska Hantidhawraha Guud si waafaqsan shuruucda iyo xeerarka.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Hay'adda la baaray wax jawaab qoraal ah lagama helin oo la xiriirta arrintaan.*

### 5.2.3 SHARCIGA

Sharci Lr. 22 ee Sharciga Iibka Qaranka oo soo baxay 9 Agoosto 2016, Qodobkiisa 14aad ayaa waxa uu farayaa in qandaraasyada iyo heshiisyada caalamiga ah lagu qoro luuqadaha kala ah Ingiriis iyo Carabi halka kuwa gudaha/maxaliga ahna lagu qoro Af-Soomaali.

### Khaladka

**A. Heshiisyada gudaha oo aan lagu qorin luuqadda Soomaaliga**

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in Wasaaraddu aysan heshiisyada gudaha/maxalliga ah ku qoray luuqadda Ingiriiska taas oo lid ku ah sharciga.

### Talo soo jeedin

Waa in maamulka hay'addu uu heshiisyada gudaha/maxalliga ah ku qoraa luuqadda Soomaaliga si waafaqsan sharciga. Sidoo kale, waxaa ay diyaarin karaan mid ku qoran luuqadda Ingiriisiga haddii ay u baahan yihiin dhinaca kale ee qandaraaslaha.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Waxaan qaadanay talada Xafiiska Hantidhawrka Guud, heshiisyada maxaliga ah, wixii hadda ka dambeeya waxaanu ku qori doonnaa Af Soomaali.*

## 5.3 Maamulka hantida

### 5.3.1 SHARCIGA

Qodobka 11$^{aad}$ (1) ( j) ee Sharciga Maamulka Maaraynta Maaliyadda Guud ee 2019 ayaa dhigaya in Xafiiska Hantidhawrka Guud uu mas'uul ka yahay diiwaangelinta dhammaan sharciyada iyo heshiisyada, diiwaangalinta waarannada (F16), hantida guurtada iyo maguurtadda, kala wareejinta miisaaniyadda, deeqaha, iyo dhacdo dhaqaale kasta oo kale sida ku cad sharcigan.

### Hannaanka la isku waafaqsan yahay

Waxaa jirta siyaasad, hagayaal iyo habraac loo ansixiyay in lagu maamulo hantida (guurto iyo ma-guurto) ee dhammaan hay'adaha kala duwan ee dowladda. Siyaasadda hantidu waa in ay ka kooban tahay xaaladda, isticmaalka, waxqabadka iyo dhaqan-ka-baxa.

Waxaa jira diiwaan guud oo lagu keydiyo hantida dowladda oo ay hayaan hay'adaha kala duwan. Diiwaanka waa in lagu sheego hanti waliba lamberka u gaarka ah, meesha lagu isticmaalo, xaaladda muuqaal ahaaneed IWM.

### Khaladka

**A. Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka hantida**

Waxaa baarista lagu ogaaday in Wasaaradda Arrimaha Dibeddu aysan lahayn habraacyada iyo siyaasadda lagu maamulo lagu lana socdo hantida.

**B. Diiwaanka hantida oo aan joogto loo cusboonaysiin**

Maamulka hay'adda ayaa ku guul dareystay in ay cusboonaysiiyaan diiwaanka hantida kaas oo ka kooban macluumaadka, lambarka aqoonsiga, qiimaha lagu iibiyay xaaladda hantida IWM.

Hubinta muuqaal ahaaneed ee hantida ayaa lagu ogaaday in hantida hay'addu aysan wada lahayn lambarka aqoonsiga hantida (tag number) kaas oo ah lambar lagu aqoonsado oo gaar u ah si loo hubiyo loona dabagalo.

Intaas waxaa dheer, sida uu qabo Sharciga Maareynta Maaliyadda Dowladda Hantida lagama soo diiwaangalin XHGQ.

### Talo soo jeedin

Waa in la hirgaliyaa lana meel mariyaa tilmaamaha iyo siyaasadda dhammaystiran ee maamulka, hubinta iyo ka warbixnta hantida.

Waa in maamulka hay'addu ay diyaariyaan diiwaan dhammaystiran ee hantida oo leh tilmaamo cad si loo xaqiijiyo in dhammaan hantida hay'adda lagu diiwaan galiyo diiwaanka, sidoo kalana loo cusboonaysiiyaa xilliyo go'an ama cayiman.

Waa in hay'adda la baaray iyo Wasaaradda Maaliyadda ay hantida hay'adda ku sameeyaan tirakoob waqtiyaysan isla markaana ay cusboonaysiiyaan diiwaanka hantida.

Waa in maamulka hay'adda ay hantida ka soo diiwangeliyaan Xafiiska Hnatidhawrka Guud si waafaqsan Sharciga Maamulka Maaliyadda.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

Hay'adda la baaray wax jawaab qoraal ah lagama helin oo la xiriirta arrintaan

## 5.4 Furitaanka iyo isticmaalka koontooyinka bangiyada

### 5.4.1 SHARCIGA

Qodobbada 42[aad] (3) iyo 9[aad] (7) ee Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud (Sharci Lr. 17) ee soo baxay 25 Diseembar 2019 wuxuu sheegayaa sida soo socota:

> 42(3) Hay'adaha Dowladda in aysan furi karin koonto bangi maxalli ah ama mid caalami ah iyada oo aan oggolaansho qoraal ah laga haysan Xisaabiyaha Guud.
>
> 9(7) Wasiirka (Wasiirka Maaliyadda) waa in uu ansixiyo furitaanka xisaab bangi ee hay'adaha Dowladda iyo qaabeynta saxiixa koontoyinka bangi.

### Khaladaadka

#### A. Koonto bangi oo la furay iyadoo aan oggolaansho loo haysan

Intii baaristu socotay waxaan ogaannay in Wasaaradda Arrimaha Dibaddu ay ka furatay koontooyin bangiyada Premier Bank iyo Dahabshiil iyada oo aan oggolaansho qoraal ah ka haysan Xisaabiyaha Guud iyo walibana uusan ansixin Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.

| TR. | BANGIGA | KOONTO LR. | TIRADA LACAGTA SOO GASHAY US $ | HARAA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1. | Premier Bank | 20700041001 | 312,633.50 | 99,864.50 |
| 2. | Dahabshiil Bank | 0005975 | 4.00 | 4.00 |
| **WADAR** | | | **312,637.50** | **99,868.50** |

**Shaxda 5.5** Furashada koontooyin bangi oo aan hay'addu oggolaansho u haysan

### Talo soo jeedin

Waa in hay'addu ay oggolaansho iyo ansixin ka hesho Xafiiska Xisaabiyaha Guud iyo Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda si loogu oggolaado koontada bangiga sare ku xusan.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Wasaaraddu waxay lacag kasta oo soo gaarta ku muujisaa xisaabxirka 3 biloodka ama sannadlaha ah ee lala Wadaago Wasaaradda Maaliyadda, waxayna Wasaaraddu hubin doontaa in la raaco talada Baarayaasha marka la eego akoonada.*

*F.G. Wasaaradda Maalliyadda Ayaan u dirnay warqad aan uga codsanayno in ay dib noogu ogolaadaan Isticmaalka Xisaab Gaara ee noo furan, anagoo raacnay taladii Hantidharka copy ka mida warqadaana waa idiin soo dirnay.*

## 5.5 Isticmaalka nidaamka maaliyadda dalka (SFIMS) ee ku aaddan lacagaha deeqaha dibedda

### 5.5.1 SHARCIGA

Qodobka 38aad (1) iyo (2) ee Sharciga Maareynta Miisaaniyadda (Sharci Lr. 17) ee soo baxay 25 Diseembar 2019 ayaa sheegaya sida soo socota:

> 38(1) Dhammaan deeqaha hay'ad Dowladeed ka hesho deeq bixiye ama cid kale waa in lagu daro Miisaaniyadda qaranka.
>
> 38(2) Looma oggola hay'ad Dowladeed iyo mid Shirkad ama Wakaalad Dowladdu leedahay toona in ay galaan heshiis ay ku helayaan deeq, taas oo ay ku jiraan deeqaha aan lacagta ahayn oo ka timid deeq bixiye ama shakhsiyaad gaar ah, iyada oo uu Wasiirku (Waasiirka Maaliyadda) la saxiixin.

Sidoo kale, Qodobka 15aad (1) ee Sharciga Maareynta Miisaaniyadda waxa uu leeyahay sida soo socota:

> 15(1) Dhammaan kharashyada hay'adaha Dowladda iyo mashaariicda dibadda laga maalgeliyo waa in lagu oggolaadaa Miisaaniyadda qaranka.

### Khaladaadka

**A. Deeqaha dibadda oo dhan US $300,000.00 ay hay'addu heshay oo aan lagu darin Miisaaniyadda qaranka sidoo kalana aan la marin nidaamka maaliyadda dowladda**

Intii baaristu socotay waxaan ogaannay in Wasaaradda Arrimaha Dibedda ay heshay deeq intii lagu guda jiray sannadkii 2020. Lacagtan laguma darin miisaaniyadda Dowladda ee la ansixiyay ee sannadka dhammaaday 31 Diseembar 2020 sidoo kalena lama marin nidaamka maaliyadda dalka.

Muddada heshiisyada ayaan lagu astayn heshiiska dhexdiisa taas oo adkaysay in la ogaado xiliga uu heshiiska soconaayo.

Intaa waxaa dheer in maamulka Wasaaradda ay lacag dhan **US $100,000.00** oo ka timid dalka Shiinaha oo loogu talagaly COVID-19 ay Wasaaraddu u isticmaashay dhismaha maqaayad kafeega (coffee house) oo ku dhex taalla Wasaaradda Arrimaha Dibedda taas oo xadgudub ku ah qodobbada heshiiska. Faahfaahinada ayaa ku xusan shaxda hoose:

| TR. | MASHRUUCA | MAAL-GALIYAHA / DEEQ-BIXIYAHA NAME | UJEEDDADA MASHRUUCA | KA FAA'IDAYSTAHA | MUDDADA | LACAGTA LOO QORSHEEYAY US $ | LACAGTA LA ISTICMAALAY US $ |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| 1. | Dayactir Wasaaradda Arrimaha Dibadda | Dowladda Turkiga | Dayactirka Wasaaradda Arrimaha Dibedda | Wasaaradda Arrimaha Dibadda | Lama sheegin | 200,000.00 | 200,000.00 |
| 2. | COVID-19 | Dowladda Shiinaha | Ka hortagga Caabuqa COVID-19, laakiin waxaa lagu dhisay maqaayad kafeega oo wasaaradda ku dhex taal. | Wasaaradda Arrimaha Dibadda | Lama sheegin | 100,000.00 | 100,000.00 |
| **WADAR** | | | | | | **300,000.00** | **300,000.00** |

**Shaxda 5.6** Deeqaha hay'addu dibadda ka heshay oo aan la marin nidaamka maaliyadda dowladda

### Talo soo jeedin

Waa in dhammaan deeqaha hay'addu hesho lagu daraa Miisaaniyadda qaranka sidoo kalana la soo mariyaa nidaamka maaliyadeed ee dalka.

Maamulku hay'adda waa in ay si dhammaystiran u cayimaad muddada heshiisyada marka ay heshiis la galayaan dhinacyo kale.

Waa in dhammaan heshiiyada hay'adda ay gasho oo la xiriira helitaanka deeq uu qeyb ka saxiixaa Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda si waafaqsan sharciga sidoo kalena laga soo dii-waan galiyaa Xafiiska Hantidhawrka Guud.

Waa maamulka Wasaaraddu uu jawaab maangal ah ka bixiyaa sababta lacagta loogu tala-ga-lay COVID-19 ka ay ugu dhiseen maqaaxi.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Sida ka muuqata jawaabta qeybta kore waxaa hawshiisyada la galay sannadka 2021 wixii duku-miintiyo ee la xiriirana waa la hayaa.*

### Jawaabta XHGQ

Hay'addu kama soo bixin khaladaadka Warqadda Maamulka lagu qoray jawaab lagu qanci karo.

## 5.6 Dabagalka baarista

### 5.6.1 KHALADAADKA WARBIXIN BAARISEEDKII 2019

Shaxdaan hoose waxaa ka muuqda marxaladda khaladaadka baarista sannadkii hore lagu sameeyay hay'adda inta la fuliyay, qayb laga fuliyay ama aan waxba laga fulin.

| TR. | KHALADAADKA | MARXALADDA |
|---|---|---|
| 1. | 5.1.1 Ma jirin xisaabaadka sannadka oo la soo gudbiyay si loo baaro | Waa la fuliyay |
| 2. | 5.2.1 Lacagbixin aan lahayn caddaymo dhammeystiran - kharashaadka | Waa la fuliyay |
| 3. | 5.2.2 Lacagbixin aan lahayn caddaymo dhammeystiran - kharashaadka safarka | La ma fulin |
| 4. | 5.3.1 Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka hantida | La ma fulin |
| 5. | 5.3.2 Diiwaanka hantida oo aan joogto loo cusboonaysiin | Waa la fuliyay |
| 6. | 5.3.3 Maamulka gaadiidka oo ah mid liita | Qayb ayaa laga fuliyay |
| 7. | 5.4.1 Heshiisyo aan laga soo diiwaangalin XHGQ | La ma fulin |
| 8. | 5.4.2 Heshiisyada gudaha aan lagu qorin afka Soomaaliga | La ma fulin |
| 9. | 5.5.1 Ku-guuldarraysiga fulinta howlaha hantidhawrka gudaha | La ma fulin |

**Shaxda 5.7** Khaladaadka baarista sannadkii 2019

### 5.6.2 KHALADAADKA WARBIXIN BAARISEEDKII 2018

| TR. | KHALADAADKA | MARXALADDA |
|---|---|---|
| 1. | 4.1.1Ma jirin xisaabaadka sannadka oo la soo gudbiyay si loo baaro | La ma fulin |
| 2. | 4.2.1Kharashaadka hawl-maalmeedka oo aan lahayn caddeymaha ku filan | Waa la fuliyey |
| 3. | 4.2.2Kharashaadka socdaalka oo aan lahayn caddeymaha ku filan | La ma fulin |
| 4. | 4.3.1Ma jirin diiwaanka hantida | Qayb ayaa laga fuliyay |
| 5. | 4.3.2Ma jirin siyaasada maamulka hantida | La ma fulin |
| 6. | 4.3.4Maamulka Gaadiidka oo ah Mid Liita | La ma fulin |
| 7. | 4.4.1Heshiisyada oo aan laga soo diiwaan-galin XHGQ | La ma fulin |
| 8. | 4.5.1Malahayn baaraha gudaha sidoo kalana baarista gudaha lama samayn | Qayb ayaa laga fuliyay |

**Shaxda 5.8** Khaladaadka baarista sannadkii 2018

# 6. Wasaaradda Maaliyadda

## 6.1 Hubinta kharash bixinta

### 6.1.1 SHARCIGA

Sida ay qabaan Qodobbada 31aad (1) iyo 32aad (4) ee Sharci Lr. 17 ee Maaraynta Maaliyadda Guud ee soo baxay 25 Diseembar 2019:

> 31(1) Wax kharash ah lagama bixin karo Miisaaniyadda qaranka, haddii aysan jiirin, qaansheegto ama caddeyn kale oo dheeraad ah oo looga baahan yahay sida ku xusan xeer-nidaamiyaha ama nidaamka xisaabaadku sheegayo.
>
> 32(4) Kharash bixin walba ee la oggolaaday waa in ay ku lifaaqan yihiin dhammaan dukumiintiyada kaabaya sida ku qeexan Xeer-nidaamiyaha Wasiirku soo saaray.

### Hannanka la isku waafaqsan yahay

Dukumiintiyada caddeymaha way kala duwan yihiin iyadoo ay ku xiran tahay nooca lacag bixinta, waxaana ka mid ah; dalabka iibka, heshiis saxiixan, warqadaha qaansheegashada, alaab-keenidda, guddoonka alaabta, lacag qabashada, iwm.

### Khaladaadka

**A. Kharashaad dhan US $148,963.59 oo aan lahayn caddeymo dhammaystiran**

Waxaa baarista lagu ogaaday in la bixiyay lacag dhan **US $148,963.59** iyada oo aan lahayn caddeymo ku filan, kharashaadkan ayaa lagu bixiyay hawlo kala duwan ee Wasaaradda Maaliyadda. Arrinkan ayaa sababay in la xaqiijin waayo sax ahaanshaha lacag bixintan.

| TR. | MADAX-XIGE | CIDDA LA SIIYAY | BISHA | LACAGTA US $ | FAAHFAAHIN |
|---|---|---|---|---|---|
| 1 | 2211 | 2020 CA-BPC-188 | Jul 2020 | 26,790.00 | Ma lahayn warqadda lacag-qabashada |
| 2 | 2215 | 2020 CA-BPC-050 | Jul 2020 | 9,477.00 | Ma lahayn warqadda lacag-qabashada |
| 3 | 2215 | 2020 CA-BPC-050 | Aug 2020 | 9,449.00 | Ma lahayn warqadda lacag-qabashada |
| 4 | 2215 | 2020 CA-BPC-051 | Sep 2020 | 7,315.00 | Ma lahayn warqadda lacag-qabashada |
| 5 | 2314 | 2020 CA-BPC-047 | Sep 2020 | 26,345.00 | Ma lahayn warqadda lacag-qabashada |
| **WADAR** | | | | **79,376.00** | |

**Shaxda 6.1** Kharashaadka aan lahayn caddeymo ku filan

| TR. | MADAX-XIGE | CIDDA LA SIIYAY | BISHA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1. | 2216 | Shaqsiyaad | Aug, Sep & Nov | 43,250.00 |
| 2. | 2216 | 2020 CA-BPC-043 | Aug & Nov | 26,337.59 |
| **WADAR** | | | | **69,587.59** |

**Shaxda 6.2** Kharashaadka safarka ee aan lahayn caddeymo ku filan

### Talo soo jeedin

Waa in dhammaan lacag bixinnada ay ku salaysnaadaan ama lahaadaan caddeymo dhammaystiran, si sax ahna ay u oggolaadaan saraakiisha sare ee mas'uulka ka ah iyo in hawlaha loo guddoomo iyadoo loo eegayo ama la raacayo shuruudo cayiman.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Hay'adda la baaray wax jawaab qoraal ah lagama helin oo la xiriirta arrintaan.*

## 6.2 Maamulka iibka iyo heshiisyada

### 6.2.1 SHARCIGA

Qodobka 27aad (1) iyo (4) ee Sharci Lr. 22 ee Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka oo soo baxay 2016, ayaa sheegaya sidaan:

> 27(1) Dhammaan Hay'adaha qandaraaska iibka ayaa sameynaya qorshaha qandaraaska Iibka ee sannadlaha, ee looga gol leeyahay si lagu gaaro in qiimaha ugu badan ee kharashka guud iyo waxyaabaha kale ee sharcigan. Qorshaha qandaraaska iibsiga wuxuu taageerayaa barnaamijka iyo miisaaniyadda ay ansixisay hay'adda qandaraaska iibka.
>
> 27(4) Qorshaha qandaraaska iibka waxaa la diyaarinayaa sannad walba iyadoo lagu saleynayo miisaaniyadda sannadka Xukuumadda, iyado la xisaabinayo miiisaaniyad sannadeedka Xukuumadda.

Sida uu qabo sharciga Iibka Qaranka lifaaqiisa 3aad tirsigiisa 1aad ayaa dhigaya:

> ***(A)*** ***Dariiqooyinka dukaameysiga waxaa la isticmaalayaa marka qiimaha lagu qiyaasay qandaraaska iibka uu ka hooseeyo:***
>
> | | | |
> |---|---|---|
> | I. | Hadduu yahay heshiisku mid qandaraas iib ee badeecad | US $ 40,000 |
> | II. | Hadduu yahay heshiisku mid qandaraas iib ee adeeg | US $ 40,000 |
> | III. | Hadduu yahay heshiisku mid qandaraas iib ee shaqo | US $ 50,000 |
>
> ***(B)*** ***Tartan maxalli ah waxaa la isticmaali karaa hadii qiimaha lagu qiyaasay qandaraaska iibka uu ka hooseeyo:***
>
> | | | |
> |---|---|---|
> | I. | Hadduu yahay heshiisku mid qandaraas iib ee badeecad | US $ 100,000 |
> | II. | Hadduu yahay heshiisku mid qandaraas iib ee adeeg | US $ 40,000 |
> | III. | Hadduu yahay heshiisku mid qandaraas iib ee shaqo | US $ 200,000 |
>
> ***(C)*** ***Tartan caalami ah waxaa la qaban karaa marka qiimaha lagu qiyaasay qandaraaska Iibka uu ka badan yahay***:
>
> | | | |
> |---|---|---|
> | I. | Hadduu yahay heshiisku mid qandaraas iib ee badeecad | US $ 100,000 |
> | II. | Hadduu yahay heshiisku mid qandaraas iib ee adeeg | US $ 40,000 |
> | III. | Hadduu yahay heshiisku mid qandaraas iib ee shaqo | US $ 200,000 |

## Khaladaadka

### A. Maqnaanshaha diyaarinta qorshaha iibka sannadka

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in Wasaaradda Maaliyaddu aysan lahayn qorshe sannadle ah ee iibka sannad maaliyadeedka dhammaaday 31[da] Diseembar 2020 kaas oo ku salaysan miisaaniyadda qaranka.

### B. Hab dukaamaysi aan ku habboonayn ayaa loo adeegsaday alaab lacagteedu dhan tahay US $728,642.85

Waxaa baarista lagu ogaaday, in maamulka Wasaaradda Maaliyaddu ay lacag dhan **US $728,642.85** u isticmaaleen hab dukaamaysi ah oo baalmarsan nidaamka tartanka furan ee sharcigu sheegayo. Sidaas darteed, maamulka Wasaaraddu ma hayaan wax asbaab maangal ah oo keeni kara in sharciga la baalmaro sida ku xusan jadwalka jaantuska iibka qeybtiisa 3aad ee sharciga Iibka Qaranka ee 2016. Faahfaahinta ayaa ku xusan shaxda hoose:

| TR. | SHIRKADDA | NOOCA | HAY'ADDA | LACAGTA US $ | FAAHFAAHIN |
|---|---|---|---|---|---|
| 1. | 2020 CA-BPC-052 | Dukaameysi | Wasaaradda Maaliyadda | 109,613.00 | Lacagta waxey ka badan tahay xaddiga dukaameysiga |
| 2. | 2020 CA-BPC-022 | Dukaameysi | Wasaaradda Maaliyadda | 65,217.00 | Lacagta waxey ka badan tahay xaddiga dukaameysiga |
| 3. | 2020 CA-BPC-022 | Maxalli | Wasaaradda Maaliyadda | 264,288.00 | Lacagta waxey ka badan tahay xaddiga tartan ee maxalliga ah |
| 4. | 2020 CA-BPC-053 | Dukaameysi | Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed | 110,922.35 | Lacagta waxey ka badan tahay xaddiga dukaameysiga |
| 5. | 2020 CA-BPC-054 | Dukaameysi | Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed | 178,602.50 | Lacagta waxey ka badan tahay xaddiga dukaameysiga |
| **WADAR** | | | | **728,642.85** | |

**Shaxda 6.3** Hab dukaamaysi oo baalmarsan nidaamka Iibka Qaranka

## Talo soo jeedin

Waa in Wasaaraddu yeelataa qorshe sannadle ah oo ku aaddan iibka kaas oo ku saleysan miisaaniyadda la ansixiyay ee hay'adda.

Maamulka hay'addu waa in ay faahfaahin kabixyaan sababta adeegga iyo alaabta qiimaheedu gaareyso **US $728,642.85**, uusan u waafaqsanayn sharciga Iibka Qaranka ee 2016.

Maamulku waa in ay baarayasha la wadaagaan dhammaan diiwannada iyo dukumintiyada iibka la sameeyay.

## Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

Hay'adda la baaray wax jawaab qoraal ah lagama helin oo la xiriirta arrintaan.

### 6.2.2 SHARCIGA

Sida uu qabo Qodobka 38aad (5) ee Sharci Lr. 17 ee Maareynta Maaliyadda Guud ee soo baxay 25 Diseembar 2019, dhammaan heshiisyada deeqaha hay'adaha Dowladda, Maamul Goboleedyada iyo hay'adaha ganacsiga ee Dowladda waa in laga diiwaan geliyaa Xafiiska Hantidhawrka Guud.

Sidoo kale, sida ku cad Qodobka 11[aad] (c) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, Xafiiska Hantidhawrka Guud wuxuu leeyahay awoodda diiwaan galinta heshiisyada iyo qandaraasyada ay galeen hay'adaha Dowladda. Qodobka 14aad ee Wax-ka-Beddelka Qodobka 84aad Sharciga Iibka Qaranka wuxuu sidoo kale caddeeyay in ay waajib ku tahay hay'adaha Dowladda in ay soo diiwaan galiyaan heshiisyadda iyo qandaraasyadda ay galaan ka hor inta aysan dhaqan galin.

## Khaladka

### A. Heshiisyada oo aan laga soo diiwaangalin XHGQ US $3,149,011.98

Waxaa baarista lagu ogaaday in heshiisyo qiimahoodu gaarayo **US $3,149,011.98** aan laga soo diiwaangalin XHGQ. Xafiiska Hantidhawrka Guud waqtigii lagu guda jiray baarista sannadla-ha waxaa laga yaabaa in uusan caddeyn karin waxyaabaha heshiisyada ku xusan ee la xiriira wixii hanti ah maadaama aan laga soo diiwaangalin Xafiiska. Xafiiska Hantidhawrka Guud ma sheegi karo in la fuliyay qodobbada heshiiska lagu galay, sidoo kalana in heshiisyadaas ay ku jiraan danaha Dowladda Federaalka Soomaaliya. Faahfaahinnada heshiisyada ayaa ku xusan shaxda hoose:

| TR. | QANDARAASLAHA | HAY'ADDA | UJEEDDO | MUDDADA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|---|
| 1. | 2020 CA-BPC-055 | Hay'adda Duulista Rayidka | Caymis caafimaad shaqaalaha Hay'adda Duulista Rayidka | 12 bilood | 303,849.84 |
| 2. | 2020 CA-BPC-056 | Wasaaradda Batroolka | Dayactirka Wasaaradda Batroolka | 1 mar | 285,068.50 |
| 3. | 2020 CA-BPC-057 | Wasaaradda Maaliyadda | Qalab xafiis oo loo soo gaday Waaxda Iibka | 21 maalmood | 37,800.00 |
| 4. | 2020 CA-BPC-058 | Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Rayidka | Dhismo Hay'adda Duulista Rayidka, Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Rayidka | 6 bilood | 1,131,175.13 |
| 5. | 2020 CA-BPC-022 | Wasaaradda Maaliyadda | Qalabaynta Xafiiska La Socodka Daymaha ee Wasaaraddu ku dhex leedahay Madaxtooyada | 45 maalmood | 65,217.00 |
| 6. | 2020 CA-BPC-059 | Wasaaradda Caddaaladda | Dayactirka dhismaha Wasaaradda Caddaaladda | 120 maalmood | 163,813.36 |
| 7. | 2020 CA-BPC-060 | Wasaaradda Caafimaadka | EMR-DC ee Wasaaradda Caafimaadka | 13 maalmood | 350,623.00 |
| 8. | 2020 CA-BPC-022 | Wasaaradda Maaliyadda | Qalab Xafiis Wasaaradda Maaliyadda | 21 maalmood | 264,288.00 |
| 9. | 2020 CA-BPC-053 | Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed | Cuntooyinka raaga | 2 maalmood | 110,922.35 |
| 10. | 2020 CA-BPC-054 | Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed | Cuntooyinka raaga | 2 maalmood | 178,602.50 |
| 11. | 2020 CA-BPC-061 | Wasaaradda Kalluumaysiga | Dayactirka Dhismaha Wasaaradda Kalluumaysiga | 60 maalmood | 207,753.30 |
| 12. | 2020 CA-BPC-062 | Wasaaradda Maaliyadda | Farsamada xadhiga fiber-optic ee isku xira Wasaaradda Maaliyadda iyo Bangiga Dhexe | 30 maalmood | 49,899.00 |
| **WADAR** | | | | | **3,149,011.98** |

**Shaxda 6.4** Heshiisyada aan laga soo diiwaangelin XHGQ

### Talo soo jeedin

Waa in dhammaan qandaraasyada iyo heshiisyada laga diiwaangaliyaa Xafiiska Hantidhawraha Guud si waafaqsan shuruucda iyo xeerarka.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

Hay'adda la baaray wax jawaab qoraal ah lagama helin oo la xiriirta arrintaan.

#### 6.2.3 SHARCIGA

Sharci Lr. 22 ee Sharciga Iibka Qaranka oo soo baxay 9 Agoosto 2016, Qodobkiisa 14aad ayaa waxa uu farayaa in qandaraasyada iyo heshiisyada caalamiga ah lagu qoro luuqadaha kala ah Ingiriis iyo Carabi halka kuwa gudaha/maxaliga ahna lagu qoro Af-Soomaali.

### Khaladka

**A. Heshiisyada gudaha oo aan lagu qorin luuqadda Soomaaliga**

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in Wasaaradda Maaliyadda ay heshiisyada gudaha/maxalliga ah ku qoraan luuqadda Ingiriiska taas oo lid ku ah sharciga.

### Talo soo jeedin

Waa in maamulka hay'addu uu heshiisyada gudaha/maxalliga ah ku qoraa luuqadda Soomaaliga si waafaqsan sharciga. Sidoo kale, waxaa ay diyaarin karaan mid ku qoran luuqadda Ingiriisiga haddii ay u baahan yihiin dhinaca kale ee qandaraaslaha.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

Hay'adda la baaray wax jawaab qoraal ah lagama helin oo la xiriirta arrintaan.

#### 6.2.4 SHARCIGA

Qodobkiisa 33aad (2) (g) Sharci Lr. 22 ee Sharciga Iibka Qaranka oo soo baxay 9 Agoosto 2016 ayaa sheegaya sidan:

> 33(2) Adeegbixiye, qandaraasle, ama talo bixiye waxa looga reebi karaa ka qaybqaadashada tartanka qandaraaska iibka sababahan soo socda awgood sida ku xusan xarafkiisa:
>
> g) bixin la aanta ee waajibaadyada cashuurta kaddib qiimeynta ay guddiga dakhliga cashuuraha ama cashuurta oo lala baxsado si kastaba ha ahaatee.

### Khaladka

**A. Qandaraasyo dhan US $2,238,907.93 ayaa la siiyay shirkado kala duwan kuwaas oo aan canshuurta bixin**

Intii lagu guda jiray baarista Wasaaradda Maaliyadda, waxaa ogaannay in shirkadaha guuleystay qaar aysan lahayn shati ganacsi, Shahaadada Canshuur Bixinta iyo lambarka canshuur bixiyaha. Soo koobida shirkadaha aan u hoggaansamin canshuuraha ayaa lagu dejiyay shaxda hoose:

| TR. | QANDARAASLAHA | TIXRAAC LR. | HAY'ADDA / UJEEDDADA | LACAGTA US $ | FAAHFAAHIN |
|---|---|---|---|---|---|
| 1. | 2020 CA-BPC-056 | FGS/MOF/ICB/2020/0056 | Wasaaradda Batroolka iyo Macdanka | 285,068.50 | Waxaa ka maqan shatiga ganacsiga, warqadda canshuur bixinta iyo lambarka canshuur bixinta |
| **WADAR** | | | | **2,238,907.93** | |

| TR. | QANDARAASLAHA | TIXRAAC LR. | HAY'ADDA / UJEEDDADA | LACAGTA US $ | FAAHFAAHIN |
|---|---|---|---|---|---|
| 2. | 2020 CA-BPC-058 | FGS/MOF/ICB/2020/005 | Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Rayidka | 1,131,175.13 | Waxaa ka maqan shatiga ganacsiga, warqadda canshuur bixinta, lambarka canshuur bixinta iyo warqadda Guddiga Qiimeynta lagu magacaabaay |
| 3. | 2020 CA-BPC-060 | FGS/MOF/EMR-DC/2020/001 | Wasaaradda Caafimaadka | 350,623.00 | Waxaa ka maqan shatiga ganacsiga, warqadda canshuur bixinta, lambarka canshuur bixinta iyo warqadda Guddiga Qiimeynta lagu magacaabaay |
| 4. | 2020 CA-BPC-064 | FGS/MOF/NCB/2020/0053 | Dayactirka albaabbada dhismayaasha Wasaarada Maaliyada | 264,288.00 | Waxaa ka maqan shatiga ganacsiga, warqadda canshuur bixinta iyo lambarka canshuur bixinta |
| 5. | 2020 CA-BPC-061 | FGS/MOF/ICB/2020/0057 | Dib-u-dayactirka Wasaaradda Kaluumeysiga | 207,753.30 | Waxaa ka maqan shatiga ganacsiga, warqadda canshuur bixinta iyo lambarka canshuur bixinta |
| **WADAR** | | | | **2,238,907.93** | |

**Shaxda 6.5** Qandaraasyo si sharciga baalmarsan loo bixiyay

### Talo soo jeedin

Waa in maamulka Wasaaradda Maaliyaddu uu u hoggaansamo sharciga iibka iyo in qandaraasyada la siiyo shirkado si sharci ah u diiwaangashan oo haysta dhammaan dukumentiyada daruuriga ah iyo kuwa loo baahan yahay sida shahaadooyinka u hoggaansanaanta canshuuraha.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

Hay'adda la baaray wax jawaab qoraal ah lagama helin oo la xiriirta khaladkan kaas oo hore lagula wadaagay warqadda maamulka.

## 6.3 Maamulka hantida

### 6.3.1 SHARCIGA

Qodobka 11[aad] (1) (j) ee Sharciga Maamulka Maaraynta Maaliyadda Guud ee 2019 ayaa dhigaya in Xafiiska Hantidhawrka Guud uu mas'uul ka yahay diiwaangelinta dhammaan sharciyada iyo heshiisyada, diiwaangalinta waarannada (F16), hantida guurtada iyo maguurtadda, kala wareejinta miisaaniyadda, deeqaha, iyo dhacdo dhaqaale kasta oo kale sida ku cad sharcigan.

### Hannaanka la isku waafaqsan yahay

Waxaa jirta siyaasad, hagayaal iyo habraac loo ansixiyay in lagu maamulo hantida (guurto iyo ma-guurto) ee dhammaan hay'adaha kala duwan ee dowladda. Siyaasadda hantidu waa in ay ka kooban tahay xaaladda, isticmaalka, waxqabadka iyo dhaqan-ka-baxa.

Waxaa jira diiwaan guud oo lagu keydiyo hantida dowladda oo ay hayaan hay'adaha kala duwan. Diiwaanka waa in lagu sheego hanti waliba lamberka u gaarka ah, meesha lagu isticmaalo, xaaladda muuqaal ahaaneed IWM.

### Khaladaadka

**A. Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka hantida**

Waxaa baarista lagu ogaaday in Wasaaradda Maaliyadda aysan lahayn habraacyada iyo siyaasadda lagu maamulo lagu lana socdo hantida.

### B. Maamulka gaadiidka oo ah mid liita

Muddadii lagu guda jiray baarista Wasaaradda Maaliyadda waxay nala wadaagtay liiska gaadiidka oo la sheegay in Wasaaraddu ay leedahay. Dhammaan gaadiidku laguma diiwaangalin magaca Wasaaradda sidoo kalena ma lahayn buugaagta lahaanshiyaha gaadiidka. Waxaa jiray 2 gaari oo aysan Maamulka Wasaaraddu keenin si muuqaal ahaan loogu xaqiijiyo.

| TR. | NOOCA GAARIGA | CIDDA BIXISAY | CAQAAYAD LR. | FAAHFAAHIN |
|---|---|---|---|---|
| 1. | Toyota Land Cruiser | DFS | JTELV71J007401162 | Laguma diiwaangalin magaca Wasaaradda |
| 2. | Toyota Hilux Pick Up | DFS | MR0HB8CD1G0471841 | Laguma diiwaangalin magaca Wasaaradda |
| 3. | Toyota Land Cruiser | DFS | JTMHV01J6H5038746 | Laguma diiwaangalin magaca Wasaaradda |
| 4 | Toyota Hilux Pick Up | DFS | MROHB8CD290471444 | Laguma diiwaangalin magaca Wasaaradda |
| 5. | Toyota Land Cruiser | DFS | | Muuqaal ahaan looma xaqiijin |
| 6. | Toyota Hilux Pick Up | DFS | MROHB8CDOGO472138 | Laguma diiwaangalin magaca Wasaaradda |
| 7. | Toyota Hilux Pick Up | DFS | MR0HX8CD2G0897703 | Laguma diiwaangalin magaca Wasaaradda |
| 8. | Toyota Hilux Pick Up | DFS | JTMH05J605033089 | Laguma diiwaangalin magaca Wasaaradda |
| 9. | Toyota Hilux Pick Up | DFS | MR0HA3CDX00713232 | Laguma diiwaangalin magaca Wasaaradda |
| 10. | Toyota Hilux Pick Up | DFS | MROBB9CD8L5146850 | Laguma diiwaangalin magaca Wasaaradda |
| 11. | Toyota Hilux Pick Up | DFS | MROBB9CD7L5147066 | Laguma diiwaangalin magaca Wasaaradda |
| 12. | Toyota Hilux Pick Up | DFS | MROBB9CD3L5147047 | Laguma diiwaangalin magaca Wasaaradda |
| 13. | Toyota Hilux Pick Up | DFS | MROH5BGD500722143 | Laguma diiwaangalin magaca Wasaaradda |
| 14. | Toyota Hilux Pick Up | DFS | MROFR2291CO674931 | Laguma diiwaangalin magaca Wasaaradda |
| 15. | Toyota Hilux Pick Up | DFS | MROFR22GXF0739442 | Laguma diiwaangalin magaca Wasaaradda |
| 16. | Toyota Hilux Pick Up | DFS | MROHX8CD5H0920036 | Laguma diiwaangalin magaca Wasaaradda |
| 17. | Toyota Hilux Surf | DFS | K2W1850054730 | Laguma diiwaangalin magaca Wasaaradda |
| 18. | Toyota Prado | DFS | K7J780025731 | Laguma diiwaangalin magaca Wasaaradda |
| 19. | Toyota Fortuna | DFS | MRIDX8FF55G0003648 | Laguma diiwaangalin magaca Wasaaradda |
| 20. | Toyota Hilux Pick Up | DFS | | Muuqaal ahaan looma xaqiijin |
| 21. | Toyota Hilux Pick Up | DFS | MR0DB9CD8L5147058 | Laguma diiwaangalin magaca Wasaaradda |

**Shaxda 6.6** Gaadiidka hay'adda la baaray

## Talo soo jeedin

Waa in la hirgaliyaa lana meel mariyaa tilmaamaha iyo siyaasadda dhammaystiran ee maamulka, hubinta iyo ka warbixnta hantida.

Waa in Wasaaradda Maaliyadda ay hoggaan u noqotaa tallaabooyin lagu hirgalinayo siyaasadda iyo habraaca maamulka hantida ee hay'adaha dowladda oo ay ku jirto Wasaaradda Maaliyaddu.

Waa in dhammaan gaadiidka hay'adda ay lahaadaan buugaagta lahaanshiyaha gaadiidka oo ku diiwaan gashan magaca hay'adda, uuna sarkaalka sare ee mas'uulka ka ah u keydiyo si xafidan.

Waa in maamulka hay'adda ay hantida ka soo diiwangeliyaan Xafiiska Hnatidhawrka Guud si waafaqsan Sharciga Maamulka Maaliyadda.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

Hay'adda la baaray wax jawaab qoraal ah lagama helin oo la xiriirta arrintaan.

## 6.4 Maamulka canshuur-dhaafka

### 6.4.1 SHARCIGA

Qodobka 5aad (2), (3),(4), (5) (b, t, j & x) cashuur-dhaafka Xeerka MMG ee 2020 wuxuu sheegayaa in Wasiirka Maaliyadda:

> 5(2) Waxaa looga baahan yahay in la diiwaangeliyo dhammaan canshuuraha laga dhaafay iyo sababaha loo sameeyay, waxayna lagu daabici doonnaa faafinta rasmiga ah ee DFS.
>
> 5(3) Waa in la wargeliyo Golaha Wasiirrada iyo XHGQ iyada oo la faahfaahinayo dhammaan canshuuraha iyo sababaha looga dhaafay, muddo toddobaad gudahiisa.
>
> 5(4) Waa in canshuur-dhaafka loo diro Golaha Shacabka DFS kadib markii Wasiirku saxiixo ka hor 30 March, 30 June 30 Sebteembar iyo 31da Diseembar ee sano kasta.
>
> 5(5) Xogta ku cad Warbixinta Canshuur Dhaafyada ee qaybta 4aad waxaa ku jiraya:
>
> b) Shakhsiga canshuur dhaafka loo sameeyey;
>
> t) Sababaha canshuur dhaafka loo sameeyey;
>
> j) Wadarta canshuurta ka baaqatay Dawladda; iyo
>
> x) Faa'iidada Dawladda ka heleyso canshuur dhaafkan.

### Khaladaadka

**A. Wasaaradda oo ku guul-daraysiga in cashuur-dhaafka ay maareyso si haggaagsan**

Intii lagu jiray baarista waxaa la oggaaday in Baarlamaanka JFS uu soo saaray Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud. Si kastaba ha ahaatee, Wasaaradda Maaliyadda si wanaagsan uma maamulin qodobada canshuuraha ee canshuur dhaafka.

**B. Ku guuldareysiga in la daabaco liiska canshuur bixiyayaasha ee loo sameeyay canshuur-dhaaf**

Intii aan ku guda jirnay baarista ayaan ogaannay in Wasaaraddu ay canshuur-dhaaf u sameysay shirkado kala duwan. Balse, Wasaaraddu ma diyaarin oo ma daabicin liis ay ku qoran yihiin cashuur-bixiyayaasha cashuur-dhaafka loo sameeyay iyo sababaha cashuur-dhaafka loo sameeyay taas oo ka soo horjeeda Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud.

**C. Wasaaradda Maaliyadda oo ku guul dareysatay in ay diyaariso warbixinta canshuur-dhaafka lana wadaagto golaha Wasiirrada iyo Hantidhawraha Guud**

Baarista Wasaaradda Maaliyadda waxaan ku ogaannay in Wasiirka Wasaaraddu uusan diyaarin lana wadaagin warbixinta Canshuur-dhaafka labada Aqal ee Baarlamaanka Soomaaliya sida uu sharcigu sheegayo.

**D. Wasaaradda Maaliyadda oo ku guul darreysatay diyaarinta warbixinta canshuur-dhaarka lana wadaagto goeyaasha Baarlamaanka**

Intii lagu guda jiray baarista, baarayaasha waxa ay oggaadeen in Wasiirka Maaliyadda ma uusan diyaarin warbixin ku saabsan canshuur-dhaafka mana hor-geynin labada gole ee Baarlamaanka waqtiyada laga rabay ee 31[da] Maarso, 30[ka] Juun, 30[ka] Sebtember, iyo 31[da] Diseembar ee 2020.

### Talo soo jeedin

Wasaaradda Maaliyaddu waa in ay si sax ah u maamushaa qodobada cashuur-dhaafka ayna xaqiijiso sida sharcigu dhigayo.

Waa in Wasaaraddu ay sameysaa siyaasado cad oo haga xeer nidaamiyaasha cashuur-dhaafka iyo hay'adaha loo oggol yahay canshuur-dhaafka.

Wasaaraddu waa in ay diyaarisaa warbixinnada cashuur-dhaafka oo ay ku daabacdaa 10 maalmood gudahooda marka ay sameyso cashuur-dhaafka sida sharcigu dhigayo, ka hor 31[da] Maarso, 30[ka] Juun 30[ka] Sebteembar iyo 31[da] Diseembar ee sannad maaliyadeed kasta.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

Hay'adda la baaray wax jawaab qoraal ah lagama helin oo la xiriirta arrintaan.

## 6.5 Dabagalka baarista

### 6.5.1 KHALADAADKA WARBIXIN BAARISEEDKII 2019

Shaxda hoose waxaa ka muuqda marxaladda khaladaadka baarista sannadkii hore lagu sameeyay hay'adda inta la fuliyay, qayb laga fuliyay ama aan waxba laga fulin.

| TR. | KHALADAADKA | MARXALADDA |
|---|---|---|
| 1. | 6.1.1 Lacag-bixin aan lahayn caddaymo dhammeystiran - kharashaadka | La ma fulin |
| 2. | 6.1.2 Lacag-bixin aan lahayn caddaymo dhammaystiran - adeeg guud | Waa la fuliyay |
| 3. | 6.1.3 Lacag-bixin aan lahayn caddaymo dhammeystiran - kharashaadka safarka | La ma fulin |
| 4. | 6.2.1 Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka hantida | La ma fulin |
| 5. | 6.2.2 Diiwaanka hantida oo aan joogto loo cusboonaysiin | Waa la fuliyay |
| 6. | 6.2.3 Maamulka gaadiidka oo ah mid liita | La ma fulin |
| 7. | 6.3.1 Qorshaha iibka oo aan jirin | La ma fulin |
| 8. | 6.2.3 Shirkado la siiyay canshuur-dhaaf iyaga oo aan lahayn (TIN), iyo (TCC) ama aan canshuur bixiye u diiwaangashanayn | La ma fulin |
| 9. | 6.3.3 Xadiga iibka Qaranka oo aan lagu dhaqmin | La ma fulin |
| 10. | 6.4.1 Siyaasadda lagu maamulo deymaha oo aan jirin | La ma fulin |
| 11. | 6.4.2 Habraaca maamulka deymaha oo aan jirin | La ma fulin |
| 12. | 6.4.3 Ka warbixinta iyo maamulka deymaha oo liita | La ma fulin |
| 13. | 6.5.1 Heshiisyo aan laga soo diiwaangalin XHGQ | La ma fulin |
| 14. | 6.1.1 Heshiisyada maxalliga ah oo lagu qoray Afka Ingiriisiga | La ma fulin |

**Shaxda 6.7** Khaladaadka baarista sannadkii 2019

### 6.5.2 KHALADAADKA WARBIXIN BAARISEEDKII 2018

| TR. | KHALADAADKA | MARXALADDA |
|---|---|---|
| 1. | 1.2.1Kharashaadka howl-maalmeedka aan lahayn caddeymaha ku filan | Lama fulin |
| 2. | 1.2.2Lacag laga bixiyay madax-xigaha xaaladdaha deg-dega (Contingency) oo aan lahayn caddeymo ku filan | Lama fulin |
| 3. | 1.2.4Kharashaadka socdaalka oo aan lahayn caddeymo ku filan | Lama fulin |
| 4. | 1.3.1Ma jirin diiwaanka hantida | Qeyb ayaa la fuliyay |
| 5. | 1.2.2Ma jiro habraacyada iyo siyaasadaha maamulka hantida | Lama fulin |
| 6. | 1.3.4Hubinta gaadiidka oo ahayd mid liita | Lama fulin |
| 7. | 1.4.1Heshiisyada oo aan laga soo diiwaan-galin XHG | Lama fulin |
| 8. | 1.6.1Haddii Sharciga libka Qaranka la raacin | Qeyb ayaa la fuliyay |

**Shaxda 6.8** Khaladaadka baarista sannadkii 2018

# 7. Xafiiska Xisaabiyaha Guud

## 7.1 Hubinta kharash bixinta

### 7.1.1 SHARCIGA

Sida ay qabaan Qodobbada 31$^{aad}$ (1) iyo 32$^{aad}$ (4) ee Sharci Lr. 17 ee Maaraynta Maaliyadda Guud ee soo baxay 25 Diseembar 2019:

> 31(1) Wax kharash ah lagama bixin karo Miisaaniyadda qaranka, haddii aysan jiirin, qaansheegto ama caddeyn kale oo dheeraad ah oo looga baahan yahay sida ku xusan xeer-nidaamiyaha ama nidaamka xisaabaadku sheegayo.
>
> 32(4) Kharash bixin walba ee la oggolaaday waa in ay ku lifaaqan yihiin dhammaan dukumiintiyada kaabaya sida ku qeexan Xeer-nidaamiyaha Wasiirku soo saaray.

### Hannanka la isku waafaqsan yahay

Dukumiintiyada caddeymaha way kala duwan yihiin iyadoo ay ku xiran tahay nooca lacag bixinta, waxaana ka mid ah; dalabka iibka, heshiis saxiixan, warqadaha qaansheegashada, alaab-keenidda, guddoonka alaabta, lacag qabashada, iwm..

### Khaladka

**A. Kharashaad dhan US $37,700.00 oo aan lahayn caddeymo dhammaystiran**

Waxaa baarista lagu ogaaday in la sameeyey lacag bixin dhan **US $37,700.00** iyada oo aan lahayn caddeymo ku filan taas oo lid ku ah sharciga. Arrinkan ayaa sababay in la xaqiijin waayo sax ahaanshaha lacag bixintan. Lacagahaan ma lahayn caddeymo dhammaystiran sida:

| TR. | MADAX-XIGE | CIDDA LA SIIYAY | BISHA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1. | 2216 | 2020 CA-BPC-106 | Jan - Sep 2020 | 37,700.00 |
| **WADAR** | | | | **37,700.00** |

**Shaxda 7.1** Kharashaadka aan lahayn caddeymo ku filan

### Talo soo jeedin

Waa in dhammaan lacag bixinnada ay ku salaysnaadaan ama lahaadaan caddeymo dhammaystiran, si sax ahna ay u oggolaadaan saraakiisha sare ee mas'uulka ka ah iyo in hawlaha loo guddoomo iyadoo loo eegayo ama la raacayo shuruudo cayiman.

Waa in dhammaan dukumiintiyadda lacag bixinnada lagu tiimbareeyaa "la bixiyay" isla marka lacagahooda la bixiyo si looga hortago in mar kale loo isticmaalo kharash bixin kale.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Caadi ahaan waxaa safar aada madaxda Xaafiiska mana keenaan "boarding Passes" balse waxaa la hayaa dalku galkii iyo bixidii passportka lagu dhuftay taas oo caddeyn ku filan in safar la aaday. Waxaan bilaaynaa in aan arruurino "boarding passes" iyo in aan keydinno xogtaas.*

## 7.2 Maamulka iibka iyo heshiisyada

### 7.2.1 SHARCIGA

Qodobka 27aad (1) iyo (4) ee Sharci Lr. 22 ee Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka oo soo baxay 2016, ayaa sheegaya sidaan:

> 27(1) Dhammaan Hay'adaha qandaraaska iibka ayaa sameynaya qorshaha qandaraaska Iibka ee sannadlaha, ee looga gol leeyahay si lagu gaaro in qiimaha ugu badan ee kharashka guud iyo waxyaabaha kale ee sharcigan. Qorshaha qandaraaska iibsiga wuxuu taageerayaa barnaamijka iyo miisaaniyadda ay ansixisay hay'adda qandaraaska iibka.
>
> 27(4) Qorshaha qandaraaska iibka waxaa la diyaarinayaa sannad walba iyadoo lagu saleynayo miisaaniyadda sannadka Xukuumadda, iyado la xisaabinayo miiisaaniyad sannadeedka Xukuumadda.

### Khaladka

**A. Maqnaanshaha diyaarinta qorshaha iibka sannadka**

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in Xafiiska Xisaabiyaha Guud uusan lahayn qorshe sannadle ah ee iibka sannad maaliyadeedka dhammaaday 31da Diseembar 2020 kaas oo ku salaysan miisaaniyadda qaranka.

### Talo soo jeedin

Waa in Xafiiska Xisaabbiyaha Guud yeeshaa qorshe sannadle ah oo ku aaddan iibka kaas oo ku saleysan miisaaniyadda la ansixiyay ee hay'adda.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Xafiiska Xisaabiyaha Guud wuxuu heshiisyo qandaraas la saxiixday ganacsato si looga iibsado adeeg iyo alaab loo baahna kuwaas oo waafaqsan habraaca miisaaniyadda Xafiiska madax-xigeenadiisa kuwaas oo waafaqsan qorshaha qaranka.*

## 7.3 Maamulka hantida

### 7.3.1 SHARCIGA

Qodobka 11aad (1) (j) ee Sharciga Maamulka Maaraynta Maaliyadda Guud ee 2019 ayaa dhigaya in Xafiiska Hantidhawrka Guud uu mas'uul ka yahay diiwaangelinta dhammaan sharciyada iyo heshiisyada, diiwaangalinta waarannada (F16), hantida guurtada iyo maguurtadda, kala wareejinta miisaaniyadda, deeqaha, iyo dhacdo dhaqaale kasta oo kale sida ku cad sharcigan.

### Hannaanka la isku waafaqsan yahay

Waxaa jirta siyaasad, hagayaal iyo habraac loo ansixiyay in lagu maamulo hantida (guurto iyo ma-guurto) ee dhammaan hay'adaha kala duwan ee dowladda. Siyaasadda hantidu waa in ay ka kooban tahay xaaladda, isticmaalka, waxqabadka iyo dhaqan-ka-baxa.

Waxaa jira diiwaan guud oo lagu keydiyo hantida dowladda oo ay hayaan hay'adaha kala duwan. Diiwaanka waa in lagu sheego hanti waliba lamberka u gaarka ah, meesha lagu isticmaalo, xaaladda muuqaal ahaaneed IWM.

### Khaladaadka

**A. Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka hantida**

Waxaa baarista lagu ogaaday in Xafiiska Xisaabiyaha Guud uusan lahayn habraacyada iyo siyaasadda lagu maamulo lagu lana socdo hantida.

**B. Diiwaanka hantida oo aan joogto loo cusboonaysiin**

Maamulka hay'adda ayaa ku guul dareystay in ay cusboonaysiiyaan diiwaanka hantida kaas oo ka kooban macluumaadka, lambarka aqoonsiga, qiimaha lagu iibiyay xaaladda hantida IWM.

Hubinta muuqaal ahaaneed ee hantida ayaa lagu ogaaday in hantida hay'addu aysan wada lahayn lambarka aqoonsiga hantida (tag number) kaas oo ah lambar lagu aqoonsado oo gaar u ah si loo hubiyo loona dabagalo.

Intaas waxaa dheer, sida uu qabo Sharciga Maareynta Maaliyadda Dowladda Hantida lagama soo diiwaangalin XHGQ.

**C. Maamulka gaadiidka oo ah mid liita**

Muddadii lagu guda jiray baarista maamulka Xafiiska Xisaabiyaha Guud waxay nala wadaageen liiska 2 gaadiid ah oo la sheegay in Xaafiisku uu leeyahay. Balse, gaadiidkaas laguma diiwaangalin magaca Xaafiiska sidoo kalena ma lahayn buugaagta lahaanshiyaha gaadiidka. Waxaa jira 1 gaari oo aan la isticmaalin muddo 2 sano ah gaariga oo ciladaysan awgii. Faahfaahin dheeriga ayaa ku xusan shaxda hoose:

| TR. | NOOCA GAARIGA | CIDDA BIXISAY | CAQAAYAD LR. | FAAHFAAHIN |
|---|---|---|---|---|
| 1. | Toyota Noah | DFS | SR50-0086663 | Ma lahayn buugga iyo taargada gaadiidka dowladda |
| 2. | Toyota Hilux Surf | DFS | R&N185-9014447 | Ma lahayn buugga iyo taargada gaadiidka dowladda |

**Shaxda 7.2** Gaadiidka hay'adda la baaray

## Talo soo jeedin

Waa in la hirgaliyaa lana meel mariyaa tilmaamaha iyo siyaasadda dhammaystiran ee maamulka, hubinta iyo ka warbixnta hantida. Waa in Wasaaradda Maaliyadda ay hoggaan u noqotaa tallaabooyin lagu hirgalinayo siyaasadda iyo habraaca maamulka hantida ee hay'adaha dowladda oo uu ku jiro Xafiiska Xisaabiyaha Guud.

Waa in Maamulka hay'adda ay diyaariyaan diiwaan dhammaystiran ee hantida oo leh tilmaamo cad si loo xaqiijiyo in dhammaan hantida hay'adda lagu diiwaan galiyo diiwaanka, sidoo kalana loo cusboonaysiiyaa xilliyo go'an ama cayiman.

Waa in hay'adda la baaray iyo Wasaaradda Maaliyadda ay hantida hay'adda ku sameeyaan tirakoob waqtiyaysan isla markaana ay cusboonaysiiyaan diiwaanka hantida.

Waa in dhammaan gaadiidka hay'adda ay lahaadaan buugaagta lahaanshiyaha gaadiidka oo ku diiwaan gashan magaca hay'adda, uuna sarkaalka sare ee mas'uulka ka ah u keydiyo si xafidan.

Waa in maamulka hay'adda ay hantida ka soo diiwangeliyaan Xafiiska Hnatidhawrka Guud si waafaqsan Sharciga Maamulka Maaliyadda.

## Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Habraaca iyo xeerka lagu maamulo hantida Xafiiska hadda gacanta lagu hayaa (draft) XHGQ-na waa lala wadaagay si uu aragti uga dhiibto.*

*Dhammaan hantida Xafiisku waa leeyihiin lambarka diiwaangalinta balse hadda wixii ka danbeeya waxaa loo saxidoonnaa si sannadle ah.*

*Sidii hore la idiinkugu wargaliyayba gaadiidka aad aragteen waxaa leh XXG balse waxaanan ku xirin taargada dowladda (GD) sababo amni aawadood.*

## 7.4 Dabagalka baarista

### 7.4.1 KHALADAADKA WARBIXIN BAARISEEDKII 2019

Shaxdaan hoose waxaa ka muuqda marxaladda khaladaadka baarista sannadkii hore lagu sameeyay hay'adda inta la fuliyay, qayb laga fuliyay ama aan waxba laga fulin.

| TR. | KHALADAADKA | MARXALADDA |
|---|---|---|
| 1. | 7.1.1 Ma jirin xisaabaadka sannadka oo la soo gudbiyay si loo baaro | Qayb ayaa laga fuliyay |
| 2. | 7.2.1 Lacagbixin aan lahayn caddaymo dhammeystiran - kharashaadka | Waa la fuliyay |
| 3. | 7.2.1 Kharashaadka socdaalka oo aan laheyn caddeymo dhammaystiran | La ma fulin |
| 4. | 7.3.1 Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka hantida | La ma fulin |
| 5. | 7.3.2 Diiwaanka hantida oo aan joogto loo cusboonaysiin | La ma fulin |
| 6. | 7.3.3 Maamulka gaadiidka oo ah mid liita | La ma fulin |
| 7. | 7.4.1 Heshiisyo aan laga soo diiwaangalin XHGQ | Waa la fuliyay |
| 8. | 7.4.2 Heshiisyada gudaha aan lagu qorin afka Soomaaliga | Waa la fuliyay |
| 9. | 7.5.1 Ku-guuldarraysiga fulinta howlaha hantidhawrka gudaha | Qayb ayaa laga fuliyay |

**Shaxda 7.3** Khaladaadka baarista sannadkii 2019

### 7.4.2 KHALADAADKA WARBIXIN BAARISEEDKII 2018

| TR. | KHALADAADKA | MARXALADDA |
|---|---|---|
| 1. | 2.1.1Hay'adaha Dowladda oo aan soo gudbin warbixinnada maaliyadeed si loo baaro | Qeyb ayaa la fuliyay |
| 2. | 2.2.1Kharashaadka socdaalka oo aan caddeymo ku filan | Lama fulin |
| 3. | 2.3.1Ma jirin diiwaanka hantida | Qeyb ayaa la fuliyay |
| 4. | 2.3.2Ma jiraan siyaasadda maamulka hantida | Lama fulin |
| 5. | 2.3.4Hubinta gaadiidka oo ahayd mid liita | Lama fulin |
| 6. | 2.4.1Heshiisyada oo aan laga soo diiwaan-galin XHG | Lama fulin |
| 7. | 2.5.1Malahayn baaraha gudaha sidoo kalana baarista gudaha lama samayn | Qeyb ayaa la fuliyay |

**Shaxda 7.4** Khaladaadka baarista sannadkii 2018

# 8. Xarunta Warbixinnada Maaliyadeed

## 8.1 Hubinta kharash bixinta

### 8.1.1 SHARCIGA

Sida ay qabaan Qodobbada 31aad (1) iyo 32aad (4) ee Sharci Lr. 17 ee Maaraynta Maaliyadda Guud ee soo baxay 25 Diseembar 2019:

> 31(1) Wax kharash ah lagama bixin karo Miisaaniyadda qaranka, haddii aysan jiirin, qaansheegto ama caddeyn kale oo dheeraad ah oo looga baahan yahay sida ku xusan xeer-nidaamiyaha ama nidaamka xisaabaadku sheegayo.
>
> 32(4) Kharash bixin walba ee la oggolaaday waa in ay ku lifaaqan yihiin dhammaan dukumiintiyada kaabaya sida ku qeexan Xeer-nidaamiyaha Wasiirku soo saaray.

### Hannanka la isku waafaqsan yahay

Dukumiintiyada caddeymaha way kala duwan yihiin iyadoo ay ku xiran tahay nooca lacag bixinta, waxaana ka mid ah; dalabka iibka, heshiis saxiixan, warqadaha qaansheegashada, alaab-keenidda, guddoonka alaabta, lacag qabashada, iwm.

### Khaladka

**A. Kharashaad dhan US $9,996.00 oo aan lahayn caddeymo dhammaystiran**

Waxaa baarista lagu ogaaday in la sameeyey lacag bixin dhan **US $9,996.00** iyada oo aan lahayn caddeymo ku filan taas oo lid ku ah sharciga. Arrinkan ayaa sababay in la xaqiijin waayo sax ahaanshaha lacag bixintan. Lacagahaan ma lahayn caddeymo dhammaystiran sida:

| TR. | MADAX-XIGE | CIDDA LA SIIYAY | BISHA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1 | 2216 | 2020 CA-BPC-065 | Jan & Apr 2020 | 9,996.00 |
| **WADAR** | | | | **9,996.00** |

**Shaxda 8.1** Kharashaadka safarka ee aan lahayn caddeymo ku filan

### Talo soo jeedin

Waa in dhammaan lacag bixinnada ay ku salaysnaadaan ama lahaadaan caddeymo dhammaystiran, si sax ahna ay u oggolaadaan saraakiisha sare ee mas'uulka ka ah iyo in hawlaha loo guddoomo iyadoo loo eegayo ama la raacayo shuruudo cayiman.

Waa in dhammaan dukumiintiyadda lacag bixinnada lagu tiimbareeyaa "la bixiyay" isla marka lacagahooda la bixiyo si looga hortago in mar kale loo isticmaalo kharash bixin kale.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

Maamulka hay'adda la baaray wax jawaab ah oo qoran kama soo bixin arrintaan.

## 8.2 Maamulka iibka iyo heshiisyada

### 8.2.1 SHARCIGA

Qodobka 27aad (1) iyo (4) ee Sharci Lr. 22 ee Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka oo soo baxay 2016, ayaa sheegaya sidaan:

> 27(1) Dhammaan Hay'adaha qandaraaska iibka ayaa sameynaya qorshaha qandaraaska Iibka ee sannadlaha, ee looga gol leeyahay si lagu gaaro in qiimaha ugu badan ee kharashka guud iyo waxyaabaha kale ee sharcigan. Qorshaha qandaraaska iibsiga wuxuu taageerayaa barnaamijka iyo miisaaniyadda ay ansixisay hay'adda qandaraaska iibka.
>
> 27(4) Qorshaha qandaraaska iibka waxaa la diyaarinayaa sannad walba iyadoo lagu saleynayo miisaaniyadda sannadka Xukuumadda, iyado la xisaabinayo miiisaaniyad sannadeedka Xukuumadda.

### Khaladka

**A. Maqnaanshaha diyaarinta qorshaha iibka sannadka**

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in Xarunta Warbixinta Maaliyadeed aysan lahayn qorshe sannadle ah ee iibka sannad maaliyadeedka dhammaaday 31da Diseembar 2020 kaas oo ku salaysan miisaaniyadda qaranka.

### Talo soo jeedin

Waa in Xarunta Warbixinta Maaliyadeed yeelataa qorshe sannadle ah oo ku aaddan iibka kaas oo ku saleysan miisaaniyadda la ansixiyay ee hay'adda.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Qorshaha iibka Xarunta waxaa uu ku saleysanyahay miisaaniyadda sannadka ee Xarunta iyada oo shay kasta uu leeyahay caddeymo ah warqadda qaansheegashada (invoice) iyo hantida oo ay kormeer ku sameeyeen maamulka Wasaaradda Maaliyadda sida ku cad dukumiintiga halkan ku lifaaqan.*

### Jawaaabta XHGQ

Sida uu qabo Sharciga Iibka Qaranka "Dhammaan Hay'adaha qandaraaska iibka ayaa sameynaya qorshaha qandaraaska Iibka ee sannadlaha, ee looga gol leeyahay si lagu gaaro in qiimaha ugu badan ee kharashka guud iyo waxyaabaha kale ee sharcigan". Miisaaniyadda loo qoondeeyay hay'adda ma ahan qorshe. Sida ku cad sharciga kor ku xusan hay'adda waa in ay yeelataa qorshe ii boo loogu tala galay isticmaalka miisaaniyadda loo qoondeeyay.

### 8.2.2 SHARCIGA

Sida uu qabo Qodobka 38aad (5) ee Sharci Lr. 17 ee Maareynta Maaliyadda Guud ee soo baxay 25 Diseembar 2019, dhammaan heshiisyada deeqaha hay'adaha Dowladda, Maamul Goboleedyada iyo hay'adaha ganacsiga ee Dowladda waa in laga diiwaan geliyaa Xafiiska Hantidhawrka Guud.

Sidoo kale, sida ku cad Qodobka 11aad (c) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, Xafiiska Hantidhawrka Guud wuxuu leeyahay awoodda diiwaan galinta heshiisyada iyo qandaraasyada ay galeen hay'adaha Dowladda. Qodobka 14aad ee Wax-ka-Beddelka Qodobka 84aad Sharciga Iibka Qaranka wuxuu sidoo kale caddeeyay in ay waajib ku tahay hay'adaha Dowladda in ay soo diiwaan galiyaan heshiisyadda iyo qandaraasyadda ay galaan ka hor inta aysan dhaqan galin.

### Khaladaadka

**A. Heshiisyo lacagtoodu dhan tahay US $98,000.00 ayaan laga soo diiwaangalin XHGQ**

Waxaa baarista lagu ogaaday in heshiisyo qiimahoodu gaarayo **US $98,000.00** aan laga soo

diiwaangalin XHGQ. Xafiiska Hantidhawrka Guud waqtigii lagu guda jiray baarista sannadla-ha waxaa laga yaabaa in uusan caddeyn karin waxyaabaha heshiisyada ku xusan ee la xiriira wixii hanti ah maadaama aan laga soo diiwaangalin Xafiiska. Xafiiska Hantidhawrka Guud ma sheegi karo in la fuliyay qodobbada heshiiska lagu galay, sidoo kalana in heshiisyadaas ay ku jiraan danaha Dowladda Federaalka Soomaaliya. Faahfaahinnada heshiisyada ayaa ah sidaan:

| TR. | QANDARAASLAHA | UJEEDDADA | MUDDADA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1. | 2020 CA-BPC-066 | Kiro | 4 bilood | 36,000.00 |
| 2. | 2020 CA-BPC-067 | Shidaal iyo saliid | 10 bilood | 38,000.00 |
| 3. | 2020 CA-BPC-068 | Adeeg | 10 bilood | 24,000.00 |
| 4. | 2020 CA-BPC-065 | Socdaal | Lama sheegin | - |
| **WADAR** | | | | **98,000.00** |

**Shaxda 8.2** Heshiisyada aan laga soo diiwaangelin XHGQS

### Talo soo jeedin

Waa in dhammaan qandaraasyada iyo heshiisyada laga diiwaangaliyaa Xafiiska Hantidhawra-ha Guud si waafaqsan shuruucda iyo xeerarka.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Dhammaan heshiisyada Xaruntu gashay waxaa laga heli karaa Xafiiska Xisaabiyaha Guud iya-doo ku jirta SFMIS-ka. Dhammaan hantida la sheegayna waxay diyaar ku tahay oo taallaa Xarun-ta Warbixinnada Maaliyadeed waxaana diiwaangaliyay maamulka Wasaaradda Maaliyadda.*

### Jawaabta XHGQ

Sida ku cad Qodobka 11aad xarafka (x) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud iyo Qodobka 14aad (3) ee Sharciga Iibka Qaranka ee 2020, Hay'adda Warbixinnada Maaliyadda waxaa waajib ku ah in ay ka soo diiwaan geliso qandaraasyada iyo heshiisyada ay la gashay hay'adaha max-aliga iyo kwa caalamiga ah XHGQ.

Sidoo kale sida uu qabo Qodobka 14aad (3) (b) ee Sharciga Iibka Qaranka ee 2020, heshiisyada waa in laga soo diiwaan-geliyaa XHGQ.

Intaa waxaa dheer, in Qodobka 5aad ee Sharci Lr. 34 uu awood usiinayo XHGQ in uu sameeyo xakamayn lagu hubinaayo kharash bixinta ka hor inta aysan bixin.

### 8.2.3 SHARCIGA

Sharci Lr. 22 ee Sharciga Iibka Qaranka oo soo baxay 9 Agoosto 2016, Qodobkiisa 14aad ayaa waxa uu farayaa in qandaraasyada iyo heshiisyada caalamiga ah lagu qoro luuqadaha kala ah Ingiriis iyo Carabi halka kuwa gudaha/maxaliga ahna lagu qoro Af-Soomaali.

### Khaladka

**A. Heshiisyada gudaha oo aan lagu qorin luuqadda Soomaaliga**

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in Xarunta Warbixinada Maaliyadeed ay heshiisyada gudaha/maxalliga ah ku qoraan luuqadda Ingiriiska taas oo lid ku ah sharciga.

### Talo soo jeedin

Waa in maamulka hay'addu uu heshiisyada gudaha/maxalliga ah ku qoraa luuqadda Soomaa-liga si waafaqsan sharciga. Sidoo kale, waxaa ay diyaarin karaan mid ku qoran luuqadda Ingi-riisiga haddii ay u baahan yihiin dhinaca kale ee qandaraaslaha.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Waxaa nalala wadaagay warqado kumbuyuutareysan si aan ugu isticmaalno heshiisyada, dalabka iibka, qiimeynta warbixinnada iyo warqadaha gudiga iyo warqado kale oo nooga yimid Xafiiska Xisaabiyaha Guud, qaasatan waaxda (commitment control-ka) Shirkadaha aan heshiisyada la galnayna wax cabasho ah oo luuqadda la xiriirta kama imaan.*

### Jawaabta XHGQ

Sida ku cad Qodobka 14aad ee Sharciga Iibka Qaranka ee 2016, hay'addaha dowladda, oo ay kujirto Xarunta Warbixinnada Maaliyadeed waxaa saaran waajibaadka ah in ay u hoggaansamaan shuruudaha Sharciga Iibka Qaranka, iyada oo aan loo eegeyn in Xafiiska Xisaabiyaha Guud uu idin siiyaya nuqul Ingiriis ah iyo in kale.

## 8.3 Maamulka hantida

### 8.3.1 SHARCIGA

Qodobka 11aad (1) ( j) ee Sharciga Maamulka Maaraynta Maaliyadda Guud ee 2019 ayaa dhigaya in Xafiiska Hantidhawrka Guud uu mas'uul ka yahay diiwaangelinta dhammaan sharciyada iyo heshiisyada, diiwaangalinta waarannada (F16), hantida guurtada iyo maguurtadda, kala wareejinta miisaaniyadda, deeqaha, iyo dhacdo dhaqaale kasta oo kale sida ku cad sharcigan.

### Hannaanka la isku waafaqsan yahay

Waxaa jirta siyaasad, hagayaal iyo habraac loo ansixiyay in lagu maamulo hantida (guurto iyo ma-guurto) ee dhammaan hay'adaha kala duwan ee dowladda. Siyaasadda hantidu waa in ay ka kooban tahay xaaladda, isticmaalka, waxqabadka iyo dhaqan-ka-baxa.

Waxaa jira diiwaan guud oo lagu keydiyo hantida dowladda oo ay hayaan hay'adaha kala duwan. Diiwaanka waa in lagu sheego hanti waliba lamberka u gaarka ah, meesha lagu isticmaalo, xaaladda muuqaal ahaaneed IWM.

### Khaladaadka

**A. Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka hantida**

Waxaa baarista lagu ogaaday in Xarunta Warbixinnada Maaliyadeed aysan lahayn habraacyada iyo siyaasadda lagu maamulo lagu lana socdo hantida.

**B. Diiwaanka hantida oo aan joogto loo cusboonaysiin**

Maamulka hay'adda ayaa ku guul dareystay in ay cusboonaysiiyaan diiwaanka hantida kaas oo ka kooban macluumaadka, lambarka aqoonsiga, qiimaha lagu iibiyay xaaladda hantida IWM.

Hubinta muuqaal ahaaneed ee hantida ayaa lagu ogaaday in hantida hay'addu aysan wada lahayn lambarka aqoonsiga hantida (tag number) kaas oo ah lambar lagu aqoonsado oo gaar u ah si loo hubiyo loona dabagalo.

Intaas waxaa dheer, sida uu qabo Sharciga Maareynta Maaliyadda Dowladda Hantida lagama soo diiwaangalin XHGQ.

### Talo soo jeedin

Waa in la hirgaliyaa lana meel mariyaa tilmaamo iyo siyaasado dhammaystiran ee maamulka, hubinta iyo ka warbixnta hantida.

Waa in hay'adda la baaray iyo Wasaaradda Maaliyadda ay hantida hay'adda ku sameeyaan tirakoob waqtiyaysan isla markaana ay cusboonaysiiyaan diiwaanka hantida.

Waa in maamulka hay'adda ay hantida oo dhan ka soo diiwangeliyaan Xafiiska Hnatidhawrka Guud si waafaqsan Sharciga Maamulka Maaliyadda.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Xaruntu waxay leedahay nidaam aad u casriyaysan oo lagu maamulo hantida Xarunta kaas oo aad iyo aad wax-ku ool u ah oo waxkasta oo hantida ka ciladeysan lagu ogaan karo.*

*Hantida Xarunta Warbixinnada Maaliyadeed waxaa diiwaangalisay Wasaaradda Maaliyadda, hantida Xarunta waxaa loo diiwaangaliyay sida lifaaqa ku jirta.*

### Jawaabta XHGQ

Sida uu qabo sharciga kor ku xusan, waxa daruuri ah in hay'addu lahaato siyaasad lagu maamulo sidoo kalena lagula xisaabtamo nidamka diiwangelinta hantida hay'adda.

## 8.4 Dabagalka baarista

### 8.4.1 KHALADAADKA WARBIXIN BAARISEEDKII 2019

Ma jirin wax khaladaad ah oo la xiriira baarisihii hore maadama aysan jirin baaris ku saabsan u hoggaansanaanta sharciga oo horey loogu sameeyay hay'addaan.

# 9. Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga, iyo Horumarinta Dhaqaalaha

## 9.1 Hubinta kharash bixinta

### 9.1.1 SHARCIGA

Sida ay qabaan Qodobbada 31aad (1) iyo 32aad (4) ee Sharci Lr. 17 ee Maaraynta Maaliyadda Guud ee soo baxay 25 Diseembar 2019:

> 31(1) Wax kharash ah lagama bixin karo Miisaaniyadda qaranka, haddii aysan jiirin, qaansheegto ama caddeyn kale oo dheeraad ah oo looga baahan yahay sida ku xusan xeer-nidaamiyaha ama nidaamka xisaabaadku sheegayo.
>
> 32(4) Kharash bixin walba ee la oggolaaday waa in ay ku lifaaqan yihiin dhammaan dukumiintiyada kaabaya sida ku qeexan Xeer-nidaamiyaha Wasiirku soo saaray.

### Hannanka la isku waafaqsan yahay

Dukumiintiyada caddeymaha way kala duwan yihiin iyadoo ay ku xiran tahay nooca lacag bixinta, waxaana ka mid ah; dalabka iibka, heshiis saxiixan, warqadaha qaansheegashada, alaab-keenidda, guddoonka alaabta, lacag qabashada, iwm.

### Khaladka

**A. Kharashaad dhan US $246,080.00 oo aan lahayn caddeymo dhammaystiran**

Waxaa baarista lagu ogaaday in la bixiyay lacag dhan **US $246,080.00** iyada oo aan lahayn caddeymo ku filan taas oo lid ku ah sharciga. Arrinkan ayaa sababay in la xaqiijin waayo sax ahaanshaha lacag bixintan. Faahfaahin dheeriya eeg shaxda hoose::

| TR. | CIDDA BIXISAY | CIDDA LA SIIYEY | BISHA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1. | National Authorizing Office (NAO) | Hirshabelle | 22-25/03/20 | 23,310.00 |
| 2. | National Authorizing Office (NAO) | Hirshabelle | 2-5/8/2020 | 23,310.00 |
| 3. | National Authorizing Office (NAO) | Hirshabelle | 21-23/11/20 | 10,330.00 |
| 4. | National Authorizing Office (NAO) | Koonfur Galbeed | 14-17/03/20 | 23,310.00 |
| 5. | National Authorizing Office (NAO) | Koonfur Galbeed | 6-9/7/2020 | 17,850.00 |
| 6. | National Authorizing Office (NAO) | Koonfur Galbeed | 14-15/11/20 | 7,770.00 |
| 7. | National Authorizing Office (NAO) | Puntland | | 9,400.00 |
| 8. | National Authorizing Office (NAO) | Galmudug | 20-24/03/20 | 23,310.00 |
| 9. | National Authorizing Office (NAO) | Galmudug | 13-17/6/20 | 23,310.00 |
| **WADAR** | | | | **246,080.00** |

| TR. | CIDDA BIXISAY | CIDDA LA SIIYEY | BISHA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 10. | National Authorizing Office (NAO) | Galmudug | 28- 29/11/20 | 8,020.00 |
| 11. | National Authorizing Office (NAO) | Jubaland | 4-5/11/2020 | 52,850.00 |
| 12. | National Authorizing Office (NAO) | Jubaland | | 23,310.00 |
| **WADAR** | | | | **246,080.00** |

**Shaxda 9.1** Kharashaadka aan lahayn caddeymo ku filan

### Talo soo jeedin

Waa in dhammaan lacag bixinnada ay ku salaysnaadaan ama lahaadaan caddeymo dhammaystiran, si sax ahna ay u oggolaadaan saraakiisha sare ee mas'uulka ka ah iyo in hawlaha loo guddoomo iyadoo loo eegayo ama la raacayo shuruudo cayiman.

Waa in dhammaan dukumiintiyadda lacag bixinnada lagu tiimbareeyaa "la bixiyay" isla marka lacagahooda la bixiyo si looga hortago in mar kale loo isticmaalo kharash bixin kale.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Waan idinla wadaagnay dhammaan jawaabaha su'aalihii aad na waydiiseen markii taariikhdu ahayd March 11, 2021. Sidoo kale waxyaabahaan oo dhan waan ka jawaabnay waxayna ku jirtey jawaabtu emailkii Maarso 20, 2021.*

*Dhammaan kharashaadka kor lagu liisgareeyay waxaa maamushay Wasaaradda Qorshaynta Qaranka. Shaqaalaha EU waxay ku ekaayeen korjoogteyn kaliya.*

*Emailka ku taariikhaysan Maarso 20, 2021 wuxuu ka jawaabayey su'aalaha soo socda:*

- ***Boarding Pass:** Dhammaan Baasaskii Boodhinka ee la waayay waxay la xiriireen safarka gudaha ee la xiriira QHQ-da 9aad. Sida ku cad heshiiska deeq -bixiyeyaasha (boarding passes looma baahna safarka gudaha).*
- ***Rasiidka:** Waxaan idinla wadaagnay rasiidhkii ka maqnaa muddadii Hantidhawrka ee emailka ku taariikhaysan 20-ka Maarso, 2021.*
- ***Xisaabaadka la ansixiyey ee safarrada la aaday:** Dhammaan dokumiintiyada aad baarteen waxaa ku jiray foomka Amarka Hawlgalka iyo foomka warbixinta.*
- ***Magacyada iyo saxiixyada dadka helay Gunnada Habeendhaxa iyo caddaynta bixinta:** Waxaan idinla wadaagnay rasiidiskii lacag -bixinta waxaanan saxnay kuwii aan ku jirin qaabkii habboonaa sida lagu muujiyey emailka ku taariikhaysan Maarso 20, 2020.*
- ***Faahfaahinta baabuurta la kiraystay:** Ma jirin wax dukumiinti ah oo la xiriira faahfaahinta baabuurta la kireystay intii uu socday baaritaanka.*

### Jawaabta XHGQ

Waxaan qiimaynay caddeynta ay hay'addu soo gudbisay, waxaana u soo ifbaxday XHGQ in aysan ahayn caddeymahaasi kuwo xaqiijin kara qarashaadka safarka.

## 9.2 Maamulka iibka iyo heshiisyada

### 9.2.1 SHARCIGA

Qodobka 27aad (1) iyo (4) ee Sharci Lr. 22 ee Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka oo soo baxay 2016, ayaa sheegaya sidaan:

27(1) Dhammaan Hay'adaha qandaraaska iibka ayaa sameynaya qorshaha qandaraaska Iibka ee sannadlaha, ee looga gol leeyahay si lagu gaaro in qiimaha ugu badan ee kharashka guud iyo waxyaabaha kale ee sharcigan. Qorshaha qandaraaska iibsiga wuxuu taageerayaa barnaamijka iyo miisaaniyadda ay ansixisay hay'adda qandaraaska iibka.

27(4) Qorshaha qandaraaska iibka waxaa la diyaarinayaa sannad walba iyadoo lagu saleynayo miisaaniyadda sannadka Xukuumadda, iyado la xisaabinayo miiisaaniyad sannadeedka Xukuumadda.

### Khaladka

**A. Maqnaanshaha diyaarinta qorshaha iibka sannadka**

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in Wasaaradda Qorsheyntu aysan lahayn qorshe sannadle ah ee iibka sannad maaliyadeedka dhammaaday 31[da] Diseembar 2020 kaas oo ku salaysan miisaaniyadda qaranka.

### Talo soo jeedin

Waa in Wasaaraddu yeelataa qorshe sannadle ah oo ku aaddan iibka kaas oo ku saleysan miisaaniyadda la ansixiyay ee hay'adda.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Wasaaradda Qorshayntu waxay diyaarindoontaa qorshaha iibka ee sannadlaha kaas oo ku saleysnaandoona miisaaniyadda dowladda.*

#### 9.2.2 SHARCIGA

Sida uu qabo Qodobka 38[aad] (5) ee Sharci Lr. 17 ee Maareynta Maaliyadda Guud ee soo baxay 25 Diseembar 2019, dhammaan heshiisyada deeqaha hay'adaha Dowladda, Maamul Goboleedyada iyo hay'adaha ganacsiga ee Dowladda waa in laga diiwaan geliyaa Xafiiska Hantidhawrka Guud.

Sidoo kale, sida ku cad Qodobka 11[aad] (c) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, Xafiiska Hantidhawrka Guud wuxuu leeyahay awoodda diiwaan galinta heshiisyada iyo qandaraasyada ay galeen hay'adaha Dowladda. Qodobka 14aad ee Wax-ka-Beddelka Qodobka 84aad Sharciga Iibka Qaranka wuxuu sidoo kale caddeeyay in ay waajib ku tahay hay'adaha Dowladda in ay soo diiwaan galiyaan heshiisyadda iyo qandaraasyadda ay galaan ka hor inta aysan dhaqan galin.

### Khaladaadka

**A. Heshiisyada oo aan laga soo diiwaangalin XHGQ oo lacag ahaan dhan US $3,835,513.50**

Waxaa baarista lagu ogaaday in heshiisyo qiimahoodu gaarayo **US $3,835,513.50** aan laga soo diiwaangalin XHGQ. Xafiiska Hantidhawrka Guud waqtigii lagu guda jiray baarista sannadlaha waxaa laga yaabaa in uusan caddeyn karin waxyaabaha heshiisyada ku xusan ee la xiriira wixii hanti ah maadaama aan laga soo diiwaangalin Xafiiska. Xafiiska Hantidhawrka Guud ma sheegi karo in la fuliyay qodobbada heshiiska lagu galay, sidoo kalana in heshiisyadaas ay ku jiraan danaha Dowladda Federaalka Soomaaliya. Faahfaahinnada heshiisyada ayaa ku xusan shaxda hoose:

| TR. | QANDARAASLAHA | UJEEDDADA | MUDDADA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1. | 2020 CA-BPC-069 | Adeegga socdaalka | 10 bilood | 20,000.00 |
| **WADAR** | | | | **3,835,513.50** |

| TR. | QANDARAASLAHA | UJEEDDADA | MUDDADA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 2. | 2020 CA-BPC-070 | Qalab xafiis | 10 bilood | 20,000.00 |
| 3. | 2020 CA-BPC-071 | Shidaal iyo saliid | 10 bilood | 20,000.00 |
| 4. | European Development Fund Agreement | Mashruuca horumarinta xirfadaha wajigii 3aad (Technical and Operational Support to Development Assistance to Somalia III) | 3 sano | 3,159,183.50 |
| 5. | UNICEF | Mashruuca qorshaynta, korjoogteynta iyo qiimeynta (Planning, Monitoring and Evaluation) | 1 sano | 216,640.00 |
| 6. | UNFPA | Mashruuca xoojinta xog aruurinta qaranka (Strengthening national capacity for production and dissemination data) | 1 sano | 76,700.00 |
| 7. | Danish Refugee Council (DRC) | Mashruuca mushaaraadka la taliyayaasha (Salary for MPIED'S Consultant) | 1 sano | 72,000.00 |
| 8. | Danish Refugee Council (DRC) | Mashruuca tayaynta la taliyayaasha cudurka Covid-19. (Supporting MPIED in Strengthening their Capacity to lead the proper planning and adaptive action of COVID-19) | 6 bilood | 17,600.00 |
| 9. | World Food Programme (WFP) | Mashruuca Xoojinta qorshaha guud ee dalka (Strengthening Somalia Interim Country Strategic Plan) | 6 bilood | 129,070.00 |
| 10. | World Food Programme (WFP) | Mashruuca Xoojinta qorshaha guud ee dalka (Strengthening Somalia Interim Country Strategic Plan) | 6 bilood | 104,320.00 |
| **WADAR** | | | | **3,835,513.50** |

**Shaxda 9.2** Heshiisyada aan laga soo diiwaangelin XHGQ

## Talo soo jeedin

Waa in dhammaan qandaraasyada iyo heshiisyada laga diiwaangaliyaa Xafiiska Hantidhawraha Guud si waafaqsan shuruucda iyo xeerarka.

## Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Wasaaradda Qorshayntu waxay hirgelisay qandaraasyada hab waafaqsan habraacyada waxaana caddaymaha iyo dukumiintiyada loo baahan yahay loo soo gudbiyey Xafiiska Hantidhawrka Guud muddadii baaristu socotay. Intaa waxaa dheer, Wasaaradda Qorsheynta ayaa qandaraasyada 2020 u dirtay Xafiiska Hantidhowrka Guud si loo diiwaangeliyo.*

## Jawaabta XHGQ

Qandaraasyada kor ku xusan waxaa loo soo gudbiyay Xafiiska Hantidhawrka Guud 2021 ka dib markii ay dhaceen.

Mustaqbalka Wasaaraddu waa inay si degdeg ah u soo gudbisaa qandaraasyada XHGQ isla marka la saxiixo iyo ka hor inta aan la samayn ama aan la bixin wax kharash ah oo qandaraasyada la xiriira.

#### 9.2.3 SHARCIGA

Sida uu qabo Qodobka 14aad ee Sharci Lr. 22 ee Sharciga Iibka Qaranka oo soo baxay 9 Agoosto 2016: waxa uu farayaa in qandaraasyada iyo heshiisyada caalamiga ah lagu qoro luuqadaha kala ah Ingiriis iyo Carabi halka kuwa gudaha/maxalliga ahna lagu qoro Af-Soomaali.

### Khaladka

**A. Heshiisyada gudaha oo aan lagu qorin luuqadda Soomaaliga**

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in Wasaaradda Qorsheynta ay heshiisyada gudaha/maxalliga ah ku qortay luuqadda Ingiriiska taas oo lid ku ah sharciga.

### Talo soo jeedin

Waa in maamulka hay'addu uu heshiisyada gudaha/maxalliga ah ku qoraa luuqadda Soomaaliga si waafaqsan sharciga. Sidoo kale, waxaa ay diyaarin karaan mid ku qoran luuqadda Ingiriisiga haddii ay u baahan yihiin dhinaca kale ee qandaraaslaha.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Wasaaradda Qorshayntu waxay qandaraasyada maxalliga ah ku qortay luuqadda Soomaaliga, waa kuwa saleysan miisaaniyadda Dowladda kuwa deeq-bixiyayaasha waxaan ku qornay English iyo Soomaali maadaama qeyb ka mid ah lala wadaagayay deeq-bixiyayaasha.*

### Jawaabta XHGQ

Waxaan xaqiijinay in qandaraasyada gudaha (2020 CA-BPC-003, 2020 CA-BPC-070 iyo 2020 CA-BPC-071) ee loo soo bandhigay baarista aysan ku qornayn Af-Soomaali taas oo aan waafaqsanayn Qodobka 14aad ee Sharciga Iibka Qaranka ee 2016.

## 9.3 Maamulka hantida

#### 9.3.1 SHARCIGA

Qodobka 11aad (1) (j) ee Sharciga Maamulka Maaraynta Maaliyadda Guud ee 2019 ayaa dhigaya in Xafiiska Hantidhawrka Guud uu mas'uul ka yahay diiwaangelinta dhammaan sharciyada iyo heshiisyada, diiwaangalinta waarannada (F16), hantida guurtada iyo maguurtadda, kala wareejinta miisaaniyadda, deeqaha, iyo dhacdo dhaqaale kasta oo kale sida ku cad sharcigan.

### Hannaanka la isku waafaqsan yahay

Waxaa jirta siyaasad, hagayaal iyo habraac loo ansixiyay in lagu maamulo hantida (guurto iyo ma-guurto) ee dhammaan hay'adaha kala duwan ee dowladda. Siyaasadda hantidu waa in ay ka kooban tahay xaaladda, isticmaalka, waxqabadka iyo dhaqan-ka-baxa.

Waxaa jira diiwaan guud oo lagu keydiyo hantida dowladda oo ay hayaan hay'adaha kala duwan. Diiwaanka waa in lagu sheego hanti waliba lamberka u gaarka ah, meesha lagu isticmaalo, xaaladda muuqaal ahaaneed IWM.

### Khaladaadka

**A. Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka hantida**

Waxaa baarista lagu ogaaday in maamulka Wasaaradda Qorsheyntu aysan lahayn habraacyada iyo siyaasadda lagu maamulo lagu lana socdo hantida.

**B. Diiwaanka hantida oo aan joogto loo cusboonaysiin**

Maamulka hay'adda ayaa ku guul dareystay in ay cusboonaysiiyaan diiwaanka hantida kaas oo ka kooban macluumaadka, lambarka aqoonsiga, qiimaha lagu iibiyay xaaladda hantida IWM.

Hubinta muuqaal ahaaneed ee hantida ayaa lagu ogaaday in hantida hay'addu aysan wada

lahayn lambarka aqoonsiga hantida (tag number) kaas oo ah lambar lagu aqoonsado oo gaar u ah si loo hubiyo loona dabagalo.

Intaas waxaa dheer, sida uu qabo Sharciga Maareynta Maaliyadda Dowladda Hantida lagama soo diiwaangalin XHGQ.

### Talo soo jeedin

Waa in la hirgaliyaa lana meel mariyaa tilmaamo iyo siyaasado dhammaystiran ee maamulka, hubinta iyo ka warbixnta hantida.

Waa in Maamulka hay'adda ay diyaariyaan diiwaan dhammaystiran ee hantida oo leh tilmaamo cad si loo xaqiijiyo in dhammaan hantida hay'adda lagu diiwaan galiyo diiwaanka, sidoo kalana loo cusboonaysiiyaa xilliyo go'an ama cayiman.

Waa in hay'adda la baaray iyo Wasaaradda Maaliyadda ay hantida hay'adda ku sameeyaan tirakoob waqtiyaysan isla markaana ay cusboonaysiiyaan diiwaanka hantida.

Waa in maamulka hay'adda ay hantida oo dhan ka soo diiwangeliyaan Xafiiska Hnatidhawrka Guud si waafaqsan Sharciga Maamulka Maaliyadda Dowladda.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Hay'addu waxay leedahay nidaam lagu maamulo hantida kaas oo la sameeyay sannadkii 2020. Sidaas darteed waa leedahay hay'addu nidaam lagu maamulo bedqabka hantida.*

*In la sameeyo maamulka siyaasadda hantida waxaa u baahantahay in la diiwaangaliyo hantida. Sidaas darteed, Wasaaraddu waxay sameysay diiwaanka hantida shaqaalena waa loo tababaray.*

*Waxaan sameynay lambarka hantida kaas oo lagu diiwaangaliyay nooca hantida, meesha ay taalo iyo cidda ka mas'uulka ah waxaana macluumaadkaas la wadaagnay Baarayaashii ka soc-day XHG. Intaas waxaa dheer in hantida Wasaaraddan ay sidoo kale ka diiwaangashantahay Wasaaradda Maaliyadda iyada oo leh lambarka tixanaha ee hantida qaranka.*

### Jawaabta XHGQ

*Arrinkan waxaa dib u eegis lagu samayn doonaa baarista soo socota.*

## 9.4 Furitaanka iyo isticmaalka koontooyinka bangiyada

### 9.4.1 SHARCIGA

Qodobbada 42[aad] (3) iyo 9[aad] (7) ee Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud (Sharci Lr. 17) ee soo baxay 25 Diseembar 2019 wuxuu sheegayaa sida soo socota:

> 42(3) Hay'adaha Dowladda in aysan furi karin koonto bangi maxalli ah ama mid caalami ah iyada oo aan oggolaansho qoraal ah laga haysan Xisaabiyaha Guud.
>
> 9(7) Wasiirka (Wasiirka Maaliyadda) waa in uu ansixiyo furitaanka xisaab bangi ee hay'ada-ha Dowladda iyo qaabeynta saxiixa koontoyinka bangi.

### Khaladka

**A. Koonto bangi oo la furay iyadoo aan oggolaansho loo haysan**

Intii baaristu socotay waxaan ogaannay in Wasaaradda Qorsheyntu ka furatay koontooyin Bangiga Dhexe ee Soomaaliya, iyo bangiyada Dahabshiil iyo Amal iyada oo aan oggolaansho qoraal ah ka haysan Xisaabiyaha Guud iyo walibana uusan ansixin Wasiirka Wasaaradda Maa-liyadda.

| TR. | BANGIGA | KOONTO LR. | TIRADA LACAGTA SOO GASHAY US $ | HARAA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1. | Bangiga Dhexe ee Soomaaliya | 1355 | 3,159,183.50 | 705,134.98 |
| 2. | Dahabshiil Bank International | 7927 | 231,640.00 | 8,550.00 |
| 3. | Dahabshiil Money Transfer | 15911 | 76,700.00 | 12,430.00 |
| 4. | Bangiga Dhexe ee Soomaaliya | 1093 | 72,000.00 | 0.00 |
| 5. | Amal Bank | 1013360862 | 17,600.00 | 0.00 |
| 6. | Bangiga Dhexe ee Soomaaliya | 1093 | 233,390.00 | 2,721.24 |
| **WADAR** | | | **3,790,513.50** | **728,836.22** |

**Shaxda 9.3** Furashada koontooyin bangi oo aan hay'addu oggolaansho u haysan

### Talo soo jeedin

Waa in hay'addu ay oggolaansho iyo ansixin ka hesho Xafiiska Xisaabiyaha Guud iyo Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda si loogu oggolaado koontada bangiga sare ku xusan.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Wasaaraddu waxay oggolaansho oga haysataa Xafiiska Xisaabiyaha Guud in ay koontooyin ku lahaadaan Bangiga Dhexe ee Soomaaliya. Kuwa kale ee ka furan bangiyada gaarka loo leeyahay iyaguna waxay ku furan yihiin sifo sharci ah oo u dhexeysa Wasaaradda iyo bangiyada aan ku leenahay koontoyinka Wasaaradda Maaliyaddana waa laga ogyahay jiritaanka koontoyinkan.*

### Jawaabta XHGQ

Sida ku cad Qodobadda 42aad (3) iyo 9aad (7) hay'adaha dowladda oo dhan waxaa waajib ku ahin ay hubiyaan in aysan isticmaalin koontooyin bangi oo ka furan bangiyada gaarka ah iyo kuwa guudba illaa ay ka helaan oggolaansho iyo fasax Xisaabiyaha Guud iyo Wasiirka Maaliyadda.

Maamulka Wasaaradda intii ay baaristu socotay ayaa ku guul darreystay in ay soo gudbiyaan warqado oggolaansho iyo fasax ah oo ay soo qoreen Xisaabiyaha Guud iyo Wasiirka Maaliyadda. Ilaa waraaqahan laga soo gudbinayo khaladkan wuu jiraa.

## 9.5 Isticmaalka nidaamka maaliyadda dalka (SFIMS) ee ku aaddan lacagaha deeqaha dibedda

### 9.5.1 SHARCIGA

Qodobka 38aad (1) iyo (2) ee Sharciga Maareynta Miisaaniyadda (Sharci Lr. 17) ee soo baxay 25 Diseembar 2019 ayaa sheegaya sida soo socota:

> 38(1) Dhammaan deeqaha hay'ad Dowladeed ka hesho deeq bixiye ama cid kale waa in lagu daro Miisaaniyadda qaranka.
>
> 38(2) Looma oggola hay'ad Dowladeed iyo mid Shirkad ama Wakaalad Dowladdu leedahay toona in ay galaan heshiis ay ku helayaan deeq, taas oo ay ku jiraan deeqaha aan lacagta ahayn oo ka timid deeq bixiye ama shakhsiyaad gaar ah, iyada oo uu Wasiirku (Waasiirka Maaliyadda) la saxiixin.

Sidoo kale, Qodobka 15aad (1) ee Sharciga Maareynta Miisaaniyadda waxa uu leeyahay sida soo socota:

> 15(1) Dhammaan kharashyada hay'adaha Dowladda iyo mashaariicda dibadda laga maalgeliyo waa in lagu oggolaadaa Miisaaniyadda qaranka.

## Khaladaadka

### A. Deeqaha hay'addu dibadda ka heshay oo dhan US $3,790,513.50 aan la marin nidaamka maaliyadda dowladda

Sanobaaristeedkan waxay maamulka Wasaaradda Qorshayntu heleen deeq dhan **US $3,790,513.50** taas oo ka kala imaatay hay'ado kala duwan. Intaas waxaa dheer in maamulka Wasaaraddu ay lacagtaas ka isticmaaleen **US $728,836.22** sannadkii dhammaaday 31 Disembar 2020. Balse, dhammaan lacagahaas lama marin nidaamka khasnadda middeysan ee Dowladda (TSA) kumana jirin Miisaaniyadda qaranka:

| TR. | MASHRUUCA | MAAL-GALIYAHA / DEEQ-BIXIYAHA | UJEEDDADA MASHRUUCA | KA FAA'IDAYSTAHA | MUDDADA | LACAGTA LOO QORSHEEYAY US $ | LACAGTA LA ISTICMAALAY US $ |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| 1. | Technical and Operational Support to Development Assistance to Somalia III | EU | Mashruuca horumarinta xirfadaha wajigii 3aad (Technical and Operational Support to Development Assistance to Somalia III) | In xirfad ahaan la caawiyo Soomaaliya | 3sano | 3,159,183.50 | 705,134.98 |
| 2. | Planning, Monitoring, and Evaluation | UNICEF | Mashruuca Worshaynta, Korjoogteynta iyo Qiimeynta (Planning, Monitoring and Evaluation) | Qorshaynta, korjoogteynta iyo qiimeynta | 1 sano | 231,640.00 | 8,550.00 |
| 3. | Strengthening national capacity for production and data dissemination | UNFPA | Mashruuca xoojinta xog aruurinta qaranka (Strengthening national capacity for production and dissemination data) | Tayeynta xirfadaha xog-aruurinta | 1 sano | 76,700.00 | 12,430.00 |
| 4. | Salary for MPIED'S Consultant | DRC | Mashruuca mushaaraadka la taliyayaasha (Salary for MPIED'S Consultant) | Mushaaraad | 1 sano | 72,000.00 | 0.00 |
| 5. | Supporting MPIED in Strengthening their Capacity to lead the proper planning and adaptive action of COVID-19 | DRC | Mashruuca tayaynta la taliyayaasha cudurka Covid-19. (Supporting MPIED in Strengthening their Capacity to lead the proper planning and adaptive action of COVID-19) | Ka hortagga cudurka COVID-19 | 6 bilood | 17,600.00 | 0.00 |
| 6. | Strengthening Somalia Interim Country Strategic Plan | WFP | Mashruuca Xoojinta qorshaha guud ee dalka (Strengthening Somalia Interim Country Strategic Plan) | Tayeynta qorshaynta dalka | 12 bilood | 233,390.00 | 2,721.24 |
| **WADAR** | | | | | | **3,790,513.50** | **728,836.22** |

**Shaxda 9.4** Deeqaha hay'addu dibadda ka heshay oo aan la marin nidaamka maaliyadda dowladda

## Talo soo jeedin

Waa in dhammaan deeqaha hay'addu hesho lagu daraa Miisaaniyadda qaranka sidoo kalana la soo mariyaa nidaamka maaliyadeed ee dalka.

Waa in dhammaan heshiiyada hay'adda ay gasho oo la xiriira helitaanka deeq uu qeyb ka saxiixaa Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda si waafaqsan sharciga sidoo kalena laga soo dii-waan galiyaa.

Waa in maamulka hay'addu ay ku wargaliyaan Wasaaradda Maaliyadda dhammaan deeqaha la helay si loogu daro miisaaniyadda dowladda. Lacagta harsan oo ah **US $3,046,677.28** waa in lagu daraa miisaaniyadda sannadka xiga iyadoo la marsiinaayo nidaamka maaliyadda dalka sida uu sharcigu qabo.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Wasaaradda Qorsheyntu waxay inta badan deeqa marisaa nidaamka dowladda ee SFMIS-ka. Waxaana ka mid ah deeqaha SFMIS-ka mara Mashruuca Biyooley, iyo NAO inta kalena waxaan diyaar u nahay in aan marsiino nidaamka dowladda.*

## 9.6 Dabagalka baarista

### 9.6.1 KHALADAADKA WARBIXIN BAARISEEDKII 2019

Shaxdaan hoose waxaa ka muuqda marxaladda khaladaadka baarista sannadkii hore lagu sameeyay hay'adda inta la fuliyay, qayb laga fuliyay ama aan waxba laga fulin.

| TR. | KHALADAADKA | MARXALADDA |
|---|---|---|
| 1. | 1.1.1 Ma jirin xisaabaadka sannadka oo la soo gudbiyay si loo baaro | Waa la fuliyay |
| 2. | 8.2.1 Lacagbixin aan lahayn caddaymo dhammeystiran - kharashaadka | Waa la fuliyay |
| 3. | 8.2.2 Lacagbixin aan lahayn caddaymo dhammeystiran - kharashaadka safarka | La ma fulin |
| 4. | 8.3.1 Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka hantida | La ma fulin |
| 5. | 8.3.2 Diiwaanka hantida oo aan joogto loo cusboonaysiin | La ma fulin |
| 6. | 8.4.1 Heshiisyo aan laga soo diiwaangalin XHGQ | La ma fulin |
| 7. | 8.4.2 Heshiisyada gudaha aan lagu qorin afka Soomaaliga | La ma fulin |
| 8. | 8.5.1 Ku-guuldarraysiga fulinta howlaha hantidhawrka gudaha | Qayb ayaa laga fuliyay |

**Shaxda 9.5** Khaladaadka baarista sannadkii 2019

### 9.6.2 KHALADAADKA WARBIXIN BAARISEEDKII 2018

| TR. | KHALADAADKA | MARXALADDA |
|---|---|---|
| 1. | 8.1.1Ma jirin xisaabaadka sannadka oo la soo gudbiyay si loo baaro | Lama fulin |
| 2. | 8.2.1Kharashaadka oo aan lahayn caddeymo ku filan | Lama fulin |
| 3. | 8.2.2Kharashaadka socdaalka oo aan laeyn caddeymo ku filan | Lama fulin |
| 4. | 8.3.1Ma jirin diiwaanka hantida | Qeyb ayaa la fuliyay |
| 5. | 8.3.2Ma jirin siyaasadda maamulka hantida | Lama fulin |
| 6. | 8.3.3Maamulka Gaadiidka oo ah Mid Liita | Lama fulin |
| 7. | 8.4.1Malahayn baaraha gudaha sidoo kalana baarista gudaha lama samayn | Qeyb ayaa la fuliyay |

**Shaxda 9.6** Khaladaadka baarista sannadkii 2018

# 10. Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed

## 10.1 Hubinta kharash bixinta

### 10.1.1 SHARCIGA

Sida ay qabaan Qodobbada 31aad (1) iyo 32aad (4) ee Sharci Lr. 17 ee Maaraynta Maaliyadda Guud ee soo baxay 25 Diseembar 2019:

> 31(1) Wax kharash ah lagama bixin karo Miisaaniyadda qaranka, haddii aysan jiirin, qaansheegto ama caddeyn kale oo dheeraad ah oo looga baahan yahay sida ku xusan xeer-nidaamiyaha ama nidaamka xisaabaadku sheegayo.
>
> 32(4) Kharash bixin walba ee la oggolaaday waa in ay ku lifaaqan yihiin dhammaan dukumiintiyada kaabaya sida ku qeexan Xeer-nidaamiyaha Wasiirku soo saaray.

### Hannanka la isku waafaqsan yahay

Dukumiintiyada caddeymaha way kala duwan yihiin iyadoo ay ku xiran tahay nooca lacag bixinta, waxaana ka mid ah; dalabka iibka, heshiis saxiixan, warqadaha qaansheegashada, alaab-keenidda, guddoonka alaabta, lacag qabashada, iwm.

### Khaladka

**A. Kharashaad dhan US $70,975.00 oo aan lahayn caddeymo ku filan**

Waxaa baarista lagu ogaaday in la bixiyay lacag dhan **US $70,975.00** iyada oo aan lahayn caddeymo ku filan, taas oo lid ku ah sharciga. Arrinkan ayaa sababay in la xaqiijin waayo sax ahaanshaha lacag bixintan. Faahfaahinta arrinkaana kala soco jaantuska hoose:

| TR. | MADAX-XIGE | CIDDA LA SIIYAY | BISHA | LACAGTA US $ | FAAHFAAHIN |
|---|---|---|---|---|---|
| 1. | 2213 | 2020 CA-BPC-072 | Jan - Dec | 65,975.00 | Ma lahan caddeyn ku saabsan sida loo isticmaalay shidaalka sida macluumaadka gaadiidka la siiyay shidaalka. |
| 2. | 2214 | 2020 CA-BPC-073 | Mar - May | 5,000.00 | Ma lahan warqadda qaansheegashada. |
| **WADAR** | | | | **70,975.00** | |

**Shaxda 10.1** Kharashaadka aan lahayn caddeymo ku filan

### Talo soo jeedin

Waa in dhammaan lacag bixinnada ay ku salaysnaadaan ama lahaadaan caddeymo dhammaystiran, si sax ahna ay u oggolaadaan saraakiisha sare ee mas'uulka ka ah iyo in hawlaha loo guddoomo iyadoo loo eegayo ama la raacayo shuruudo cayiman.

Waa in dhammaan dukumiintiyadda lacag bixinnada lagu tiimbareeyaa "la bixiyay" isla marka lacagahooda la bixiyo si looga hortago in mar kale loo isticmaalo kharash bixin kale.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Lacagaha qarashaadka ah oo aad ku sheegteen shaxda kore ee shidaalka uma naqaano qaab logsheet ahaan ah ama tafaariiq ah ee waxaan u diiwan gelinaa si guud oo ah diiwaanka guud oo shidaalka ku baxayo.*

**Jawaabta XHGQ**
Jawaabta maamulka hay'addu ma ahan mid lagu qanci karo.

## 10.2 Maamulka iibka iyo heshiisyada

### 10.2.1 SHARCIGA

Qodobka 27aad (1) iyo (4) ee Sharci Lr. 22 ee Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka oo soo baxay 2016, ayaa sheegaya sidaan:

> 27(1) Dhammaan Hay'adaha qandaraaska iibka ayaa sameynaya qorshaha qandaraaska Iibka ee sannadlaha, ee looga gol leeyahay si lagu gaaro in qiimaha ugu badan ee kharashka guud iyo waxyaabaha kale ee sharcigan. Qorshaha qandaraaska iibsiga wuxuu taageerayaa barnaamijka iyo miisaaniyadda ay ansixisay hay'adda qandaraaska iibka.
>
> 27(4) Qorshaha qandaraaska iibka waxaa la diyaarinayaa sannad walba iyadoo lagu saleynayo miisaaniyadda sannadka Xukuumadda, iyado la xisaabinayo miiisaaniyad sannadeedka Xukuumadda.

### Khaladka

**A. Maqnaanshaha diyaarinta qorshaha iibka sannadka**

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in Ciidanka Asluubtu ayan lahayn qorshe sannadle ah ee iibka sannad maaliyadeedka dhammaaday 31da Diseembar 2020 kaas oo ku salaysan miisaaniyadda qaranka.

### Talo soo jeedin

Waa in Ciidanka Asluubtu yeeshaan qorshe sannadle ah oo ku aaddan iibka kaas oo ku saleysan miisaaniyadda la ansixiyay ee hay'adda.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Maamulka hay'adda la baaray wax jawaab ah oo qoran kama soo bixin arrintaan.*

### 10.2.2 SHARCIGA

Sida uu qabo Qodobka 38aad (5) ee Sharci Lr. 17 ee Maareynta Maaliyadda Guud ee soo baxay 25 Diseembar 2019, dhammaan heshiisyada deeqaha hay'adaha Dowladda, Maamul Goboleedyada iyo hay'adaha ganacsiga ee Dowladda waa in laga diiwaan geliyaa Xafiiska Hantidhawrka Guud.

Sidoo kale, sida ku cad Qodobka 11aad (c) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, Xafiiska Hantidhawrka Guud wuxuu leeyahay awoodda diiwaan galinta heshiisyada iyo qandaraasyada ay galeen hay'adaha Dowladda. Qodobka 14aad ee Wax-ka-Beddelka Qodobka 84aad Sharciga Iibka Qaranka wuxuu sidoo kale caddeeyay in ay waajib ku tahay hay'adaha Dowladda in ay soo diiwaan galiyaan heshiisyadda iyo qandaraasyadda ay galaan ka hor inta aysan dhaqan galin.

### Khaladka

**A. Heshiisyo lacagtoodu dhantahay US $11,000.00 ayaan laga soo diiwaangalin XHGQ**

Waxaa baarista lagu ogaaday in heshiisyo qiimahoodu gaarayo **US $11,000.00** aan laga soo diiwaangalin XHGQ. Xafiiska Hantidhawrka Guud waqtigii lagu guda jiray baarista sannadlaha waxaa laga yaabaa in uusan caddeyn karin waxyaabaha heshiisyada ku xusan ee la xiriira wixii hanti ah maadaama aan laga soo diiwaangalin Xafiiska. Xafiiska Hantidhawrka Guud ma sheegi karo in la fuliyay qodobbada heshiiska lagu galay, sidoo kalana in heshiisyadaas ay ku

jiraan danaha Dowladda Federaalka Soomaaliya. Faahfaahinnada heshiisyada ayaa ku xusan shaxda hoose:

| TR. | QANDARAASLAHA | UJEEDDO | MUDDADA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1. | 2020 CA-BPC-073 | Alaab | 10 bilood | 11,000.00 |
| **WADAR** | | | | **11,000.00** |

**Shaxda 10.2** Heshiisyada aan laga soo diiwaangelin XHGQ

### Talo soo jeedin

Waa in dhammaan qandaraasyada iyo heshiisyada laga diiwaangaliyaa Xafiiska Hantidhawraha Guud si waafaqsan shuruucda iyo xeerarka.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Waa laga soo diiwaangalin doonaa Xafiiska Hantidhawrka Guud ee Qaranka.*

## 10.3 Maamulka hantida

### 10.3.1 SHARCIGA

Qodobka 11aad (1) (j) ee Sharciga Maamulka Maaraynta Maaliyadda Guud ee 2019 ayaa dhigaya in Xafiiska Hantidhawrka Guud uu mas'uul ka yahay diiwaangelinta dhammaan sharciyada iyo heshiisyada, diiwaangalinta waarannada (F16), hantida guurtada iyo maguurtadda, kala wareejinta miisaaniyadda, deeqaha, iyo dhacdo dhaqaale kasta oo kale sida ku cad sharcigan.

### Hannaanka la isku waafaqsan yahay

Waxaa jirta siyaasad, hagayaal iyo habraac loo ansixiyay in lagu maamulo hantida (guurto iyo ma-guurto) ee dhammaan hay'adaha kala duwan ee dowladda. Siyaasadda hantidu waa in ay ka kooban tahay xaaladda, isticmaalka, waxqabadka iyo dhaqan-ka-baxa.

Waxaa jira diiwaan guud oo lagu keydiyo hantida dowladda oo ay hayaan hay'adaha kala duwan. Diiwaanka waa in lagu sheego hanti waliba lamberka u gaarka ah, meesha lagu isticmaalo, xaaladda muuqaal ahaaneed IWM.

### Khaladaadka

**A. Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka hantida**

Waxaa baarista lagu ogaaday in Ciidanka Asluubta aysan lahayn habraacyada iyo siyaasadda lagu maamulo lagu lana socdo hantida.

**B. Diiwaanka hantida oo aan joogto loo cusboonaysiin**

Maamulka hay'adda ayaa ku guul dareystay in ay cusboonaysiiyaan diiwaanka hantida kaas oo ka kooban macluumaadka, lambarka aqoonsiga, qiimaha lagu iibiyay xaaladda hantida IWM.

Hubinta muuqaal ahaaneed ee hantida ayaa lagu ogaaday in hantida hay'addu aysan wada lahayn lambarka aqoonsiga hantida (tag number) kaas oo ah lambar lagu aqoonsado oo gaar u ah si loo hubiyo loona dabagalo.

Intaas waxaa dheer, sida uu qabo Sharciga Maareynta Maaliyadda Dowladda Hantida lagama soo diiwaangalin XHGQ.

### Talo soo jeedin

Waa in la hirgaliyaa lana meel mariyaa tilmaamo iyo siyaasado dhammaystiran ee maamulka, hubinta iyo ka warbixnta hantida.

Waa in maamulka hay'addu ay diyaariyaan diiwaan dhammaystiran ee hantida oo leh tilmaamo cad si loo xaqiijiyo in dhammaan hantida hay'adda lagu diiwaan galiyo diiwaanka, sidoo kalana loo cusboonaysiiyaa xilliyo go'an ama cayiman.

Waa in hay'adda la baaray iyo Wasaaradda Maaliyadda ay hantida hay'adda ku sameeyaan tirakoob waqtiyaysan isla markaana ay cusboonaysiiyaan diiwaanka hantida.

Waa in maamulka hay'adda ay hantida oo dhan ka soo diiwangeliyaan Xafiiska Hnatidhawrka Guud si waafaqsan Sharciga Maamulka Maaliyadda Dowladda.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Siyaasadda hantida iyo guud ahaan siyaasadaha kale waa qabyo qoraal waan soo dhammaystireynaa waana soo gudbineynaa insha alah.*

*Diiwaanka hantida waa qabyo qoraal waan soo dhammaystireynaa waana soo gudbineynaa Insha Allaah.*

## 10.4 Dabagalka baarista

### 10.4.1 KHALADAADKA WARBIXIN BAARISEEDKII 2018

Shaxdaan hoose waxaa ka muuqda marxaladda khaladaadka baarista sannadkii hore lagu sameeyay hay'adda inta la fuliyay, qayb laga fuliyay ama aan waxba laga fulin.

| TR. | KHALADAADKA | MARXALADDA |
|---|---|---|
| 1. | 16.1.1 Ma jirin xisaabaadka sannadka oo la soo gudbiyay si loo baaro | Waa la fuliyay |
| 2. | 16.2.1 Shuruucda iyo Xeerarka Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed oo aan la cusbooneysiin | Lama fulin |
| 3. | 16.3.1 Keydka Xogta Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed oo aan jirin | Waa la fuliyay |
| 4. | 16.3.2 Hubinta Muuqaal ahaaneed ee ciidanka oo aan jirin | Waa la fuliyay |
| 5. | 16.4.1 Maaraynta mushaaraadka oo aan hagaagsaneyn | Waa la fuliyay |
| 6. | 16.5.1 Lacagbixin aan lahayn caddaymo dhammeystiran - kharashaadka hawl-maalmeedka | Qayb ayaa laga fuliyay |
| 7. | 16.5.2 Kharashaadka caafimaadka oo aan lahayn caddeymo ku filan | Waa la fuliyay |
| 8. | 16.5.3 Kharashaadka socdaalka oo aan lahayn caddeymo ku filan | Waa la fuliyay |
| 9. | 16.6.1 Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka hantida | Lama fulin |
| 10. | 16.6.2 Ma jirin diiwaanka hantida | Lama fulin |
| 11. | 16.7.1 Maamulka gaadiidka oo ah mid liita | Lama fulin |
| 12. | 16.8.1 Ku-guuldarraysiga fulinta howlaha hantidhawrka gudaha | Qayb ayaa laga fuliyay |
| 13. | 16.9.1 Heshiisyo aan laga soo diiwaangalin XHGQ | Lama fulin |

**Shaxda 10.3** Khaladaadka baarista sannadkii 2018




# II. HAY'ADAHA AMNIGA

# 11. Wasaaradda Gaashaandhigga

## 11.1 Hubinta kharash bixinta

### 11.1.1 SHARCIGA

Sida ay qabaan Qodobbada 31aad (1) iyo 32aad (4) ee Sharci Lr. 17 ee Maaraynta Maaliyadda Guud ee soo baxay 25 Diseembar 2019:

> 31(1) Wax kharash ah lagama bixin karo Miisaaniyadda qaranka, haddii aysan jiirin, qaansheegto ama caddeyn kale oo dheeraad ah oo looga baahan yahay sida ku xusan xeer-nidaamiyaha ama nidaamka xisaabaadku sheegayo.
>
> 32(4) Kharash bixin walba ee la oggolaaday waa in ay ku lifaaqan yihiin dhammaan dukumiintiyada kaabaya sida ku qeexan Xeer-nidaamiyaha Wasiirku soo saaray.

### Hannanka la isku waafaqsan yahay

Dukumiintiyada caddeymaha way kala duwan yihiin iyadoo ay ku xiran tahay nooca lacag bixinta, waxaana ka mid ah; dalabka iibka, heshiis saxiixan, warqadaha qaansheegashada, alaab-keenidda, guddoonka alaabta, lacag qabashada, iwm.

### Khaladka

**A. Kharashaad socdaal dhan US $10,670.00 oo aan lahayn caddeymo dhammaystiran**

Si aan waa faqsaneyn shuruudaha Sharciga kor ku xasan, lacag bixin oo dhan **US $10,670.00** ayaa lagu kharash gareeyay safar iyada oo aan la heynin caddeymo dhammeystiran, taas oo noo suurtagelin weyday inaan xaqiijinno dhab ahaan-shaha lacag bixintaas. Faahfaahinta waxaa lagu muujiyay shaxda hoose:

| TR. | MADAX-XIGE | CIDDA LA SIIYAY | BISHA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1. | 2216 | 2020 CA-BPC-074 | Feb 2020 | 10,670.00 |
| **WADAR** | | | | **10,670.00** |

**Shaxda 11.1** Kharashaadka safarka ee aan lahayn caddeymo ku filan

### Talo soo jeedin

Waa in dhammaan lacag bixinnada ay ku salaysnaadaan ama lahaadaan caddeymo dhammaystiran, si sax ahna ay u oggolaadaan saraakiisha sare ee mas'uulka ka ah iyo in hawlaha loo guddoomo iyadoo loo eegayo ama la raacayo shuruudo cayiman.

Waa in dhammaan dukumiintiyadda lacag bixinnada lagu tiimbareeyaa "la bixiyay" isla marka lacagahooda la bixiyo si looga hortago in mar kale loo isticmaalo kharash bixin kale.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Dhaafiyaha  marka uu mas'uulka baxaayo badanaa makeeno Boarding pass maadaama aysan la socon wax xogheyn ah waxaa dhacdo in uu tuuro;*

*Oggolaanshada safarrada la galay wuxuu ku xirany ayay dukumiinti mas'uulka uu ku safaray iyo wadanka casuumaada uu ka helay.*

## 11.2 Maamulka iibka iyo heshiisyada

### 11.2.1 SHARCIGA

Qodobka 27aad (1) iyo (4) ee Sharci Lr. 22 ee Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka oo soo baxay 2016, ayaa sheegaya sidaan:

> 27(1) Dhammaan Hay'adaha qandaraaska iibka ayaa sameynaya qorshaha qandaraaska Iibka ee sannadlaha, ee looga gol leeyahay si lagu gaaro in qiimaha ugu badan ee kharashka guud iyo waxyaabaha kale ee sharcigan. Qorshaha qandaraaska iibsiga wuxuu taageerayaa barnaamijka iyo miisaaniyadda ay ansixisay hay'adda qandaraaska iibka.
>
> 27(4) Qorshaha qandaraaska iibka waxaa la diyaarinayaa sannad walba iyadoo lagu saleynayo miisaaniyadda sannadka Xukuumadda, iyado la xisaabinayo miiisaaniyad sannadeedka Xukuumadda.

### Khaladka

**A. Maqnaanshaha diyaarinta qorshaha iibka sannadka**

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in Wasaaradda Gaashaandhiggu aysan lahayn qorshe sannadle ah ee iibka sannad maaliyadeedka dhammaaday 31da Diseembar 2020 kaas oo ku salaysan miisaaniyadda qaranka.

### Talo soo jeedin

Waa in Wasaaraddu yeelataa qorshe sannadle ah oo ku aaddan iibka kaas oo ku saleysan miisaaniyadda la ansixiyay ee hay'adda.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Miisaaniyadda markii la fiiriyo Shirkadda ayaan heshiis la galnaa midda kale mar walbana waxaa galnaa deyn sannadle ah. Maadaama aanan haysan lacag caddaan ah oo aan waxaan door bidnaa in aan shirkaddan la galno heshiis sannadle ah, hadda sannadka dhan waxaan helnay lix bil iyada oo loogu talagaly in aan helno sannadka dhan waxa noolagu talgalay. Wasaaradanna iyaadaa lacaga badan lagu leeyahay maadaama aan la siin waxa ay u baahantahay Miisaayadda Dowladda ay wili looga bixin wax qarashaad ah markii laga reebo lix bilood ee la soo dhaafay. Isku soo duub, Wasaaradda Gaashandhigu ma hesho miisaaniyad sannadeedka loogu talo-galay in hawlaha lagu kala dabiro.*

### 11.2.2 SHARCIGA

Sharci Lr. 17 ee Maareynta Maaliyadda Guud ee Dowladda oo soo baxay 25 Diseembar 2019, Qodobka 38aad (5) wuxuu dhigayaa dhammaan heshiisyada deeqaha hay'adaha Dowladda, Maamul Goboleedyada iyo hay'adaha ganacsiga ee Dowladda waa in laga diiwaan geliyaa Xafiiska Hantidhawrka Guud.

Intaa waxaa dheer, Qodobka 11aad (c) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee 2019 wuxuu awood u siinayaa Hantidhawrka Guud inuu diiwaan geliyo qandaraasyada iyo heshiisyada ay galaan hay'adaha Dowladda. Qodobka 14aad (wax-ka-beddelka Qodobka 84aad) ee Sharciga Iibka Qaranka 2020 wuxuu sheegayaa in dhammaan hay'adaha dawliga ah ay qandaraasyada iyo heshiisyada ka diiwaan-galiyaan XHGQ.

### Khaladka

**A. Heshiisyo qiimahoodu dhanyahay US $104,818.00 oo aan laga soo diiwaan-galin XHGQ**

Waxaa baarista lagu ogaaday in heshiisyo qiimahoodu gaarayaan **US $104,818.00** aan laga soo diiwaangalin XHGQ. Xafiiska Hantidhawrka Guud waqtigii lagu guda jiray baarista sannadlaha waxaa laga yaabaa in uusan caddeyn karin waxyaabaha heshiisyada ku xusan ee la xiriira

wixii hanti ah maadaama aan laga soo diiwaangalin. Xafiiska Hantidhawrka Guud ma sheegi karo in la fuliyay qodobbada heshiiska lagu galay, sidoo kalana in heshiisyadaas ay ku jiraan danaha Dowladda Federaalka Soomaaliya:

| TR. | QANDARAASLAHA | UJEEDDADA | MUDDADA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1. | 2020 CA-BPC-075 | Kiro | 8 bilood | 22,456.00 |
| 2. | 2020 CA-BPC-076 | Oil and Lubricants | 8 bilood | 16,037.00 |
| 3. | 2020 CA-BPC-077 | Dayactir and Maintenance | 8 bilood | 66,325.00 |
| **WADAR** | | | | **104,818.00** |

**Shaxda 11.2** Heshiisyada aan laga soo diiwaangelin XHGQ

### Talo soo jeedin
Waa in dhammaan qandaraasyada iyo heshiisyada laga diiwaangaliyaa Xafiiska Hantidhawraha Guud si waafaqsan shuruucda iyo xeerarka.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray
*Waxay ku dhacday midaas ogaansho la'aan maadaama aanan hore u arkin warqad rasmi ah oo in noogu timid Xafiiska Hantidhawrka Guud ee Dowladda, Insha Allah hadda wixii ka dambeeya waa soo diiwangelin donnaa wax walbo o heshiis ah ee Wasaaraddu gasho sannadka 2021..*

### 11.2.3 SHARCIGA
Sharci Lr. 22 ee Sharciga Iibka Qaranka oo soo baxay 9 Agoosto 2016, Qodobkiisa 14aad ayaa waxa uu farayaa in qandaraasyada iyo heshiisyada caalamiga ah lagu qoro luuqadaha kala ah Ingiriis iyo Carabi halka kuwa gudaha/maxalliga ahna lagu qoro Af-Soomaali.

### Khaladka
**A. Heshiisyada gudaha  oo aan lagu qorin luuqadda Soomaaliga**

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in Wasaaradda Gaashaandhigga ay heshiisyada gudaha/maxalliga ah ku qoraan luuqadda Ingiriiska taas oo lid ku ah sharciga.

### Talo soo jeedin
Waa in maamulka hay'addu uu heshiisyada gudaha/maxalliga ah ku qoraa luuqadda Soomaaliga si waafaqsan sharciga. Sidoo kale, waxaa ay diyaarin karaan mid ku qoran luuqadda Ingiriisiga haddii ay u baahan yihiin dhinaca kale ee qandaraaslaha.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray
*Hay'adda la baaray ayaan qoraal ahaan uga jawaabin natiijooyinka ku jira warqadda maamulka ee lala wadaagay.*

## 11.3 Maamulka hantida

### 11.3.1 SHARCIGA
Qodobka 11aad (1) (j) ee Sharciga Maamulka Maaraynta Maaliyadda Guud ee 2019 ayaa dhigaya in Xafiiska Hantidhawrka Guud uu mas'uul ka yahay diiwaangelinta dhammaan sharciyada iyo heshiisyada, diiwaangalinta waarannada (F16), hantida guurtada iyo maguurtadda, kala wareejinta miisaaniyadda, deeqaha, iyo dhacdo dhaqaale kasta oo kale sida ku cad sharcigan.

### Hannaanka la isku waafaqsan yahay

Waxaa jirta siyaasad, hagayaal iyo habraac loo ansixiyay in lagu maamulo hantida (guurto iyo ma-guurto) ee dhammaan hay'adaha kala duwan ee dowladda. Siyaasadda hantidu waa in ay ka kooban tahay xaaladda, isticmaalka, waxqabadka iyo dhaqan-ka-baxa.

Waxaa jira diiwaan guud oo lagu keydiyo hantida dowladda oo ay hayaan hay'adaha kala duwan. Diiwaanka waa in lagu sheego hanti waliba lamberka u gaarka ah, meesha lagu isticmaalo, xaaladda muuqaal ahaaneed IWM.

### Khaladaadka

#### A. Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka hantida

Waxaa baarista lagu ogaaday in Wasaaradda Gaashaandhigga aysan lahayn habraacyada iyo siyaasadda lagu maamulo lagu lana socdo hantida.

#### B. Diiwaanka hantida oo aan joogto loo cusboonaysiin

Maamulka hay'adda ayaa ku guul dareystay in ay cusboonaysiiyaan diiwaanka hantida kaas oo ka kooban macluumaadka, lambarka aqoonsiga, qiimaha lagu iibiyay xaaladda hantida IWM.

Hubinta muuqaal ahaaneed ee hantida ayaa lagu ogaaday in hantida hay'addu aysan wada lahayn lambarka aqoonsiga hantida (tag number) kaas oo ah lambar lagu aqoonsado oo gaar u ah si loo hubiyo loona dabagalo.

Intaas waxaa dheer, sida uu qabo Sharciga Maareynta Maaliyadda Dowladda Hantida lagama soo diiwaangalin XHGQ.

#### C. Maamulka gaadiidka oo ah mid liita

Muddadii lagu guda jiray baarista Wasaaradda Gaashaandhigga waxay nala wadaagtay liiska gaadiidka oo la sheegay in hay'addu ay leedahay oo dhan 24 gaadiid. 19 ka mid ah gaadiidka laguma diiwaangalin magaca hay'adda sidoo kalena ma lahayn buugaagta lahaanshiyaha gaadiidka. Faahfaahinta gaadiidka waa sida hoos ku xusan:

| TR. | NOOCA GAARIGA | CIDDA BIXISAY | CAQAAYAD LR. | FAAHFAAHIN |
|---|---|---|---|---|
| 1. | Hardtop (Bullet Proof) | Dowladda Maraykanka | JTGEB73J3G9017399 | Muuqaal ahaan looma xaqiijin |
| 2. | Hardtop (Bullet Proof) | Dowladda Maraykanka | JTGEB73J5G9017396 | Muuqaal ahaan looma xaqiijin |
| 3. | Hardtop (Bullet Proof) | Dowladda Maraykanka | JTGEB73J0G9017397 | Muuqaal ahaan looma xaqiijin |
| 4. | Hardtop (Bullet Proof) | Dowladda Maraykanka | JTGEB73J5G9017398 | Muuqaal ahaan looma xaqiijin |
| 5. | Hardtop (Bullet Proof) | Dowladda Maraykanka | JTGEB73J1G9017394 | Muuqaal ahaan looma xaqiijin |
| 6. | Pickup Hilux | Dowladda Turkiga | 040GU20B01BR156F | Muuqaal ahaan looma xaqiijin |
| 7. | Pickup Hilux | Dowladda Turkiga | Looma soo gudbin baaris | Muuqaal ahaan looma xaqiijin |
| 8. | Pickup Hilux | Dowladda Turkiga | Looma soo gudbin baaris | Muuqaal ahaan looma xaqiijin |
| 9. | Hardtop (Bullet Proof) | Dowladda Masar | Looma soo gudbin baaris | Muuqaal ahaan looma xaqiijin |
| 10. | Pickup Hilux | Dowladda Masar | Looma soo gudbin baaris | Muuqaal ahaan looma xaqiijin |
| 11. | Toyota Noah | Dowladda Talyaanniga | Looma soo gudbin baaris | Muuqaal ahaan looma xaqiijin |
| 12. | Toyota Camry | DFS | Looma soo gudbin baaris | Muuqaal ahaan looma xaqiijin |

| TR. | NOOCA GAARIGA | CIDDA BIXISAY | CAQAAYAD LR. | FAAHFAAHIN |
|---|---|---|---|---|
| 13. | Pickup (Bulletproof) | Dowladda Turkiga | Looma soo gudbin baaris | Muuqaal ahaan looma xaqiijin |
| 14. | Pickup (Bulletproof) | Dowladda Turkiga | Looma soo gudbin baaris | Muuqaal ahaan looma xaqiijin |
| 15. | Toyota Pickup | Dowladda Turkiga | Looma soo gudbin baaris | Muuqaal ahaan looma xaqiijin |
| 16. | Toyota Pickup | Dowladda Turkiga | Looma soo gudbin baaris | Muuqaal ahaan looma xaqiijin |
| 17. | Hardtop (Bullet Proof) | Dowladda Masar | Looma soo gudbin baaris | Muuqaal ahaan looma xaqiijin |
| 18. | Hardtop (Bullet Proof) | Dowladda Masar | Looma soo gudbin baaris | Muuqaal ahaan looma xaqiijin |
| 19. | Toyota Pickup | Dowladda Masar | Looma soo gudbin baaris | Muuqaal ahaan looma xaqiijin |
| 20. | Toyota Pickup | Dowladda Masar | Looma soo gudbin baaris | Muuqaal ahaan looma xaqiijin |
| 21. | Toyota Noah | Dowladda Talyaanniga | Looma soo gudbin baaris | Muuqaal ahaan looma xaqiijin |
| 22. | Toyota Noah | Dowladda Talyaanniga | Looma soo gudbin baaris | Muuqaal ahaan looma xaqiijin |
| 23. | Land Cruiser V8 (Bullet Proof) | Dowladda Imaaraadka | Looma soo gudbin baaris | Muuqaal ahaan looma xaqiijin |
| 24. | Toyota Pickup | Dowladda Imaaraadka | Looma soo gudbin baaris | Muuqaal ahaan looma xaqiijin |

**Shaxda 11.3** Gaadiidka hay'adda la baaray

## Talo soo jeedin

Waa in la hirgaliyaa lana meel mariyaa tilmaamaha iyo siyaasadda dhammaystiran ee maamulka, hubinta iyo ka warbixnta hantida.

Waa in Wasaaradda Maaliyadda ay hoggaan u noqotaa tallaabooyin lagu hirgalinayo siyaasadda iyo habraaca maamulka hantida ee hay'adaha dowladda oo ay ku jirto Wasaaradda Maaliyaddu..

Waa in maamulka hay'addu ay diyaariyaan diiwaan dhammaystiran ee hantida oo leh tilmaamo cad si loo xaqiijiyo in dhammaan hantida hay'adda lagu diiwaan galiyo diiwaanka, sidoo kalana loo cusboonaysiiyaa xilliyo go'an ama cayiman.

Waa in hay'adda la baaray iyo Wasaaradda Maaliyadda ay hantida hay'adda ku sameeyaan tirakoob waqtiyaysan isla markaana ay cusboonaysiiyaan diiwaanka hantida.

Waa in maamulka hay'adda ay hantida ka soo diiwangeliyaan Xafiiska Hnatidhawrka Guud si waafaqsan Sharciga Maamulka Maaliyadda.

## Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Midaas waa sax sida baaristii Sannadka hore Wasaaradda lagu sameeyey ee aan ku soo gudbinnay in Wasaaradda ay ka maqan yihiin gawaari badan iyo cidda gacantooda ay ku jiraan ilaa hadda waxaa ka sugeynaa in Wasaaradda loo soo celiyo gawaaridaas oo ay haysataan madax hore oo Wasaaradda soo maray midda kale haddii aan ka jawaabo gawaarida aan laga soo diiwaan gelin ee Wasaaradda gaadiidka waaan oga jawaabay Wasaaradda waxaa loogu deeqay gawaari aan xabaddu karin kuwaas oo aan idiin wada tusnay iyagana waxaa keenay Dowladda Mareekan ka waxaana ku dhagan Taargo CXDS Maadaama aysan Wasaaraddu soo iibsan waxaa lagu dhajiyey Taargada CXDS Maadaama uu jiro Hoggaanka Gaadiidka ee CXDS.*

## 11.4 Furitaanka iyo isticmaalka koontooyinka bangiyada

### 11.4.1 SHARCIGA

Qodobbada 42aad (3) iyo 9aad (7) ee Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud (Sharci Lr. 17) ee soo baxay 25 Diseembar 2019 wuxuu sheegayaa sida soo socota:

> 42(3) Hay'adaha Dowladda in aysan furi karin koonto bangi maxalli ah ama mid caalami ah iyada oo aan oggolaansho qoraal ah laga haysan Xisaabiyaha Guud.
>
> 9(7) Wasiirka (Wasiirka Maaliyadda) waa in uu ansixiyo furitaanka xisaab bangi ee hay'adaha Dowladda iyo qaabeynta saxiixa koontoyinka bangi.

### Khaladka

**A. Koonto bangi oo la furay iyadoo aan oggolaansho loo haysan**

Intii baaristu socotay waxaan ogaannay in Wasaaradda Gaashaandhigga ka furatay koonto bangiga Amal iyada oo aan oggolaansho qoraal ah ka haysan Xisaabiyaha Guud iyo walibana uusan ansixin Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.

| TR. | BANGIGA | KOONTO LR. | TIRADA LACAGTA SOO GASHAY US $ | HARAA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1. | Amal Bank | 1012153177- IDNO 2365492 | 178,706.00 | 300.00 |
| **WADAR** | | | **178,706.00** | **300.00** |

**Shaxda 11.4** Furashada koontooyin bangi oo aan hay'addu oggolaansho u haysan

### Talo soo jeedin

Waa in hay'addu ay oggolaansho iyo ansixin ka hesho Xafiiska Xisaabiyaha Guud iyo Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda si loogu oggolaado koontada bangiga sare ku xusan.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Wasaaraddu markii ay furanaysay akoonada gaar ah ma jirin wax sharci ah oo aan haynay oo ka mida dhanka Dowladda kadib waxaa dhacay in aan helnay warqad amrayso in aan soo diiwaan gelino ama aan soo gudbinno akoonada gaarka ah ee Wasaaradda leedahay waxaana u gudbinay Xafiiska Xisaabiyaha Guud (Akoonkaas gaarka ah waxaa lagu isticmaali jiray ka hortaga askaraynta caruurta) markaas kadib waxaan furanay Bangiga Dhaxe ee Soomaaliya iyada oo la soo xiray kii private ka ahaa isla markaana lagu wareejiyey wixii lacag ku jirtay koontada Bangiga Dhexe oo aan hada isticmaalno F.G Warqadda xiritaanka koontada Amal waxaan tusnay saraakiisha baarintaanka sameeyey. Wasaaraddu haba yaraate ma laha koonto ka baxsan tan dowladda (Central Bank).*

### Jawaabta XHGQ

XHGQ waxa uu xaqiijinayaa in Wasaaradda Gaashaandhiga aysan baaris usoo gudbin warqadda lagu xeray koontada bangiga.

## 11.5 Isticmaalka nidaamka maaliyadda dalka (SFIMS) ee ku aaddan lacagaha deeqaha dibedda

### 11.5.1 SHARCIGA

Qodobka 38aad (1) iyo (2) ee Sharciga Maareynta Miisaaniyadda (Sharci Lr. 17) ee soo baxay 25 Diseembar 2019 ayaa sheegaya sida soo socota:

> 38(1) Dhammaan deeqaha hay'ad Dowladeed ka hesho deeq bixiye ama cid kale waa in lagu daro Miisaaniyadda qaranka.
>
> 38(2) Looma oggola hay'ad Dowladeed iyo mid Shirkad ama Wakaalad Dowladdu leedahay toona in ay galaan heshiis ay ku helayaan deeq, taas oo ay ku jiraan deeqaha aan lacagta ahayn oo ka timid deeq bixiye ama shakhsiyaad gaar ah, iyada oo uu Wasiirku (Waasiirka Maaliyadda) la saxiixin.

Sidoo kale, Qodobka 15[aad] (1) ee Sharciga Maareynta Miisaaniyadda waxa uu leeyahay sida soo socota:

> 15(1) Dhammaan kharashyada hay'adaha Dowladda iyo mashaariicda dibadda laga maalgeliyo waa in lagu oggolaadaa Miisaaniyadda qaranka.

## Khaladaadka

### A. Deeqaha hay'addu dibadda ka heshay oo aan la marin nidaamka maaliyadda dowladda

Intii baaristu socotay waxan oggaanay in Wasaaradda Gaashaandhigga ay fulisay (2) mashruuc oo lacagahooda aan lagu darin miisaaniyada Qaranka sidoo kalana aan la soo marin nidaamka maaliyadda dalka.

Wasaaraddu waxay UNDP ka heshay deeq loogu talagalay horumarinta iyo tababbarka shaqaalaha oo dhan **US $556,295.00** oo muddo hal sano loogu talagalay balse Wasaaradda ayaa isticmaashay keliya lacag dhan **US $325,245.00**.

Sidoo kale, Wasaaraddu waxay UNDP ka heshay deeq oo loogu tala-galay ka hortaga askareynta caruurta oo dhan **US $178,706.00** iyadoo Wasaaradda ay lacagtan wada isticmaashay.

All transactions relating to this external assistance from the UNDP were neither on-budget nor on-treasury nor on-account.

Dhammaan lacag-bixinaha la xiriira taageerada dibadda ee ka timid UNDP ayaan la soo marin nidaamka maaliyadda dalka sidoo kalena aan lagu darin miisaaniyadda qaranka.

## Talo soo jeedin

Waa in dhammaan deeqaha hay'addu hesho lagu daraa Miisaaniyadda qaranka sidoo kalana la soo mariyaa nidaamka maaliyadeed ee dalka.

Waa in dhammaan heshiiyada hay'adda ay gasho oo la xiriira helitaanka deeq uu qeyb ka saxiixaa Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda si waafaqsan sharciga. Sidoo kale, waa in laga soo diiwaan galiyaa Xafiiska Hantidhawrka Guud.

## Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Waxaan idin dareensiinayaa in Wasaaradda Gaashaandhigu aanay awood u lahayn in ay ku qasabto Hay'adaha na caawinaya halka ay mariyaan deeqaha kaalamada ah. Waa howl u taala Wasaaradda Maaliyada in ay la xisaabtanto Hay'adaha ka howl gala dhamaan wadanka gudahi-isa in ay SYSTEM SFMIS la marsiiyo kaalmooyinka.*

*Labada hay'adood ee kor ku xusan waa fuliyayaal (Implementing Agency) ayagna lacagta ma laha ee waxaa soo gudbiya Deeq bixiye. Sidaa darted waxa habboon in lala xisaabtamo deeq bix-iyayaasha. Wasaaradda maaliyaduna la xisaabtanto, maxaa yeelay awood u malah Wasaaradda Gaashaandhigu in ay howlaha fara geliso.*

## 11.6 Dabagalka baarista

### 1.6.1 KHALADAADKA WARBIXIN BAARISEEDKII 2019

Shaxdaan hoose waxaa ka muuqda marxaladda khaladaadka baarista sannadkii hore lagu sameeyay hay'adda inta la fuliyay, qayb laga fuliyay ama aan waxba laga fulin.

| TR. | KHALADAADKA | MARXALADDA |
|---|---|---|
| 1. | 20.1.1 Kharashaadka oo aan laheyn caddeymo dhammaystiran - kharashaadka hawl-maalmeedka | Waa la fuliyay |
| 2. | 20.1.2 Kharashaadka socdaalka oo aan laheyn caddeymo dhammaystiran | La ma fulin |
| 3. | 20.2.1 Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka hantida | La ma fulin |
| 4. | 20.2.2 Diiwaanka Hantida oo aan la cusboonaysiin | La ma fulin |
| 5. | 20.2.3 Maamulka gaadiidka oo ah mid liita | La ma fulin |
| 6. | 20.3.1 Heshiisyo aan laga soo diiwaangalin XHGQ | La ma fulin |
| 7. | 20.3.2 Heshiisyada gudaha aan lagu qorin afka Soomaaliga | La ma fulin |
| 8. | 20.4.1 Ku-guuldarraysiga fulinta howlaha hantidhawrka gudaha | La ma fulin |

**Shaxda 11.5** Khaladaadka baarista sannadkii 2019

### 1.6.2 KHALADAADKA WARBIXIN BAARISEEDKII 2018

| TR. | KHALADAADKA | MARXALADDA |
|---|---|---|
| 1. | 2.1 Ma jiraan siyaasad iyo hayaal lagu maamulo hantida | Lama fulin |
| 2. | 2.2 Ma jirin diiwaanka hantida | Qeyb ayaa la fuliyay |
| 3. | 2.3 Hubinta gaadiidka oo ahayd mid liita | Lama fulin |
| 4. | 3.1 Kharashaadka howl-maalmeedka oo aan lahayn caddeymo ku filan | Lama fulin |
| 5. | 3.2 kharashaadka socdaalka oo aan lahayn caddeymo ku filan | Lama fulin |
| 6. | 3.4 Malaha baaraha gudaha sidoo kalana baarista gudaha lama samayn | Qeyb ayaa la fuliyay |
| 7. | 3.5 Heshiisyada oo aan laga soo diiwaangalin XHG | Lama fulin |

**Shaxda 11.6** Khaladaadka baarista sannadkii 2018

# 12. Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed

## 12.1 Hubinta kharash bixinta

### 12.2.1 SHARCIGA

Sida ay qabaan Qodobbada 31aad (1) iyo 32aad (4) ee Sharci Lr. 17 ee Maaraynta Maaliyadda Guud ee soo baxay 25 Diseembar 2019:

> 31(1) Wax kharash ah lagama bixin karo Miisaaniyadda qaranka, haddii aysan jiirin, qaansheegto ama caddeyn kale oo dheeraad ah oo looga baahan yahay sida ku xusan xeer-nidaamiyaha ama nidaamka xisaabaadku sheegayo.
>
> 32(4) Kharash bixin walba ee la oggolaaday waa in ay ku lifaaqan yihiin dhammaan dukumiintiyada kaabaya sida ku qeexan Xeer-nidaamiyaha Wasiirku soo saaray.

### Hannanka la isku waafaqsan yahay

Dukumiintiyada caddeymaha way kala duwan yihiin iyadoo ay ku xiran tahay nooca lacag bixinta, waxaana ka mid ah; dalabka iibka, heshiis saxiixan, warqadaha qaansheegashada, alaab-keenidda, guddoonka alaabta, lacag qabashada, iwm.

### Khaladka

**A. Kharashaad dhan US $907,500.60 oo aan lahayn caddeymo dhammaystiran**

Si aan waa faqsaneyn shuruudaha Sharciga kor ku xasan, lacag bixin dhan **US $907,500.60** ayaa kharash ahaan loo isticmaalay iyada oo aan lahayn cadeymo dhammaystiran. Faahfaahinta waxaa lagu muujiyay shaxda hoose:

| TR. | MADAX-XIGE | CIDDA LA SIIYAY | BISHA | LACAGTA US $ | FAAHFAAHIN |
|---|---|---|---|---|---|
| 1. | 2261 | Somali National Army | Jan - Sept 2020 | 362,250.00 | Malahan wax caddeymo ah |
| 2. | 2255 | Somali National Army | Mar 2020 | 100,000.00 | Malahan wax caddeymo ah |
| 3. | 2253 | Somali National Army | Mar 2020 | 100,000.00 | Malahan wax caddeymo ah |
| **WADAR** | | | | **562,250.00** | |

**Shaxda 12.1** Kharashaadka aan lahayn caddeymo ku filan

| TR. | MADAX-XIGE | CIDDA LA SIIYEY | BISHA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1. | 2216 | 2020 CA-BPC-078 | Feb, Abr & Jul 2020 | 203,654.60 |
| 2. | 2216 | 2020 CA-BPC-079 | Aug, Nov & Dec 2020 | 141,596.00 |
| **WADAR** | | | | **345,250.60** |

**Shaxda 12.2** Kharashaadka safarka ee aan lahayn caddeymo ku filan

### Talo soo jeedin

Waa in dhammaan lacag bixinnada ay ku salaysnaadaan ama lahaadaan caddeymo dhammaystiran, si sax ahna ay u oggolaadaan saraakiisha sare ee mas'uulka ka ah iyo in hawlaha loo guddoomo iyadoo loo eegayo ama la raacayo shuruudo cayiman.

Waa in dhammaan dukumiintiyadda lacag bixinnada lagu tiimbareeyaa "la bixiyay" isla marka lacagahooda la bixiyo si looga hortago in mar kale loo isticmaalo kharash bixin kale.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

Maamulka hay'adda la baaray wax jawaab ah oo qoran kama soo bixin arrintaan.

## 12.3 Maamulka iibka iyo heshiisyada

### 12.3.1 SHARCIGA

Qodobka 27aad (1) iyo (4) ee Sharci Lr. 22 ee Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka oo soo baxay 2016, ayaa sheegaya sidaan:

> 27(1) Dhammaan Hay'adaha qandaraaska iibka ayaa sameynaya qorshaha qandaraaska Iibka ee sannadlaha, ee looga gol leeyahay si lagu gaaro in qiimaha ugu badan ee kharashka guud iyo waxyaabaha kale ee sharcigan. Qorshaha qandaraaska iibsiga wuxuu taageerayaa barnaamijka iyo miisaaniyadda ay ansixisay hay'adda qandaraaska iibka.
>
> 27(4) Qorshaha qandaraaska iibka waxaa la diyaarinayaa sannad walba iyadoo lagu saleynayo miisaaniyadda sannadka Xukuumadda, iyado la xisaabinayo miiisaaniyad sannadeedka Xukuumadda.

### Khaladka

**A. Maqnaanshaha diyaarinta qorshaha iibka sannadka**

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed ayan lahayn qorshe sannadle ah ee iibka sannad maaliyadeedka dhammaaday 31da Diseembar 2020 kaas oo ku salaysan miisaaniyadda qaranka.

### Talo soo jeedin

Waa in Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed yeeshaan qorshe sannadle ah oo ku aaddan iibka kaas oo ku saleysan miisaaniyadda la ansixiyay ee hay'adda.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

Hay'adda la baaray ayaan ka jawaabin khaladaadka ku jira warqadda maamulka eel ala wadaagay.

### 12.3.2 SHARCIGA

Sida uu qabo sharciga Iibka Qaranka Iifaaqiisa 3aad tirsigiisa 1aad ayaa dhigaya:

> *(A) Dariiqooyinka dukaameysiga waxaa la isticmaalayaa marka qiimaha lagu qiyaasay qandaraaska iibka uu ka hooseeyo:*
>
> | | | |
> |---|---|---|
> | I. | Hadduu yahay heshiisku mid qandaraas iib ee badeecad | US $ 40,000 |
> | II. | Hadduu yahay heshiisku mid qandaraas iib ee adeeg | US $ 40,000 |
> | III. | Hadduu yahay heshiisku mid qandaraas iib ee shaqo | US $ 50,000 |
>
> *(B) Tartan maxalli ah waxaa la isticmaali karaa hadii qiimaha lagu qiyaasay qandaraaska iibka uu ka hooseeyo:*
>
> | | | |
> |---|---|---|
> | I. | Hadduu yahay heshiisku mid qandaraas iib ee badeecad | US $ 100,000 |
> | II. | Hadduu yahay heshiisku mid qandaraas iib ee adeeg | US $ 40,000 |
> | III. | Hadduu yahay heshiisku mid qandaraas iib ee shaqo | US $ 200,000 |
>
> *(C) Tartan caalami ah waxaa la qaban karaa marka qiimaha lagu qiyaasay qandaraaska Iibka uu ka badan yahay*:
>
> | | | |
> |---|---|---|
> | I. | Hadduu yahay heshiisku mid qandaraas iib ee badeecad | US $ 100,000 |
> | II. | Hadduu yahay heshiisku mid qandaraas iib ee adeeg | US $ 40,000 |
> | III. | Hadduu yahay heshiisku mid qandaraas iib ee shaqo | US $ 200,000 |

### Khaladaadka

**A. Iib sharcidarro ah ee hab dukaamaysi oo qiimahiisu dhan yahay US $1,179,955.73**

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in CXDS oo adeegsanaya hab dukaameysi

ah in ay bixiyeen qandaraasyo adeeg oo qiimahoodu uu gaarayo **US $1,179,955.73** taas oo ay aheyd in lamariyo hannaan tartan caalami ah waxa ayna kahor imaanaysaa sida uu dhigayo Sharciga Iibka Qaranka. Faahfaahinta ayaa lagu muujiyay hoos:

<table>
<tr><th>TR.</th><th>QANDARAASLAHA</th><th>UJEEDDADA</th><th>LACAGTA US $</th></tr>
<tr><td>1</td><td>2020 CA-BPC-080</td><td>Iib badeecad</td><td>287,172.54</td></tr>
<tr><td>2</td><td>2020 CA-BPC-079</td><td>Iib badeecad</td><td>649,992.07</td></tr>
<tr><td>3</td><td>2020 CA-BPC-081</td><td>Iib badeecad</td><td rowspan="2">242,791.12</td></tr>
<tr><td>4</td><td>2020 CA-BPC-081</td><td>Iib badeecad</td></tr>
<tr><td>WADAR</td><td></td><td></td><td>1,179,955.73</td></tr>
</table>

**Shaxda 12.3** Hab dukaamaysi oo baalmarsan nidaamka Iibka Qaranka

## Talo soo jeedin

Maamulku CXDS waa inuu faahfaahin ka bixiyaa sababta badeecadaha lagu qiimeeyay **US $1,179,955.73** la soo iibsaday iyadoo la adeegsanayo habka hab dukaamaysi halkii ay ka ahaan lahayd hannaanka qandaraaska furan taas oo lid ku ah Sharciga Iibka Qaranka ee 2016.

## Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

Hay'adda la baaray ayaan ka jawaabin khaladaadka ku jira warqadda maamulka eel ala wadaagay.

### 12.3.3. SHARCIGA

Sharci Lr. 17 ee Maareynta Maaliyadda Guud ee Dowladda oo soo baxay 25 Diseembar 2019, Qodobka 38[aad] (5) wuxuu dhigayaa dhammaan heshiisyada deeqaha hay'adaha dowladda, Maamul Goboleedyada iyo hay'adaha ganacsiga ee dowladda waa in laga diiwaan geliyaa Xafiiska Hantidhawrka Guud.

Intaa waxaa dheer, Qodobka 11[aad] (c) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee 2019 wuxuu awood u siinayaa Hantidhawrka Guud inuu diiwaangeliyo qandaraasyada iyo heshiisyada ay galaan hay'adaha dowladda. Qodobka 14[aad] (wax-ka-beddelka Qodobka 84[aad]) ee Sharciga Iibka Qaranka 2020 wuxuu sheegayaa in dhammaan hay'adaha dawliga ah ay qandaraasyada iyo heshiisyada ka diiwaan-galiyaan XHGQ.

## Khaladaadka

**A. Heshiisyo aan laga soo diiwaangalin XHGQ**

Waxaa baarista lagu ogaaday in heshiisyo qiimahoodu gaarayaan **US $4,072,013.72** aan laga soo diiwaangalin XHGQ. Xafiiska Hantidhawrka Guud waqtigii lagu guda jiray baarista sannadlaha waxaa laga yaabaa in uusan caddeyn karin waxyaabaha heshiisyada ku xusan ee la xiriira wixii hanti ah maadaama aan laga soo diiwaangalin XHGQ. Sidoo kale XHGQ si madaxbannaan uma xaqiijin karo in heshiisyadaas loo qoray hab waafaqsan shuruucda iyo xeerarka jira. Faahfaahinta heshiisyada aan laga soo diiwaangalin XHGQ:

| TR. | QANDARAASLAHA | UJEEDDADA | MUDDADA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1. | 2020 CA-BPC-082 | Raashin | 12 bilood | 918,612.00 |
| 2. | 2020 CA-BPC-083 | Raashin | 3 bilood | 119,997.78 |
| 3. | 2020 CA-BPC-084 | Raashin | 4 bilood | 49,400.00 |
| 4. | 2020 CA-BPC-085 | Raashin | 1 bil | 24,975.00 |
| **WADAR** | | | | **4,072,013.72** |

| TR. | QANDARAASLAHA | UJEEDDADA | MUDDADA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 5. | 2020 CA-BPC-086 | Raashin | 12 bilood | 1,921,237.00 |
| 6. | 2020 CA-BPC-083 | Raashin | 3 bilood | 117,117.78 |
| 7. | 2020 CA-BPC-087 | Shidaal iyo saliid | 12 bilood | 808,140.00 |
| 8. | 2020 CA-BPC-083 | Raashin | 4 bilood | 29,600.00 |
| 9. | 2020 CA-BPC-083 | Raashin | 3 bilood | 82,934.16 |
| 10. | 2020 CA-BPC-080 | Adeegyo guud | | |
| 11. | 2020 CA-BPC-079 | Adeegyo guud | | |
| 12. | 2020 CA-BPC-081 | Daawo | 6 bilood | |
| 13. | 2020 CA-BPC-081 | Daawo | 4 bilood | |
| **WADAR** | | | | **4,072,013.72** |

**Shaxda 12.4** Heshiisyada aan laga soo diiwaangelin XHGQ

### Talo soo jeedin

Waa in dhammaan qandaraasyada iyo heshiisyada laga diiwaangaliyaa Xafiiska Hantidhawraha Guud si waafaqsan shuruucda iyo xeerarka.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

Hay'adda la baaray ayaan ka jawaabin khaladaadka ku jira warqadda maamulka eel ala wadaagay.

### 12.3.4 SHARCIGA

Sharci Lr. 22 ee Sharciga Iibka Qaranka oo soo baxay 9 Agoosto 2016, Qodobkiisa 14$^{aad}$ ayaa waxa uu farayaa in qandaraasyada iyo heshiisyada caalamiga ah lagu qoro luuqadaha kala ah Ingiriis iyo Carabi halka kuwa gudaha/maxalliga ahna lagu qoro Af-Soomaali.

### Khaladka

**A. Heshiisyada gudaha oo aan lagu qorin luuqadda Soomaaliga**

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in CXDS ay heshiisyada gudaha/maxalliga ah ku qoreen luuqadda Ingiriiska taas oo lid ku ah sharciga.

### Talo soo jeedin

Waa in maamulka hay'addu uu heshiisyada gudaha/maxalliga ah ku qoraa luuqadda Soomaaliga si waafaqsan sharciga. Sidoo kale, waxaa ay diyaarin karaan mid ku qoran luuqadda Ingiriisiga haddii ay u baahan yihiin dhinaca kale ee qandaraaslaha.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

Maamulka hay'adda la baaray wax jawaab ah oo qoran kama soo bixin arrintaan.

## 12.4 Maamulka hantida

### 12.3.1 SHARCIGA

Qodobka 11$^{aad}$ (1) (j) ee Sharciga Maamulka Maaraynta Maaliyadda Guud ee 2019 ayaa dhigaya in Xafiiska Hantidhawrka Guud uu mas'uul ka yahay diiwaangelinta dhammaan sharciyada iyo heshiisyada, diiwaangalinta waarannada (F16), hantida guurtada iyo maguurtadda, kala wareejinta miisaaniyadda, deeqaha, iyo dhacdo dhaqaale kasta oo kale sida ku cad sharcigan.

### Hannaanka la isku waafaqsan yahay

Waxaa jirta siyaasad, hagayaal iyo habraac loo ansixiyay in lagu maamulo hantida (guurto iyo ma-guurto) ee dhammaan hay'adaha kala duwan ee dowladda. Siyaasadda hantidu waa in ay ka kooban tahay xaaladda, isticmaalka, waxqabadka iyo dhaqan-ka-baxa.

Waxaa jira diiwaan guud oo lagu keydiyo hantida dowladda oo ay hayaan hay'adaha kala duwan. Diiwaanka waa in lagu sheego hanti waliba lamberka u gaarka ah, meesha lagu isticmaalo, xaaladda muuqaal ahaaneed IWM.

### Khaladaadka

**A. Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka hantida**

Waxaa baarista lagu ogaaday in Ciidanka Xoogga Dalka aysan lahayn habraacyada iyo siyaasadda lagu maamulo lagu lana socdo hantida.

**B. Diiwaanka hantida oo aan joogto loo cusboonaysiin**

Maamulka hay'adda ayaa ku guul dareystay in ay cusboonaysiiyaan diiwaanka hantida kaas oo ka kooban macluumaadka, lambarka aqoonsiga, qiimaha lagu iibiyay xaaladda hantida IWM.

Hubinta muuqaal ahaaneed ee hantida ayaa lagu ogaaday in hantida hay'addu aysan wada lahayn lambarka aqoonsiga hantida (tag number) kaas oo ah lambar lagu aqoonsado oo gaar u ah si loo hubiyo loona dabagalo.

Intaas waxaa dheer, sida uu qabo Sharciga Maareynta Maaliyadda Dowladda Hantida lagama soo diiwaangalin XHGQ.

**C. Maamulka gaadiidka oo ah mid liita**

Baarista u hoggaansanaanta sharciga ayaa shaaca ka qaaday in CXDS aysan lahayn habraacyo iyo siyaasado lagu maamulo gaadiidka. Baabuurtu ma lahayn buugaagta lahaanshiyaha gaadiidka kuwaas oo ku diiwaangashan magaca CXDS ama Wasaaradda Gaashaandhigga.

### Talo soo jeedin

Waa in la hirgaliyaa lana meel mariyaa tilmaamaha iyo siyaasadda dhammaystiran ee maamulka, hubinta iyo ka warbixnta hantida.

Waa in Maamulka hay'adda ay diyaariyaan diiwaan dhammaystiran ee hantida oo leh tilmaamo cad si loo xaqiijiyo in dhammaan hantida hay'adda lagu diiwaan galiyo diiwaanka, sidoo kalana loo cusboonaysiiyaa xilliyo go'an ama cayiman.

Waa in hay'adda la baaray iyo Wasaaradda Maaliyadda ay hantida hay'adda ku sameeyaan tirakoob waqtiyaysan isla markaana ay cusboonaysiiyaan diiwaanka hantida.

Waa in maamulka hay'adda ay hantida ka soo diiwangeliyaan Xafiiska Hnatidhawrka Guud si waafaqsan Sharciga Maareynta Maaliyadda.

Waa in dhammaan gaadiidka hay'adda ay lahaadaan buugaagta lahaanshiyaha gaadiidka oo ku diiwaangashan magaca Ciidanka Xoogga Dalka oo uu si wanaagsan uga warhayaa sarkaalka sare ee mas'uulka ka ah.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

Maamulka hay'adda la baaray wax jawaab ah oo qoran kama soo bixin arrintaan.

## 12.5 Dabagalka baarista

#### 12.5.1 KHALADAADKA WARBIXIN BAARISEEDKII 2019

Shaxdaan hoose waxaa ka muuqda marxaladda khaladaadka baarista sannadkii hore lagu sameeyay hay'adda inta la fuliyay, qayb laga fuliyay ama aan waxba laga fulin.

| TR. | KHALADAADKA | MARXALADDA |
|---|---|---|
| 1. | 21.1.1 Ka gaabinta diyaarinta iyo soo gudbinta warbixinta maaliyadeed ee sannadlaha | Waa la fuliyay |
| 2. | 21.2.1 Maqnaanshaha sharci cusub | La ma fulin |
| 3. | 21.3.1 Maqnaashaha Qaab-dhismeedka Ciidanka iyo Qalabka (QCC) oo dhaqan gal ah | La ma fulin |
| 4. | 21.3.2 Ka gaabinta cusboonaysiinta nidaamka keydka xogta | Waa la fuliyay |
| 5. | 21.4.1 Maqnaashaha Habraaca iyo Siyaasadda Maamulka Raashinka | Qayb ayaa laga fuliyay |
| 6. | 21.4.2 Maqnaashaha Habraaca iyo Siyaasadda Maamulka Shidaalka | Qayb ayaa laga fuliyay |
| 7. | 21.5.1 Lacag-bixin aan lahayn caddaymo dhammeystiran - kharashaadka | La ma fulin |
| 8. | 21.6.1 Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka hantida | La ma fulin |
| 9. | 21.6.2 Diiwaanka hantida oo aan joogto loo cusboonaysiin | La ma fulin |
| 10. | 21.6.3 Maamulka gaadiidka oo ah mid liita | La ma fulin |
| 11. | 21.6.4 Maamulka Qalabka aan aheyn kuwa militariga oo ah mid liita | La ma fulin |
| 12. | 21.7.1 Heshiisyo aan laga soo diiwaangalin XHGQ | La ma fulin |
| 13. | 21.8.1 Ku-guuldarraysiga fulinta howlaha hantidhawrka gudaha | Qayb ayaa laga fuliyay |

**Shaxda 12.5** Khaladaadka baarista sannadkii 2019

### 12.5.2 KHALADAADKA WARBIXIN BAARISEEDKII 2018

| TR. | KHALADAADKA | MARXALADDA |
|---|---|---|
| 1. | 4.1 Ma jirin xisaabaadka sannadka oo la soo gudbiyay si loobaaro | Lama fulin |
| 2. | 5.1 Lama cusboonaysiinin Shuruucda iyo Xeerarka | Lama fulin |
| 3. | 6.1 Ma jrin Qaab-dhismeedka Ciidanka iyo Qalabka (QCQ) | Lama fulin |
| 4. | 6.2 Ma jirin keydka xogta | Qeyb ayaa la fuliyay |
| 5. | 8.1 Maamulka raashinka oo ah mid liita | Qeyb ayaa la fuliyay |
| 6. | 8.2 Maamulka shidaalka oo ah mid liita | Qeyb ayaa la fuliyay |
| 7. | 8.3 Ma jirin maamulka qalabka aan ahayn kuwa milatariga | Qeyb ayaa la fuliyay |
| 8. | 9.1 Hubinta gaadiidka oo ahayd mid liita | Lama fulin |
| 9. | 10.1 Ma jirin diiwaanka hantida | Qeyb ayaa la fuliyay |
| 10. | 11.1 Haddii sharciyada iibsiga ay raacaan CXDS | Lama fulin |
| 11. | 12.1 Kharashaadka oo aan wadan caddeymo ku filan | Qeyb ayaa la fuliyay |
| 12. | 12.2 Heshiisyada oo aan laga soo diiwaan-galin XHG | Lama fulin |
| 13. | 12.4 Ma lahayn baaraha gudaha sidoo kalana baarista gudaha lama samayn | Qeyb ayaa la fuliyay |

**Shaxda 12.6** Khaladaadka baarista sannadkii 2018

# 13. Wasaaradda Amniga Gudaha

## 13.1 Hubinta kharash bixinta

### 13.1.1 SHARCIGA

Sida ay qabaan Qodobbada 31aad (1) iyo 32aad (4) ee Sharci Lr. 17 ee Maaraynta Maaliyadda Guud ee soo baxay 25 Diseembar 2019:

> 31(1) Wax kharash ah lagama bixin karo Miisaaniyadda qaranka, haddii aysan jiirin, qaansheegto ama caddeyn kale oo dheeraad ah oo looga baahan yahay sida ku xusan xeer-nidaamiyaha ama nidaamka xisaabaadku sheegayo.
>
> 32(4) Kharash bixin walba ee la oggolaaday waa in ay ku lifaaqan yihiin dhammaan dukumiintiyada kaabaya sida ku qeexan Xeer-nidaamiyaha Wasiirku soo saaray.

### Hannanka la isku waafaqsan yahay

Dukumiintiyada caddeymaha way kala duwan yihiin iyadoo ay ku xiran tahay nooca lacag bixinta, waxaana ka mid ah; dalabka iibka, heshiis saxiixan, warqadaha qaansheegashada, alaab-keenidda, guddoonka alaabta, lacag qabashada, iwm..

### Khaladka

**A. Kharashaad dhan US $9,429.43 oo aan lahayn caddeymo dhammaystiran**

Si aan waa faqsaneyn shuruudaha Sharciga kor ku xasan, lacag bixin oo dhan **US $9,429.43** ayaa loo isticmaalay safar iyada oo aan la heyn caddeymo dhammaystiran, taas oo noo suurtagelin weyday inaan xaqiijinno dhab ahaanshaha lacag bixintaas. Faahfaahinta waxaa lagu muujiyay shaxda hoose.

| TR. | MADAX-XIGE | CIDDA LA SIIYAY | BISHA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1. | 2216 | 2020 CA-BPC-090 | Apr - Jun 2020 | 4,701.74 |
| 2. | 2216 | 2020 CA-BPC-090 | Apr - Jun 2020 | 4,727.69 |
| **WADAR** | | | | **9,429.43** |

**Shaxda 13.1** Kharashaadka aan lahayn caddeymo ku filan

### Talo soo jeedin

Waa in dhammaan lacag bixinnada ay ku salaysnaadaan ama lahaadaan caddeymo dhammaystiran, si sax ahna ay u oggolaadaan saraakiisha sare ee mas'uulka ka ah iyo in hawlaha loo guddoomo iyadoo loo eegayo ama la raacayo shuruudo cayiman.

Waa in dhammaan dukumiintiyadda lacag bixinnada lagu tiimbareeyaa "la bixiyay" isla marka lacagahooda la bixiyo si looga hortago in mar kale loo isticmaalo kharash bixin kale.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

Hay'adda la baraay jawaab qoraal ah kama soo bixin arrinta loogu gudbiyay Warqadda Maamulka.

## 13.2 Maamulka iibka iyo heshiisyada

### 13.2.1 SHARCIGA

Qodobka 27aad (1) iyo (4) ee Sharci Lr. 22 ee Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka oo soo baxay 2016, ayaa sheegaya sidaan:

> 27(1) Dhammaan Hay'adaha qandaraaska iibka ayaa sameynaya qorshaha qandaraaska Iibka ee sannadlaha, ee looga gol leeyahay si lagu gaaro in qiimaha ugu badan ee kharashka guud iyo waxyaabaha kale ee sharcigan. Qorshaha qandaraaska iibsiga wuxuu taageerayaa barnaamijka iyo miisaaniyadda ay ansixisay hay'adda qandaraaska iibka.
>
> 27(4) Qorshaha qandaraaska iibka waxaa la diyaarinayaa sannad walba iyadoo lagu saleynayo miisaaniyadda sannadka Xukuumadda, iyado la xisaabinayo miiisaaniyad sannadeedka Xukuumadda.

Sidoo kale, Qodobka 61aad (1) iyo (2) ee Sharciga Iibka Qaranka, 2016 ayaa sheegaya sidaan:

> 61(1) Hay'ad kasta oo Iibin waa in ay dhistaa Waax Iib Qandaraas si waafaqsan Sharcigan.
>
> 61(2) Sarkaalka Xisaabaha ayaa go'aaminaaya inta xubnood ee ka mid noqoneysa Waaxda Qandaraaska Iibka, waana in laga shaqaaleyaa ugu yaraan hal (1) qof oo u tababaran aqoonna u leh Qandaraaska Iibka.

Qodobka 31aad (1) (9) ee Sharciga Iibka Qaranka, 2016 uu sheegayo sidaan:

> 31(1) Hay'adda Iibinta Qandaraaska ayaa keydineysa dhammaan dhokumiintiyada la xiriira heshiis kasta ee qandaraas iib iyo habraacyadeeda si waafaqsan xeerarka lagu dabaqi karo ee ku saabsan diiwaangelinta qoraallada Xukuumadda, laakin ugu yaraan dokumiintiyada waa in la hayaa muddo lix (6) sano ah ee soo raacda taariikhda ugu dambeysa ee dhammaadka heshiiska qandaraaska iibka ama laga soo billaabo taariikhda dhammaan la wada diido tartanka dalabka qandaraaska ama la baabi'iyo habraaca, ama sideey xaaladdu noqotaba.
>
> 31(9) Hay'adda Iibka waa in ay soo bandhigtaa:
>
> Warbixinnada iyo dokumiintiyada ay kaydiyaan Hay'adaha Qandaraaska Iibka si waafaqsan Sharcigan waa inay heli karaan markii ay u baahdaan Maamulka, Guddiga La Dagaallanka Laaluushka, iyo Hantidhawraha Guud si ay u baaraan, Guddiga Baarlammanka uga wakiilka ah kormeerka fulinta shuruucda qaranka iyo xafiis dawladeed kasta ee lagu aaminay mas'uuliyaddaas marka la codsado.

Intaa waxaa dheer in Qodobka 69aad (2) ee Sharciga Iibka Qaran 2016, uu sidaan sheegaayo:

> 69(2) 2. Heshiisyada Qandaraasyada Iibka lama kala qaybin karo iyadoo qasadku yahay si looga leexdo xayeysiinta ka qaybgalka tartanka furan ee looga baahan yahay dhammaan heshiisyada lagu qiyaasay in qiimohoodu ka badan yahay qaddarka lacageed ee lagu sheegay Xeer-nidaamiyaha Sharcigan.

Sida uu qabo sharciga Iibka Qaranka lifaaqiisa 3aad tirsigiisa 1aad ayaa dhigaya:

> *(A)* ***Dariiqooyinka dukaameysiga waxaa la isticmaalayaa marka qiimaha lagu qiyaasay qandaraaska iibka uu ka hooseeyo:***

| | | |
|---|---|---|
| I. | Hadduu yahay heshiisku mid qandaraas iib ee badeecad | US $ 40,000 |
| II. | Hadduu yahay heshiisku mid qandaraas iib ee adeeg | US $ 40,000 |
| III. | Hadduu yahay heshiisku mid qandaraas iib ee shaqo | US $ 50,000 |

**(B)** ***Tartan maxalli ah waxaa la isticmaali karaa hadii qiimaha lagu qiyaasay qandaraas-ka iibka uu ka hooseeyo:***

| | | |
|---|---|---|
| I. | Hadduu yahay heshiisku mid qandaraas iib ee badeecad | US $ 100,000 |
| II. | Hadduu yahay heshiisku mid qandaraas iib ee adeeg | US $ 40,000 |
| III. | Hadduu yahay heshiisku mid qandaraas iib ee shaqo | US $ 200,000 |

**(C)** ***Tartan caalami ah waxaa la qaban karaa marka qiimaha lagu qiyaasay qandaraas-ka Iibka uu ka badan yahay***:

| | | |
|---|---|---|
| I. | Hadduu yahay heshiisku mid qandaraas iib ee badeecad | US $ 100,000 |
| II. | Hadduu yahay heshiisku mid qandaraas iib ee adeeg | US $ 40,000 |
| III. | Hadduu yahay heshiisku mid qandaraas iib ee shaqo | US $ 200,000 |

## Khaladaadka

### A. Maqnaanshaha diyaarinta qorshaha iibka sannadka

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in Wasaaradda Amniga Gudahu aysan lahayn qorshe sannadle ah ee iibka sannad maaliyadeedka dhammaaday 31da Diseembar 2020 kaas oo ku salaysan miisaaniyadda qaranka.

### B. Xafiiska iibka ee hay'adda oo aan dhisneyn

Intii uu socday baarista ayaa waxaa la ogaaday in sarkaalka idman ee Wasaaradda Amniga Gudaha uusan abuurin qeybta iibka (procurement unit) si ay u qabato dhammaan howlaha iibka hay'adda.

### C. Maqnaanshaha u hoggaansanaanta xaddiga wax soo iibsiga

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in Wasaaradda Amnigga Gudaha oo adeegsanaysa hab dukaameysi ah in ay bixisay qandaraasyo adeeg oo qiimihoodu uu gaarayo **US $2,206,000.00** taas oo ay aheyd in lamariyo hannaan tartan calami ah.

Intaa waxaa dheer, in maamulku baarashu uusan la wadaagin dhammaan dukumiintiyada iibka ee qiimaha sare ku baxay marka laga reebo heshiisyada la galay. Eeg faahfaahinta sida shaxda hoose ka muuqata:

| TR. | CIDDA LA SIIYEY | NOOCA HESHIISKA | LACAGTA US$ |
|---|---|---|---|
| 1. | 2020 CA-BPC-091 | Alaab | 480,000.00 |
| 2. | 2020 CA-BPC-092 | Alaab | 480,000.00 |
| 3. | 2020 CA-BPC-093 | Adeeg amni | 1,246,000.00 |
| **WADAR** | | | **2,206,000.00** |

**Shaxda 13.2** Xaddiga iibka oo aan loo raacin sida sharciga iibku qabo

## Talo soo jeedin

Waa in Wasaaraddu yeelataa qorshe sannadle ah oo ku aaddan iibka kaas oo ku saleysan miisaaniyadda la ansixiyay ee hay'adda.

Waa in sarkaalka idman uu dhisaa xafiiska iibka ee hay'adda si waafaqsan sharciga.

Maamulka hay'addu waa in ay faahfaahin ka bixyaan sababta adeegga iyo alaabta qiimaheedu gaareyso **US $2,206,000.00**, kaas oo aan waafaqsanayn Sharciga Iibka Qaranka, 2016.

Maamulku waa in ay baarayasha la wadaagaan dhammaan diiwaannada iyo dukumintiyada iibka lasameeyay.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Maadama uu kharash kaan si toos ah u bixi jiray, ayaa Wasaaradda Maaliyada amar ku bixisay in ay lacagtaan Vender ku baxdo, hadaba lacagta bishii ku baxeysay vender aay ka yareyd $40,000 kun. Sharciga iibka qaranka ayaa qabo in Wasaaradda amniga ay vendar ahaan u bixiso. Heshiiskaani kaliya waxaa ka hirgalay oo lacag ahaan u baxay mudo laba bilooda ah sidan hoos ku xusan:*

- *$62,371.00 lasiiyay (2020 CA-BPC-092) bisha Feberaayo iyo Maarso 2020*
- *$62,322.50 lasiiyay (2020 CA-BPC-091) bisha Feberaayo iyo Maarso 2020.*

*(2020 CA-BPC-093) waxaa la mar siiyay hanaanka sharciga iibka qaranka waxaan tartanka qabtay Wasaaradda Maaliyadda oo dhoor shirkadood ayaa ku tartamay, Shirkadaan ayaa ku guuleestay waxaana Dukumintigeeda oo dhammeystiran laga heli karaa Wasarada Maaliyadda Kharashkii wali wax baxay majiraan oo la siiyay shirkadii qandaraas ka ku guuleysay ilaa hadda wixii fahfahin kale ah kala xiriir Wasaaradda Maaliyadda.*

### 13.2.2. SHARCIGA

Sharci Lr. 17 ee Maareynta Maaliyadda Guud ee Dowladda oo soo baxay 25 Diseembar 2019, Qodobka 38[aad] (5) wuxuu dhigayaa dhammaan heshiisyada deeqaha hay'adaha dowladda, Maamul Goboleedyada iyo hay'adaha ganacsiga ee dowladda waa in laga diiwaan geliyaa Xafiiska Hantidhawrka Guud.

Intaa waxaa dheer, Qodobka 11[aad] (c) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee 2019 wuxuu awood u siinayaa Hantidhawrka Guud inuu diiwaangeliyo qandaraasyada iyo heshiisyada ay galaan hay'adaha dowladda. Qodobka 14[aad] (wax-ka-beddelka Qodobka 84[aad]) ee Sharciga Iibka Qaranka 2020 wuxuu sheegayaa in dhammaan hay'adaha dawliga ah ay qandaraasyada iyo heshiisyada ka diiwaan-galiyaan XHGQ.

## Khaladka

### A. Heshiisyada aan laga soo diiwaangalin XHGQ

Waxaa baarista lagu ogaaday in heshiisyo qiimahoodu gaarayaan **US $2,874,910.00** aan laga soo diiwaangalin XHGQ. Xafiiska Hantidhawrka Guud waqtigii lagu guda jiray baarista sannadlaha waxaa laga yaabaa in uusan caddeyn karin waxyaabaha heshiisyada ku xusan ee la xiriira wixii hanti ah maadaama aan laga soo diiwaangalin XHGQ. Xafiiska Hantidhawrka Guud ma sheegi karo in la fuliyay qodobbada heshiiska lagu galay, sidoo kalana in heshiisyadaas ay ku jiraan danaha Dowladda Federaalka Soomaaliya. Faahfaahinta heshiisyada aan laga soo diiwaangalin XHGQ:

| TR. | QANDARAASLAHA | UJEEDDADA | MUDDADA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1. | 2020 CA-BPC-094 | Shidaal | 11 bilood | 33,000.00 |
| 2. | 2020 CA-BPC-095 | Qalab xafiis | 11 bilood | 18,330.00 |
| 3. | 2020 CA-BPC-096 | Kiro guri | 11 bilood | 18,330.00 |
| 4. | 2020 CA-BPC-097 | Agab ciidan (teendhoyin iyo joodariyaal) | 1 sano | 480,000.00 |
| 5. | 2020 CA-BPC-096 | Raashin | 1 sano | 480,000.00 |
| 6. | Joint Security Sector Governance Program | Horumarinta Hay'adda iyo dhisidda aqoonta shaqaalaha | 11 bilood | 386,700.00 |
| **WADAR** | | | | **2,874,910.00** |

| TR. | QANDARAASLAHA | UJEEDDADA | MUDDADA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 7. | Supporting an Inclusive and Multi-sectoral Response to Covid-19 and addressing its socio-economic impact in Somalia. | COVID-19 | 5 bilood | 60,000.00 |
| 8. | Provision of Explosive detection Dog (EDD) Service in Aden Abdulle International Airport | Amniga garoonka diyaaradaha | 6 bilood | 1,246,000.00 |
| 9. | 2020 CA-BPC-189 | Raashin | 1 bil | 24,000.00 |
| 10.. | 2020 CA-BPC-097 | Alaab | 1 bil | 64,300.00 |
| 11. | 2020 CA-BPC-091 | Raashin | 1 bil | 64,250.00 |
| **WADAR** | | | | **2,874,910.00** |

**Shaxda 13.3** Heshiisyada aan laga soo diiwaangelin XHGQ

### Talo soo jeedin

Waa in dhammaan qandaraasyada iyo heshiisyada laga diiwaangaliyaa Xafiiska Hantidhawraha Guud si waafaqsan shuruucda iyo xeerarka.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Dhammaan soo jeedinta aad noo soo jeediseen oo ah in aan soo ka soo diiwaangalinno dhamnaan heshiisyada aad aayn niila qaaddannay in aan sannadkaan aan ku jirno aan diiwaan galinno.*

### 13.2.3 SHARCIGA

Sharci Lr. 22 ee Sharciga Iibka Qaranka oo soo baxay 9 Agoosto 2016, Qodobkiisa 14aad ayaa waxa uu farayaa in qandaraasyada iyo heshiisyada caalamiga ah lagu qoro luuqadaha kala ah Ingiriis iyo Carabi halka kuwa gudaha/maxaliga ahna lagu qoro Af-Soomaali.

### Khaladka

**A. Heshiisyada gudaha oo aan lagu qorin luuqadda Soomaaliga**

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in Wasaaradda Amnigga ay heshiisyada gudaha/maxalliga ah ku qoreen luuqadda Ingiriiska taas oo lid ku ah sharciga.

### Talo soo jeedin

Waa in maamulka hay'addu uu heshiisyada gudaha/maxalliga ah ku qoraa luuqadda Soomaaliga si waafaqsan sharciga. Sidoo kale, waxaa ay diyaarin karaan mid ku qoran luuqadda Ingiriisiga haddii ay u baahan yihiin dhinaca kale ee qandaraaslaha.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Maadama aan horay u la socon in heshiiska laga soo diiwan-galiyo Xafiiska Hantidhawrka laakin waxay amniga talo soo jeedin aad u qaaddanay maanta wixii ka dambeeyo aan ka soo diiwan galindoona wax walbo heshiis ah Xafiiska Hantidhawrka hadii alla idmo.*

## 13.3 Maamulka hantida

### 13.3.1 SHARCIGA

Qodobka 11aad (1) (j) ee Sharciga Maamulka Maaraynta Maaliyadda Guud ee 2019 ayaa dhigaya in Xafiiska Hantidhawrka Guud uu mas'uul ka yahay diiwaangelinta dhammaan sharciyada iyo heshiisyada, diiwaangalinta waarannada (F16), hantida guurtada iyo maguurtadda, kala wareejinta miisaaniyadda, deeqaha, iyo dhacdo dhaqaale kasta oo kale sida ku cad sharcigan.

### Hannaanka la isku waafaqsan yahay

Waxaa jirta siyaasad, hagayaal iyo habraac loo ansixiyay in lagu maamulo hantida (guurto iyo ma-guurto) ee dhammaan hay'adaha kala duwan ee dowladda. Siyaasadda hantidu waa in ay ka kooban tahay xaaladda, isticmaalka, waxqabadka iyo dhaqan-ka-baxa.

Waxaa jira diiwaan guud oo lagu keydiyo hantida dowladda oo ay hayaan hay'adaha kala duwan. Diiwaanka waa in lagu sheego hanti waliba lamberka u gaarka ah, meesha lagu isticmaalo, xaaladda muuqaal ahaaneed IWM.

### Khaladaadka

**A. Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka hantida**

Waxaa baarista lagu ogaaday in Wasaaradda Amnigga aynan lahayn habraacyada iyo siyaasadda lagu maamulo lagu lana socdo hantida.

**B. Diiwaanka hantida oo aan joogto loo cusboonaysiin**

Maamulka hay'adda ayaa ku guul dareystay in ay cusboonaysiiyaan diiwaanka hantida kaas oo ka kooban macluumaadka, lambarka aqoonsiga, qiimaha lagu iibiyay xaaladda hantida IWM.

Hubinta muuqaal ahaaneed ee hantida ayaa lagu ogaaday in hantida hay'addu aysan wada lahayn lambarka aqoonsiga hantida (tag number) kaas oo ah lambar lagu aqoonsado oo gaar u ah si loo hubiyo loona dabagalo.

Intaas waxaa dheer, sida uu qabo Sharciga Maareynta Maaliyadda Dowladda Hantida lagama soo diiwaangalin XHGQ.

**C. Maamulka gaadiidka oo ah mid liita**

Muddadii lagu guda jiray baarista Wasaaradda Amnigga waxay nala wadaagtay liiska gaadiidka oo la sheegay in hay'addu ay leedahay oo dhan 11 gaari. Baaraha waxaa keliya lala wadaagay 1 gaari oo uu muuqaal ahaan u xaqiijiyay, halka 10 haray aan muuqaal ahaan loo keenin si loo xaqiijiyo.

| TR. | NOOCA GAARIGA | CIDDA BIXISAY | CAQAAYAD LR. | FAAHFAAHIN |
|---|---|---|---|---|
| 1. | Toyota Hilux | Talyaanniga | Lama hayo | Muuqaal ahaan lama xaqiijin |
| 2. | Toyota Hilux | Talyaanniga | Lama hayo | Muuqaal ahaan lama xaqiijin |
| 3. | Toyota Hilux | Talyaanniga | Lama hayo | Muuqaal ahaan lama xaqiijin |
| 4. | Toyota Hilux | Talyaanniga | Lama hayo | Muuqaal ahaan lama xaqiijin |
| 5. | Toyota Hilux | Talyaanniga | Lama hayo | Muuqaal ahaan lama xaqiijin |
| 6. | Toyota Hilux | Talyaanniga | Lama hayo | Muuqaal ahaan lama xaqiijin |

| TR. | NOOCA GAARIGA | CIDDA BIXISAY | CAQAAYAD LR. | FAAHFAAHIN |
|---|---|---|---|---|
| 7. | Toyota Hilux | Talyaanniga | Lama hayo | Muuqaal ahaan lama xaqiijin |
| 8. | Toyota Hilux | Talyaanniga | Lama hayo | Muuqaal ahaan lama xaqiijin |
| 9. | Toyota Hilux | Talyaanniga | Lama hayo | Muuqaal ahaan lama xaqiijin |
| 10. | Ford Pick Up | Talyaanniga | Lama hayo | Muuqaal ahaan lama xaqiijin |

**Shaxda 13.4** Gaadiidka hay'adda la baaray

### Talo soo jeedin

Waa in la hirgaliyaa lana meel mariyaa tilmaamaha iyo siyaasadda dhammaystiran ee maamulka, hubinta iyo ka warbixnta hantida.

Waa in maamulka hay'addu ay diyaariyaan diiwaan dhammaystiran ee hantida oo leh tilmaamo cad si loo xaqiijiyo in dhammaan hantida hay'adda lagu diiwaan galiyo diiwaanka, sidoo kalana loo cusboonaysiiyaa xilliyo go'an ama cayiman.

Waa in hay'adda la baaray iyo Wasaaradda Maaliyadda ay hantida hay'adda ku sameeyaan tirakoob waqtiyaysan isla markaana ay cusboonaysiiyaan diiwaanka hantida.

Waa in dhammaan gaadiidka hay'adda ay lahaadaan buugaagta lahaanshiyaha gaadiidka oo ku diiwaangashan magaca Wasaaradda Amniga oo uu si wanaagsan uga warhayaa sarkaalka sare ee mas'uulka ka ah.

Waa in maamulka hay'adda ay hantida ka soo diiwangeliyaan Xafiiska Hnatidhawrka Guud si waafaqsan Sharciga Maareynta Maaliyadda.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Dhammaan Gadiidkaan waqti hore ayuu madax wasaaradda soo martay horay ula tageen la kiin insha allaha waxan dajindoonaa hantida gaadidka ay leedahay wasaaradda in aay hada kaddib qorshe looga reebaayo madaxda soo marto wasaaradda aan kun jirno.*

## 13.4 Furitaanka iyo isticmaalka koontooyinka bangiyada

### 13.4.1 SHARCIGA

Qodobbada 42[aad] (3) iyo 9[aad] (7) ee Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud (Sharci Lr. 17) ee soo baxay 25 Diseembar 2019 wuxuu sheegayaa sida soo socota:

> 42(3) Hay'adaha Dowladda in aysan furi karin koonto bangi maxalli ah ama mid caalami ah iyada oo aan oggolaansho qoraal ah laga haysan Xisaabiyaha Guud.
>
> 9(7) Wasiirka (Wasiirka Maaliyadda) waa in uu ansixiyo furitaanka xisaab bangi ee hay'adaha Dowladda iyo qaabeynta saxiixa koontoyinka bangi.

### Khaladaadka

**A. Koonto bangi oo la furay iyadoo aan oggolaansho loo haysan**

Intii baaristu socotay waxaan ogaannay in Wasaaradda Amnigga ka furatay koonto bangiga Amal iyada oo aan oggolaansho qoraal ah ka haysan Xisaabiyaha Guud iyo walibana uusan ansixin Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.

| TR. | BANGIGA | KOONTO LR. | TIRADA LACAGTA SOO GASHAY US $ | HARAA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1. | Amal Bank | 1013753264 | 0.00 | 0.00 |
| **WADAR** | | | **0.00** | **0.00** |

**Shaxda 13.5** Furashada koontooyin bangi oo aan hay'addu oggolaansho u haysan

### Talo soo jeedin

Waa in hay'addu ay oggolaansho iyo ansixin ka hesho Xafiiska Xisaabiyaha Guud iyo Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda ka hor inta aan laga furin koonto bangi maxalliama caalami ah.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

Maamulka hay'adda la baaray wax jawaab ah oo qoran kama soo bixin arrintaan.

## 13.5 Isticmaalka nidaamka maaliyadda dalka (SFIMS) ee ku aaddan lacagaha deeqaha dibedda

### 13.5.1 SHARCIGA

Qodobka 38[aad] (1) iyo (2) ee Sharciga Maareynta Miisaaniyadda (Sharci Lr. 17) ee soo baxay 25 Diseembar 2019 ayaa sheegaya sida soo socota:

> 38(1) Dhammaan deeqaha hay'ad Dowladeed ka hesho deeq bixiye ama cid kale waa in lagu daro Miisaaniyadda qaranka.
>
> 38(2) Looma oggola hay'ad Dowladeed iyo mid Shirkad ama Wakaalad Dowladdu leedahay toona in ay galaan heshiis ay ku helayaan deeq, taas oo ay ku jiraan deeqaha aan lacagta ahayn oo ka timid deeq bixiye ama shakhsiyaad gaar ah, iyada oo uu Wasiirku (Waasiirka Maaliyadda) la saxiixin.

Sidoo kale, Qodobka 15[aad] (1) ee Sharciga Maareynta Miisaaniyadda waxa uu leeyahay sida soo socota:

> 15(1) Dhammaan kharashyada hay'adaha Dowladda iyo mashaariicda dibadda laga maalgeliyo waa in lagu oggolaadaa Miisaaniyadda qaranka.

### Khaladaadka

**A. Deeqaha hay'addu dibadda ka heshay oo gaaraya lacag dhan us $446,700.00 oo aan la marin nidaamka maaliyadda dowladda**

Intii baaristu socotay waxan ogaannay in Wasaaradda Amnigga Gudaha ay fulisay (2) mashruuc oo qiimahiisu uu dhan yahay **US $446,700.00** kuwaas oo aan lagu darin miisaaniyada Qaranka sidoo kalana aan la soo marin nidaamka maaliyadda dalka.

| TR. | MASHRUUCA | MAAL-GALIYAHA / DEEQ-BIXIYAHA | UJEEDDADA MASHRUUCA | KA FAA'IDAYSTAHA | MUDDADA | LACAGTA LOO QORSHEEYAY US $ | LACAGTA LA ISTICMAALAY US $ |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| 1. | Joint Security Sector Governance Program | UNDP | Horumarinta Wasaaradda iyo Dhisidda aqoonta Shaqaalaha | Wasaaradda Amniga Gudaha | 7 bilood | 386,700.00 | 243.700.00 |
| **WADAR** | | | | | | **446,700.00** | **243,700.00** |

| TR. | MASHRUUCA | MAAL-GALIYAHA / DEEQ-BIXIYAHA | UJEEDDADA MASHRUUCA | KA FAA'IDAYSTAHA | MUDDADA | LACAGTA LOO QORSHEEYAY US $ | LACAGTA LA ISTICMAALAY US $ |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| 2. | Supporting an Inclusive and Multi-sector Response to COVID-19 and addressing its socio-economic impact in Somalia. | UNDP | Kahortaga faafidda COVID-19 | Wasaaradda Amniga Gudaha | 6 bilood | 60,000.0 | 0.00 |
| **WADAR** | | | | | | **446,700.00** | **243,700.00** |

**Shaxda 13.6** Deeqaha hay'addu dibadda ka heshay oo aan la marin nidaamka maaliyadda dowladda

### Talo soo jeedin

Waa in dhammaan deeqaha hay'addu hesho lagu daraa Miisaaniyadda qaranka sidoo kalana la soo mariyaa nidaamka maaliyadeed ee dalka.

Waa in dhammaan heshiiyada hay'adda ay gasho oo la xiriira helitaanka deeq uu qeyb ka saxiixaa Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda si waafaqsan sharciga sidoo kalena laga soo dii-waangaliyaa Xafiiska Hantidhawrka Guud.

Waa in Maamulka ay wargeliyaan Wasaaradda Maaliyadda lacagta aan la iscticmaalin oo qii-mo ahaan dhan **US $203,000.00** si loogu daro miisaaniyadda soo socota loona mariyo ni-daamka maaliyadda wadanka.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

Maamulka hay'adda la baaray wax jawaab ah oo qoran kama soo bixin arrintaan.

## 13.6 Maamulka iyo la xisaabtanka dakhliga laga helo ruqsadaha hubka iyo shatiyada shirkadaha amnigga ee gaarka loo leeyaay

### 13.6.1 HANNAANKA LA ISKU WAAFAQSAN YAHAY

Waxaa jira shuruuc, siyaasado iyo habraacyo soo saaridda diiwaangelinta hubka iyo shirkada-ha amniga ee gaarka loo leeyahay.

Siyaasaddu waa inay lahaataa shuruudo sharraxaya shaqsi u qalma inuu qaato hub iyo shirka-do amni oo gaar loo leeyahay oo u qalma inay bixiyaan adeegyo nabadgelyo.

Waxaa jira nidaam xog aruurin ah oo lagu kaydiyo hubka gaarka loo leeyahay iyo dabagal si loo hubiyo maareynta saxda ah ee rukhsadaha la soo saaray.

### Khaladaadka

**A. Maqnaanshaha shuruuc iyo siyaasado dhammaystiran oo qeexaya habraaca bixinta shatiyada, diiwaangelinta iyo maareynta hubka iyo shirkadaha amnigga ee gaarka loo leeyahay**

Inta lagu guda jiray baarista ayaa waxaa lagu ogaaday in Wasaaradda Amnigga aysan lahayn shuruuc dhammaystiran kuwaas oo qeexaya siyaasadaha iyo habraacyada soo saaridda shati-yadaha, diiwaangelinta iyo maamulka hubka iyo shirkado amni oo gaar loo leeyahay.

**B. Maqnaanshaha nidaamka keydka xogta**

Ma jirin nidaamka keydka xogta (Database system) kaa oo lagu keydiyo dhammaan hubka loo oggolaaday shakhsiyaadka iyo shirkadaha amni ee gaarka loo leeyahay.

**C. Maqnaanshaha hab turxaan bixin ama hubin shaqsiyaadka iyo shirkadaha amnigga ee la siiyay ruqsadaha**

Intii baaristu socotay, waxaa la ogaaday in aysan jirin hab turxaan bixin ah ama hubin ah oo

lagu sameeyo shaqsiyaadka iyo shirkadaha amniga ee la siiyo ruqsadaha. Haddii aan la helin hab hubin oo wax ku ool ah waxaa dhici kara in uu hubka gacanta u galo shakhsiyaad aan u qalmin in la siiyo.

**D. Maqnaanshaha nidaam daba-gal ah**

Waxaa kale oo la ogaaday in Wasaaradda aynan lahayn nidaam daba-gal taa oo lagu kor joogteeyo isticmaalka hubka gaarka loo leeyahay. Intaa waxaa dheer in aan ogaannay in 32 shirkad kuwaa oo ka dhacay shatiyada oggolaashaha hubka, dibna aan u cusboonaysiin, Wasaaradda Amniga na wax tallaabo oo ay ka qabatay arrintaan ma jirin.

### Talo soo jeedin

Golaha Fulinta iyo Baarlamaanka waa in ay dejiyaan shuruuc iyo xeerar dhammaystiran oo nidaamiya adeegsiga hubka.

Wasaaraddu waa in ay sameysaa nidaamka keydka xogta (database system) kaa oo lagu key-diyo dhammaan shirkadaha iyo shakhsiyaadka loo oggolaaday in ay qaataan hub.

Waa in la sameeyaa lana fuliyaa nidaam hibin oo wax ku ool ah si loo hubiyo shakhsiyaadka iyo shirkadaha amnigga ee gaarka loo leeyahay.

Wasaaraddu waa in ay sameysaa nidaam daba-gal ah ee isticmaalka hubka la sharciyeeyay.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Arinta ku saabsan diiwaan gelinta Hubka iyo Shirkadaha Amniga waxaa lagu maamula hab shar-ci ah oo lagu ansixiyay Golaha Wasiirada lehna hab raac ay dejiyeen Golaha Wasiirada ee Xu-kumada. Shirkadda ama Shaqasiga loo Sharciyeynaya Hubka waxaa lagu maamula sharciga ay ansixiyaan Golaha Wasiiradda. Waxaa kale oo jira darft laga sameeyey Sharciga Hubka Fudud oo hadda la yaala Golaha Shacabka si lo ansaxiyo.*

## 13.7 Dabagalka baarista

### 13.7.1 KHALADAADKA WARBIXIN BAARISEEDKII 2019

Shaxdaan hoose waxaa ka muuqda marxaladda khaladaadka baarista sannadkii hore lagu sameeyay hay'adda inta la fuliyay, qayb laga fuliyay ama aan waxba laga fulin.

| TR. | KHALADAADKA | MARXALADDA |
|---|---|---|
| 1. | 22.1.1 Lacagbixin aan lahayn caddaymo dhammeystiran - kharashaadka | Waa la fuliyay |
| 2. | 22.1.2 Lacagbixin aan lahayn caddaymo dhammeystiran - kharashaadka safarka | La ma fulin |
| 3. | 22.1.3 Miisaaniyad la kala wareejiyay oggolaansho la'aan | Waa la fuliyay |
| 4. | 22.2.1 Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka hantida | La ma fulin |
| 5. | 22.2.2 Diiwaanka hantida oo aan joogto loo cusboonaysiin | Qayb ayaa laga fuliyay |
| 6. | 22.3.1 Heshiisyo aan laga soo diiwaangalin XHGQ | La ma fulin |
| 7. | 22.3.2 Heshiisyada gudaha aan lagu qorin afka Soomaaliga | La ma fulin |
| 8. | 22.4.1 Ku-guuldarraysiga fulinta howlaha hantidhawrka gudaha | La ma fulin |

**Shaxda 13.7** Khaladaadka baarista sannadkii 2019

# 14. Ciidanka Booliiska Soomaaliyeed

## 14.1 Hubinta kharash bixinta

### 14.1.1 SHARCIGA

Sida ay qabaan Qodobbada 31aad (1) iyo 32aad (4) ee Sharci Lr. 17 ee Maaraynta Maaliyadda Guud ee soo baxay 25 Diseembar 2019:

> 31(1) Wax kharash ah lagama bixin karo Miisaaniyadda qaranka, haddii aysan jiirin, qaansheegto ama caddeyn kale oo dheeraad ah oo looga baahan yahay sida ku xusan xeer-nidaamiyaha ama nidaamka xisaabaadku sheegayo.
>
> 32(4) Kharash bixin walba ee la oggolaaday waa in ay ku lifaaqan yihiin dhammaan dukumiintiyada kaabaya sida ku qeexan Xeer-nidaamiyaha Wasiirku soo saaray.

### Hannanka la isku waafaqsan yahay

Dukumiintiyada caddeymaha way kala duwan yihiin iyadoo ay ku xiran tahay nooca lacag bixinta, waxaana ka mid ah; dalabka iibka, heshiis saxiixan, warqadaha qaansheegashada, alaab-keenidda, guddoonka alaabta, lacag qabashada, iwm..

### Khaladka

**A. Kharashaad dhan US $5,500.00 oo aan lahayn caddeymo dhammaystiran**

Waxaa baarista lagu ogaaday in la sameeyey lacag bixin dhan **US $5,500.00** loona isticmaalay socdaal ahaan iyada oo aan lahayn caddeymo ku filan taas oo lid ku ah sharciga. Arrinkan ayaa sababay in la xaqiijin waayo sax ahaanshaha lacag bixintan. Lacagahaan ma lahayn caddeymo dhammaystiran sida hoos ku xusan:

| TR. | MADAX-XIGE | CIDDA LA SIIYAY | BISHA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1. | 2216 | 2020 CA-BPC-175 | Aug 2020 | 5,500.00 |
| **WADAR** | | | | **5,500.00** |

**Shaxda 14.1** Kharashaadka safarka ee aan lahayn caddeymo ku filan

### Talo soo jeedin

Waa in dhammaan lacag bixinnada ay ku salaysnaadaan ama lahaadaan caddeymo dhammaystiran, si sax ahna ay u oggolaadaan saraakiisha sare ee mas'uulka ka ah iyo in hawlaha loo guddoomo iyadoo loo eegayo ama la raacayo shuruudo cayiman.

Waa in dhammaan dukumiintiyadda lacag bixinnada lagu tiimbareeyaa "la bixiyay" isla marka lacagahooda la bixiyo si looga hortago in mar kale loo isticmaalo kharash bixin kale.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Safarkaan waxaa lagu soo Qaaday Saraakiil Tababar loogu qabtay Akadeemiyada S/Guuto Kaahiye waxaaa ku lifaaqan Dukumintiyada Tiktka  laga soo qaaday Dhuusomareeb.*

### Jawaabta XHGQ

Marka laga reebo tigidhada ma jirin caddeymo kale oo dheeri ah kuwaas oo lagu lifaaqay caddeymaha safarka.

## 14.2 Maamulka raashinka iyo shidaalka

### 14.2.1 SHARCIGA

Qodobka 12[aad] (2) (d, r & s) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee soo baxay 2019 ayaa sheegaya:

> 12(2) Sarkaal kasta oo idman ee hay'adaha iyo shirkadaha Dawladda wuxuu mas'uul ka yahay dhammaan arrimaha la xiriira maamulka lacagaha dadweynaha, hantida iyo qaamaha hay'adaha Dawladda ee uu mas'uulka ka yahay, taasi oo ay ka mid yihiin iyadoo aysan ku koobnayn:
>
> d) Maareyn hufan, oo wax-ku-ool ah, oo daah-furan, lagu maamulo dhammaan lacagaha hay'adda;
>
> r) In si hufan, oo wax ku ool ah, oo daah-furan loo yegleelo ilaalinta gudaha (internal controls) iyo maareynta khataraha (risk management);
>
> s) Kormeeridda iyo xaqiijinta in sida ugu habboon loo isticmaalo lacagaha Dawladda ee hay'dda uu masuulka ka yahay hoos yimaada.

### Hannaanka la isku waafaqsan yahay

Maamulka raashinka ee hay'adaha amniga, gaar ahaan Ciidanka Booliska ayaa muhiim u ah nabadda iyo xasilloonida.

Ciidanka Booliska ayaa u baahan raashin la hubo, ku filan si ciidanku ay ahmiyadda u siyaan amniga Qaranka iyo badqabka dadka.

Waxaa loo baahan yahay in ay jiraan shuruudo ka mid ah sharci ama xeer ee xaq lahaanshaha raashinka kaas oo saldhig u ah ujeeddada miisaaniyadda, maamulka iyo hubinta raashinka.

Ciidanka Booliska Soomaaliyeed ayaa u baahan raisin la hubo, ku filan, oo macquul ah si ay shaqaalaha awood ugu yeeshaan inay diiradda saaraan amniga Qaranka iyo badbaadada dadweynaha.

Waa inay jirtaa hannaan ku habboon hubinta gudaha ee maaraynta, kaydinta iyo qaybinta shidaalka. Kaydinta iyo qaybinta shidaalka ayaa lagu qeexaa habraac la ansixiyay oo uu fuliyo sarkaalka mas'uulka ka ah.

Hubinta muuqaal ahaaneed ee shidaalka ayaa loo baahan yahay in si waqtiyaysan loo sameeyo, iyo in sidoo kale baaris lagu sameeyo isbeddel kasta si tallaabo deg-deg ah looga qaado.

### Khaladaadka

**A. Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka raashinka**

Waxaa baarista lagu ogaaday in aysan jirin siyaasad iyo habraac qoran oo lagu ilaaliyo tayada si loo hubiyo ama loo xaqiijiyo in Ciidanka Booliska Soomaaliyeed loo qaybiyo tirada iyo tayada saxda ah ee raashinka.

**B. Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka shidaalka**

Waxaa baarista lagu ogaaday in aysan jirin siyaasad iyo habraac qoran oo la ansixiyay ee maaraynta, qaybinta iyo bixinta shidaalka hawlgallada Ciidamada Booliska Soomaaliyeed. Arrinkan ayaa sababay in la xaqiijin waayo in shidaalka loo adeegsaday ama loo isticmaalay ujeeddooyinki loogu talagalay oo ahayd in loogu adeego muwaadinka iyo Qaranka iyo in kale.

### Talo soo jeedin

Waa in Wasaaradda Amniga Gudaha iyo Maamulka Ciidanka Booliska Soomaaliyeed ay hirgaliyaan siyaasadda iyo habraaca hubinta tayada raashinka ciidanka iyo in la xaqiijiyo in ay jiraan hubanti-galin ku filan bixinta raashinka.

Waa in la hirgaliyaa lana meelmariyaa habraaca iyo siyaasadda maamulka shidaalka ayna si hufan u maareeyaan Ciidanka Booliska Soomaaliyeed.

Waa inay jirtaa hubinno gudaha ee shidaalka iyo meel kasta oo aan si khaldan loogu qoondeeyay shidaalka Ciidanka Booliska Soomaaliyeed waa in si degdeg ah loo xalliyaa.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Maamulka Ciidanka Booliska Soomaaliyeed ayaa caddeeyay in ay sameeyen habraacyo qabyo-qoraal ah iyo hannaan oo lagu maamulo arrimaha sare ku xusan.*

### Jawaabta XHGQ

Ciidanka Booliska Soomaaliyeed ayaan baaris usoo gudbin siyaasadaha iyo habraacyada qabyo qoraalka ah ay sheegeen in ay diyaariyeen. Siyaasadaha iyo habraacyada ayaan wali la dhamaystirin.

## 14.3 Maamulka iibka iyo heshiisyada

### 14.3.1 SHARCIGA

Qodobka 27aad (1) iyo (4) ee Sharci Lr. 22 ee Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka oo soo baxay 2016, ayaa sheegaya sidaan:

> 27(1) Dhammaan Hay'adaha qandaraaska iibka ayaa sameynaya qorshaha qandaraaska Iibka ee sannadlaha, ee looga gol leeyahay si lagu gaaro in qiimaha ugu badan ee kharashka guud iyo waxyaabaha kale ee sharcigan. Qorshaha qandaraaska iibsiga wuxuu taageerayaa barnaamijka iyo miisaaniyadda ay ansixisay hay'adda qandaraaska iibka.
>
> 27(4) Qorshaha qandaraaska iibka waxaa la diyaarinayaa sannad walba iyadoo lagu saleynayo miisaaniyadda sannadka Xukuumadda, iyado la xisaabinayo miiisaaniyad sannadeedka Xukuumadda.

### Khaladka

**A. Maqnaanshaha diyaarinta qorshaha iibka sannadka**

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in Ciidanka Booliska Soomaaliyeed ayan lahayn qorshe sannadle ah ee iibka sannad maaliyadeedka dhammaaday 31da Diseembar 2020 kaas oo ku salaysan miisaaniyadda qaranka.

### Talo soo jeedin

Waa in Ciidanka Booliska Soomaaliyeed yeeshaan qorshe sannadle ah oo ku aaddan iibka kaas oo ku saleysan miisaaniyadda la ansixiyay ee hay'adda.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

Maamulka hay'adda la baaray wax jawaab ah oo qoran kama soo bixin arrintaan.

### 14.3.2 SHARCIGA

Sharci Lr. 17 ee Maareynta Maaliyadda Guud ee Dowladda oo soo baxay 25 Diseembar 2019, Qodobka 38aad (5) wuxuu dhigayaa dhammaan heshiisyada deeqaha hay'adaha dowladda, Maamul Goboleedyada iyo hay'adaha ganacsiga ee dowladda waa in laga diiwaan geliyaa Xafiiska Hantidhawrka Guud.

Intaa waxaa dheer, Qodobka 11aad (c) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee 2019 wuxuu awood u siinayaa Hantidhawrka Guud inuu diiwaangeliyo qandaraasyada iyo heshiisyada ay galaan hay'adaha dowladda. Qodobka 14aad (wax-ka-beddelka Qodobka 84aad) ee Sharciga Iib-

ka Qaranka 2020 wuxuu sheegayaa in dhammaan hay'adaha dawliga ah ay qandaraasyada iyo heshiisyada ka diiwaan-galiyaan XHGQ.

### Khaladka

**A. Heshiisyada oo aan laga soo diiwaangalin XHGQ**

Intii aan baarista ku guda jirnay ayaan inoo suurta galin in aan helno dhammaan heshiisyada la xiriira sannad maaliyadeedka dhammaaday, taas oo keentay in Xafiiska Hantidhawrka Guud uusan xaqiijin karin in la fuliyay qodobbada heshiiska lagu galay, iyo in heshiisyadu ay waafaqsan yihiin shuruucda quseeya, ayna yihiin kuwa ku jiraan danaha Dowladda Federaalka Soomaaliya.

### Talo soo jeedin

Waa in dhammaan qandaraasyada iyo heshiisyada laga diiwaangaliyaa Xafiiska Hantidhawraha Guud si waafaqsan shuruucda iyo xeerarka.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

Ma jirto jawaab qoraal ah oo laga helay hay'adda la baaray.

#### 14.3.3 SHARCIGA

Sharci Lr. 22 ee Sharciga libka Qaranka oo soo baxay 9 Agoosto 2016, Qodobkiisa 14aad ayaa waxa uu farayaa in qandaraasyada iyo heshiisyada caalamiga ah lagu qoro luuqadaha kala ah Ingiriis iyo Carabi halka kuwa gudaha/maxalliga ahna lagu qoro Af-Soomaali.

### Khaladka

**A. Heshiisyada gudaha oo aan lagu qorin luuqadda Soomaaliga**

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in Ciidanka Booliska Soomaaliyeed ay heshiisyada gudaha/maxalliga ah ku qoraan luuqadda Ingiriiska taas oo lid ku ah sharciga.

### Talo soo jeedin

Waa in maamulka hay'addu uu heshiisyada gudaha/maxalliga ah ku qoraa luuqadda Soomaaliga si waafaqsan sharciga. Sidoo kale, waxaa ay diyaarin karaan mid ku qoran luuqadda Ingiriisiga haddii ay u baahan yihiin dhinaca kale ee qandaraaslaha.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

Ma jirto jawaab qoraal ah oo laga helay hay'adda la baaray.

## 14.4 Maamulka hantida

#### 14.4.1 SHARCIGA

Qodobka 11aad (1) (j) ee Sharciga Maamulka Maaraynta Maaliyadda Guud ee 2019 ayaa dhigaya in Xafiiska Hantidhawrka Guud uu mas'uul ka yahay diiwaangelinta dhammaan sharciyada iyo heshiisyada, diiwaangalinta waarannada (F16), hantida guurtada iyo maguurtadda, kala wareejinta miisaaniyadda, deeqaha, iyo dhacdo dhaqaale kasta oo kale sida ku cad sharcigan.

### Hannaanka la isku waafaqsan yahay

Waxaa jirta siyaasad, hagayaal iyo habraac loo ansixiyay in lagu maamulo hantida (guurto iyo ma-guurto) ee dhammaan hay'adaha kala duwan ee dowladda. Siyaasadda hantidu waa in ay ka kooban tahay xaaladda, isticmaalka, waxqabadka iyo dhaqan-ka-baxa.

Waxaa jira diiwaan guud oo lagu keydiyo hantida dowladda oo ay hayaan hay'adaha kala du-

wan. Diiwaanka waa in lagu sheego hanti waliba lamberka u gaarka ah, meesha lagu isticmaalo, xaaladda muuqaal ahaaneed IWM.

### Khaladaadka

**A. Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka hantida**

Waxaa baarista lagu ogaaday in Ciidanka Booliska Soomaaliyeed aysan lahayn habraacyada iyo siyaasadda lagu maamulo lagu lana socdo hantida.

**B. Diiwaanka hantida oo aan joogto loo cusboonaysiin**

Maamulka hay'adda ayaa ku guul dareystay in ay cusboonaysiiyaan diiwaanka hantida kaas oo ka kooban macluumaadka, lambarka aqoonsiga, qiimaha lagu iibiyay xaaladda hantida IWM.

Hubinta muuqaal ahaaneed ee hantida ayaa lagu ogaaday in hantida hay'addu aysan wada lahayn lambarka aqoonsiga hantida (tag number) kaas oo ah lambar lagu aqoonsado oo gaar u ah si loo hubiyo loona dabagalo.

Intaas waxaa dheer, sida uu qabo Sharciga Maareynta Maaliyadda Dowladda Hantida lagama soo diiwaangalin XHGQ.

**C. Maamulka gaadiidka oo ah mid liita**

Intii aan ku guda jirnay baarista CBS nalama aysan wadaagin baarayaasha diiwaanka hantida iyo buugaagtooda lahaanshiyaha, sidoo kale baabuurta looma keenin si muuqaal ahaan loo xaqiijiyo.

Maqnaanshaha buugaagta lahaanshiyaha iyo cusboonaysiin la'aanta diiwaankooda ayaa XHGQ u suurtagelin weyday in la hubiyo in gaadiidka loo isticmaalay si waafaqsan waajibaadka ciidanka.

### Talo soo jeedin

Waa in la hirgaliyaa lana meel mariyaa tilmaamo iyo siyaasado dhammaystiran ee maamulka, hubinta iyo ka warbixnta hantida. Waa in la hirgaliyaa lana meel mariyaa habraac iyo siyaasad dhammaystiran ee maamulka, hubinta iyo ka warbixinta hantida. Waa in Wasaaradda Maaliyadda ay hoggaamiso hawlaha lagu abuurayo siyaasad iyo hagayaal la xiriira hannaanka maamulka hantida Dowladda si ay u dhaqan galiyaan dhammaan hay'adaha Dowladda oo ay ka mid tahay Ciidanka Booliska Soomaaliyeed.

Waa in maamulka hay'addu ay diyaariyaan diiwaan dhammaystiran ee hantida oo leh tilmaamo cad si loo xaqiijiyo in dhammaan hantida hay'adda lagu diiwaan galiyo diiwaanka, sidoo kalana loo cusboonaysiiyaa xilliyo go'an ama cayiman.

Waa in hay'adda la baaray iyo Wasaaradda Maaliyadda ay hantida hay'adda ku sameeyaan tirakoob waqtiyaysan isla markaana ay cusboonaysiiyaan diiwaanka hantida.

Waa in dhammaan gaadiidka hay'adda ay lahaadaan buugaagta lahaanshiyaha gaadiidka oo ku diiwaangashan magaca Ciidanka Booliska Soomaaliyeed oo uu si wanaagsan uga warhayaa sarkaalka sare ee mas'uulka ka ah.

Waa in maamulka hay'adda ay hantida ka soo diiwangeliyaan Xafiiska Hnatidhawrka Guud si waafaqsan Sharciga Maareynta Maaliyadda.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

Ma jirto jawaab qoraal ah oo laga helay hay'adda la baaray.

## 14.5 Maamulka mushaarka

### 14.5.1 SHARCIGA

Qodobka 12aad (2) (t, d, r iyo s) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee soo baxay 2019 ayaa sheegaya:

> 12(2) Sarkaal kasta oo idman ee hay'adaha iyo shirkadaha Dawladda wuxuu mas'uul ka yahay dhammaan arrimaha la xiriira maamulka lacagaha dadweynaha, hantida iyo qaamaha hay'adaha Dawladda ee uu mas'uulka ka yahay, taasi oo ay ka mid yihiin iyadoo aysan ku koobnayn:
>
> (t) Ilaalinta iyo kor-joogteynta fulinta Miisaaniyadda hay'adda uu masuulka ka yahay, si waafaqsan sharcigan, xeer-nidaamiyeyaasha iyo tilmaamaha Wasiirka;
>
> (j) Haynta (maintain) xisaabaadka iyo diiwaanada hay'adda uu masuulka ka yahay si waafaqsan xeer-nidaamiyeyaasha ama hageyaasha uu soo jeediyo Xisaabiyaha Guud;
>
> (d) Maareyn hufan, oo wax-ku-ool ah, oo daah-furan, lagu maamulo dhammaan lacagaha hay'adda;
>
> (r) In si hufan, oo wax ku ool ah, oo daah-furan loo yegleelo ilaalinta gudaha (internal controls) iyo maareynta khataraha (risk management);
>
> (s) Kormeeridda iyo xaqiijinta in sida ugu habboon loo isticmaalo lacagaha Dawladda ee hay'dda uu masuulka ka yahay hoos yimaada.

### Hannaanka la isku waafaqsan yahay

Waxaa jira kala baxsanaan mas'uuliyadaha diyaarinta mushaarka, la socodka, hubinta, ansixinta iyo oggolaanshaha u danbeeya ee mushaarka.

Mas'uuliyadahan waxaa qabta saraakiil madax-bannaan ee mas'uulka ka ah.

Hannaanka mushaar bixinta waa mid kumbuyuutar ku saleysan, tillaabo kasta waa in la diiwaan galiyaa si ay ugu fududaato isla-xisaabtanka si wax ku ool ah.

Dhammaan isbedellada mushaar bixinta waxaa si waqtiyaysan u ansixiya sarkaal sare ee mas'uulka ka ah.

Waxaa jira dukumiintiyo la ansixiyay oo loogu tala-galay maamulka mushaarka oo leh tilmaamo. Mushaaraadka waa in ay ku saleysnaadaan heerarka askarta oo la ansixiyey gaar ahaan Ciidanka Booliska Soomaaliyeed. Tani waa in lagu qoraa xeerarka CBS.

### Khaladka

**A. Kala duwanaansho ka jirta nidaamka keydka xogta**

Intii aan baarista ku guda jirnay ayaan ogaannay in nidaamka SFMIS-ka lee laga diyaariyo mushaaraadka ciidanka uusan si toos ah ugu xirnayn Nidaamka Xogta Keydka Ciidanka Booliska Soomaaliyeed. Waxaa aad u adkaatay in hubinno dhammaystiran oo wax ku ool ah lagu sameeyo mushaaraadka maadaama ay kala duwan yihiin qaab qoraalka magaca iyo in laba nidaam (system) ay kala isticmaalayaan (bixinayaan) laba (2) lambar aqoonsi kala duwan, baarayaasha ma hubin kareen in mushahar iyo lacagaha kale la siiyay cidda xaqa u laheyd.

### Talo soo jeedin

Waa in la mideeyaa labada nidaam ee keydka xogta ciidanka si loo hubiyo in lacagaha la siiyo ciidanka ku habboon.

Waa inay jiraan hubinta gudaha si looga hortago khaladaadka iyo qiyaano loo qasday in ay ka dhacaan mushaaraadka CBS.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Nidaamka keydka xogta (database) Ciidanka Boliiska wuuu u qoran yahay si gaar ah, iyadoo muhiimadda la siinayo macluumaad guud ee ciidanka.*

*Balse Databseka Wasaaradda Maaliyadda waa ka duwan yahay keenna oo waxay xoogga saaraan Magac, Akoon Bangi, mana fududa in la mideeyo. Saa darteed, waxaa loo baahan yahay in loo helo khubaro IT ah oo midysa labada database, ama mid ka mid ah laga guuro kan kalena loo guuro iyadoo ay iswada kaashanayaan Taliska Boliiska iyo Wasaaradda Maaliyadda.*

*Mushaaraadka Ciidanka Boliiska Waxey ku baxaan si waafaqsan habraayada u degsan Dowladda, waxaana ku bixinnay Nidaamka Maaraynta Xogta Maaliyadda Dalka (SFMIS).*

## 14.6 Dabagalka baaristii hore

### 14.6.1 KHALADAADKA BAARISTA SANNADKII 2019

Shaxda hoose waxaa ka muuqda marxalada khaladaadka baarista sannadkii hore lagu sameeyay hay'adda in la fuliyay, qayb laga fuliyay ama aan waxba laga fulin.

| TR. | KHALADAADKA | MARXALADDA |
|---|---|---|
| 1. | 23.1.1 Ka gaabinta diyaarinta iyo soo gudbinta warbixinta maaliyadeed ee sannadlaha | Lama fulin |
| 2. | 23.2.1 Maqnaanshaha sharci cusub | Lama fulin |
| 3. | 23.3.1 Maqnaanshaha Qaab-dhismeedka Ciidanka iyo Qalabka (QCQ) oo dhaqan gal ah | Lama fulin |
| 4. | 23.3.2 Maqnaanshaha cusboonaysiinta keydka xogta (Database) | Waa la fuliyay |
| 5. | 23.4.1 Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka raashinka | Lama fulin |
| 6. | 23.4.2 Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka shidaalka | Lama fulin |
| 7. | 23.5.1 Lacagbixin aan lahayn caddaymo dhammeystiran - kharashaadka | Waa la fuliyay |
| 8. | 23.5.2 Miisaaniyad la kala wareejiyay oggolaansho la'aan | Waa la fuliyay |
| 9. | 23.6.1 Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka hantida | Lama fulin |
| 10. | 23.6.2 Maqnaanshaha cusboonaysiinta diiwaanka hantida | Lama fulin |
| 11. | 23.6.3 Maamulka gaadiidka oo ah mid liita | Lama fulin |
| 12. | 23.6.4 Maamulka qalabka aan ahayn kuwa milatariga oo ah mid liita | Lama fulin |
| 13. | 23.7.1 Heshiisyo aan laga soo diiwaangalin XHGQ | Qayb ayaa laga fuliyay |
| 14. | 23.7.2 Heshiisyada gudaha aan lagu qorin afka Soomaaliga | Lama fulin |
| 15. | 23.8.1 Ku-guuldarraysiga fulinta howlaha hantidhawrka gudaha | Lama fulin |

**Shaxda 14.2** Khaladaadka baarista sannadkii 2019

### 14.6.2 KHALADAADKA BAARISTA SANNADKII 2018

| TR. | KHALADAADKA | MARXALADDA |
|---|---|---|
| 1. | 13.1 Ma jirin xisaabaadka sannadka oo la soo gudbiyay si loobaaro | Lama fulin |
| 2. | 14.1 Lama cusboonaysiinin Shuruucda iyo Xeerarka | Lama fulin |
| 3. | 15.1 Ma jirin Qaab-dhismeedka Ciidanka iyo Qalabka (QCQ) | Lama fulin |
| 4. | 15.2 Ma jirin keydka xogta | Qeyb ayaa la fuliyay |
| 5. | 15.3 Maqnaanshaha hubinta muuqaal ahaaneed | Qeyb ayaa la fuliyay |
| 6. | 17.1 Maamulka raashinka oo ah mid liita | Qeyb ayaa la fuliyay |
| 7. | 17.2 Maamulka shidaalka oo ah mid liita | Qeyb ayaa la fuliyay |
| 8. | 17.3 Ma jirin maamulka qalabka aan ahayn kuwa milatariga | Qeyb ayaa la fuliyay |
| 9. | 18.1 Hubinta gaadiidka oo ahayd mid liita | Lama fulin |
| 10. | 19.1 Ma jirin Siyaasaddamaamulka hantida | Lama fulin |
| 11. | 19.2 Ma jirin diiwaanka hantida | Qeyb ayaa la fuliyay |
| 12. | 20.1 Dhammaan lacag bixinada waa in ay lahaadaan caddaymo dhammaystiran | Lama fulin |
| 13. | 20.2 Heshiisyada oo aan laga soo diiwaan-galin XHG | Lama fulin |
| 14. | 20.3 Ogolaansho la'aan la kala wareejiyay kharashaadka miisaaniyadda | Lama fulin |
| 15. | 20.4 Malahayn baaraha gudaha sidoo kalana baarista gudaha lama samayn | Qeyb ayaa la fuliyay |

**Shaxda 14.3** Khaladaadka baarista sannadkii 2018

# 15. Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka

## 15.1 Hubinta kharash bixinta

### 15.1.1 SHARCIGA

Sida ay qabaan Qodobbada 31aad (1) iyo 32aad (4) ee Sharci Lr. 17 ee Maaraynta Maaliyadda Guud ee soo baxay 25 Diseembar 2019:

> 31(1) Wax kharash ah lagama bixin karo Miisaaniyadda qaranka, haddii aysan jiirin, qaansheegto ama caddeyn kale oo dheeraad ah oo looga baahan yahay sida ku xusan xeer-nidaamiyaha ama nidaamka xisaabaadku sheegayo.
>
> 32(4) Kharash bixin walba ee la oggolaaday waa in ay ku lifaaqan yihiin dhammaan dukumiintiyada kaabaya sida ku qeexan Xeer-nidaamiyaha Wasiirku soo saaray.

### Hannanka la isku waafaqsan yahay

Dukumiintiyada caddeymaha way kala duwan yihiin iyadoo ay ku xiran tahay nooca lacag bixinta, waxaana ka mid ah; dalabka iibka, heshiis saxiixan, warqadaha qaansheegashada, alaab-keenidda, guddoonka alaabta, lacag qabashada, iwm..

### Khaladaadka

**A. Kharashaad dhan US $77,000.00 oo aan lahayn caddeymo dhammaystiran**

Waxaa baarista lagu ogaaday in la bixiyay lacag dhan **US $77,000.00** iyada oo aan lahayn caddeymo ku filan taas oo lid ku ah sharciga. Arrinkan ayaa sababay in la xaqiijin waayo sax ahaanshaha lacag bixintan. Faahfaahin dheeraad ah kala soco shaxda hoose:

| TR. | MADAX-XIGE | CIDDA LA SIIYAY | BISHA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1. | 2216 | 2020 CA-BPC-104 | Jan, May & Oct 2020 | 77,000.00 |
| **WADAR** | | | | **77,000.00** |

**Shaxda 15.1** Kharashaadka aan lahayn caddeymo ku filan

### Talo soo jeedin

Waa in dhammaan lacag bixinnada ay ku salaysnaadaan ama lahaadaan caddeymo dhammaystiran, si sax ahna ay u oggolaadaan saraakiisha sare ee mas'uulka ka ah iyo in hawlaha loo guddoomo iyadoo loo eegayo ama la raacayo shuruudo cayiman.

Waa in dhammaan dukumiintiyadda lacag bixinnada lagu tiimbareeyaa "la bixiyay" isla marka lacagahooda la bixiyo si looga hortago in mar kale loo isticmaalo kharash bixin kale.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

Maamulka hay'adda la baaray wax jawaab ah oo qoran kama soo bixin arrintaan.

## 15.2 Maamulka iibka iyo heshiisyada

### 15.2.1 SHARCIGA

Qodobka 27aad (1) iyo (4) ee Sharci Lr. 22 ee Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka oo soo baxay 2016, ayaa sheegaya sidaan:

> 27(1) Dhammaan Hay'adaha qandaraaska iibka ayaa sameynaya qorshaha qandaraaska Iibka ee sannadlaha, ee looga gol leeyahay si lagu gaaro in qiimaha ugu badan ee kharashka guud iyo waxyaabaha kale ee sharcigan. Qorshaha qandaraaska iibsiga wuxuu taageerayaa barnaamijka iyo miisaaniyadda ay ansixisay hay'adda qandaraaska iibka.
>
> 27(4) Qorshaha qandaraaska iibka waxaa la diyaarinayaa sannad walba iyadoo lagu saleynayo miisaaniyadda sannadka Xukuumadda, iyado la xisaabinayo miiisaaniyad sannadeedka Xukuumadda.

### Khaladka

**A. Maqnaanshaha diyaarinta qorshaha iibka sannadka**

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in Hay'adda Nabadsugidda iyo Sirdoonka Qaranku aysan lahayn qorshe sannadle ah ee iibka sannad maaliyadeedka dhammaaday 31da Diseembar 2020 kaas oo ku salaysan miisaaniyadda qaranka.

### Talo soo jeedin

Waa in Hay'adda Nabadsugidda iyo Sirdoonka Qaranku yeelataa qorshe sannadle ah oo ku aaddan iibka kaas oo ku saleysan miisaaniyadda la ansixiyay ee hay'adda.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

Maamulka hay'adda la baaray wax jawaab ah oo qoran kama soo bixin arrintaan.

### 15.2.2 SHARCIGA

Sharci Lr. 17 ee Maareynta Maaliyadda Guud ee Dowladda oo soo baxay 25 Diseembar 2019, Qodobka 38aad (5) wuxuu dhigayaa dhammaan heshiisyada deeqaha hay'adaha dowladda, Maamul Goboleedyada iyo hay'adaha ganacsiga ee dowladda waa in laga diiwaan geliyaa Xafiiska Hantidhawrka Guud.

Intaa waxaa dheer, Qodobka 11aad (c) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee 2019 wuxuu awood u siinayaa Hantidhawrka Guud inuu diiwaangeliyo qandaraasyada iyo heshiisyada ay galaan hay'adaha dowladda. Qodobka 14aad (wax-ka-beddelka Qodobka 84aad) ee Sharciga Iibka Qaranka 2020 wuxuu sheegayaa in dhammaan hay'adaha dawliga ah ay qandaraasyada iyo heshiisyada ka diiwaan-galiyaan XHGQ.

### Khaladaadka

**A. Heshiisyo aan laga soo diiwaangalin XHGQ -US $2,805,668.00**

Waxaa baarista lagu ogaaday in heshiisyo qiimahoodu gaarayo **US $2,805,668.00** aan laga soo diiwaangalin XHGQ, taas oo keentay in aan la caddeyn karin waxyaabaha heshiisyada ku xusan ee la xiriira wixii hanti ah maadaama aan laga soo diiwaangalin XHGQ. Sidoo kale, diiwaan galinla'aanta waxa ay keentay in Xafiiska Hantidhawrka Guud uusan xaqiijin karin in la fuliyay qodobbada heshiiska lagu galay, iyo in heshiisyadu ay waafaqsan yihiin shuruucda iyo xeer hoosaadyada.

| TR. | QANDARAASLAHA | UJEEDDO | MUDDADA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1 | 2020 CA-BPC-099 | Qalab xafiis | 1 sano | 145,200.00 |
| 2 | 2020 CA-BPC-100 | Kharashaadka kale | 1 sano | 752,940.00 |
| 3 | 2020 CA-BPC-101 | Shidaal | 1 sano | 664,796.00 |
| 4 | 2020 CA-BPC-102 | Alaabaha & adeegga kale | 1 sano | 685,732.00 |
| 5 | 2020 CA-BPC-103 | Hawlaha guud | 1 sano | 279,000.00 |
| 6 | 2020 CA-BPC-104 | Socdaalka | 1 sano | 278,000.00 |
| **WADAR** | | | | **2,805,668.00** |

**Shaxda 15.2** Heshiisyada aan laga soo diiwaangelin XHGQ

### Talo soo jeedin

Waa in dhammaan qandaraasyada iyo heshiisyada laga diiwaangaliyaa Xafiiska Hantidhawraha Guud si waafaqsan shuruucda iyo xeerarka.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

Maamulka hay'adda la baaray wax jawaab ah oo qoran kama soo bixin arrintaan.

### 15.2.3 SHARCIGA

Sharci Lr. 22 ee Sharciga Iibka Qaranka oo soo baxay 9 Agoosto 2016, Qodobkiisa 14aad ayaa waxa uu farayaa in qandaraasyada iyo heshiisyada caalamiga ah lagu qoro luuqadaha kala ah Ingiriis iyo Carabi halka kuwa gudaha/maxalliga ahna lagu qoro Af-Soomaali.

### Khaladka

**A. Heshiisyada gudaha oo aan lagu qorin luuqadda Soomaaliga**

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in HSNQ ay heshiisyada gudaha/maxalliga ah ku qortay luuqadda Ingiriiska taas oo lid ku ah sharciga.

### Talo soo jeedin

Waa in maamulka hay'addu uu heshiisyada gudaha/maxalliga ah ku qoraa luuqadda Soomaaliga si waafaqsan sharciga. Sidoo kale, waxaa ay diyaarin karaan mid ku qoran luuqadda Ingiriisiga haddii ay u baahan yihiin dhinaca kale ee qandaraaslaha.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Maamulka hay'adda la baaray wax jawaab ah oo qoran kama soo bixin arrintaan.*

## 15.3 Maamulka hantida

### 15.3.1 SHARCIGA

Qodobka 11aad (1) (j) ee Sharciga Maamulka Maaraynta Maaliyadda Guud ee 2019 ayaa dhigaya in Xafiiska Hantidhawrka Guud uu mas'uul ka yahay diiwaangelinta dhammaan sharciyada iyo heshiisyada, diiwaangalinta waarannada (F16), hantida guurtada iyo maguurtadda, kala wareejinta miisaaniyadda, deeqaha, iyo dhacdo dhaqaale kasta oo kale sida ku cad sharcigan.

### Hannaanka la isku waafaqsan yahay

Waxaa jirta siyaasad, hagayaal iyo habraac loo ansixiyay in lagu maamulo hantida (guurto iyo ma-guurto) ee dhammaan hay'adaha kala duwan ee dowladda. Siyaasadda hantidu waa in ay ka kooban tahay xaaladda, isticmaalka, waxqabadka iyo dhaqan-ka-baxa.

Waxaa jira diiwaan guud oo lagu keydiyo hantida dowladda oo ay hayaan hay'adaha kala duwan. Diiwaanka waa in lagu sheego hanti waliba lamberka u gaarka ah, meesha lagu isticmaalo, xaaladda muuqaal ahaaneed IWM.

### Khaladaadka

**A. Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka hantida**

Waxaa baarista lagu ogaaday in Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka aysan lahayn habraacyada iyo siyaasadda lagu maamulo lagu lana socdo hantida.

**B. Diiwaanka hantida oo aan joogto loo cusboonaysiin**

Maamulka hay'adda ayaa ku guul dareystay in ay cusboonaysiiyaan diiwaanka hantida kaas oo ka kooban macluumaadka, lambarka aqoonsiga, qiimaha lagu iibiyay xaaladda hantida IWM.

Hubinta muuqaal ahaaneed ee hantida ayaa lagu ogaaday in hantida hay'addu aysan wada lahayn lambarka aqoonsiga hantida (tag number) kaas oo ah lambar lagu aqoonsado oo gaar u ah si loo hubiyo loona dabagalo.

Intaas waxaa dheer, sida uu qabo Sharciga Maareynta Maaliyadda Dowladda Hantida lagama soo diiwaangalin XHGQ.

### Talo soo jeedin

Iibinta, maamulka iyo dhaqan-ka-baxa hantida ayaa la waafajiyaa qorshaha iyo istaraatiijiyadda hay'adda.

Go'aannada qorshaha hantida ayaa lagu saleeyaa qiimayn kala duwan, taas oo lagu qiimeeyo khataraha iyo faa'idooyinka laguna sameeyo ama lagu dabaqo mabaadii'da muhiimka ah ee iibka DFS si loo jaan-gooyo jirintaanka iyo qiimiga lacageed ee hantida. Sidoo kale, waxaa la abuuraa ama la hirgaliyaa hubinno gudaha oo wax ku ool ah ee dhinaca maamulka hantida.

Waxaa la hirgaliyaa qaab isla xisaabtan oo ku aaddan ee xaaladaha hantida iyo isticmaalkeeda, sidoo kale go'aaminta dhaqan ka baxa hantida ayaa lagu saleeyaa qaabka ugu habboon ee lagu gaari karo waxtarkiisa ama sida ugu wanaagsan ee looga manfacsan karo.

Go'aan ka gaarista dhaqan ka baxa hantida ayaa lagu saleeya qaabka ugu habboon oo lagu heli karo qiimaha ugu fiican.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Maamulka hay'adda la baaray wax jawaab ah oo qoran kama soo bixin arrintaan.*

## 15.4 Dabagalka baarista

#### 15.4.1 KHALADAADKA WARBIXIN BAARISEEDKII 2019

Shaxdaan hoose waxaa ka muuqda marxaladda khaladaadka baarista sannadkii hore lagu sameeyay hay'adda inta la fuliyay, qayb laga fuliyay ama aan waxba laga fulin.

| TR. | KHALADAADKA | MARXALADDA |
|---|---|---|
| 1 | 24.1.1 Ma jirin xisaabaadka sannadka oo la soo gudbiyay si loo baaro | Waa la fuliyay |
| 2 | 24.2.1 Maqnaanshaha sharci cusub | La ma fulin |
| 3 | 24.3.1 Lacagbixin aan lahayn caddaymo dhammeystiran - kharashaadka | Waa la fuliyay |
| 4 | 24.3.2 Lacagbixin aan lahayn caddaymo dhammeystiran - kharashaadka safarka | La ma fulin |
| 5 | 24.4.1 Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka hantida | La ma fulin |
| 6 | 24.4.2 Diiwaanka hantida oo aan joogto loo cusboonaysiin | La ma fulin |
| 7 | 24.4.3 Maamulka gaadiidka oo ah mid liita | Waa la fuliyay |
| 8 | 24.5.1 Heshiisyo aan laga soo diiwaangalin XHGQ | La ma fulin |
| 9 | 24.5.2 Heshiisyada gudaha aan lagu qorin afka Soomaaliga | La ma fulin |

**Shaxda 15.3** Khaladaadka baarista sannadkii 2019

### 15.4.2 KHALADAADKA WARBIXIN BAARISEEDKII 2018

| TR. | KHALADAADKA | MARXALADDA |
|---|---|---|
| 1. | 21.1 Ma jirin xisaabaadka sannadka oo la soo gudbiyay si loobaaro | Lama fulin |
| 2. | 22.1 Lama cusboonaysiinin Shuruucda iyo Xeerarka | Lama fulin |
| 3. | 23.1 Hubinta gaadiidka oo ahayd mid liita | Lama fulin |
| 4. | 24.1 Ma jirin Siyaasaddamaamulka hantida | Lama fulin |
| 5. | 24.2 Ma jirin diiwaanka hantida | Qeyb ayaa la fuliyay |
| 6. | 25.1 Kharashaadka howl-maalmeedka oo aan wadan caddeymo ku filan | Lama fulin |

**Shaxda 15.4** Khaladaadka baarista sannadkii 2018

# 16. Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda

## 16.1 Hubinta kharash bixinta

### 16.1.1 SHARCIGA

Sida ay qabaan Qodobbada 31aad (1) iyo 32aad (4) ee Sharci Lr. 17 ee Maaraynta Maaliyadda Guud ee soo baxay 25 Diseembar 2019:

> 31(1) Wax kharash ah lagama bixin karo Miisaaniyadda qaranka, haddii aysan jiirin, qaansheegto ama caddeyn kale oo dheeraad ah oo looga baahan yahay sida ku xusan xeer-nidaamiyaha ama nidaamka xisaabaadku sheegayo.
>
> 32(4) Kharash bixin walba ee la oggolaaday waa in ay ku lifaaqan yihiin dhammaan dukumiintiyada kaabaya sida ku qeexan Xeer-nidaamiyaha Wasiirku soo saaray.

### Hannanka la isku waafaqsan yahay

Dukumiintiyada caddeymaha way kala duwan yihiin iyadoo ay ku xiran tahay nooca lacag bixinta, waxaana ka mid ah; dalabka iibka, heshiis saxiixan, warqadaha qaansheegashada, alaab-keenidda, guddoonka alaabta, lacag qabashada, iwm..

### Khaladka

**A. Kharashaad dhan US $132,000.00 oo aan lahayn caddeymo dhammaystiran**

Waxaa baarista lagu ogaaday in la bixiyay lacag dhan **US $132,000.00** iyada oo aan lahayn caddeymo ku filan taas oo lid ku ah sharciga. Arrinkan ayaa sababay in la xaqiijin waayo sax ahaanshaha lacag bixintan. Faahfaahin dheeraad ah kala soco shaxda hoose:

| NO | MADAX-XIGE | CIDDA LA SIIYAY | BISHA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1. | 2216 | 2020 CA-BPC-105 | Feb - Apr 2020 | 66,000.00 |
| 2. | 2216 | 2020 CA-BPC-106 | Jun, Oct, Nov, and Dec 2020 | 66,000.00 |
| **WADAR** | | | | **132,000.00** |

**Shaxda 16.1** Kharashaadka safarka ee aan lahayn caddeymo ku filan

### Talo soo jeedin

Waa in dhammaan lacag bixinnada ay ku salaysnaadaan ama lahaadaan caddeymo dhammaystiran, si sax ahna ay u oggolaadaan saraakiisha sare ee mas'uulka ka ah iyo in hawlaha loo guddoomo iyadoo loo eegayo ama la raacayo shuruudo cayiman.

Waa in dhammaan dukumiintiyadda lacag bixinnada lagu tiimbareeyaa "la bixiyay" isla marka lacagahooda la bixiyo si looga hortago in mar kale loo isticmaalo kharash bixin kale.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Wax waan wax ka qaban doonnaa arrimaha ku xusan Warqadda Maamulka.*

## 16.2 Maamulka iibka iyo heshiisyada

### 16.2.1 SHARCIGA

Qodobka 27aad (1) iyo (4) ee Sharci Lr. 22 ee Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka oo soo baxay 2016, ayaa sheegaya sidaan:

> 27(1) Dhammaan Hay'adaha qandaraaska iibka ayaa sameynaya qorshaha qandaraaska Iibka ee sannadlaha, ee looga gol leeyahay si lagu gaaro in qiimaha ugu badan ee kharashka guud iyo waxyaabaha kale ee sharcigan. Qorshaha qandaraaska iibsiga wuxuu taageerayaa barnaamijka iyo miisaaniyadda ay ansixisay hay'adda qandaraaska iibka.
>
> 27(4) Qorshaha qandaraaska iibka waxaa la diyaarinayaa sannad walba iyadoo lagu saleynayo miisaaniyadda sannadka Xukuumadda, iyado la xisaabinayo miiisaaniyad sannadeedka Xukuumadda.

### Khaladaadka

**A. Maqnaanshaha diyaarinta qorshaha iibka sannadka**

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyaddu aysan lahayn qorshe sannadle ah ee iibka sannad maaliyadeedka dhammaaday 31da Diseembar 2020 kaas oo ku salaysan miisaaniyadda qaranka.

### Talo soo jeedin

Waa in Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyaddu yeelataa qorshe sannadle ah oo ku aaddan iibka kaas oo ku saleysan miisaaniyadda la ansixiyay ee hay'adda.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Wax waan wax ka qaban doonnaa arrimaha ku xusan Warqadda Maamulka.*

### 16.2.2 SHARCIGA

Sharci Lr. 22 ee Sharciga Iibka Qaranka oo soo baxay 9 Agoosto 2016, Qodobkiisa 14aad ayaa waxa uu farayaa in qandaraasyada iyo heshiisyada caalamiga ah lagu qoro luuqadaha kala ah Ingiriis iyo Carabi halka kuwa gudaha/maxalliga ahna lagu qoro Af-Soomaali.

### Khaladka

**A. Heshiisyada gudaha oo aan lagu qorin luuqadda Soomaaliga**

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in Hay'adda Socdaalka ay heshiisyada gudaha/maxalliga ah ku qortay luuqadda Ingiriiska taas oo lid ku ah sharciga.

### Talo soo jeedin

Waa in maamulka hay'addu uu heshiisyada gudaha/maxalliga ah ku qoraa luuqadda Soomaaliga si waafaqsan sharciga. Sidoo kale, waxaa ay diyaarin karaan mid ku qoran luuqadda Ingiriisiga haddii ay u baahan yihiin dhinaca kale ee qandaraaslaha.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Wax waan wax ka qaban doonnaa arrimaha ku xusan Warqadda Maamulka.*

## 16.3 Maamulka hantida

### 16.3.1 SHARCIGA

Qodobka 11aad (1) (j) ee Sharciga Maamulka Maaraynta Maaliyadda Guud ee 2019 ayaa dhigaya in Xafiiska Hantidhawrka Guud uu mas'uul ka yahay diiwaangelinta dhammaan sharciyada iyo heshiisyada, diiwaangalinta waarannada (F16), hantida guurtada iyo maguurtadda, kala wareejinta miisaaniyadda, deeqaha, iyo dhacdo dhaqaale kasta oo kale sida ku cad sharcigan.

### Hannaanka la isku waafaqsan yahay

Waxaa jirta siyaasad, hagayaal iyo habraac loo ansixiyay in lagu maamulo hantida (guurto iyo ma-guurto) ee dhammaan hay'adaha kala duwan ee dowladda. Siyaasadda hantidu waa in ay ka kooban tahay xaaladda, isticmaalka, waxqabadka iyo dhaqan-ka-baxa.

Waxaa jira diiwaan guud oo lagu keydiyo hantida dowladda oo ay hayaan hay'adaha kala duwan. Diiwaanka waa in lagu sheego hanti waliba lamberka u gaarka ah, meesha lagu isticmaalo, xaaladda muuqaal ahaaneed IWM.

### Khaladaadka

**A. Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka hantida**

Waxaa baarista lagu ogaaday in Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda aysan lahayn habraacyada iyo siyaasadda lagu maamulo lagu lana socdo hantida.

**B. Diiwaanka hantida oo aan joogto loo cusboonaysiin**

Maamulka hay'adda ayaa ku guul dareystay in ay cusboonaysiiyaan diiwaanka hantida kaas oo ka kooban macluumaadka, lambarka aqoonsiga, qiimaha lagu iibiyay xaaladda hantida IWM.

Hubinta muuqaal ahaaneed ee hantida ayaa lagu ogaaday in hantida hay'addu aysan wada lahayn lambarka aqoonsiga hantida (tag number) kaas oo ah lambar lagu aqoonsado oo gaar u ah si loo hubiyo loona dabagalo.

Intaas waxaa dheer, sida uu qabo Sharciga Maareynta Maaliyadda Dowladda Hantida lagama soo diiwaangalin XHGQ.

**C. Maamulka gaadiidka oo ah mid liita**

Muddadii lagu guda jiray baarista Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda waxay nala wadaagtay liiska 8 gaari ah, 1 Mooto LTM ah iyo 1 doon kuwaas oo la sheegay in ay hay'addu leedahay. Balse hay'addu waxay baarayaasha la wadaagtay 2 gaari iyo 1 doon muuqaal ahaan. 6 Gaari iyo mootada aan lakeenin muuqaal ahaan si loo xaqiijiyo.

| TR. | NOOCA GAARIGA | CIDDA BIXISAY | CAQAAYAD LR. | FAAHFAAHIN |
|---|---|---|---|---|
| 1. | Toyota Hardtop | IOM | 877005 | Muuqaal ahaan lama xaqiijin |
| 2. | Toyota Hardtop | IOM | 8506556 | Muuqaal ahaan lama xaqiijin |
| 3. | Toyota Hardtop | IOM | 850821 | Muuqaal ahaan lama xaqiijin |
| 4. | Toyota Hardtop | IOM | 860086 | Muuqaal ahaan lama xaqiijin |
| 5. | Toyota Hardtop | IOM | 860227 | Muuqaal ahaan lama xaqiijin |
| 6. | Toyota Hardtop | IOM | 860083 | Muuqaal ahaan lama xaqiijin |
| 7. | Motor LTM | DFS | | Muuqaal ahaan lama xaqiijin |

**Shaxda 16.2** Gaadiidka hay'adda la baaray

### Talo soo jeedin
Iibinta, maamulka iyo dhaqan-ka-baxa hantida ayaa la waafajiyaa qorshaha iyo istaraatiiji-yadda hay'adda.

Go'aannada qorshaha hantida ayaa lagu saleeyaa qiimayn kala duwan, taas oo lagu qiimeeyo khataraha iyo faa'idooyinka laguna sameeyo ama lagu dabaqo mabaadii'da muhiimka ah ee iibka DFS si loo jaan-gooyo jirintaanka iyo qiimiga lacageed ee hantida. Sidoo kale, waxaa la abuuraa ama la hirgaliyaa hubinno gudaha oo wax ku ool ah ee dhinaca maamulka hantida.

Waxaa la hirgaliyaa qaab isla xisaabtan oo ku aaddan ee xaaladaha hantida iyo isticmaalkeeda, sidoo kale go'aaminta dhaqan ka baxa hantida ayaa lagu saleeyaa qaabka ugu habboon ee lagu gaari karo waxtarkiisa ama sida ugu wanaagsan ee looga manfacsan karo.

Waa in dhammaan gaadiidka hay'adda ay lahaadaan buugaagta lahaanshiyaha gaadiidka oo ku diiwaangashan magaca Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda oo uu si wanaagsan uga war-hayaa sarkaalka sare ee mas'uulka ka ah.

Go'aan ka gaarista dhaqan ka baxa hantida ayaa lagu saleeya qaabka ugu habboon oo lagu heli karo qiimaha ugu fiican.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray
*Wax waan wax ka qaban doonnaa arrimaha ku xusan Warqadda Maamulka.*

## 16.4 Dabagalka baarista

### 16.4.1 KHALADAADKA WARBIXIN BAARISEEDKII 2019
Shaxdaan hoose waxaa ka muuqda marxaladda khaladaadka baarista sannadkii hore lagu sameeyay hay'adda inta la fuliyay, qayb laga fuliyay ama aan waxba laga fulin.

| TR. | KHALADAADKA | MARXALADDA |
|---|---|---|
| 1. | 25.1.1 Lacagbixin aan lahayn caddaymo dhammeystiran - kharashaadka | Waa la fuliyay |
| 2. | 25.1.2 Lacagbixin aan lahayn caddaymo dhammeystiran - kharashaadka safarka | La ma fulin |
| 3. | 25.2.1 Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka hantida | La ma fulin |
| 4. | 25.2.2 Diiwaanka hantida oo aan joogto loo cusboonaysiin | La ma fulin |
| 5. | 25.2.3 Maamulka gaadiidka oo ah mid liita | La ma fulin |
| 6. | 25.3.1 Heshiisyo aan laga soo diiwaangalin XHGQ | Waa la fuliyay |

**Shaxda 16.3** Khaladaadka baarista sannadkii 2019

### 16.4.1 KHALADAADKA WARBIXIN BAARISEEDKII 2018

| TR. | KHALADAADKA | MARXALADDA |
|---|---|---|
| 1. | 28.1 Hubinta gaadiidka oo ah mid liita | Lama fulin |
| 2. | 29.1 Ma jiraan siyaasad iyo hayaal lagu maamulo hantida | Lama fulin |
| 3. | 29.2 Ma jirin diiwaanka hantida | Qeyb ayaa la fuliyay |
| 4. | 30.1 Ma lahayn baaraha gudaha sidoo kalana baarista gudaha lama samayn | Qeyb ayaa la fuliyay |

**Shaxda 16.4** Khaladaadka baarista sannadkii 2018




# III. HAY'ADAHA DHAQAALAHA

# 17. Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta

## 17.1 Maamulka hantida

### 17.1.1 SHARCIGA

Qodobka 11aad (j) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee 2019 ayaa sheegaya mas'uuliyadaha Hantidhawraha Guud waxaana ka mid ah "Diiwaangelinta dhammaan sharciyada iyo heshiisyada, diiwaangalinta waarannada (F16), hantida guurtada iyo maguurtadda, kala wareejinta Miisaaniyadda, deeqaha, iyo dhacdo dhaqaale kasto kale sida ku cad sharcigan".

### Hannaanka la isku waafaqsan yahay

Waxaa jirta siyaasad, hagayaal iyo habraac loo ansixiyay in lagu maamulo hantida (guurto iyo ma-guurto) ee dhammaan hay'adaha kala duwan ee dowladda. Siyaasadda hantidu waa in ay ka kooban tahay xaaladda, isticmaalka, waxqabadka iyo dhaqan-ka-baxa.

Waxaa jira diiwaan guud oo lagu keydiyo hantida dowladda oo ay hayaan hay'adaha kala duwan. Diiwaanka waa in lagu sheego hanti waliba lamberka u gaarka ah, meesha lagu isticmaalo, xaaladda muuqaal ahaaneed IWM.

### Khaladaadka

**A. Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka hantida**

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in Wasaaradda Batroolka iyo Macdantu aysan lahayn qorshe sannadle ah ee iibka sannad maaliyadeedka dhammaaday 31da Diseembar 2020 kaas oo ku salaysan miisaaniyadda qaranka.

**B. Diiwaanka hantida oo aan joogto loo cusboonaysiin**

Maamulka hay'adda ayaa ku guul dareystay in ay cusboonaysiiyaan diiwaanka hantida kaas oo ka kooban macluumaadka, lambarka aqoonsiga, qiimaha lagu iibiyay xaaladda hantida IWM.

Hubinta muuqaal ahaaneed ee hantida ayaa lagu ogaaday in hantida hay'addu aysan wada lahayn lambarka aqoonsiga hantida (tag number) kaas oo ah lambar lagu aqoonsado oo gaar u ah si loo hubiyo loona dabagalo.

Intaas waxaa dheer, sida uu qabo Sharciga Maareynta Maaliyadda Dowladda Hantida lagama soo diiwaangalin XHGQ.

### Talo soo jeedin

Waa in la hirgaliyaa lana meel mariyaa tilmaamaha iyo siyaasadda dhammaystiran ee maamulka, hubinta iyo ka warbixnta hantida.

Waa in Maamulka hay'adda ay diyaariyaan diiwaan dhammaystiran ee hantida oo leh tilmaamo cad si loo xaqiijiyo in dhammaan hantida hay'adda lagu diiwaan galiyo diiwaanka, sidoo kalana loo cusboonaysiiyaa xilliyo go'an ama cayiman.

Waa in hay'adda la baaray iyo Wasaaradda Maaliyadda ay hantida hay'adda ku sameeyaan tirakoob waqtiyaysan isla markaana ay cusboonaysiiyaan diiwaanka hantida.

Hay'adda la baaray iyo Wasaaradda Maaliyadda waa inay hantida ku sameeyaan hubin muuqa-al ahaaneed oo xilliyo go'an ama cayiman sidoo kalena la cusboonaysiiyaa diiwaanka hantida.

Waa in maamulka hay'adda ay hantida ka soo diiwangeliyaan Xafiiska Hnatidhawrka Guud si waafaqsan Sharciga Maareynta Maaliyadda.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta waxaa ay qoraal ku sheegtay in sida ugu dhaqsiyaha badan hergelin doonto tillaabooyinka sixitaanka.*

## 17.2 Dabagalka baarista

### 17.2.1 KHALADAADKA WARBIXIN BAARISEEDKII 2019

Shaxdaan hoose waxaa ka muuqda marxaladda khaladaadka baarista sannadkii hore lagu sameeyay hay'adda inta la fuliyay, qayb laga fuliyay ama aan waxba laga fulin.

| TR. | KHALADAADKA | MARXALADDA |
|---|---|---|
| 1. | 26.1.1 Ma jirin xisaabaadka sannadka oo la soo gudbiyay si loo baaro | La ma fulin |
| 2. | 26.2.1 Lacagbixin aan lahayn caddaymo dhammeystiran - kharashaadka | Waa la fuliyay |
| 3. | 26.2.2 Lacagbixin aan lahayn caddaymo dhammeystiran - kharashaadka safarka | Waa la fuliyay |
| 4. | 26.3.1 Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka hantida | La ma fulin |
| 5. | 26.3.2 Maqnaanshaha cusboonaysiinta diiwaanka hantida | La ma fulin |
| 4. | 26.4.1 Heshiisyo aan laga soo diiwaangalin XHGQ | Waa la fuliyay |
| 5. | 26.4.2 Heshiisyada gudaha aan lagu qorin afka Soomaaliga | Waa la fuliyay |
| 6 | 26.5.1 Ku-guuldarraysiga fulinta howlaha hantidhawrka gudaha | La ma fulin |

**Shaxda 17.1** Khaladaadka baarista sannadkii 2019

# 18. Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska

## 18.1 Hubinta kharash bixinta

### 18.1.1 SHARCIGA

Sida ay qabaan Qodobbada 31$^{aad}$ (1) iyo 32$^{aad}$ (4) ee Sharci Lr. 17 ee Maaraynta Maaliyadda Guud ee soo baxay 25 Diseembar 2019:

> 31(1) Wax kharash ah lagama bixin karo Miisaaniyadda qaranka, haddii aysan jiirin, qaansheegto ama caddeyn kale oo dheeraad ah oo looga baahan yahay sida ku xusan xeer-nidaamiyaha ama nidaamka xisaabaadku sheegayo.
>
> 32(4) Kharash bixin walba ee la oggolaaday waa in ay ku lifaaqan yihiin dhammaan dukumiintiyada kaabaya sida ku qeexan Xeer-nidaamiyaha Wasiirku soo saaray.

### Hannaanka la isku waafaqsan yahay

Dukumiintiyada caddeymaha way kala duwan yihiin iyadoo ay ku xiran tahay nooca lacag bixinta, waxaana ka mid ah; dalabka iibka, heshiis saxiixan, warqadaha qaansheegashada, alaab-keenidda, guddoonka alaabta, lacag qabashada, iwm.

### Khaladaadka

**A. Kharashaad dhan US $1,924,181.90 oo aan lahayn caddeymo dhammaystiran**

Waxaa baarista lagu ogaaday in Wasaaradda Warfaafinta in ay samaysay kharash bixinno kala duwan iyada oo aan lahayn caddeymo ku filan. Arrinkan ayaa sababay in la xaqiijin waayo sax ahaanshaha lacag bixintan. Faahfaahinta waa sida ku cad labada shax ee hoose:

| TR. | MADAX-XIGE | CIDDA LA SIIYAY | BISHA | LACAGTA US $ | FAAHFAAHIN |
|---|---|---|---|---|---|
| 1. | 2211 | 2020 CA-BPC-015 | Jan - Oct 2020 | 40,000.00 | Ma lahan dalabka iibka, lacag qabasho iyo heshiis saxiixan. |
| 2. | 2211 | 2020 CA-BPC-108 | Jan - Mar 2020 | 20,916.68 | Ma lahan dalabka iibka, lacag qabasho iyo heshiis saxiixan. |
| 3. | 2211 | 2020 CA-BPC-109 | Jan - Sep 2020 | 149,760.00 | Ma lahan dalabka iibka, lacag qabasho iyo heshiis saxiixan. |
| 4. | 2211 | 2020 CA-BPC-110 | Jan - Oct 2020 | 90,000.00 | Ma lahan dalabka iibka, lacag qabasho iyo heshiis saxiixan. |
| 5. | 2211 | 2020 CA-BPC-111 | Apr - Oct 2020 | 18,635.00 | Ma lahan dalabka iibka, lacag qabasho iyo heshiis saxiixan. |
| 6. | 2211 | 2020 CA-BPC-112 | Apr - Oct 2020 | 29,865.92 | Ma lahan dalabka iibka iyo lacag qabasho. |
| **WADAR** | | | | **1,917,841.90** | |

| TR. | MADAX-XIGE | CIDDA LA SIIYAY | BISHA | LACAGTA US $ | FAAHFAAHIN |
|---|---|---|---|---|---|
| 7. | 2212 | 2020 CA-BPC-113 | Jan - May 2020 | 140,800.00 | Ma lahan dalabka iibka, Khaansheegad iyo lacag qabasho. |
| 8. | 2212 | 2020 CA-BPC-114 | Jan - Dec 2020 | 613,200.00 | Ma lahan dalabka iibka iyo lacag qabasho. |
| 9. | 2213 | 2020 CA-BPC-115 | Jan - Oct 2020 | 336,760.0 | Ma lahan dalabka iibka iyo lacag qabasho. |
| 10. | 2214 | 2020 CA-BPC-116 | June 2020 | 19,960.00 | Ma lahan dalabka iibka iyo lacag qabasho. |
| 11. | 2214 | 2020 CA-BPC-117 | Jan - Aug 2020 | 49,720.00 | Ma lahan dalabka iibka iyo lacag qabasho. |
| 12. | 2215 | 2020 CA-BPC-118 | January 2020 | 4,020.0 | Ma lahan dalabka iibka iyo lacag qabasho. |
| 13. | 2215 | 2020 CA-BPC-119 | Feb - Apr 2020 | 8,102.00 | Ma lahan dalabka iibka iyo lacag qabasho. |
| 14. | 2215 | 2020 CA-BPC-118 | May - Aug 2020 | 11,783.90 | Ma lahan dalabka iibka iyo lacag qabasho. |
| 15. | 2222 | 2020 CA-BPC-120 | Jan - Feb 2020 | 3,030.00 | Ma lahan dalabka iibka, lacag qabasho iyo heshiis saxiixan. |
| 16. | 2222 | 2020 CA-BPC-121 | Mar - Aug 2020 | 7,515.00 | Ma lahan dalabka iibka, lacag qabasho iyo heshiis saxiixan. |
| 17. | 2255 | 2020 CA-BPC-121 | Jan - Aug 2020 | 19,800.00 | Ma lahan dalabka iibka, lacag qabasho iyo heshiis saxiixan. |
| 18. | 2256 | 2020 CA-BPC-121 | Jan - Aug 2020 | 166,000.00 | Ma lahan dalabka iibka iyo lacag qabasho. |
| 19. | 2261 | 2020 CA-BPC-121 | Jan - Oct 2020 | 130,000.00 | Ma lahan dalabka iibka iyo lacag qabasho. |
| 20. | 2314 | 2020 CA-BPC-121 | Jun 2020 | 57,973.40 | Ma lahan dalabka iibka iyo lacag qabasho. |
| **WADAR** | | | | **1,917,841.90** | |

**Shaxda 18.1** Kharashaadka aan lahayn caddeymo ku filan

| TR. | MADAX-XIGE | CIDDA LA SIIYAY | BISHA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1. | 2216 | 2020 CA-BPC-122 | Mar | 6,340.00 |
| **WADAR** | | | | **6,340.00** |

**Shaxda 18.2** Kharashaadka safarka ee aan lahayn caddeymo ku filan

## Talo soo jeedin

Waa in dhammaan lacag bixinnada ay ku salaysnaadaan ama lahaadaan caddeymo dhammaystiran, si sax ahna ay u oggolaadaan saraakiisha sare ee mas'uulka ka ah iyo in hawlaha iyo adeegga loo guddoomo iyadoo loo eegayo ama la raacayo shuruudo cayiman.

Waa in dhammaan dukumiintiyadda lacag bixinnada lagu tiimbareeyaa "la bixiyay" isla marka lacagahooda la bixiyo si looga hortago in mar kale loo isticmaalo kharash bixin kale.

## Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Waan aqbalnay taladan waxaana hirgelin doonnaa ka hor xisaabinta soo socota ee howlaha 2021, marka laga hadlaayo kharaashaka safarka maan raacin nidaamka habboon laakin waxaan qaadaneynaa taloyinka wax lagu saxayo.*

## 18.2 Maamulka iibka iyo heshiisyada

### 18.2.1 SHARCIGA

Qodobka 27aad (1) iyo (4) ee Sharci Lr. 22 ee Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka oo soo baxay 2016, ayaa sheegaya sidaan:

> 27(1) Dhammaan Hay'adaha qandaraaska iibka ayaa sameynaya qorshaha qandaraaska Iibka ee sannadlaha, ee looga gol leeyahay si lagu gaaro in qiimaha ugu badan ee kharashka guud iyo waxyaabaha kale ee sharcigan. Qorshaha qandaraaska iibsiga wuxuu taageerayaa barnaamijka iyo miisaaniyadda ay ansixisay hay'adda qandaraaska iibka.
>
> 27(4) Qorshaha qandaraaska iibka waxaa la diyaarinayaa sannad walba iyadoo lagu saleynayo miisaaniyadda sannadka Xukuumadda, iyado la xisaabinayo miiisaaniyad sannadeedka Xukuumadda.

### Khaladka

**A. Maqnaanshaha diyaarinta qorshaha iibka sannadka**

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in Wasaaradda Warfaafintu aysan lahayn qorshe sannadle ah ee iibka sannad maaliyadeedka dhammaaday 31da Diseembar 2020 kaas oo ku salaysan miisaaniyadda qaranka.

### Talo soo jeedin

Waa in Wasaaraddu yeelataa qorshe sannadle ah oo ku aaddan iibka kaas oo ku saleysan miisaaniyadda la ansixiyay ee hay'adda.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Waan aqbalnay taladaan waxaana samayn doonaa qorshe sanadeed ku salaysan Miisaaniyadda qaranka.*

### 18.2.2 SHARCIGA

Sharci Lr. 17 ee Maareynta Maaliyadda Guud ee Dowladda oo soo baxay 25 Diseembar 2019, Qodobka 38aad (5) wuxuu dhigayaa dhammaan heshiisyada deeqaha hay'adaha dowladda, Maamul Goboleedyada iyo hay'adaha ganacsiga ee dowladda waa in laga diiwaan geliyaa Xafiiska Hantidhawrka Guud.

Intaa waxaa dheer, Qodobka 11aad (c) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee 2019 wuxuu awood u siinayaa Hantidhawrka Guud inuu diiwaangeliyo qandaraasyada iyo heshiisyada ay galaan hay'adaha dowladda. Qodobka 14aad (wax-ka-beddelka Qodobka 84aad) ee Sharciga Iibka Qaranka 2020 wuxuu sheegayaa in dhammaan hay'adaha dawliga ah ay qandaraasyada iyo heshiisyada ka diiwaan-galiyaan XHGQ.

### Khaladka

**A. Heshiisyo aan laga soo diiwaangalin XHGQ**

Waxaa baarista lagu ogaaday in heshiisyo qiimahoodu gaarayaan **US $744,742.60** oo aan laga soo diiwaangalin XHGQ. Xafiiska Hantidhawrka Guud waqtigii lagu guda jiray baarista sannadlaha waxaa laga yaabaa in uusan caddeyn karin waxyaabaha heshiisyada ku xusan ee la xiriira wixii hanti ah maadaama aan laga soo diiwaangalinXafiiska.

Xafiiska Hantidhawrka Guud ma sheegi karo in la fuliyay qodobbada heshiiska lagu galay, sidoo kalana in heshiisyadaas ay ku jiraan danaha Dowladda Federaalka Soomaaliya. Faahfaahinta ayaa ku cad halkan hoose:

| TR. | QANDARAASLAHA | UJEEDDADA | MUDDADA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1. | 2020 CA-BPC-120 | Adeeg guud | 3 bilood | 20,916.60 |
| 2. | 2020 CA-BPC-121 | Adeeg gaar ah | 7 bilood | 166,000.00 |
| 3. | 2020 CA-BPC-015 | Adeeg internet | 12 bilood | 48,000.00 |
| 4. | 2020 CA-BPC-125 | Saliid | 10 bilood | 336,760.00 |
| 5. | 2020 CA-BPC-109 | Adeeg guud | J10 bilood | 83,200.00 |
| 6. | 2020 CA-BPC-126 | Kharashaad kale | 10 bilood | 60,000.00 |
| 7. | 2020 CA-BPC-119 | Adeeg guud | 6 bilood | 29,865.90 |
| **WADAR** | | | | **744,742.60** |

**Shaxda 18.3** Heshiisyada aan laga soo diiwaangelin XHGQ

### Talo soo jeedin

Waa in dhammaan qandaraasyada iyo heshiisyada laga diiwaangaliyaa Xafiiska Hantidhawraha Guud si waafaqsan shuruucda iyo xeerarka.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Waan aqbalnay soo jeedinta oo marka laga reebo heshiiska satellite-ka oo aan horey ugu diwaan galinnay xafiiska hantidhworka guud, waxaana fareynaa masuuliyiinta ka shaqeeya waaxda maamulka iyo maaliyadda ee wasaaradda iney iska diiwaan-galiyaan xafiiska hantidhowrka diiwaangelinta qandaraasyada harsan ee aan diiwaan gashaneeyn.*

### 18.2.3 SHARCIGA

Sharci Lr. 22 ee Sharciga Iibka Qaranka oo soo baxay 9 Agoosto 2016, Qodobkiisa 14aad ayaa waxa uu farayaa in qandaraasyada iyo heshiisyada caalamiga ah lagu qoro luuqadaha kala ah Ingiriis iyo Carabi halka kuwa gudaha/maxalliga ahna lagu qoro Af-Soomaali.

### Khaladka

**A. Heshiisyada gudaha oo aan lagu qorin luuqadda Soomaaliga**

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in Wasaaradda warfaafinta, dhaqanka iyo dalxiisaka ay heshiisyada gudaha/maxalliga ah ku qoraan luuqadda Ingiriiska taas oo lid ku ah sharciga.

### Talo soo jeedin

Waa in maamulka hay'addu uu heshiisyada gudaha/maxalliga ah ku qoraa luuqadda Soomaaliga si waafaqsan sharciga. Sidoo kale, waxaa ay diyaarin karaan mid ku qoran luuqadda Ingiriisiga haddii ay u baahan yihiin dhinaca kale ee qandaraaslaha.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Waan aqbalnay taladan waxaana wasaaradda ku qori doontaa heshiisyada maxaliga ah afka soomaaliga ah si loo waafajiyo qordobka 14aad ee xeerka qandaraasyada qaranka iyo talooyinka XHGQ.*

## 18.3 Maamulka hantida

### 18.3.1 SHARCIGA

Qodobka 11aad (1) (j) ee Sharciga Maamulka Maaraynta Maaliyadda Guud ee 2019 ayaa dhigaya in Xafiiska Hantidhawrka Guud uu mas'uul ka yahay diiwaangelinta dhammaan sharciyada

iyo heshiisyada, diiwaangalinta waarannada (F16), hantida guurtada iyo maguurtadda, kala wareejinta miisaaniyadda, deeqaha, iyo dhacdo dhaqaale kasta oo kale sida ku cad sharcigan.

### Hannaanka la isku waafaqsan yahay

Waxaa jirta siyaasad, hagayaal iyo habraac loo ansixiyay in lagu maamulo hantida (guurto iyo ma-guurto) ee dhammaan hay'adaha kala duwan ee dowladda. Siyaasadda hantidu waa in ay ka kooban tahay xaaladda, isticmaalka, waxqabadka iyo dhaqan-ka-baxa.

Waxaa jira diiwaan guud oo lagu keydiyo hantida dowladda oo ay hayaan hay'adaha kala duwan. Diiwaanka waa in lagu sheego hanti waliba lamberka u gaarka ah, meesha lagu isticmaalo, xaaladda muuqaal ahaaneed IWM.

### Khaladaadka

**A. Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka hantida**

Waxaa baarista lagu ogaaday in Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska in aysan lahayn habraacyada iyo siyaasadda lagu maamulo lagu lana socdo hantida.

**B. Diiwaanka hantida oo aan joogto loo cusboonaysiin**

Maamulka hay'adda ayaa ku guul dareystay in ay cusboonaysiiyaan diiwaanka hantida kaas oo ka kooban macluumaadka, lambarka aqoonsiga, qiimaha lagu iibiyay xaaladda hantida IWM.

Hubinta muuqaal ahaaneed ee hantida ayaa lagu ogaaday in hantida hay'addu aysan wada lahayn lambarka aqoonsiga hantida (tag number) kaas oo ah lambar lagu aqoonsado oo gaar u ah si loo hubiyo loona dabagalo.

Intaas waxaa dheer, sida uu qabo Sharciga Maareynta Maaliyadda Dowladda Hantida lagama soo diiwaangalin XHGQ.

### Talo soo jeedin

Waa in la hirgaliyaa lana meel mariyaa tilmaamaha iyo siyaasadda dhammaystiran ee maamulka, hubinta iyo ka warbixnta hantida.

Waa in maamulka hay'addu ay diyaariyaan diiwaan dhammaystiran ee hantida oo leh tilmaamo cad si loo xaqiijiyo in dhammaan hantida hay'adda lagu diiwaan galiyo diiwaanka, sidoo kalana loo cusboonaysiiyaa xilliyo go'an ama cayiman.

Waa in hay'adda la baaray iyo Wasaaradda Maaliyadda ay hantida hay'adda ku sameeyaan tirakoob waqtiyaysan isla markaana ay cusboonaysiiyaan diiwaanka hantida.

Waa in maamulka hay'adda ay hantida ka soo diiwangeliyaan Xafiiska Hnatidhawrka Guud si waafaqsan Sharciga Maareynta Maaliyadda.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Waa run in diiwaanka diiwaangelinta hantida aan la cusbooneysiin, waxaana taas sabab u ahaa dayactirka wasaaradda in xafiisyo kala duwan loo raro.*

## 18.4 Dabagalka baarista

### 18.4.1 KHALADAADKA WARBIXIN BAARISEEDKII 2019

Ma jiro dabagal khaladaadka maadaama sannadkan uu yahay sannadkii ugu horeeyay ee lagu sameeyo Baarista u Hoggaansanaanta Sharciga ee Wasaaradda Warfaafinta.

# 19. Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka

## 19.1 Maamulka iibka iyo heshiisyada

### 19.1.1 SHARCIGA

Qodobka 27aad (1) iyo (4) ee Sharci Lr. 22 ee Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka oo soo baxay 2016, ayaa sheegaya sidaan:

> 27(1) Dhammaan Hay'adaha qandaraaska iibka ayaa sameynaya qorshaha qandaraaska Iibka ee sannadlaha, ee looga gol leeyahay si lagu gaaro in qiimaha ugu badan ee kharashka guud iyo waxyaabaha kale ee sharcigan. Qorshaha qandaraaska iibsiga wuxuu taageerayaa barnaamijka iyo miisaaniyadda ay ansixisay hay'adda qandaraaska iibka.
>
> 27(4) Qorshaha qandaraaska iibka waxaa la diyaarinayaa sannad walba iyadoo lagu saleynayo miisaaniyadda sannadka Xukuumadda, iyado la xisaabinayo miiisaaniyad sannadeedka Xukuumadda.

### Khaladka

**A. Maqnaanshaha diyaarinta qorshaha iibka sannadka**

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in Hay'adda Isgaarsiinta Qaranku aysan lahayn qorshe sannadle ah ee iibka sannad maaliyadeedka dhammaaday 31da Diseembar 2020 kaas oo ku salaysan miisaaniyadda qaranka.

### Talo soo jeedin

Waa in Hay'adda Isgaarsiinta Qaranku yeelataa qorshe sannadle ah oo ku aaddan iibka kaas oo ku saleysan miisaaniyadda la ansixiyay ee hay'adda.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Waxaan garowsanahay ahmiyadda ay leedahay diyaarinta qroshaha wax-iibsiga sannadlaha ah si waafaqsan xeerka qandaraasyada qaranka, waxaana fulin doonaa soo-jeedinta.*

### 19.1.2 SHARCIGA

Sharci Lr. 17 ee Maareynta Maaliyadda Guud ee Dowladda oo soo baxay 25 Diseembar 2019, Qodobka 38aad (5) wuxuu dhigayaa dhammaan heshiisyada deeqaha hay'adaha dowladda, Maamul Goboleedyada iyo hay'adaha ganacsiga ee dowladda waa in laga diiwaan geliyaa Xafiiska Hantidhawrka Guud.

Intaa waxaa dheer, Qodobka 11aad (c) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee 2019 wuxuu awood u siinayaa Hantidhawrka Guud inuu diiwaangeliyo qandaraasyada iyo heshiisyada ay galaan hay'adaha dowladda. Qodobka 14aad (wax-ka-beddelka Qodobka 84aad) ee Sharciga Iibka Qaranka 2020 wuxuu sheegayaa in dhammaan hay'adaha dawliga ah ay qandaraasyada iyo heshiisyada ka diiwaan-galiyaan XHGQ.

### Khaladka

**A. Heshiisyo aan laga soo diiwaangalin XHGQ**

Waxaa baarista lagu ogaaday in heshiisyo qiimahoodu gaarayaan **US $115,330.00** aan laga soo diiwaangalin XHGQ. Xafiiska Hantidhawrka Guud waqtigii lagu guda jiray baarista sannadlaha waxaa laga yaabaa in uusan caddeyn karin waxyaabaha heshiisyada ku xusan ee la xiriira

wixii hanti ah maadaama aan laga soo diiwaangalin Xafiiska. Xafiiska Hantidhawrka Guud ma sheegi karo in la fuliyay qodobbada heshiiska lagu galay, sidoo kalana in heshiisyadaas ay ku jiraan danaha Dowladda Federaalka Soomaaliya. Faahfaahinta heshiisyadan ayaa ah sida tan:

| TR. | QANDARAASLAHA | UJEEDDADA | MUDDADA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1. | 2020 CA-BPC-127 | Adeeg | 9 bilood | 28,330.00 |
| 2. | 2020 CA-BPC-128 | Shidaal iyo saliid | 9 bilood | 15,000.00 |
| 3. | 2020 CA-BPC-129 | Kiro | 12 bilood | 48,000.00 |
| 4. | 2020 CA-BPC-129 | Kiro | 12 bilood | 24,000.00 |
| **WADAR** | | | | **115,330.00** |

**Shaxda 19.1** Heshiisyada aan laga soo diiwaangelin XHGQ

### Talo soo jeedin

Waa in dhammaan qandaraasyada iyo heshiisyada laga diiwaangaliyaa Xafiiska Hantidhawraha Guud si waafaqsan shuruucda iyo xeerarka.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka ayaa dhamaan qandaraasyadii ay la gashay shirkadaha u gudbisay Xafiiska Xisaabiyaha Guud oo qayb ka ah dhameystirka hannaanka wax iibsiga. Waxaa kale oo ay hay'addu codsatay in qandaraasyada kor ku xusan la diiwaangeliyo laakiin waxaa nalagu soo wargaliyay in waqtigii diiwaangelintu dhamaaday.*

#### 19.1.3 SHARCIGA

Sharci Lr. 22 ee Sharciga Iibka Qaranka oo soo baxay 9 Agoosto 2016, Qodobkiisa 14$^{aad}$ ayaa waxa uu farayaa in qandaraasyada iyo heshiisyada caalamiga ah lagu qoro luuqadaha kala ah Ingiriis iyo Carabi halka kuwa gudaha/maxalliga ahna lagu qoro Af-Soomaali.

### Khaladka

**A. Heshiisyada gudaha oo aan lagu qorin luuqadda Soomaaliga**

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka ay heshiisyada gudaha/maxalliga ah ku qoraan luuqadda Ingiriiska taas oo lid ku ah sharciga.

### Talo soo jeedin

Waa in maamulka hay'addu uu heshiisyada gudaha/maxalliga ah ku qoraa luuqadda Soomaaliga si waafaqsan sharciga. Sidoo kale, waxaa ay diyaarin karaan mid ku qoran luuqadda Ingiriisiga haddii ay u baahan yihiin dhinaca kale ee qandaraaslaha.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Waxaan ku guda jirnaa diyaarinta dhamaan qandaraasyada iyo heshiisyada in lagu qoro afka soomaaliga, waxaan hergelin doonaa taldan kadib marka loo soo afjaro baarista u hoggaansanaanta sharciga.*

## 19.2 Maamulka hantida

#### 19.2.1 SHARCIGA

Qodobka 11$^{aad}$ (1) (j) ee Sharciga Maamulka Maaraynta Maaliyadda Guud ee 2019 ayaa dhigaya in Xafiiska Hantidhawrka Guud uu mas'uul ka yahay diiwaangelinta dhammaan sharciyada iyo heshiisyada, diiwaangalinta waarannada (F16), hantida guurtada iyo maguurtadda, kala wareejinta miisaaniyadda, deeqaha, iyo dhacdo dhaqaale kasta oo kale sida ku cad sharcigan.

### Hannaanka la isku waafaqsan yahay
Waxaa jirta siyaasad, hagayaal iyo habraac loo ansixiyay in lagu maamulo hantida (guurto iyo ma-guurto) ee dhammaan hay'adaha kala duwan ee dowladda. Siyaasadda hantidu waa in ay ka kooban tahay xaaladda, isticmaalka, waxqabadka iyo dhaqan-ka-baxa.

Waxaa jira diiwaan guud oo lagu keydiyo hantida dowladda oo ay hayaan hay'adaha kala duwan. Diiwaanka waa in lagu sheego hanti waliba lamberka u gaarka ah, meesha lagu isticmaalo, xaaladda muuqaal ahaaneed IWM.

### Khaladka
A. **Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka hantida**

Waxaa baarista lagu ogaaday in Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka in aysan lahayn habraacyada iyo siyaasadda lagu maamulo lagu lana socdo hantida.

### Talo soo jeedin
Waa in la hirgaliyaa lana meel mariyaa tilmaamaha iyo siyaasadda dhammaystiran ee maamulka, hubinta iyo ka warbixnta hantida.

Waa in Wasaaradda Maaliyadda ay hoggaamiso hawlaha lagu abuurayo siyaasad iyo hagayaal la xiriira hannaanka maamulka hantida Dowladda si ay u dhaqan galiyaan dhammaan hay'adaha Dowladda oo ay ka mid tahay Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka.

Waa in maamulka hay'adda ay hantida ka soo diiwangeliyaan Xafiiska Hnatidhawrka Guud si waafaqsan Sharciga Maareynta Maaliyadda.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray
*Hay'adda Isgaarsiinta Qaranku waxay leedahay siyaasad gudaha ah oo loo adeegsado diiwaangelinta dhamaan hantida guurtada iyo ma-guurtada ah ee ay soo iibsatay hay'addu oo mid kasta oo ka mid ah hantidaas waxaa la siiyaa lambar summad u gaar ah. Dhamaan hantida ma-guuryada ah ee ay soo iibsato hay'addu waxay ku diiwaangashan yihiin foomka meelaynta hantida si waafaqsan hab-raaca ay hay'addu dejisay. Intaas waxaa sii dheer dhamaan hantida maamulka ayaa sidoo kale la baaraa lixdii (6) bilood kasta mar natiijada baaritaanka waxaa lala wadaagayaa xafiiska diiwaangelinta ee wasaaradda maaliyadda.*

### Jawabta XHGQ
Jawaabta hay'adda la baaray ay bixisay ma khusayso khaladka lagu tilmaamay Warqadda Maamulka.

## 19.3 Dabagalka baarista

#### 19.3.1 KHALADAADKA WARBIXIN BAARISEEDKII 2019
Ma jiro dabagal khaladaadka maadaama sannadkan uu yahay sannadkii ugu horeeyay ee lagu sameeyo Baarista u Hoggaansanaanta Sharciga ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka.

# 20. Wasaaradda Howlaha Guud, Dib-u-dhiska iyo Guryeynta

## 20.1 Hubinta kharash bixinta

### 20.1.1 SHARCIGA

Sida ay qabaan Qodobbada 31aad (1) iyo 32aad (4) ee Sharci Lr. 17 ee Maaraynta Maaliyadda Guud ee soo baxay 25 Diseembar 2019:

> 31(1) Wax kharash ah lagama bixin karo Miisaaniyadda qaranka, haddii aysan jiirin, qaansheegto ama caddeyn kale oo dheeraad ah oo looga baahan yahay sida ku xusan xeer-nidaamiyaha ama nidaamka xisaabaadku sheegayo.
>
> 32(4) Kharash bixin walba ee la oggolaaday waa in ay ku lifaaqan yihiin dhammaan dukumiintiyada kaabaya sida ku qeexan Xeer-nidaamiyaha Wasiirku soo saaray.

### Hannaanka la isku waafaqsan yahay

Dukumiintiyada caddeymaha way kala duwan yihiin iyadoo ay ku xiran tahay nooca lacag bixinta, waxaana ka mid ah; dalabka iibka, heshiis saxiixan, warqadaha qaansheegashada, alaab-keenidda, guddoonka alaabta, lacag qabashada, iwm.

### Khaladka

**A. Kharashaad dhan US $2,780.00 oo aan lahayn caddeymo dhammaystiran**

Intii lagu guda jiray baaritaanka waxaa lagu ogaaday Wasaarada Howlaha Guud in ay samaysay lacag bixinno kala duwan oo dhan **US $2,780.00** kuwaas oo aan wadan cadeymo ku filan sidaas darteedna aysan suurogal noo noqon inaan xaqiijinno dhab ahaanshiyaha lacagahaas. Faahfaahinta waxaa lagu muujiyay shaxda hoose:

| TR. | MADAX-XIGE | CIDDA LA SIIYAY | BISHA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1. | 2216 | 2020 CA-BPC-168 | Sep 2020 | 1,400.00 |
| 2. | 2216 | 2020 CA-BPC-168 | Dec 2020 | 1,380.00 |
| **WADAR** | | | | **2,780.00** |

**Shaxda 20.1** Kharashaadka aan lahayn caddeymo ku filan

### Talo soo jeedin

Waa in dhammaan lacag bixinnada ay ku salaysnaadaan ama lahaadaan caddeymo dhammaystiran, si sax ahna ay u oggolaadaan saraakiisha sare ee mas'uulka ka ah iyo in hawlaha loo guddoomo iyadoo loo eegayo ama la raacayo shuruudo cayiman.

Waa in dhammaan dukumiintiyadda lacag bixinnada lagu tiimbareeyaa "la bixiyay" isla marka lacagahooda la bixiyo si looga hortago in mar kale loo isticmaalo kharash bixin kale.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Waxaan ku raacsanahay XHGQ in dhaafiyada aan la lagu xerin ka dib safarro ay sameeyeen maritida wasiirrada laakin waxaan hubin doonnaa in arrintan la xalliyo safarada mustaqbalka.*

## 20.2 Maamulka iibka iyo heshiisyada

### 20.2.1 SHARCIGA

Qodobka 27aad (1) iyo (4) ee Sharci Lr. 22 ee Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka oo soo baxay 2016, ayaa sheegaya sidaan:

> 27(1) Dhammaan Hay'adaha qandaraaska iibka ayaa sameynaya qorshaha qandaraaska Iibka ee sannadlaha, ee looga gol leeyahay si lagu gaaro in qiimaha ugu badan ee kharashka guud iyo waxyaabaha kale ee sharcigan. Qorshaha qandaraaska iibsiga wuxuu taageerayaa barnaamijka iyo miisaaniyadda ay ansixisay hay'adda qandaraaska iibka.
>
> 27(4) Qorshaha qandaraaska iibka waxaa la diyaarinayaa sannad walba iyadoo lagu saleynayo miisaaniyadda sannadka Xukuumadda, iyado la xisaabinayo miiisaaniyad sannadeedka Xukuumadda.

### Khaladka

**A. Maqnaanshaha diyaarinta qorshaha iibka sannadka**

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in Wasaaradda Hawlaha Guud aysan lahayn qorshe sannadle ah ee iibka sannad maaliyadeedka dhammaaday 31da Diseembar 2020 kaas oo ku salaysan miisaaniyadda qaranka.

### Talo soo jeedin

Waa in Wasaaraddu yeelataa qorshe sannadle ah oo ku aaddan iibka kaas oo ku saleysan miisaaniyadda la ansixiyay ee hay'adda.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Maadaama aysan jirin miisaaniyad la isku hallayn karo, taasi waa mid bil walba la qaadan karo ama sida ku cad Miisaaniyadda qaranka laakin taa baddelkeeda waxaan helnaa qiyaastii 6 bilood oo kaliya miisaaniyadda 12-ka bilood ee wasaaradda loo ansixiyay. Sidaas darteed, ma jirin qorshe iibsi sannadeed oo ay hay'addu diyaarisay ki saktaba ha ahaatee waxaan hergelin doonaa qorshe iibsi hay'adda sannadle ah oo loogu talagalay hantidhowrka mustaqbalka.*

### 20.2.2 SHARCIGA

Sharci Lr. 17 ee Maareynta Maaliyadda Guud ee Dowladda oo soo baxay 25 Diseembar 2019, Qodobka 38aad (5) wuxuu dhigayaa dhammaan heshiisyada deeqaha hay'adaha dowladda, Maamul Goboleedyada iyo hay'adaha ganacsiga ee dowladda waa in laga diiwaan geliyaa Xafiiska Hantidhawrka Guud.

Intaa waxaa dheer, Qodobka 11aad (c) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee 2019 wuxuu awood u siinayaa Hantidhawrka Guud inuu diiwaangeliyo qandaraasyada iyo heshiisyada ay galaan hay'adaha dowladda. Qodobka 14aad (wax-ka-beddelka Qodobka 84aad) ee Sharciga Iibka Qaranka 2020 wuxuu sheegayaa in dhammaan hay'adaha dawliga ah ay qandaraasyada iyo heshiisyada ka diiwaan-galiyaan XHGQ.

### Khaladka

**A. Heshiisyo aan laga soo diiwaangalin XHGQ**

Waxaa baarista lagu ogaaday in heshiisyo qiimahoodu gaarayaan **US $948,925.00** aan laga soo diiwaangalin XHGQ. Xafiiska Hantidhawrka Guud waqtigii lagu guda jiray baarista sannad-

laha waxaa laga yaabaa in uusan caddeyn karin waxyaabaha heshiisyada ku xusan ee la xiriira wixii hanti ah maadaama aan laga soo diiwaangalin Xafiiska.

Xafiiska Hantidhawrka Guud ma sheegi karo in la fuliyay qodobbada heshiiska lagu galay, si-doo kalana in heshiisyadaas ay ku jiraan danaha Dowladda Federaalka Soomaaliya.

| TR. | QANDARAASLAHA | UJEEDDADA | MUDDADA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1. | 2020 CA-BPC-199 | Adeeg | 10 bilood | 20,000.00 |
| 2. | 2020 CA-BPC-200 | Alaab | 10 bilood | 25,000.00 |
| 3. | 2020 CA-BPC-176 | Alaab | 10 bilood | 10,000.00 |
| 4. | 2020 CA-BPC-201 | Alaab | 10 bilood | 25,000.00 |
| 5. | 2020 CA-BPC-202 | Alaab | 1 mar | 17,040.00 |
| 6. | 2020 CA-BPC-201 | Alaab | 1 mar | 25,685.00 |
| 7. | 2020 CA-BPC-202 | Adeeg kiro xafiis | 1 sano | 61,860.00 |
| 8. | Consultant | Adeeg | 2 sano | 276,000.00 |
| 9. | Consultant | Adeeg | 4 bilood | 24,460.00 |
| 10. | Consultant | Adeeg | 1 sano | 140,000.00 |
| 11. | Consultant | Adeeg | 1 sano | 142,000.00 |
| 12. | Consultant | Adeeg | 1 sano | 140,000.00 |
| 13. | Consultant | Adeeg | 1 sano | 41,880.00 |
| **WADAR** | | | | **948,925.00** |

**Shaxda 20.2** Heshiisyada aan laga soo diiwaangelin XHGQ

### Talo soo jeedin
Waa in dhammaan heshiisyada iyo qandaraasyada laga soo diiwaan galiyaa Xafiiska Hantidhawrka Guud si waafaqsan shuruucda iyo xeerarka.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray
*Sida lagu sheegay warqadda XHGQ tix XHGQ/HG098/2021, kuna taariikheysneed 14/06/2021 oo ahayd in wasaaradda lagu wargeliyay inay jirto shuruud sharci ah oo lagu diiwaangeliyo qandaraasyada/heshiisyada XHGQ; waxaana raacsanahay in XHGQ inaanan diiwaangelin qandaraasyada inta lagu guda jiray 2020. Si kastaba ha haatee, waa markii ugu horreysay ee aan warqad noocaas ah helno XHGQ waxaanna qireynaa inaan mustaqbalka diiwaangelin doono qandaraasyada/heshiisyada. Waxaa kale oo ku lifaaqan dhammaan heshiisyada 2021-ka kuwaas oo aan jeclaan lahayn inaan codsanno in is-diiwaangelinno.*

### Jawaabta XHGQ
Wasaaraddu waxa la xasuusinayaa dhammaan qandaraasyada iyo heshiisyada marka ay galaan in ay ka diiwaan-geliso Xafiiska Hantidhawrka Guud. Soo gudbinta daahda lama ogola.

### 20.2.3 SHARCIGA

Sharci Lr. 22 ee Sharciga Iibka Qaranka oo soo baxay 9 Agoosto 2016, Qodobkiisa 14aad ayaa waxa uu farayaa in qandaraasyada iyo heshiisyada caalamiga ah lagu qoro luuqadaha kala ah

Ingiriis iyo Carabi halka kuwa gudaha/maxalliga ahna lagu qoro Af-Soomaali.

### Khaladka

**A. Heshiisyada gudaha  oo aan lagu qorin luuqadda Soomaaliga**

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in Wasaradda Hawlaha Guud ay heshiisyada gudaha/maxalliga ah ku qoran luuqadda Ingiriiska taas oo lid ku ah sharciga.

### Talo soo jeedin

Waa in maamulka hay'addu uu heshiisyada gudaha/maxalliga ah ku qoraa luuqadda Soomaaliga si waafaqsan sharciga. Sidoo kale, waxaa ay diyaarin karaan mid ku qoran luuqadda Ingiriisiga haddii ay u baahan yihiin dhinaca kale ee qandaraaslaha.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Wasaaradda Howlaha Guud waxey ku howlan tahay iney ku qorto dhammaan qandaraasyada maxalliga ah luuqadda maxalliga.*

## 20.3 Maamulka hantida

### 20.3.1 SHARCIGA

Qodobka 11aad (1) (j) ee Sharciga Maamulka Maaraynta Maaliyadda Guud ee 2019 ayaa dhigaya in Xafiiska Hantidhawrka Guud uu mas'uul ka yahay diiwaangelinta dhammaan sharciyada iyo heshiisyada, diiwaangalinta waarannada (F16), hantida guurtada iyo maguurtadda, kala wareejinta miisaaniyadda, deeqaha, iyo dhacdo dhaqaale kasta oo kale sida ku cad sharcigan.

### Hannaanka la isku waafaqsan yahay

Waxaa jirta siyaasad, hagayaal iyo habraac loo ansixiyay in lagu maamulo hantida (guurto iyo ma-guurto) ee dhammaan hay'adaha kala duwan ee dowladda. Siyaasadda hantidu waa in ay ka kooban tahay xaaladda, isticmaalka, waxqabadka iyo dhaqan-ka-baxa.

Waxaa jira diiwaan guud oo lagu keydiyo hantida dowladda oo ay hayaan hay'adaha kala duwan. Diiwaanka waa in lagu sheego hanti waliba lamberka u gaarka ah, meesha lagu isticmaalo, xaaladda muuqaal ahaaneed IWM.

### Khaladka

**A. Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka hantida**

Waxaa baarista lagu ogaaday in Wasaaradda Howlaha Guud in aysan lahayn habraacyada iyo siyaasadda lagu maamulo lagu lana socdo hantida.

**B. Gaadiidka oo aan ku diiwaan-gashanayn magaca hay'adda**

Mudadii ay socotay baarista hantidhowrka waxaa la ogaaday in 7 gaari oo ay laheed Wasaaradda Howlaha Guud kuwaas oo aan lagu diiwaangalinmagaca Wasaaradda sidoo kalena ma aysan nala wadaagin buugga lahaanshiyaha gaadiidka. Waxaa muuqaal ahaan loo xaqiijiyay labo (2) gaari halka aan muuqaal ahaan loo xaqiijin 5 gaari. Faahfaahin gaadiidka ayaa lagu muujiyay shaxda hoose.

| TR. | NOOCA GAARIGA | CIDDA BIXISAY | CAQAAYAD LR. | FAAHFAAHIN |
|---|---|---|---|---|
| 1. | Toyota Hilux Double Cabin | GIZ | Ma arkin | Muuqaal ahaan looma xaqiijin mana ku diiwan gashana magaca wasaaradda |
| 2. | Toyota Hilux Double Cabin | GIZ | AHTKK8CO700670805 | Kuma diiwan gashana magaca wasaaradda |

| TR. | NOOCA GAARIGA | CIDDA BIXISAY | CAQAAYAD LR. | FAAHFAAHIN |
|---|---|---|---|---|
| 3. | Toyota Hilux Double Cabin | GIZ | AHTKK8CD900676806 | Kuma diiwan gashana magaca wasaaradda |
| 4. | Toyota Hilux Double Cabin | GIZ | Ma arkin | Muuqaal ahaan looma xaqiijin mana ku diiwan gashana magaca wasaaradda |
| 5. | Toyota Hilux Double Cabin | GIZ | Ma arkin | Muuqaal ahaan looma xaqiijin mana ku diiwan gashana magaca wasaaradda |
| 6. | Toyota Hilux Double Cabin | GIZ | Ma arkin | Muuqaal ahaan looma xaqiijin mana ku diiwan gashana magaca wasaaradda |
| 7. | Toyota Hilux Double Cabin | GIZ | Ma arkin | Muuqaal ahaan looma xaqiijin mana ku diiwan gashana magaca wasaaradda |

**Shaxda 20.3** Gaadiidka hay'adda la baaray

## Talo soo jeedin

Waa in la hirgaliyaa lana meel mariyaa tilmaamaha iyo siyaasadda dhammaystiran ee maamulka, hubinta iyo ka warbixnta hantida.

Waa in Wasaaradda Hawlaha Guud ay diyaariyaa diiwaan dhammaystiran ee hantida oo leh tilmaamo cad si loo xaqiijiyo in dhammaan hantida hay'adda lagu diiwaan galiyo diiwaanka, sidoo kalana loo cusboonaysiiyaa xilliyo go'an ama cayiman. Sidoo kale, Wasaaraddu waxay mas'uul ka tahay samaynta dukumentiyada lahaanshaha hantida.

Waa in hay'adda la baaray iyo Wasaaradda Maaliyadda ay hantida hay'adda ku sameeyaan tirakoob waqtiyaysan isla markaana ay cusboonaysiiyaan diiwaanka hantida.

Waa in maamulka hay'adda ay hantida ka soo diiwangeliyaan Xafiiska Hnatidhawrka Guud si waafaqsan Sharciga Maareynta Maaliyadda.

Waa in dhammaan gaadiidka hay'adda ay lahaadaan buugaagta lahaanshiyaha gaadiidka oo ku diiwaan gashan magaca hay'adda, uuna sarkaalka sare ee mas'uulka ka ah u keydiyo si xafidan.

Waa in dhammaan gaadiidka lagu diiwaan galiyaa diiwaanka hantida oo faahfaahin dheeraad ah leh sida nooca baabuurka, magaca baabuurka, lambarka diiwaan galinta, lambarka caqaayadda (chassis lr.), goobta uu gaariga ku sugan yahay, qiimaha, iyo sarkaalka mas'uulka ka ah.

Waa in la samayaa lana meelmariyaa tilmaamaha siyaasadeed iyo habraacyada khaaska u ah maamulka gaadiidka.

## Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Maadaama ay Wasaaradda Maaliyaddu u xilsaaran tahay diiwaangelinta hantida, waxaannu ka diiwaangelinnay hantideenna (isticmaashay ama dib -u -dhac) Xafiiska Diiwaangelinta Hantida Qaranka ee Wasaaradda Maaliyadda.*

*Wasaaradda ayaa diyaarisay:*

- *Siyaasadda Guryeynta Qaranka*
- *Tilmaamaha Guriyeynta Qaranka*
- *Hannaanka diiwaangelinta Hantida iyo Nidaamka Khariidaynta*

*Dhammaan dukumiintiyadaan kor ku xusan ee la magacaabay waxay diyaar u yihiin in loo gudbiyo Golaha Wasiirada si loo meel mariyo. Waxa kale oo aad halkan ku arki kartaa lifaaqyadooda oo ku qoran afafka Soomaaliga iyo Ingiriiska.*

*Waxaan la wadaagnay XHGQ dhammaan wixii ku saabsan baabuurta hay'adda intaan la hubin, waxaan kaloo la wadaagnay gawaarida hay'adda XHGQ ee ay qaateen mas'uuliyiintii hore ee Wasaaradda iyo baahida loo qabo in loo soo celiyo hay'adda maadaama baabuurtan ay khuseyso ay yihiin hanti dadweyne. Sidoo kale, waxaan ka warqabnaa in XHGQ ay u qabatay 14 cisho in baabuurta lagu soo celiyo gacanta Wasaaradda Hawlaha Guud laakiin waxaan xaqiijinaynaa inaysan jirin wax gaadiid ah oo la soo celiyay. Wasaaraddu waxay ku dhaqmi doontaa talo soo jeedinta XHGQ si loogu diiwaangeliyo baabuurta hay'ad inay tahay hay'ad.*

## 20.4 Isticmaalka nidaamka maaliyadda dalka (SFIMS) ee ku aaddan lacagaha deeqaha dibedda

### 20.4.1 SHARCIGA

Qodobka 38[aad] (1) iyo (2) ee Sharciga Maareynta Miisaaniyadda (Sharci Lr. 17) ee soo baxay 25 Diseembar 2019 ayaa sheegaya sida soo socota:

> 38(1) Dhammaan deeqaha hay'ad Dowladeed ka hesho deeq bixiye ama cid kale waa in lagu daro Miisaaniyadda qaranka.
>
> 38(2) Looma oggola hay'ad Dowladeed iyo mid Shirkad ama Wakaalad Dowladdu leedahay toona in ay galaan heshiis ay ku helayaan deeq, taas oo ay ku jiraan deeqaha aan lacagta ahayn oo ka timid deeq bixiye ama shakhsiyaad gaar ah, iyada oo uu Wasiirku (Waasiirka Maaliyadda) la saxiixin.

Sidoo kale, Qodobka 15[aad] (1) ee Sharciga Maareynta Miisaaniyadda waxa uu leeyahay sida soo socota:

> 15(1) Dhammaan kharashyada hay'adaha Dowladda iyo mashaariicda dibadda laga maalgeliyo waa in lagu oggolaadaa Miisaaniyadda qaranka.

### Khaladka

**A. Lacago deeq ah oo dhan US $7,819,000.00 oo aan lagu darin Miisaaniyadda qaranka sidoo kalena aan la soo marin nidaamka xogta maaliyadda dalka**

Intii ay baaristu socotay waxaa la ogaaday in labo (2) mashaariic kuwaas oo ka soo lid ku ah shuruucda kor ku xusan in ay hirgelisay Wasaaradda Hawlaha Guud kuwaas oo qiimahoodu dhammaan **US $7,819,000.00**. Kharashaadka mashaariicdan ayaan la dhex marin nidaamka xogta maaliyadda dalka.

| TR. | MASHRUUCA | MAALGELIYAHA / DEEQ-BIXIYAHA | MUDDADA | LACAGTA LOO QORSHEEYAY US $ | LACAGTA LA ISTICMAALAY US $ |
|---|---|---|---|---|---|
| 1. | (Somali Strengthening Intuitions for Public Works Project (SSIPWP)) | AFDB/UNOPS | 2017-2020 | 7.800.000.00 | 7.800.000.00 |
| 2. | Somalia National Land/Urban Policy Project | UNHABITAT | 2020-2021 | 63,000.00 | 19,197.00 |
| **WADAR** | | | | **7,863,000.00** | **7,819,197.00** |

**Shaxda 20.4** Deeqaha hay'addu dibadda ka heshay oo aan la marin nidaamka maaliyadda dowladda

#### Talo soo jeedin

Waa in dhammaan deeqaha hay'addu hesho lagu daraa Miisaaniyadda qaranka sidoo kalana la soo mariyaa nidaamka xogta maaliyadeed ee dalka.

Waa in dhammaan heshiiyada hay'adda ay gasho oo la xiriira helitaanka deeq uu qeyb ka saxiixaa Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda si waafaqsan sharciga sidoo kalena laga soo dii-waangaliyaa Xafiiska Hantidhawrka Guud.

Maamulku waa inuu ku wargeliyaa wasaaradda maaliyadda qaddarka aan la isticmaalin ee qiimihiisu yahay **US $43,803.00** si loogu daro miisaaniyadda ku xigta loona soo mariyo ni-daamka dalka.

#### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Mashruuca SSIPWP waxaa si toos ah u hirgeliyey UNOPS isla markaasna waxay ahayd hay'addii fulinaysay, sidaa darteed, Wasaaraddu wax door ah kuma lahayn mid ka mid ah lacag -bixinnadii la bixiyay mana lagu dhex -marsiin Hannaanka maaliyadeed ee dowladda SFMIS -ka. Mashruu-ca kale waxaa la saxiixay sanadkii 2017 – waxuu ku egyahay bisha maarso ee 2021ka iyadoo aan la dhammaystirin mashruuca kharashkii soo haray ayaa dib loogu celiyay deeq -bixiyeha AFDB taasina waxay ahayd heshiiskii ay kala saxiixdeen AFDB iyo Wasaaradda Maaliyadda. Dham-maan mas'uuliyadda mashruucan khuseeya waxay saaran tahay UNOPS.*

*Kharashaadka Mashruuca Siyaasadda Dhulka/Siyaasadda Magaalooyinka Soomaaliyeed wux-uu ahaa $63,000 USD sida ku cad heshiiska lala saxiixday UN-HAHITAT waxaana la helay $ 19,000USD oo kaliya oo lagu kharash gareeyey mushaharka khubarada iyo diyaarinta siyaas-adda iyo tababarada sida:*

- *Siyaasadda Dhulka iyo Siyaasadda Qaranka Soomaaliyeed*
- *Tababar xirfadeed oo shaqaalaha Wasaaradda ah.*

#### Jawaabta XHGQ

Kaalmada dibadda ee AfDB iyo UN-HABITAT waxay ahayd inay ku jiraan miisaaniyadda iyo khasnada dhexe. Maamulka Wasaaraddu waa inay raacaan shuruudaha Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud.

## 20.5 Dabagalka baarista

### 20.5.1 KHALADAADKA WARBIXIN BAARISEEDKII 2019

Ma jiro dabagal khaladaadka maadaama sannadkan uu yahay sannadkii ugu horeeyay ee lagu sameeyo Baarista u Hoggaansanaanta Sharciga ee Wasaaradda Hawlaha Guud.

# 21. Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada

## 21.1 Maamulka iibka iyo heshiisyada

### 21.1.1 SHARCIGA

Qodobka 27[aad] (1) iyo (4) ee Sharci Lr. 22 ee Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka oo soo baxay 2016, ayaa sheegaya sidaan:

> 27(1) Dhammaan Hay'adaha qandaraaska iibka ayaa sameynaya qorshaha qandaraaska Iibka ee sannadlaha, ee looga gol leeyahay si lagu gaaro in qiimaha ugu badan ee kharashka guud iyo waxyaabaha kale ee sharcigan. Qorshaha qandaraaska iibsiga wuxuu taageerayaa barnaamijka iyo miisaaniyadda ay ansixisay hay'adda qandaraaska iibka.
>
> 27(4) Qorshaha qandaraaska iibka waxaa la diyaarinayaa sannad walba iyadoo lagu saleynayo miisaaniyadda sannadka Xukuumadda, iyado la xisaabinayo miiisaaniyad sannadeedka Xukuumadda.

### Khaladka

**A. Maqnaanshaha diyaarinta qorshaha iibka sannadka**

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawadu aysan lahayn qorshe sannadle ah ee iibka sannad maaliyadeedka dhammaaday 31[da] Diseembar 2020 kaas oo ku salaysan miisaaniyadda qaranka.

### Talo soo jeedin

Waa in Wasaaraddu yeelataa qorshe sannadle ah oo ku aaddan iibka kaas oo ku saleysan miisaaniyadda la ansixiyay ee hay'adda.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

Maamulka hay'adda la baaray wax jawaab ah oo qoran kama soo bixin arrintaan.

### 21.1.2 SHARCIGA

Sharci Lr. 22 ee Sharciga Iibka Qaranka oo soo baxay 9 Agoosto 2016, Qodobkiisa 14aad ayaa waxa uu farayaa in qandaraasyada iyo heshiisyada caalamiga ah lagu qoro luuqadaha kala ah Ingiriis iyo Carabi halka kuwa gudaha/maxalliga ahna lagu qoro Af-Soomaali.

### Khaladka

**A. Heshiisyada gudaha oo aan lagu qorin luuqadda Soomaaliga**

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada ay heshiisyada gudaha/maxalliga ah ku qoran luuqadda Ingiriiska (English) taas oo lid ku ah sharciga.

### Talo soo jeedin

Waa in maamulka hay'addu uu heshiisyada gudaha/maxalliga ah ku qoraa luuqadda Soomaaliga si waafaqsan sharciga. Sidoo kale, waxaa ay diyaarin karaan mid ku qoran luuqadda Ingiriisiga haddii ay u baahan yihiin dhinaca kale ee qandaraaslaha.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray
Maamulka hay'adda la baaray wax jawaab ah oo qoran kama soo bixin arrintaan.

## 21.2 Maamulka hantida

### 21.2.1 SHARCIGA

Qodobka 11aad (1) ( j) ee Sharciga Maamulka Maaraynta Maaliyadda Guud ee 2019 ayaa dhigaya in Xafiiska Hantidhawrka Guud uu mas'uul ka yahay diiwaangelinta dhammaan sharciyada iyo heshiisyada, diiwaangalinta waarannada (F16), hantida guurtada iyo maguurtadda, kala wareejinta miisaaniyadda, deeqaha, iyo dhacdo dhaqaale kasta oo kale sida ku cad sharcigan.

### Hannaanka la isku waafaqsan yahay
Waxaa jirta siyaasad, hagayaal iyo habraac loo ansixiyay in lagu maamulo hantida (guurto iyo ma-guurto) ee dhammaan hay'adaha kala duwan ee dowladda. Siyaasadda hantidu waa in ay ka kooban tahay xaaladda, isticmaalka, waxqabadka iyo dhaqan-ka-baxa.

Waxaa jira diiwaan guud oo lagu keydiyo hantida dowladda oo ay hayaan hay'adaha kala duwan. Diiwaanka waa in lagu sheego hanti waliba lamberka u gaarka ah, meesha lagu isticmaalo, xaaladda muuqaal ahaaneed IWM.

### Khaladka

**A. Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka hantida**

Waxaa baarista lagu ogaaday in Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada in aysan lahayn habraacyada iyo siyaasadda lagu maamulo lagu lana socdo hantida.

### Talo soo jeedin
Waa in la hirgaliyaa lana meel mariyaa tilmaamaha iyo siyaasadda dhammaystiran ee maamulka, hubinta iyo ka warbixnta hantida.

Waa in Wasaaradda Maaliyadda ay hoggaamiso hawlaha lagu abuurayo siyaasad iyo hagayaal la xiriira hannaanka maamulka hantida Dowladda si ay u dhaqan galiyaan dhammaan hay'adaha Dowladda oo ay ka mid tahay Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada.

Wasaaradda waa in ay dhammaan hantideeda ka diiwaan-gelisaa XHGQ.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray
*Waxaan hadda ku guda jirnaa dejinta siyaasad lagu maamulayo hantida guurtada iyo ma guurtada ah ee Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada.*

## 21.3 Dabagalka baarista

### 21.3.1 KHALADAADKA WARBIXIN BAARISEEDKII 2019

Shaxdaan hoose waxaa ka muuqda marxaladda khaladaadka baarista sannadkii hore lagu sameeyay hay'adda inta la fuliyay, qayb laga fuliyay ama aan waxba laga fulin.

| TR. | KHALADAADKA | MARXALADDA |
|---|---|---|
| 1. | 28.1.1 Khaladaadka uruurinta iyo adeegsiga dakhliga | Waa la fuliyay |
| 2. | 28.2.1 Lacagbixin aan lahayn caddaymo dhammeystiran - kharashaadka | Waa la fuliyay |
| 3. | 28.2.2 Lacagbixin aan lahayn caddaymo dhammeystiran - kharashaadka safarka | Waa la fuliyay |
| 4. | 28.3.1 Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka hantida | La ma fulin |
| 5. | 28.3.2 Diiwaanka hantida oo aan joogto loo cusboonaysiin | Waa la fuliyay |
| 6. | 28.4.1 Heshiisyo aan laga soo diiwaangalin XHGQ | Waa la fuliyay |
| 7. | 28.4.2 Heshiisyada gudaha aan lagu qorin afka Soomaaliga | La ma fulin |
| 8. | 28.5.1 Ku-guuldarraysiga fulinta howlaha hantidhawrka gudaha | La ma fulin |

**Shaxda 21.1** Khaladaadka baarista sannadkii 2019

### 21.3.2 KHALADAADKA WARBIXIN BAARISEEDKII 2018

| TR. | KHALADAADKA | MARXALADDA |
|---|---|---|
| 1. | 6.2.1 Kharashaadka oo aan wadan caddeymo ku filan | Lama fulin |
| 2. | 6.2.3 Kharasaadka ku baxay safarada dibada la aaday ma lahan caddeymo ku filan | Waa la fuliyay |
| 3. | 6..2.4 Dakhligii Wasaaraddu aruurisay waxaa lagu isticmaalay isla Wasaaradda iyada oo aan lagu shubin Bangiga Dhexe | Lama fulin |
| 4. | 6.3.1 Ma jiraan diiwaanka hantida | Qeyb ayaa la fuliyay |
| 5. | 6.3.2 Ma jiran siyaasad iyo habraac lagu maamulo hantida. Hantida | Lama fulin |
| 6. | 6.4.1 Heshiisyada oo aan laga soo diiwaan-galin XHG | Lama fulin |
| 7. | 5.1 Malahayn baaraha gudaha sidoo kalana baarista gudaha lama samayn | Qeyb ayaa la fuliyay |

**Shaxda 21.2** Khaladaadka baarista sannadkii 2018

# 22. Hay'adda Duulista Rayidka Soomaaliyeed

## 22.1 Hubinta kharash bixinta

### 22.1.1 SHARCIGA

Sida ay qabaan Qodobbada 31aad (1) iyo 32aad (4) ee Sharci Lr. 17 ee Maaraynta Maaliyadda Guud ee soo baxay 25 Diseembar 2019:

> 31(1) Wax kharash ah lagama bixin karo Miisaaniyadda qaranka, haddii aysan jiirin, qaan-sheegto ama caddeyn kale oo dheeraad ah oo looga baahan yahay sida ku xusan xeer-nidaamiyaha ama nidaamka xisaabaadku sheegayo.
>
> 32(4) Kharash bixin walba ee la oggolaaday waa in ay ku lifaaqan yihiin dhammaan dukumi-intiyada kaabaya sida ku qeexan Xeer-nidaamiyaha Wasiirku soo saaray.

### Hannaanka la isku waafaqsan yahay

Dukumiintiyada caddeymaha way kala duwan yihiin iyadoo ay ku xiran tahay nooca lacag bixinta, waxaana ka mid ah; dalabka iibka, heshiis saxiixan, warqadaha qaansheegashada, alaab-keenidda, guddoonka alaabta, lacag qabashada, iwm.

### Khaladaadka

**A. Kharashaad dhan US $35,714.09 oo aan lahayn caddeymo dhammaystiran**

Waxaa baarista lagu ogaaday in la bixiyay lacag dhan **US $35,714.09** iyada oo aan lahayn caddeymo ku filan, kharashaadkan ayaa lagu bixiyay hawlo kala duwan ee Hay'adda Duulista Rayidka Soomaaliyeed taas oo lid ku ah sharciga. Arrinkan ayaa sababay in la xaqiijin waayo sax ahaanshaha lacag bixintan. Faahfaahinta waxaa lagu muujiyay shaxda hoose:

| TR. | MADAX-XIGE | CIDDA LA SIIYAY | BISHA | LACAGTA US $ | FAAHFAAHIN |
|---|---|---|---|---|---|
| 1. | 2313 | 2020 CA-BPC-130 | Mar & Jun | 20,083.34 | Ma lahan dalabka iibka, lacag qabasho, heshiis saxiixan warqada gudoonka alaabada. |
| **WADAR** | | | | **20,083.34** | |

**Shaxda 22.1** Kharashaadka aan lahayn caddeymo ku filan

| TR. | MADAX-XIGE | CIDDA LA SIIYAY | BISHA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1. | 2216 | 2020 CA-BPC-131 | Jan - Mar | 7,000.00 |
| 2. | 2216 | 2020 CA-BPC-132 | Jan - Mar | 4,454.75 |
| 3. | 2216 | Individuals | Jan - Mar | 4,176.00 |
| **WADAR** | | | | **15,630.75** |

**Shaxda 22.2** Kharashaadka safarka ee aan lahayn caddeymo ku filan

### Talo soo jeedin

Waa in dhammaan lacag bixinnada ay ku salaysnaadaan ama lahaadaan caddeymo dhammaystiran, si sax ahna ay u oggolaadaan saraakiisha sare ee mas'uulka ka ah iyo in hawlaha loo guddoomo iyadoo loo eegayo ama la raacayo shuruudo cayiman.

Waa in dhammaan dukumiintiyadda lacag bixinnada lagu tiimbareeyaa "la bixiyay" isla marka lacagahooda la bixiyo si looga hortago in mar kale loo isticmaalo kharash bixin kale.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

Maamulka hay'adda la baaray wax jawaab ah oo qoran kama soo bixin arrintaan.

## 22.2 Maamulka iibka iyo heshiisyada

### 22.2.1 SHARCIGA

Qodobka 31aad (1) (9) ee Sharciga Iibka Qaranka, 2016 uu sheegayo sidaan:

> 31(1) Hay'adda Iibinta Qandaraaska ayaa keydineysa dhammaan dhokumiintiyada la xiriira heshiis kasta ee qandaraas iib iyo habraacyadeeda si waafaqsan xeerarka lagu dabaqi karo ee ku saabsan diiwaangelinta qoraallada Xukuumadda, laakin ugu yaraan dokumiintiyada waa in la hayaa muddo lix (6) sano ah ee soo raacda taariikhda ugu dambeysa ee dhammaadka heshiiska qandaraaska iibka ama laga soo billaabo taariikhda dhammaan la wada diido tartanka dalabka qandaraaska ama la baabi'iyo habraaca, ama sideey xaaladdu noqotaba.
>
> 31(9) Hay'adda Iibka waa in ay soo bandhigtaa:
>
> Warbixinnada iyo dokumiintiyada ay kaydiyaan Hay'adaha Qandaraaska Iibka si waafaqsan Sharcigan waa inay heli karaan markii ay u baahdaan Maamulka, Guddiga La Dagaallanka Laaluushka, iyo Hantidhawraha Guud si ay u baaraan, Guddiga Baarlammanka uga wakiilka ah kormeerka fulinta shuruucda qaranka iyo xafiis dawladeed kasta ee lagu aaminay mas'uuliyaddaas marka la codsado.

### Khaladka

**A. Diiwaannada la xariira iibka oo aan baaris loo soo gudbin kuwaas oo dhan US $519,583.75**

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa lagu ogaaday in iib iyo addeeg qiimahoodu yahay **US $519,583.75** oo ay soo iibsatay Hay'adda Duulista Rayidka Soomaaliyeed. Si kastaba ha ahaatee, wax dukumiintiyo kaabaya lama soo gudbin si loo baaro. Maamulku wuxuu kaliya baarayaasha la wadaagay heshiisyo saxiixan. Sidaa darteed, maamulku wuxuu ku xad gudbay Sharciga Iibka Qaranka ee 2016. Faahfaahinta ayaa ku cad halkan:

| TR. | SHIRKADDA | NOOCA ALAABTA/ADEEGGA | MUDDADA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1. | 2020 CA-BPC-133 | Alaab | 1 bil | 4,635.00 |
| 2. | 2020 CA-BPC-076 | Shidaal | 1 sano | 68,121.00 |
| 3. | 2020 CA-BPC-134 | Qalab xafiiseed | 1 mar | 68,121.00 |
| 4. | 2020 CA-BPC-135 | Socdaalka | 5 bilood | 15,000.00 |
| 5. | 2020 CA-BPC-136 | Alaab | 2 bilood | 66,475.00 |
| **WADAR** | | | | **519,583.75** |

| TR. | SHIRKADDA | NOOCA ALAABTA/ADEEGGA | MUDDADA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 6. | 2020 CA-BPC-138 | Dhismo | 2 bilood | 79,417.00 |
| 7. | 2020 CA-BPC-137 | Dhismo | 20 maalmood | 25,010.00 |
| 8. | 2020 CA-BPC-138 | Dhismo | 1 mar | 39,817.75 |
| 9. | 2020 CA-BPC-139 | Qalab xafiiseed | 1 mar | 9,235.00 |
| 10. | 2020 CA-BPC-140 | Qalab xafiiseed | 1 mar | 33,965.00 |
| 11. | 2020 CA-BPC-141 | Adeeg | 5 sano | 82,200.00 |
| 12. | 2020 CA-BPC-142 | Qalab xafiiseed | 1 mar | 27,587.00 |
| **WADAR** | | | | **519,583.75** |

**Shaxda 22.3** Diiwaannada la xiriira iibka oo aan baarista loo soo bandhigin

### Talo soo jeedin

Waa in dhammaan qandaraasyada iyo heshiisyada laga diiwaangaliyaa Xafiiska Hantidhawraha Guud si waafaqsan shuruucda iyo xeerarka.

Waa in Sarkaalka Idman uu sameeyaa qeybta iibka si sharciga waafaqsan.

Waa in maamulku ay faahfaahin maangal ah ka bixiyaan sababta ay u filiyeen qandaraasyo qalab iyo adeeg lacagtoodu gaarayso **US $519,583.75** kuwaas oo aan waafsanayn sharciga Iibka Qaranka ee 2016.

Waa in maamulka hay'adda la baaray ay XHGQ la wadaagaan dhammaan dukumiintiyada la xiriira iibka ee baaristan la xiriira.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

Maamulka hay'adda la baaray wax jawaab ah oo qoran kama soo bixin arrintaan.

### 22.2.2 SHARCIGA

Sharci Lr. 17 ee Maareynta Maaliyadda Guud ee Dowladda oo soo baxay 25 Diseembar 2019, Qodobka 38aad (5) wuxuu dhigayaa dhammaan heshiisyada deeqaha hay'adaha dowladda, Maamul Goboleedyada iyo hay'adaha ganacsiga ee dowladda waa in laga diiwaan geliyaa Xafiiska Hantidhawrka Guud.

Intaa waxaa dheer, Qodobka 11aad (c) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee 2019 wuxuu awood u siinayaa Hantidhawrka Guud inuu diiwaangeliyo qandaraasyada iyo heshiisyada ay galaan hay'adaha dowladda. Qodobka 14aad (wax-ka-beddelka Qodobka 84aad) ee Sharciga Iibka Qaranka 2020 wuxuu sheegayaa in dhammaan hay'adaha dawliga ah ay qandaraasyada iyo heshiisyada ka diiwaan-galiyaan XHGQ.

### Khaladka

#### A. Heshiisyo aan laga soo diiwaangalin XHGQ

Waxaa baarista lagu ogaaday in Hay'adda Saadaasha iyo Duulista Hawada ay gashay heshiisyo qiimahoodu gaarayaan **US $519,583.75** kuwaas oo aan laga soo diiwaangalin XHGQ. Xafiiska Hantidhawrka Guud waqtigii lagu guda jiray baarista sannadlaha waxaa laga yaabaa in uusan caddeyn karin waxyaabaha heshiisyada ku xusan ee la xiriira wixii hanti ah maadaama aan laga soo diiwaangalin Xafiiska.

Xafiiska Hantidhawrka Guud ma sheegi karo in la fuliyay qodobbada heshiiska lagu galay,

sidoo kalana in heshiisyadaas ay ku jiraan danaha Dowladda Federaalka Soomaaliya. faahfaahinta waxaa lagu muujiyay shaxda hoose:

| TR. | QANDARAASLAHA | UJEEDDADA | MUDDADA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1. | 2020 CA-BPC-133 | Alaab | 1 bil | 4,635.00 |
| 2. | 2020 CA-BPC-076 | Saliid iyo xaydh | 1 sano | 68,121.00 |
| 3. | 2020 CA-BPC-134 | Qalab xafiis | 1 mar | 68,121.00 |
| 4. | 2020 CA-BPC-135 | Adeegga socdaalka | 1 bil | 15,000.00 |
| 5. | 2020 CA-BPC-136 | Alaab | 2 bilood | 66,475.00 |
| 6. | 2020 CA-BPC-138 | Dhismo | 2 bilood | 79,417.00 |
| 7. | 2020 CA-BPC-137 | Dhismo | 20 days | 25,010.00 |
| 8. | 2020 CA-BPC-138 | Dhismo | 1 mar | 39,817.75 |
| 9. | 2020 CA-BPC-139 | Qalab xafiis | 1 mar | 9,235.00 |
| 10. | 2020 CA-BPC-140 | Qalab xafiis | 1 mar | 33,965.00 |
| 11. | 2020 CA-BPC-141 | Adeeg | 5 sano | 82,200.00 |
| 12. | 2020 CA-BPC-142 | Qalab xafiis | 1 mar | 27,587.00 |
| **WADAR** | | | | **519,583.75** |

**Shaxda 22.4** Heshiisyada aan laga soo diiwaangelin XHGQ

### Talo soo jeedin
Waa in dhammaan heshiisyada iyo qandaraasyada laga soo diiwaan galiyaa Xafiiska Hantidhawrka Guud si waafaqsan shuruucda iyo xeerarka.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray
Maamulka hay'adda la baaray wax jawaab ah oo qoran kama soo bixin arrintaan.

## 22.3 Maamulka hantida

### 22.3.1 SHARCIGA
Qodobka 11$^{aad}$ (1) ( j) ee Sharciga Maamulka Maaraynta Maaliyadda Guud ee 2019 ayaa dhigaya in Xafiiska Hantidhawrka Guud uu mas'uul ka yahay diiwaangelinta dhammaan sharciyada iyo heshiisyada, diiwaangalinta waarannada (F16), hantida guurtada iyo maguurtadda, kala wareejinta miisaaniyadda, deeqaha, iyo dhacdo dhaqaale kasta oo kale sida ku cad sharcigan.

### Hannaanka la isku waafaqsan yahay
Waxaa jirta siyaasad, hagayaal iyo habraac loo ansixiyay in lagu maamulo hantida (guurto iyo ma-guurto) ee dhammaan hay'adaha kala duwan ee dowladda. Siyaasadda hantidu waa in ay ka kooban tahay xaaladda, isticmaalka, waxqabadka iyo dhaqan-ka-baxa.

Waxaa jira diiwaan guud oo lagu keydiyo hantida dowladda oo ay hayaan hay'adaha kala duwan. Diiwaanka waa in lagu sheego hanti waliba lamberka u gaarka ah, meesha lagu isticmaalo, xaaladda muuqaal ahaaneed IWM.

### Khaladka

**A. Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka hantida**

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in Hay'adda Duulista Rayidka Soomaaliyeed aysan lahayn qorshe sannadle ah ee iibka sannad maaliyadeedka dhammaaday 31$^{da}$ Diseembar 2020 kaas oo ku salaysan miisaaniyadda qaranka.

### Talo soo jeedin

Waa in la hirgaliyaa lana meel mariyaa tilmaamaha iyo siyaasadda dhammaystiran ee maamulka, hubinta iyo ka warbixnta hantida.

Waa in maamulka hay'addu ay hantida ka soo diiwangeliyaan Xafiiska Hnatidhawrka Guud si waafaqsan Sharciga Maareynta Maaliyadda.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

Maamulka hay'adda la baaray wax jawaab ah oo qoran kama soo bixin arrintaan.

## 22.4 Dabagalka baarista

### 22.4.1 KHALADAADKA WARBIXIN BAARISEEDKII 2019

Shaxdaan hoose waxaa ka muuqda marxaladda khaladaadka baarista sannadkii hore lagu sameeyay hay'adda inta la fuliyay, qayb laga fuliyay ama aan waxba laga fulin.

| NO | KHALADAADKA | MARXALADDA |
|---|---|---|
| 1. | 29.1.1 Ma jirin xisaabaadka sannadka oo la soo gudbiyay si loo baaro | La ma fulin |
| 2. | 29.2.1 Khaladaadka uruurinta iyo adeegsiga dakhliga | Waa la fuliyay |
| 3. | 29.3.1 Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka hantida | La ma fulin |
| 4. | 29.4.1 Heshiisyo aan laga soo diiwaangalin XHGQ | La ma fulin |
| 5. | 29.4.2 Heshiisyada gudaha aan lagu qorin afka Soomaaliga | La ma fulin |
| 6. | 29.5.1 Ku-guuldarraysiga fulinta howlaha hantidhawrka gudaha | Waa la fuliyay |

**Shaxda 22.5** Khaladaadka baarista sannadkii 2019

### 22.4.2 KHALADAADKA WARBIXIN BAARISEEDKII 2018

| LR. | KHALADAADKA | MARXALADDA |
|---|---|---|
| 1. | 12.1.1 Ma jirin xisaabaadka sannadka oo la soo gudbiyay si loo baaro | Lama fulin |
| 2. | 12.3.2 Ma jirin siyaasadda maamulka hantida | Lama fulin |
| 3. | 12.3.2 Heshiisyada oo aan laga soo diiwaan-galin XHG | Lama fulin |
| 4. | 12.5.1 Malahayn baaraha gudaha sidoo kalana baarista gudaha lama samayn | Qeyb ayaa la fuliyay |
| 5. | 12.6.1 Haddii Sharciga Iibka Qaranka oo hoggaansamay | Qeyb ayaa la fuliyay |

**Shaxda 22.6** Khaladaadka baarista sannadkii 2018




# IV. HAY'ADAHA ADEEGGA BULSHADA

# 23. Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare

## 23.1 Hubinta kharash bixinta

### 23.1.1 SHARCIGA

Sida ay qabaan Qodobbada 31[aad] (1) iyo 32[aad] (4) ee Sharci Lr. 17 ee Maaraynta Maaliyadda Guud ee soo baxay 25 Diseembar 2019:

> 31(1) Wax kharash ah lagama bixin karo Miisaaniyadda qaranka, haddii aysan jiirin, qaansheegto ama caddeyn kale oo dheeraad ah oo looga baahan yahay sida ku xusan xeer-nidaamiyaha ama nidaamka xisaabaadku sheegayo.
>
> 32(4) Kharash bixin walba ee la oggolaaday waa in ay ku lifaaqan yihiin dhammaan dukumiintiyada kaabaya sida ku qeexan Xeer-nidaamiyaha Wasiirku soo saaray.

### Hannaanka la isku waafaqsan yahay

Dukumiintiyada caddeymaha way kala duwan yihiin iyadoo ay ku xiran tahay nooca lacag bixinta, waxaana ka mid ah; dalabka iibka, heshiis saxiixan, warqadaha qaansheegashada, alaab-keenidda, guddoonka alaabta, lacag qabashada, iwm.

### Khaladka

**A. Kharashaad dhan US $669,555.00 oo aan lahayn caddaymo dhammaystiran**

Waxaa baarista lagu ogaaday in la bixiyay lacag dhan **US $669,555.00** iyada oo aan lahayn caddeymo ku filan, kharashaadkan ayaa lagu bixiyay hawlo kala duwan ee wasaaradda waxbarashada taas oo lid ku ah sharciga. Arrinkan ayaa sababay in la xaqiijin waayo sax ahaanshaha lacag bixintan. Faahfaahinta waxaa lagu muujiyay shaxda hoose:

| TR. | MADAX-XIGE | CIDDA LA SIIYAY | BISHA | LACAGTA US $ | FAAHFAAHIN |
|---|---|---|---|---|---|
| 1. | 2213 | 2020 CA-BPC-143 | Mar - Apr 2020 | 5,500.00 | Ma lahayn waraqadda lacag qabashada |
| 2. | 2214 | 2020 CA-BPC-144 | Mar - May & Aug 2020 | 6,303.00 | Ma lahayn waraqadda lacag qabashada |
| 3. | 2215 | 2020 CA-BPC-145 | Mar, May & Aug 2020 | 6,512.00 | Ma lahayn warqadda lacag-qabashada |
| 4. | 2211 | 2020 CA-BPC-015 | Mar, May & Aug 2020 | 8,160.00 | Ma lahayn warqadda lacag-qabashada |
| 5. | 2214 | 2020 CA-BPC-145 | Mar, Apr & Aug 2020 | 4,380.00 | Ma lahayn warqadda lacag-qabashada |
| 6. | 2221 | 2020 CA-BPC-146 | April, May & Jun 2020 | 441,950.00 | Ma lahayn warqadda lacag-qabashada |
| | | 2020 CA-BPC-147 | April, June & Jul 2020 | 72,224.00 | Ma lahayn warqadda lacag-qabashada |
| | | 2020 CA-BPC-148 | Jun 2020 | 32,930.00 | Ma lahayn warqadda lacag-qabashada |
| | | 2020 CA-BPC-149 | Jun 2020 | 19,679.00 | Ma lahayn warqadda lacag-qabashada |
| **WADAR** | | | | **669,555.00** | |

| TR. | MADAX-XIGE | CIDDA LA SIIYAY | BISHA | LACAGTA US $ | FAAHFAAHIN |
|---|---|---|---|---|---|
| | | 2020 CA-BPC-150 | Jun 2020 | 71,917.00 | Ma lahayn warqadda lacag-qabashada |
| **WADAR** | | | | **669,555.00** | |

**Shaxda 23.1** Kharashaadka aan lahayn caddeymo ku filan

### Talo soo jeedin

Waa in dhammaan lacag bixinnada ay ku salaysnaadaan ama lahaadaan caddeymo dhammaystiran, si sax ahna ay u oggolaadaan saraakiisha sare ee mas'uulka ka ah iyo in hawlaha loo guddoomo iyadoo loo eegayo ama la raacayo shuruudo cayiman.

Waa in dhammaan dukumiintiyadda lacag bixinnada lagu tiimbareeyaa "la bixiyay" isla marka lacagahooda la bixiyo si looga hortago in mar kale loo isticmaalo kharash bixin kale.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Wasaaradda waxa ay caddeyneysaa in dhammaan lacagaha ka baxay la mariyay nidaamka maaliyadda dalka ee loo yaqaano (SFMIS), kadib lacagta waxaa bixiya Bankiga Dhexe. Bankiga dhexe ma ogeysiiyo Wasaaradda in lacagtaas ay bixiyeen, taas oo atkeyneysa in Wasaaraddu ka dalbato warqadda lacag qabashada shirkadaha, sido kale nidaamka onlineka ah ee (FMIS) ma lahan meel laga ogaan karo in lacagta ay baxday, iyo meel laga daabacan karo caddeyn ah in lacagtaas gaartay qofka loogu talagalay (Beneficiary).*

*Caqabddan oo ah mid guud oo ay ka simanyihiin dhammaan hey'adaha Federaalka si loo xaliyo Wasaaraddu waxa ay kulan la yeelatay 12 June 2021 Bankiga Dhexe waxa ayna xaqiijiyeen in Bankigu uu laheen nidaam u oggolaanaya in Hey'adaha dowladda u diro caddeyn ah in lacagta ay bixiyeen.*

*Sidaa darted arrinta warqadda lacag qabashada waa mid ka baxsan awoodda hay'adda, oo ku xiran in la hagaajiyo guud ahaan nidaamka Maaliyadda ee dalka iyo in la hormariyo awoodda xog is dhaafsiga hay'adaha dowladda.*

*Lifaaqa hoose waa qodobbada & xogta kulankii dhexmaray Wasaaradda iyo Bankiga Dhexe iyo Hay'adda Save The Children oo ay Wasaaraddu isla fuliyaan Mashruuca GPE.*

## 23.2 Maamulka iibka iyo heshiisyada

### 23.2.1 SHARCIGA

Qodobka 27aad (1) iyo (4) ee Sharci Lr. 22 ee Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka oo soo baxay 2016, ayaa sheegaya sidaan:

> 27(1) Dhammaan Hay'adaha qandaraaska iibka ayaa sameynaya qorshaha qandaraaska Iibka ee sannadlaha, ee looga gol leeyahay si lagu gaaro in qiimaha ugu badan ee kharashka guud iyo waxyaabaha kale ee sharcigan. Qorshaha qandaraaska iibsiga wuxuu taageerayaa barnaamijka iyo miisaaniyadda ay ansixisay hay'adda qandaraaska iibka.
>
> 27(4) Qorshaha qandaraaska iibka waxaa la diyaarinayaa sannad walba iyadoo lagu saleynayo miisaaniyadda sannadka Xukuumadda, iyado la xisaabinayo miiisaaniyad sannadeedka Xukuumadda.

Sidoo kale, Qodobka 61aad (1) iyo (2) ee Sharciga Iibka Qaranka, 2016 ayaa sheegaya sidaan:

61(1) Hay'ad kasta oo Iibin waa in ay dhistaa Waax Iib Qandaraas si waafaqsan Sharcigan.

61(2) Sarkaalka Xisaabaha ayaa go'aaminaaya inta xubnood ee ka mid noqoneysa Waaxda Qandaraaska Iibka, waana in laga shaqaaleyaa ugu yaraan hal (1) qof oo u tababaran aqoonna u leh Qandaraaska Iibka.

Qodobka 31[aad] (1) (9) ee Sharciga Iibka Qaranka, 2016 uu sheegayo sidaan:

31(1) Hay'adda Iibinta Qandaraaska ayaa keydineysa dhammaan dhokumiintiyada la xiriira heshiis kasta ee qandaraas iib iyo habraacyadeeda si waafaqsan xeerarka lagu dabaqi karo ee ku saabsan diiwaangelinta qoraallada Xukuumadda, laakin ugu yaraan dokumiintiyada waa in la hayaa muddo lix (6) sano ah ee soo raacda taariikhda ugu dambeysa ee dhammaadka heshiiska qandaraaska iibka ama laga soo billaabo taariikhda dhammaan la wada diido tartanka dalabka qandaraaska ama la baabi'iyo habraaca, ama sideey xaaladdu noqotaba.

31(9) Hay'adda Iibka waa in ay soo bandhigtaa:

Warbixinnada iyo dokumiintiyada ay kaydiyaan Hay'adaha Qandaraaska Iibka si waafaqsan Sharcigan waa inay heli karaan markii ay u baahdaan Maamulka, Guddiga La Dagaallanka Laaluushka, iyo Hantidhawraha Guud si ay u baaraan, Guddiga Baarlammanka uga wakiilka ah kormeerka fulinta shuruucda qaranka iyo xafiis dawladeed kasta ee lagu aaminay mas'uuliyaddaas marka la codsado.

## Khaladaadka

### A. Maqnaanshaha diyaarinta qorshaha iibka sannadka

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in Wasaaradda Waxbarashadu aysan lahayn qorshe sannadle ah ee iibka sannad maaliyadeedka dhammaaday 31[da] Diseembar 2020 kaas oo ku salaysan miisaaniyadda qaranka.

### B. Xafiiska iibka ee hay'adda oo aan dhisneyn

Waxaa baarista lagu ogaaday in sarkaalka idman ee hay'adda uusan dhisin xafiiska iibka ee hay'adda, taas oo xadgudub ku ah Sharciga Iibka Qaranka, 2016.

### C. Diiwaannada la xariira iibka oo aan baaris loo soo gudbin, kuwaas oo qiimahoodu ahaa US $290,325.00

Wasaaradda Waxbarashada ayaa sameeyay iib la xiriira addeeg iyo alaabo qiimahoodu dhan yahay **US $290,325.00** kuwaas oo aan loo soo gudbin baaris. Wasaaradda ayaa ku guul dareysatay in ay baaris usoo gudbiso dhammaan dukumiintiyada iibka. Faahfaahinta waxaa lagu muujiyay shaxda hoose:

| TR. | SHIRKADDA | NOOCA IIBKA | MUDDADA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1. | 2020 CA-BPC-146 | Alaab | Apr 2020 | 99,000.00 |
| 2. | 2020 CA-BPC-160 | Adeeg | 15 Aug 2020 | 74,997.00 |
| 3. | 2020 CA-BPC-161 | Adeeg | 9 Aug 2020 | 81,328.00 |
| 4. | 2020 CA-BPC-151 | Alaab | Mar - Apr 2020 | 35,000.00 |
| **WADAR** | | | | **290,325.00** |

**Shaxda 23.2** Diiwaannada la xiriira iibka oo aan baarista loo soo bandhigin

### Talo soo jeedin
Waa in Wasaaraddu yeelataa qorshe sannadle ah oo ku aaddan iibka kaas oo ku saleysan miisaaniyadda la ansixiyay ee hay'adda.

Waa in sarkaalka idman uu dhisaa xafiiska iibka ee hay'adda si waafaqsan sharciga.

Maamulka Wasaaradda Waxbarashadu waa in ay baarayasha la wadaagaan dhammaan dii-waannada iyo dukumintiyada iibka la sameeyay.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray
*Wasaaraddu waa ay leedahay qorshe sannadeedka iibka kaas oo u qeybsama mashaariicda wasaaraddu maamusho, sido kale qorshe sannadeedka iibka ee Miisaaniyadda qaranka waxa uu ku jiraa isaga oo faahfaahsan nidaamka maaliyadda ee (SFMIS).*

### Jawaabta XHGQ
Waa mas'uuliyadda Wasaaradda in ay diyaariso qorshe sanadeedka wax iibka sanad walba iyadoo lagu saleynayo miisaaniyad sanadeedka la ansixiyay.

### 23.2.2 SHARCIGA
Sharci Lr. 17 ee Maareynta Maaliyadda Guud ee Dowladda oo soo baxay 25 Diseembar 2019, Qodobka 38aad (5) wuxuu dhigayaa dhammaan heshiisyada deeqaha hay'adaha dowladda, Maamul Goboleedyada iyo hay'adaha ganacsiga ee dowladda waa in laga diiwaan geliyaa Xafiiska Hantidhawrka Guud.

Intaa waxaa dheer, Qodobka 11aad (c) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee 2019 wux-uu awood u siinayaa Hantidhawrka Guud inuu diiwaangeliyo qandaraasyada iyo heshiisyada ay galaan hay'adaha dowladda. Qodobka 14aad (wax-ka-beddelka Qodobka 84aad) ee Sharciga Iibka Qaranka 2020 wuxuu sheegayaa in dhammaan hay'adaha dawliga ah ay qandaraasyada iyo heshiisyada ka diiwaan-galiyaan XHGQ.

### Khaladka
#### A. Heshiisyo aan laga soo diiwaangalin XHGQ
Waxaa baarista lagu ogaaday in heshiisyo qiimahoodu gaarayaan **US $845,169.50** aan laga soo diiwaangalin XHGQ. Xafiiska Hantidhawrka Guud waqtigii lagu guda jiray baarista sannad-laha waxaa laga yaabaa in uusan caddeyn karin waxyaabaha heshiisyada ku xusan ee la xiriira wixii hanti ah maadaama aan laga soo diiwaangalin. Xafiiska Hantidhawrka Guud ma sheegi karo in la fuliyay qodobbada heshiiska lagu galay, sidoo kalana in heshiisyadaas ay ku jiraan danaha Dowladda Federaalka Soomaaliya. Faahfaahinta waxaa lagu muujiyay shaxda hoose:

| TR. | QANDARAASLAHA | UJEEDDADA | MUDDADA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1. | 2020 CA-BPC-152 | Qalab xafiis | 13 bilood | 19,679.00 |
| 2. | 2020 CA-BPC-153 | Qalab xafiis | 1 bil | 21,060.00 |
| 3. | 2020 CA-BPC-015 | Adeeg internet | 2 bilood | 24,480.00 |
| 4. | 2020 CA-BPC-154 | Adeeg farsamo | 2 bilood | 35,000.00 |
| 5. | 2020 CA-BPC-155 | Daabicid buugaag | 1 bil | 33,950.00 |
| 6. | 2020 CA-BPC-155 | Daabicid buugaag | 1 bil | 99,000.00 |
| **WADAR** | | | | **845,169.50** |

| TR. | QANDARAASLAHA | UJEEDDADA | MUDDADA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 7. | 2020 CA-BPC-156 | Raashin | 9 bilood | 99,000.00 |
| 8. | 2020 CA-BPC-157 | Adeeg farsamo | 1 bil | 13,085.00 |
| 9. | 2020 CA-BPC-158 | Adeegga socdaalka | 12 bilood | 100,000.00 |
| 10. | 2020 CA-BPC-159 | Adeegga socdaalka | 12 bilood | 100,000.00 |
| 11. | 2020 CA-BPC-160 | Qalab dayctir | 1 bil | 81,328.80 |
| 12. | 2020 CA-BPC-161 | Qalab dayctir | 1 bil | 74,997.22 |
| 13. | 2020 CA-BPC-162 | Qalab dayctir | 1 bil | 41,673.98 |
| 14. | 2020 CA-BPC-163 | Raashin | 1 bil | 29,998.00 |
| 15. | 2020 CA-BPC-164 | Qalab xafiis | 1 bil | 71,917.50 |
| **WADAR** | | | | **845,169.50** |

**Shaxda 23.3** Heshiisyada aan laga soo diiwaangelin XHGQ

### Talo soo jeedin

Waa in dhammaan qandaraasyada iyo heshiisyada laga diiwaangaliyaa Xafiiska Hantidhawraha Guud si waafaqsan shuruucda iyo xeerarka.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Diiwangalinta heshiisyada wixii ka yar $40,000 waxaa la mariyaa nidaamka saddexda qiimesheeg (Three Quotation Method), ma ahan nidaamka wax iibsiga furan (Open tendering process), inta badanna waxa ay ku baxaan Dalabka wax so Iibsiga (Purchase Order), wixii heshiisyo ah ee qiimihiisu ka badanyahay $40,000 wan u soo gudbinay Xafiiska Hantidhawrka si loo diiwangeliyo.*

*Waxa jira faham la'aan nidaamka diiwangelinta heshiisyada oo jirtay sannadkii hore iyo fariimaha xusuusinta arinkan oo aan lagu soo hagaajin waaxyaha sida tooska ay u khuseyso shaqada, sannadka 2021 waan xalinnay caqabadaas waxa aanna soo diiwangelinay dhammaan heshiisyada Wasaaraddu ay gashay si waafaqsan habraaca diiwaangelinta qandaraasyada dowladda.*

### Jawaabta XHGQ

Iyadoo aan la eegaynin xaddiga iibka la sameeyay, dhammaan heshiisyada waa in laga diiwaan-galiyaa XHGQ.

XHGQ waxaa uu maamulka hay'adaha la wadaagaa talo soo jeedin la xiriirta arrimaha laga gaabiyay sida kuwa kor ku xusan, hase ahatee, Xafiisku si toos ah Waaxyada kala duwan ee hay'adaha uma xasuusiyo arrimahaas.

### 23.2.3 SHARCIGA

Sharci Lr. 22 ee Sharciga Iibka Qaranka oo soo baxay 9 Agoosto 2016, Qodobkiisa 14[aad] ayaa waxa uu farayaa in qandaraasyada iyo heshiisyada caalamiga ah lagu qoro luuqadaha kala ah Ingiriis iyo Carabi halka kuwa gudaha/maxalliga ahna lagu qoro Af-Soomaali.

### Khaladka

**A. Heshiisyada gudaha  oo aan lagu qorin luuqadda Soomaaliga**

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in Wasaaradda Waxbarashada ay heshiisyada gudaha/maxalliga ah ku qoraan luuqadda Ingiriiska taas oo lid ku ah sharciga.

### Talo soo jeedin

Waa in maamulka hay'addu uu heshiisyada gudaha/maxalliga ah ku qoraa luuqadda Soomaaliga si waafaqsan sharciga. Sidoo kale, waxaa ay diyaarin karaan mid ku qoran luuqadda Ingiriisiga haddii ay u baahan yihiin dhinaca kale ee qandaraaslaha.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Si waafaqsan sharciga libka Qaranka Wasaaradu waxa ay ku gali doonta heshiisyada maxaliga Af-Soomaali.*

## 23.3 Maamulka hantida

#### 23.3.1 SHARCIGA

Qodobka 11aad (1) ( j) ee Sharciga Maamulka Maaraynta Maaliyadda Guud ee 2019 ayaa dhigaya in Xafiiska Hantidhawrka Guud uu mas'uul ka yahay diiwaangelinta dhammaan sharciyada iyo heshiisyada, diiwaangalinta waarannada (F16), hantida guurtada iyo maguurtadda, kala wareejinta miisaaniyadda, deeqaha, iyo dhacdo dhaqaale kasta oo kale sida ku cad sharcigan.

### Hannaanka la isku waafaqsan yahay

Waxaa jirta siyaasad, hagayaal iyo habraac loo ansixiyay in lagu maamulo hantida (guurto iyo ma-guurto) ee dhammaan hay'adaha kala duwan ee dowladda. Siyaasadda hantidu waa in ay ka kooban tahay xaaladda, isticmaalka, waxqabadka iyo dhaqan-ka-baxa.

Waxaa jira diiwaan guud oo lagu keydiyo hantida dowladda oo ay hayaan hay'adaha kala duwan. Diiwaanka waa in lagu sheego hanti waliba lamberka u gaarka ah, meesha lagu isticmaalo, xaaladda muuqaal ahaaneed IWM.

### Khaladka

**A. Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka hantida**

Waxaa baarista lagu ogaaday in Wasaaradda Waxbarashada aysan lahayn habraacyada iyo siyaasadda lagu maamulo lagu lana socdo hantida.

### Talo soo jeedin

Waa in la hirgaliyaa lana meel mariyaa tilmaamaha iyo siyaasadda dhammaystiran ee maamulka, hubinta iyo ka warbixnta hantida.

Waa in hay'adda la baaray iyo Wasaaradda Maaliyadda ay hantida hay'adda ku sameeyaan tirakoob waqtiyaysan isla markaana ay cusboonaysiiyaan diiwaanka hantida.

Waa in maamulka hay'adda ay hantida ka soo diiwangeliyaan XHGQ si waafaqsan Sharciga.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Wasaaraddu waa ay leedahay habraacyada iyo siyaasadda lagu maamulo lagu lana socdo hantida sida ku cad bogga 16-18 nidaamka maamulka maaliyadda wasaaraddu dajisay.*

### Jawaabta XHGQ

*Waa aan arragnay Qodobbada 16-18 ee (Annex 7 Financial Manual) mana ahan kuwa dabooli kara siyaasadda maamulka hantida Wasaaradda oo dhammaystiran.*

## 23.4 Dabagalka baarista

### 23.4.1 KHALADAADKA WARBIXIN BAARISEEDKII 2019

Shaxdaan hoose waxaa ka muuqda marxaladda khaladaadka baarista sannadkii hore lagu sameeyay hay'adda inta la fuliyay, qayb laga fuliyay ama aan waxba laga fulin.

| TR. | KHALADAADKA | MARXALADDA |
|---|---|---|
| 1. | 32.1.1 Lacagbixin aan lahayn caddaymo dhammeystiran - kharashaadka | La ma fulin |
| 2. | 32.2.1 Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka hantida | La ma fulin |
| 3. | 32.3.1 Heshiisyada gudaha aan lagu qorin afka Soomaaliga | La ma fulin |
| 4. | 32.4.1 Ku-guuldarraysiga fulinta howlaha hantidhawrka gudaha | La ma fulin |

**Shaxda 23.4** Khaladaadka baarista sannadkii 2019

### 23.4.2 KHALADAADKA WARBIXIN BAARISEEDKII 2018

| LR. | KHALADAADKA | MARXALADDA |
|---|---|---|
| 1. | 10.2.1 Kharashaadka howl-maalmeedka oo aan wadan caddeymo ku filan | Lama fulin |
| 2. | 10.3.2 Ma jirin siyaasada maamulka hantida | Qeyb ayaa la fuliyay |
| 3. | 10.4.1 Ma jiro heshiis lala saxiixday shaqsiyaadka maamula dugsiyada dowladda | Lama fulin |
| 4. | 10.5.1 Malahayn baaraha gudaha sidoo kalana baarista gudaha lama samayn | Qeyb ayaa la fuliyay |

**Shaxda 23.5** Khaladaadka baarista sannadkii 2018

# 24. Wasaaradda Dhalinyarada iyo Ciyaaraha

## 24.1 Hubinta kharash bixinta

### 24.1. SHARCIGA

Sida ay qabaan Qodobbada 31$^{aad}$ (1) iyo 32$^{aad}$ (4) ee Sharci Lr. 17 ee Maaraynta Maaliyadda Guud ee soo baxay 25 Diseembar 2019:

> 31(1) Wax kharash ah lagama bixin karo Miisaaniyadda qaranka, haddii aysan jiirin, qaansheegto ama caddeyn kale oo dheeraad ah oo looga baahan yahay sida ku xusan xeer-nidaamiyaha ama nidaamka xisaabaadku sheegayo.
>
> 32(4) Kharash bixin walba ee la oggolaaday waa in ay ku lifaaqan yihiin dhammaan dukumiintiyada kaabaya sida ku qeexan Xeer-nidaamiyaha Wasiirku soo saaray.

### Hannaanka la isku waafaqsan yahay

Dukumiintiyada caddeymaha way kala duwan yihiin iyadoo ay ku xiran tahay nooca lacag bixinta, waxaana ka mid ah; dalabka iibka, heshiis saxiixan, warqadaha qaansheegashada, alaab-keenidda, guddoonka alaabta, lacag qabashada, iwm.

### Khaladaadka

**A. Kharashaad dhan US $260,561.00 oo aan lahayn caddeymo dhammaystiran**

Waxaa baarista lagu ogaaday in la bixiyay lacag dhan **US $260,561.00** iyada oo aan lahayn caddeymo ku filan, kharashaadkan ayaa lagu bixiyay hawlo kala duwan ee Wasaaradda Dhalinyarada iyo Ciyaaraha taas oo lid ku ah sharciga. Arrinkan ayaa sababay in la xaqiijin waayo sax ahaanshaha lacag bixintan:

| TR. | MADAX-XIGE | CIDDA LA SIIYAY | BISHA | LACAGTA US $ | FAAHFAAHIN |
|---|---|---|---|---|---|
| 1. | 2211 | 2020 CA-BPC-176 | Feb - May 2020 | 6,316.00 | Ma lahayn warqadda lacag-qabashada iyo heshiis midna |
| 2. | 2211 | 2020 CA-BPC-177 | Jan 2020 | 1,515.00 | Ma lahayn warqadda lacag-qabashada iyo heshiis midna |
| 3. | 2211 | 2020 CA-BPC-178 | Jan - Apr 2020 | 4,662.00 | Ma lahayn warqadda lacag-qabashada iyo heshiis midna |
| 4. | 2213 | 2020 CA-BPC-179 | Jan - May 2020 | 7,500.00 | Ma lahayn waraqadda lacag qabashada iyo faahfaahinta baabuurta shidaalka la siiyay |
| 5. | 2214 | 2020 CA-BPC-177 | Jan 2020 | 1,000.00 | Ma lahayn warqadda lacag-qabashada iyo heshiis midna |
| 6. | 2214 | 2020 CA-BPC-176 | Jan - May 2020 | 3,997.00 | Ma lahayn warqadda lacag-qabashada iyo heshiis midna |
| **WADAR** | | | | **71,945.00** | |

| TR. | MADAX-XIGE | CIDDA LA SIIYAY | BISHA | LACAGTA US $ | FAAHFAAHIN |
|---|---|---|---|---|---|
| 7. | 2215 | 2020 CA-BPC-176 | Jan - May 2020 | 45,455.00 | Ma lahayn warqadda lacag-qabashada |
| 8. | 2215 | 2020 CA-BPC-180 | Jan 2020 | 1,500.00 | Ma lahayn warqadda lacag-qabashada |
| **WADAR** | | | | **71,945.00** | |

**Shaxda 24.1** Kharashaadka aan lahayn caddeymo ku filan

| TR. | MADAX-XIGE | BISHA | LACAGTA US $ | FAAHFAAHIN |
|---|---|---|---|---|
| 1. | 2020 CA-BPC-181 | May, Jul, Oct 2020 | 44,300.00 | Ma lahayn dalabka iibka, liiska ka qeybgalayaasha iyo heshiis. |
| 2. | 2020 CA-BPC-182 | Nov 2020 | 7,000.00 | Ma lahayn dalabka iibka, liiska ka qeybgalayaasha iyo heshiis. |
| 3. | 2020 CA-BPC-183 | May – Dec | 12,550.00 | Ma lahayn dalabka iibka, liiska ka qeybgalayaasha iyo heshiis. |
| 4. | 2020 CA-BPC-184 | Oct – Dec | 34,100.00 | Ma lahayn dalabka iibka, liiska ka qeybgalayaasha iyo heshiis. |
| 5. | 2020 CA-BPC-185 | Feb 2020 | 50,000.00 | Ma lahayn caddeymo dhammaytiran. |
| 6. | 2020 CA-BPC-186 | Feb 2020 | 25,000.00 | Ma lahayn caddeymo dhammaytiran. |
| 7. | 2020 CA-BPC-184 | Feb 2020 | 12,000.00 | Ma lahayn caddeymo dhammaytiran. |
| **WADAR** | | | **184,950.00** | |

**Shaxda 24.2** Kharashaadka safarka ee aan lahayn caddeymo ku filan

| TR. | MADAX-XIGE | CIDDA LA SIIYAY | BISHA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1. | 2216 | 2020 CA-BPC-187 | Jan – Feb 2020 | 3,666.00 |
| **WADAR** | | | | **3,666.00** |

**Shaxda 24.3** Lacago la bixiyey

## Talo soo jeedin

Waa in dhammaan lacag bixinnada ay ku salaysnaadaan ama lahaadaan caddeymo dhammaystiran, si sax ahna ay u oggolaadaan saraakiisha sare ee mas'uulka ka ah iyo in hawlaha loo guddoomo iyadoo loo eegayo ama la raacayo shuruudo cayiman.

Waa in dhammaan dukumiintiyadda lacag bixinnada lagu tiimbareeyaa "la bixiyay" isla marka lacagahooda la bixiyo si looga hortago in mar kale loo isticmaalo kharash bixin kale.

## Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Inkastoo dokumiintiyada qaar ay leeyihiin heshiishyada qaarna ay yihiin 'single source' ayna raacsanyihiin waraaq la yiraahdo (Justification Letter), haddana sannadka 2021 waxaan usoo dhammeystiri doonnaa waraaqaha looga baahan yahay in la raacsiyo. Ka Wasaaarad ahaan sannadka 2021 waxaan sameynanaynaa stampada (la bixiyey), sidoo kale waxaan Hantidhawrka Guud la soo wadaagi doonnaa heshiishyada ay gasho Wasaaradda dhallinyarada iyo Isboortiga. Waxaan talo ahaan u soo jeedinaynaa in baaritaanada soo socda lanaga fiiriyo tala soo jeedinta.*

## 24.2 Maamulka iibka iyo heshiisyada

### 24.2.1 SHARCIGA

Qodobka 27[aad] (1) iyo (4) ee Sharci Lr. 22 ee Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka oo soo baxay 2016, ayaa sheegaya sidaan:

> 27(1) Dhammaan Hay'adaha qandaraaska iibka ayaa sameynaya qorshaha qandaraaska Iibka ee sannadlaha, ee looga gol leeyahay si lagu gaaro in qiimaha ugu badan ee kharashka guud iyo waxyaabaha kale ee sharcigan. Qorshaha qandaraaska iibsiga wuxuu taageerayaa barnaamijka iyo miisaaniyadda ay ansixisay hay'adda qandaraaska iibka.
>
> 27(4) Qorshaha qandaraaska iibka waxaa la diyaarinayaa sannad walba iyadoo lagu saleynayo miisaaniyadda sannadka Xukuumadda, iyado la xisaabinayo miiisaaniyad sannadeedka Xukuumadda.

### Khaladka

**A. Maqnaanshaha diyaarinta qorshaha iibka sannadka**

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in Wasaaradda Dhallinyarada iyo Cayaaruhu aysan lahayn qorshe sannadle ah ee iibka sannad maaliyadeedka dhammaaday 31[da] Diseembar 2020 kaas oo ku salaysan miisaaniyadda qaranka.

### Talo soo jeedin

Waa in Wasaaraddu yeelataa qorshe sannadle ah oo ku aaddan iibka kaas oo ku saleysan miisaaniyadda la ansixiyay ee hay'adda.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Inkastoo Wasaaradda aysan lahayn lacag loo qoondeeyey in lagu soo iibiyo Qalabka Waaweyn ee wasaaraddu u baahan tahay marka laga reebo kharashaadka maalinlaha oo ujeedadiisu cadahay. Sannadka 2021 waxay wasaaraddu diyaarin doonta qorshaha iibka ee yaryar ayna u baahan tahay Wasaaraddu iyadoo ku salaynaysaa baahida hadba taagan markaas Wasaaradduna ku jaangoyn doonto sannadle baahidaas, haddaba waxaan talo ahaan u soo jeedinaynaa in baaritaannada soo socda lanaga fiiriyo tala soo jeedinta.*

### 24.2.2 SHARCIGA

Sharci Lr. 17 ee Maareynta Maaliyadda Guud ee Dowladda oo soo baxay 25 Diseembar 2019, Qodobka 38[aad] (5) wuxuu dhigayaa dhammaan heshiisyada deeqaha hay'adaha dowladda, Maamul Goboleedyada iyo hay'adaha ganacsiga ee dowladda waa in laga diiwaan geliyaa Xafiiska Hantidhawrka Guud.

Intaa waxaa dheer, Qodobka 11[aad] (c) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee 2019 wuxuu awood u siinayaa Hantidhawrka Guud inuu diiwaangeliyo qandaraasyada iyo heshiisyada ay galaan hay'adaha dowladda. Qodobka 14[aad] (wax-ka-beddelka Qodobka 84[aad]) ee Sharciga Iibka Qaranka 2020 wuxuu sheegayaa in dhammaan hay'adaha dawliga ah ay qandaraasyada iyo heshiisyada ka diiwaan-galiyaan XHGQ.

### Khaladka

**A. Heshiisyo aan laga soo diiwaangalin XHGQ**

Waxaa baarista lagu ogaaday in heshiisyo qiimahoodu gaarayaan **US $280,458.00** aan laga soo diiwaangalin XHGQ. Xafiiska Hantidhawrka Guud waqtigii lagu guda jiray baarista sannadlaha waxaa laga yaabaa in uusan caddeyn karin waxyaabaha heshiisyada ku xusan ee la xiriira wixii hanti ah maadaama aan laga soo diiwaangalin Xafiiska. Xafiiska Hantidhawrka Guud ma sheegi karo in la fuliyay qodobbada heshiiska lagu galay, sidoo kalana in heshiisyadaas ay ku jiraan danaha Dowladda Federaalka Soomaaliya. Faahfaahinta waxaa lagu muujiyay shaxda hoose:

| TR. | QANDARAASLAHA | UJEEDDO | MUDDADA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1. | 2020 CA-BPC-176 | Qalab xafiis | 11 bilood | 16,500.00 |
| 2. | 2020 CA-BPC-179 | Shidaal | 1 sano | 18,000.00 |
| 3. | 2020 CA-BPC-176 | Dayactir guri | 1 bil | 39,458.00 |
| 4. | UNFPA | Wacyigelin iyo tababar | 1 sano | 206,500.00 |
| **WADAR** | | | | **280,458.00** |

**Shaxda 24.4** Heshiisyada aan laga soo diiwaangelin XHGQ

### Talo soo jeedin

Waa in dhammaan qandaraasyada iyo heshiisyada laga diiwaangaliyaa Xafiiska Hantidhawraha Guud si waafaqsan shuruucda iyo xeerarka.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Wasaaradda Dhallinyarada iyo Ciyaaruhu markasta waxay diyaar u tahay in ay ilaaliso hufnaanta iyo daahfurnaanta maaliyadeed ee dalka u yaal, sidoo kalana ilaaliso shuruucda maaliyadda. Haddaba Wasaaraddu waxay rajeynaysaa in sannadka 2021 ay ka soo diiwaan geliso heshiishyada kharashaadka laga helo dowladda inta aysan marin 'commitment controlka'.*

*Waxaa sidoo kale soo diiwaan gelin doonna heshiiska fulinta (implementing PartnerAgreement 2021-2025) ay la saxiixatay Wasaaradda Hey'adda UNFPA.*

#### 24.2.3 SHARCIGA

Sharci Lr. 22 ee Sharciga Iibka Qaranka oo soo baxay 9 Agoosto 2016, Qodobkiisa 14aad ayaa waxa uu farayaa in qandaraasyada iyo heshiisyada caalamiga ah lagu qoro luuqadaha kala ah Ingiriis iyo Carabi halka kuwa gudaha/maxalliga ahna lagu qoro Af-Soomaali.

### Khaladaadka

**A. Heshiisyada gudaha oo aan lagu qorin luuqadda Soomaaliga**

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in Wasaaradda Dhalinyarada iyo Ciyaaraha ay heshiisyada gudaha/maxalliga ah ku qoraan luuqadda Ingiriiska taas oo lid ku ah sharciga.

### Talo soo jeedin

Waa in maamulka hay'addu uu heshiisyada gudaha/maxalliga ah ku qoraa luuqadda Soomaaliga si waafaqsan sharciga. Sidoo kale, waxaa ay diyaarin karaan mid ku qoran luuqadda Ingiriisiga haddii ay u baahan yihiin dhinaca kale ee qandaraaslaha.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Wasaaradda Dhallinyarada iyo Ciyaaruhu waxay rajeynaysaa in sannadka 2021 haddi ay jiraan heshiishyo lala geli doono heshiishyada guddaha/maxalliga ay ku qori doonto Af-Soomaali, sidoo kalana heshiishyada caalamiga ah ay ku qori doonto luuqadda Ingiriisiga.*

## 24.3 Maamulka hantida

#### 24.3.1 SHARCIGA

Qodobka 11aad (1) ( j) ee Sharciga Maamulka Maaraynta Maaliyadda Guud ee 2019 ayaa dhigaya in Xafiiska Hantidhawrka Guud uu mas'uul ka yahay diiwaangelinta dhammaan sharciyada iyo heshiisyada, diiwaangalinta waarannada (F16), hantida guurtada iyo maguurtadda, kala wareejinta miisaaniyadda, deeqaha, iyo dhacdo dhaqaale kasta oo kale sida ku cad sharcigan.

### Hannaanka la isku waafaqsan yahay

Waxaa jirta siyaasad, hagayaal iyo habraac loo ansixiyay in lagu maamulo hantida (guurto iyo ma-guurto) ee dhammaan hay'adaha kala duwan ee dowladda. Siyaasadda hantidu waa in ay ka kooban tahay xaaladda, isticmaalka, waxqabadka iyo dhaqan-ka-baxa.

Waxaa jira diiwaan guud oo lagu keydiyo hantida dowladda oo ay hayaan hay'adaha kala duwan. Diiwaanka waa in lagu sheego hanti waliba lamberka u gaarka ah, meesha lagu isticmaalo, xaaladda muuqaal ahaaneed IWM.

### Khaladaadka

A. **Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka hantida**

Waxaa baarista lagu ogaaday in Wasaaradda Dhalinyarada iyo Ciyaaraha aysan lahayn habraacyada iyo siyaasadda lagu maamulo lagu lana socdo hantida.

B. **Diiwaanka hantida oo aan joogto loo cusboonaysiin**

Maamulka hay'adda ayaa ku guul dareystay in ay cusboonaysiiyaan diiwaanka hantida kaas oo ka kooban macluumaadka, lambarka aqoonsiga, qiimaha lagu iibiyay xaaladda hantida IWM.

Hubinta muuqaal ahaaneed ee hantida ayaa lagu ogaaday in hantida hay'addu aysan wada lahayn lambarka aqoonsiga hantida (tag number) kaas oo ah lambar lagu aqoonsado oo gaar u ah si loo hubiyo loona dabagalo.

Intaas waxaa dheer, sida uu qabo Sharciga Maareynta Maaliyadda Dowladda Hantida lagama soo diiwaangalin XHGQ.

### Talo soo jeedin

Waa in la hirgaliyaa lana meel mariyaa tilmaamaha iyo siyaasadda dhammaystiran ee maamulka, hubinta iyo ka warbixnta hantida.

Waa in Wasaaradda Ciyaaraha iyo Dhalinyarada ay diyaarisaan diiwaan dhammaystiran ee hantida oo leh tilmaamo cad si loo xaqiijiyo in dhammaan hantida hay'adda lagu diiwaan galiyo diiwaanka, sidoo kalana loo cusboonaysiiyaa xilliyo go'an ama cayiman. Sidoo kale, waa in hay'adda la baaray iyo Wasaaradda Maaliyadda ay hantida hay'adda ku sameeyaan tirakoob waqtiyaysan isla markaana ay cusboonaysiiyaan diiwaanka hantida.

Waa in maamulka hay'adda ay hantida ka soo diiwangeliyaan Xafiiska Hnatidhawrka Guud si waafaqsan Sharciga Maareynta Maaliyadda.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Haddaba si loo fuliyo habraaca iyo siyaasado dhammeystiran ee maamulka iyo hubinta hantida Wasaaradda Dhallinyarada iyo Ciyaaruhu waxay usoo jeedinaysaa Hantidhawrka iyo Wasaaradda Maaliyadda in ay nala soo wadaagan wixii ku saabsan hannaanka maamulka iyo habraaca siyaasadaha lagu maamulaayo hantida si aan uga tixraacno. Wasaaraddu waxay markasta diyaar u tahay in ay diyaariso nidaam hufan ayna fahmi karto cid kasta oo Wasaaradda dokumiinti uga soo baahata, Wasaaradduna waxay diyaar u tahay inay tirakoobto qalabka yaalla Wasaaradda afartii bilba halmar.*

## 24.4 Furitaanka iyo isticmaalka koontooyinka bangiyada

### 24.4.1 SHARCIGA

Qodobbada 42^aad (3) iyo 9^aad (7) ee Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud (Sharci Lr. 17) ee soo baxay 25 Diseembar 2019 wuxuu sheegayaa sida soo socota:

> 42(3) Hay'adaha Dowladda in aysan furi karin koonto bangi maxalli ah ama mid caalami ah iyada oo aan oggolaansho qoraal ah laga haysan Xisaabiyaha Guud.

> 9(7) Wasiirka (Wasiirka Maaliyadda) waa in uu ansixiyo furitaanka xisaab bangi ee hay'adaha Dowladda iyo qaabeynta saxiixa koontoyinka bangi.

## Khaladka

### A. Koonto bangi oo la furay iyadoo aan oggolaansho loo haysan

Intii baaristu socotay waxaan ogaannay in Wasaaradda Dhalinyarada iyo Ciyaaruhu ka furatay koontooyin bangiga Amal iyada oo aan oggolaansho qoraal ah ka haysan Xisaabiyaha Guud iyo walibana uusan ansixin Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.

| TR. | BANGIGA | KOONTO LR. | TIRADA LACAGTA SOO GASHAY US $ | HARAA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1. | Amal Bank | 1012129128 | 206,500.00 | 5.160.00 |
| 2. | Amal Bank | 1013703228 | 8,000.00 | 0.00 |
| 3. | Amal Bank | 1012437869 | 133,560.00 | 0.30 |
| **WADAR** | | | **348,060.00** | **5,160.30** |

**Shaxda 24.5** Furashada koontooyin bangi oo aan hay'addu oggolaansho u haysan

## Talo soo jeedin

Waa in hay'addu ay oggolaansho iyo ansixin ka hesho Xafiiska Xisaabiyaha Guud iyo Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda ka hor inta aan laga furin koonto bangi maxalliama caalami ah.

## Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Wasaaradda Dhallinyarada iyo Ciyaaruhu waa hay'ad ka tirsan hay'adaha Dowladda dalka mar-kasta diyaar u ah in ay fuliso awaamiirta iyo nidaamka iyo shuruucda maaliyadeed ee dalka u yaal. Ka hor Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud (Sharci Lr. 17) ee soo baxay 25 Diseembar 2019 ayey wasaaraddu furatay akoonnada gaarka ah waana ogeysiinaynaa cidda shaqada ku leh.*

# 24.5 Isticmaalka nidaamka maaliyadda dalka (SFIMS) ee ku aaddan lacagaha deeqaha dibedda

### 24.5.1 SHARCIGA

Qodobka 38aad (1) iyo (2) ee Sharciga Maareynta Miisaaniyadda (Sharci Lr. 17) ee soo baxay 25 Diseembar 2019 ayaa sheegaya sida soo socota:

> 38(1) Dhammaan deeqaha hay'ad Dowladeed ka hesho deeq bixiye ama cid kale waa in lagu daro Miisaaniyadda qaranka.
>
> 38(2) Looma oggola hay'ad Dowladeed iyo mid Shirkad ama Wakaalad Dowladdu leedahay toona in ay galaan heshiis ay ku helayaan deeq, taas oo ay ku jiraan deeqaha aan lacagta ahayn oo ka timid deeq bixiye ama shakhsiyaad gaar ah, iyada oo uu Wasiirku (Waasiirka Maaliyadda) la saxiixin.

Sidoo kale, Qodobka 15aad (1) ee Sharciga Maareynta Miisaaniyadda waxa uu leeyahay sida soo socota:

> 15(1) Dhammaan kharashyada hay'adaha Dowladda iyo mashaariicda dibadda laga maal-geliyo waa in lagu oggolaadaa Miisaaniyadda qaranka.

### Khaladaadka

**A. Deeqaha hay'addu dibadda ka heshay oo gaaraya lacag dhan US $348,060.00 oo aan la marin nidaamka maaliyadda dalka**

Intii baaristu socotay waxan ogaannay in Wasaaradda Dhalinyaradu ay fulisay (4) mashruuc ooqiimadoodu gaarayo **US $348,060.00** kuwaas oo aan lagu darin miisaaniyada Qaranka si-doo kalana aan la soo marin nidaamka maareynta xogta maaliyadda dalka.

| TR. | MASHRUUCA | NOOCA MASHRUUCA | LACAGTA LA ISTICMAALAY US $ | UJEEDADDA MASHRUUCA | CIDDA KA MAS'UULKA AH |
|---|---|---|---|---|---|
| 1. | Awareness and Skill Training | Lacag | 206,500.00 | Horumarinta Xirfadda Dhalinyarada | Agaasimaha Guud |
| 2. | UN HABITAT | Lacag | 103,560.00 | Shirar | Agaasimaha Guud |
| 3. | Youth Peer Network | Lacag | 30,000.00 | Shirka Dhalinyarada ee sannadlaha | Agaasimaha Guud |
| 4. | SOS Children | Lacag | 8,000.00 | Shirka Dhalinyarada ee sannadlaha | Agaasimaha Guud |
| **WADAR** | | | **348,060.00** | | |

**Shaxda 24.5** Deeqaha hay'addu dibadda ka heshay oo aan la marin nidaamka maaliyadda dowladda

### Talo soo jeedin

Waa in dhammaan deeqaha hay'addu hesho lagu daraa Miisaaniyadda qaranka sidoo kalana la soo mariyaa nidaamka maareynta xogta maaliyadeed ee dalka.

Waa in dhammaan heshiiyada hay'adda ay gasho oo la xiriira helitaanka deeq uu qeyb ka saxiixaa Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda si waafaqsan sharciga sidoo kalena laga soo dii-waangaliyaa Xafiiska Hantidhawrka Guud.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Wasaaraddu dhallinyarada iyo isboortigu waa hay'ad ka tirsan hay'adaha Dowladda dalka mar-kasta diyaar u ah in ay fuliso awaamiirta iyo nidaamka dalka iyo shuruucda maaliyadeed ee dalka u yaal.*

*Wasaaraddu waxa ay hesho waa wax qabadyo yar yar (activity) oo deeq bixiyaashu soo mari-yaan hay'adda UNFPA, si wadajir ahna ay Wasaaradda iyo UNFPA ugu heshiiyaan activities'ka laqaban doono oo ku xiran dhaqaalaha ay UNFPA soo hesho. Sida rasmiga ah, waxaa Dowladda Federaalka heshiisyadda caalamiga ee Bi-lateral agreement'ka ee deeq bixiyayaasha la saxiixda Wasaaradda Qorshaynta iyo iskaashiga caalamiga ah mana ahan deeq ay wasaaraddu si toos ah u hesho sannad kasta, waxaan talo ku soo jeedinaynaa in ay iska kaashadaan wasaraadda Qorsheynta iyo iskaashiga caalamiga ah iyo Hantidhawrka dalka loona sameeyo siyaasad cad in deeqaha oo dhan loo soo wareejiyo Bangiga Dhexe (Central Bank).*

## 24.5 Dabagalka baarista

### 24.5.1 KHALADAADKA WARBIXIN BAARISEEDKII 2019

Ma jiro dabagal khaladaadka maadaama sannadkan uu yahay sannadkii ugu horeeyay ee lagu sameeyo Baarista u Hoggaansanaanta Sharciga ee Wasaaradda Dhalinyarada iyo Ciyaaraha.



# V. MAAMULKA GOBOLKA BANAADIR

# 25. Maamulka Gobolka Banaadir

## 25.1 Hubinta kharash bixinta

### 25.1.1 SHARCIGA

Sida ay qabaan Qodobbada 31aad (1) iyo 32aad (4) ee Sharci Lr. 17 ee Maaraynta Maaliyadda Guud ee soo baxay 25 Diseembar 2019:

> 31(1) Wax kharash ah lagama bixin karo Miisaaniyadda qaranka, haddii aysan jiirin, qaansheegto ama caddeyn kale oo dheeraad ah oo looga baahan yahay sida ku xusan xeer-nidaamiyaha ama nidaamka xisaabaadku sheegayo.
>
> 32(4) Kharash bixin walba ee la oggolaaday waa in ay ku lifaaqan yihiin dhammaan dukumiintiyada kaabaya sida ku qeexan Xeer-nidaamiyaha Wasiirku soo saaray.

### Hannaanka la isku waafaqsan yahay

Dukumiintiyada caddeymaha way kala duwan yihiin iyadoo ay ku xiran tahay nooca lacag bixinta, waxaana ka mid ah; dalabka iibka, heshiis saxiixan, warqadaha qaansheegashada, alaab-keenidda, guddoonka alaabta, lacag qabashada, iwm.

### Khaladaadka

**A. Kharashaad dhan US $3,281,269.17 oo aan lahayn caddeymo dhammaystiran**

Waxaa baarista lagu ogaaday in la bixiyay lacag dhan **US $3,281,269.17** iyada oo aan lahayn caddeymo ku filan, kharashaadkan ayaa lagu bixiyay hawlo kala duwan ee Gobolka Benadir taas oo lid ku ah sharciga. Arrinkan ayaa sababay in la xaqiijin waayo sax ahaanshaha lacag bixintan.

| TR. | MADAX-XIGE | CIDDA LA SIIYAY | BISHA | LACAGTA US $ | FAAHFAAHIN |
|---|---|---|---|---|---|
| 1. | 132140 | 2020 CA-BPC-027 | 2/10/2020 | 56,000.00 | Ma lahayn xaashida qaansheegadka, lacag-qabashada iyo heshiis saxiixan. |
| **WADAR** | | | | **56,000.00** | |

**Shaxda 25.1.A** Kharashaadka aan lahayn caddeymo ku filan

| TR. | MADAX-XIGE | PAYEE | BISHA | LACAGTA US $ | FAAHFAAHIN |
|---|---|---|---|---|---|
| 1. | 131902 | 2020 CA-BPC-166 | 2/7/2020 | 45,539.00 | Ma lahayn xaashida qaansheegadka, lacag-qabashada iyo heshiis saxiixan. |
| 2. | 131903 | 2020 CA-BPC-166 | 2/7/2020 | 43,333.00 | Ma lahayn xaashida qaansheegadka, lacag-qabashada iyo heshiis saxiixan. |
| 3. | 131905 | 2020 CA-BPC-166 | 2/7/2020 | 38,287.00 | Ma lahayn xaashida qaansheegadka, lacag-qabashada iyo heshiis saxiixan. |
| 4. | 131907 | 2020 CA-BPC-167 | 2/7/2020 | 38,587.50 | Ma lahayn xaashida qaansheegadka iyo lacag-qabashada. |
| **WADAR** | | | | **3,219,179.17** | |

| TR. | MADAX-XIGE | PAYEE | BISHA | LACAGTA US $ | FAAHFAAHIN |
|---|---|---|---|---|---|
| 5. | 132485 | 2020 CA-BPC-167 | 10/11/2020 | 77,175.00 | Ma lahayn xaashida qaansheegadka iyo lacag-qabashada. |
| 6. | 132491 | 2020 CA-BPC-167 | 10/13/2020 | 312,225.00 | Ma lahayn xaashida qaansheegadka iyo lacag-qabashada. |
| 7. | 132461 | 2020 CA-BPC-168 | 6/1/2020 | 1,000,000.00 | Ma lahayn xaashida qaansheegadka iyo lacag-qabashada. |
| 8. | 132462 | 2020 CA-BPC-168 | 6/15/2020 | 200,000.00 | Ma lahayn xaashida qaansheegadka iyo lacag-qabashada. |
| 9. | 132483 | 2020 CA-BPC-168 | 10/28/2020 | 499,206.50 | Ma lahayn xaashida qaansheegadka iyo lacag-qabashada. |
| 10. | 132495 | 2020 CA-BPC-168 | 11/9/2020 | 61,179.00 | Ma lahayn xaashida qaansheegadka iyo lacag-qabashada. |
| 11. | 132500 | 2020 CA-BPC-168 | 11/17/2020 | 357,000.00 | Ma lahayn xaashida qaansheegadka iyo lacag-qabashada. |
| 12. | 132455 | 2020 CA-BPC-169 | 4/8/2020 | 300,000.00 | Ma lahayn xaashida qaansheegadka iyo lacag-qabashada. |
| 13. | 132468 | 2020 CA-BPC-170 | 9/13/2020 | 45,000.00 | Ma lahayn xaashida qaansheegadka iyo lacag-qabashada. |
| 14. | 132484 | 2020 CA-BPC-170 | 10/11/2020 | 80,000.00 | Ma lahayn xaashida qaansheegadka iyo lacag-qabashada. |
| 15. | 132467 | 2020 CA-BPC-109 | 9/9/2020 | 33,375.00 | Ma lahayn xaashida qaansheegadka, lacag-qabashada iyo heshiis saxiixan. |
| 16. | 132479 | 2020 CA-BPC-171 | 10/11/2020 | 88,272.17 | Ma lahayn xaashida qaansheegadka, lacag-qabashada iyo heshiis saxiixan. |
| **WADAR** | | | | **3,219,179.17** | |

**Shaxda 25.1.B** Kharashaadka aan lahayn caddeymo ku filan

| TR. | CIDDA LA SIIYAY | BISHA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|
| 1. | 2020 CA-BPC-204 | Feb 2020 | 6,090.00 |
| **WADAR** | | | **6,090.00** |

**Shaxda 25.2** Kharashaadka safarka ee aan lahayn caddeymo ku filan

## Talo soo jeedin

Waa in dhammaan lacag bixinnada ay ku salaysnaadaan ama lahaadaan caddeymo dhammaystiran, si sax ahna ay u oggolaadaan saraakiisha sare ee mas'uulka ka ah iyo in hawlaha loo guddoomo iyadoo loo eegayo ama la raacayo shuruudo cayiman.

Waa in dhammaan dukumiintiyadda lacag bixinnada lagu tiimbareeyaa "la bixiyay" isla marka lacagahooda la bixiyo si looga hortago in mar kale loo isticmaalo kharash bixin kale.

## Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

Maamulka hay'adda la baaray wax jawaab ah oo qoran kama soo bixin arrintaan.

## 25.2 Maamulka iibka iyo heshiisyada

### 25.2.1 SHARCIGA

Qodobka 27aad (1) iyo (4) ee Sharci Lr. 22 ee Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka oo soo baxay 2016, ayaa sheegaya sidaan:

> 27(1) Dhammaan Hay'adaha qandaraaska iibka ayaa sameynaya qorshaha qandaraaska Iibka ee sannadlaha, ee looga gol leeyahay si lagu gaaro in qiimaha ugu badan ee kharashka guud iyo waxyaabaha kale ee sharcigan. Qorshaha qandaraaska iibsiga wuxuu taageerayaa barnaamijka iyo miisaaniyadda ay ansixisay hay'adda qandaraaska iibka.
>
> 27(4) Qorshaha qandaraaska iibka waxaa la diyaarinayaa sannad walba iyadoo lagu saleynayo miisaaniyadda sannadka Xukuumadda, iyado la xisaabinayo miiisaaniyad sannadeedka Xukuumadda.

### Khaladka

**A. Maqnaanshaha diyaarinta qorshaha iibka sannadka**

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in Maamulka Gobolka Banaadir ayan lahayn qorshe sannadle ah ee iibka sannad maaliyadeedka dhammaaday 31da Diseembar 2020 kaas oo ku salaysan miisaaniyadda qaranka.

### Talo soo jeedin

Waa in Maamulka Gobolka Banaadir yeeshaan qorshe sannadle ah oo ku aaddan iibka kaas oo ku saleysan miisaaniyadda la ansixiyay ee hay'adda.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

Maamulka hay'adda la baaray wax jawaab ah oo qoran kama soo bixin arrintaan.

### 25.2.2 SHARCIGA

Sharci Lr. 17 ee Maareynta Maaliyadda Guud ee Dowladda oo soo baxay 25 Diseembar 2019, Qodobka 38aad (5) wuxuu dhigayaa dhammaan heshiisyada deeqaha hay'adaha dowladda, Maamul Goboleedyada iyo hay'adaha ganacsiga ee dowladda waa in laga diiwaan geliyaa Xafiiska Hantidhawrka Guud.

Intaa waxaa dheer, Qodobka 11aad (c) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee 2019 wuxuu awood u siinayaa Hantidhawrka Guud inuu diiwaangeliyo qandaraasyada iyo heshiisyada ay galaan hay'adaha dowladda. Qodobka 14aad (wax-ka-beddelka Qodobka 84aad) ee Sharciga Iibka Qaranka 2020 wuxuu sheegayaa in dhammaan hay'adaha dawliga ah ay qandaraasyada iyo heshiisyada ka diiwaan-galiyaan XHGQ.

### Khaladka

**A. Heshiisyo aan laga soo diiwaangalin XHGQ oo qiimahoodu gaarayo US $4,744,440.84**

Waxaa baarista lagu ogaaday in heshiisyo qiimahoodu gaarayaan **US $4,744,440.84** aan laga soo diiwaangalin XHGQ. Xafiiska Hantidhawrka Guud waqtigii lagu guda jiray baarista sannadlaha waxaa laga yaabaa in uusan caddeyn karin waxyaabaha heshiisyada ku xusan ee la xiriira wixii hanti ah maadaama aan laga soo diiwaangalin Xafiiska. Xafiiska Hantidhawrka Guud ma sheegi karo in la fuliyay qodobbada heshiiska lagu galay, sidoo kalana in heshiisyadaas ay ku jiraan danaha Dowladda Federaalka Soomaaliya:

| TR. | QANDARAASLAHA | UJEEDDADA | MUDDADA | LACAGTA US $ |
|---|---|---|---|---|
| 1. | 2020 CA-BPC-168 | Dhisme waddo | 6 bilood | 2,445,283.00 |
| 2. | 2020 CA-BPC-168 | Dhisme waddo | Lama sheegin | 1,000,000.00 |
| 3. | 2020 CA-BPC-168 | Dhisme waddo | 2 bilood | 998,413.00 |
| 4. | 2020 CA-BPC-172 | Dib-u-dhis biyo xireen | 17 toddobaad | 300,744.84 |
| 5. | 2020 CA-BPC-173 | Water drainage | 2 sano | *Qiimuhu heshiiska kuma xusna* |
| 6. | 2020 CA-BPC-170 | Daabacaad dokumentiyo | 5 sano | *Qiimuhu heshiiska kuma xusna* |
| 7. | 2020 CA-BPC-174 | Qalab nadaafad | 2 sano | *Qiimuhu heshiiska kuma xusna* |
| 8. | 2020 CA-BPC-109 | Daabacaad dokumentiyo | 2 sano | *Qiimuhu heshiiska kuma xusna* |
| **WADAR** | | | | **4,744,440.84** |

**Shaxda 25.3** Heshiisyada aan laga soo diiwaangelin XHGQ

### Talo soo jeedin
Waa in dhammaan qandaraasyada iyo heshiisyada laga diiwaangaliyaa Xafiiska Hantidhawraha Guud si waafaqsan shuruucda iyo xeerarka.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray
Maamulka hay'adda la baaray wax jawaab ah oo qoran kama soo bixin arrintaan.

## 25.3 Maamulka hantida

### 25.3.1 SHARCIGA
Qodobka 11aad (1) (j) ee Sharciga Maamulka Maaraynta Maaliyadda Guud ee 2019 ayaa dhigaya in Xafiiska Hantidhawrka Guud uu mas'uul ka yahay diiwaangelinta dhammaan sharciyada iyo heshiisyada, diiwaangalinta waarannada (F16), hantida guurtada iyo maguurtadda, kala wareejinta miisaaniyadda, deeqaha, iyo dhacdo dhaqaale kasta oo kale sida ku cad sharcigan.

### Hannaanka la isku waafaqsan yahay
Waxaa jirta siyaasad, hagayaal iyo habraac loo ansixiyay in lagu maamulo hantida (guurto iyo ma-guurto) ee dhammaan hay'adaha kala duwan ee dowladda. Siyaasadda hantidu waa in ay ka kooban tahay xaaladda, isticmaalka, waxqabadka iyo dhaqan-ka-baxa.

Waxaa jira diiwaan guud oo lagu keydiyo hantida dowladda oo ay hayaan hay'adaha kala duwan. Diiwaanka waa in lagu sheego hanti waliba lamberka u gaarka ah, meesha lagu isticmaalo, xaaladda muuqaal ahaaneed IWM.

### Khaladaadka
**A. Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka hantida**

Waxaa baarista lagu ogaaday in Gobolka Benadir aysan lahayn habraacyada iyo siyaasadda lagu maamulo lagu lana socdo hantida.

**B. Diiwaanka hantida oo aan joogto loo cusboonaysiin**

Maamulka hay'adda ayaa ku guul dareystay in ay cusboonaysiiyaan diiwaanka hantida kaas oo ka kooban macluumaadka, lambarka aqoonsiga, qiimaha lagu iibiyay xaaladda hantida IWM.

Hubinta muuqaal ahaaneed ee hantida ayaa lagu ogaaday in hantida hay'addu aysan wada lahayn lambarka aqoonsiga hantida (tag number) kaas oo ah lambar lagu aqoonsado oo gaar u ah si loo hubiyo loona dabagalo.

Intaas waxaa dheer, sida uu qabo Sharciga Maareynta Maaliyadda Dowladda Hantida lagama soo diiwaangalin XHGQ.

**C. La wadaagid la'aan macluumaadka lahaansha gaadiidka**

Intii lagu guda jiray baarista sannadlaha ah Maamulka Gobolka Benadir waxa uu ku kharash gareeyay soo iibsi gaadiid lacag dhan $813,000.00. si walba oo ay ahaataba buugga la haanshaha gaadiidka la soo iibiyay looma soo bandhigin baaris. Sidaa daraadeed ma xaiijin karno in lacagtaa loo isticmaalayay hadafkii loo qorsheeyay.

### Talo soo jeedin

Waa in la hirgaliyaa lana meel mariyaa tilmaamaha iyo siyaasadda dhammaystiran ee maamulka, hubinta iyo ka warbixnta hantida.

Wasaaradda Maaliyadda waa in ay hoggaan ka noqotaa samaynta tilmaamaha iyo habraacyada siyaasadda ee dhamaan hay'adaha oo ay ku jirto Maamulka Gobolka Benadir.

Maamulka Gobolka Benadir ay diyaariyaa diiwaan dhammaystiran ee hantida oo leh tilmaamo cad si loo xaqiijiyo in dhammaan hantida hay'adda lagu diiwaan galiyo diiwaanka, sidoo kalana loo cusboonaysiiyaa xilliyo go'an ama cayiman.

Waa in hay'adda la baaray iyo Wasaaradda Maaliyadda ay hantida hay'adda ku sameeyaan tirakoob waqtiyaysan isla markaana ay cusboonaysiiyaan diiwaanka hantida.

Waa in dhammaan gaadiidka hay'adda ay lahaadaan buugaagta lahaanshiyaha gaadiidka oo ku diiwaan gashan magaca Gobolka Benadir, uuna sarkaalka sare ee mas'uulka ka ah u keydiyo si xafidan.

Waa in dhammaan gaadiidka lagu diiwaan galiyaa diiwaanka hantida oo faahfaahin dheeraad ah leh sida nooca baabuurka, magaca baabuurka, lambarka diiwaan galinta, lambarka caqaayadda (chassis lr.), goobta uu gaariga ku sugan yahay, qiimaha, iyo sarkaalka mas'uulka ka ah.

Maamulka waa in ay la wadaagaan kooxda baarista buugaagta lahaansha dhammaan baabuurta ay soo iibsatay sannadka dib-u-eegista lagu samenayo.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

Maamulka hay'adda la baaray wax jawaab ah oo qoran kama soo bixin arrintaan.

## 25.4 Dabagalka baarista

### 25.4.1 KHALADAADKA WARBIXIN BAARISEEDKII 2019

Shaxdaan hoose waxaa ka muuqda marxaladda khaladaadka baarista sannadkii hore lagu sameeyay hay'adda inta la fuliyay, qayb laga fuliyay ama aan waxba laga fulin.

| TR. | KHALADAADKA | MARXALADDA |
|---|---|---|
| 1. | 35.1.1 Diyaarin la'aanta warbixinta maaliyadeed ee sannadlaha ah | La ma fulin |
| 2. | 35.2.1 Lacagbixin aan lahayn caddaymo dhammeystiran - kharashaadka | La ma fulin |
| 3. | 35.2.2 Lacagbixin aan lahayn caddaymo dhammeystiran - kharashaadka safarka | La ma fulin |
| 4. | 35.3.1 Maqnaanshaha habraaca iyo siyaasadda maamulka hantida | La ma fulin |
| 5. | 35.3.2 Diiwaanka hantida oo aan joogto loo cusboonaysiin | La ma fulin |
| 6. | 35.3.3 Maamulka gaadiidka oo ah mid liita | La ma fulin |
| 4. | 35.4.1 Heshiisyo aan laga soo diiwaangalin XHGQ | La ma fulin |
| 5. | 35.4.2 Heshiisyada gudaha aan lagu qorin afka Soomaaliga | La ma fulin |
| 9. | 35.5.1 Ku-guuldarraysiga fulinta howlaha hantidhawrka gudaha | La ma fulin |

**Shaxda 25.4** Khaladaadka baarista sannadkii 2019

### 25.4.2 KHALADAADKA WARBIXIN BAARISEEDKII 2018

| LR. | KHALADAADKA | MARXALADDA |
|---|---|---|
| 1. | 14.1.1 Ma jirin xisaabaadka sannadka oo la soo gudbiyay si loo baaro | Lama fulin |
| 2. | 14.2.3 Kharashaadka socdaalka oo aan wadan caddeymo ku filan | Lama fulin |
| 3. | 14.2.4 Maamulka Gaadiidka oo ah Mid Liita | Lama fulin |
| 4. | 14.3.1 Heshiisyada oo aan laga soo diiwaan-galin XHG | Lama fulin |
| 5. | 14.4.1 Baarista gudaha lama samayn | Qeyb ayaa la fuliyay |

**Shaxda 25.5** Khaladaadka baarista sannadkii 2018



# VI. SAFAARADAHA

# 1. Safaradda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee Pretoria, Koonfur Afrika

## 1.1 Maamulka dakhliga iyo isla-xisaabtanka

### 1.1.1 SHARCIGA

Sidoo kale, Qodobka 50aad (f) ee Dastuurka Ku-meelgaarka ah ee Soomaaliya ayaa sheegaya in "Dakhli-ururinta oo loo xilsaaro hadba heer xukuumadeedka sida ugu wax-ku-oolsan u fulin karta".

Qodobka 9aad (6) ee Sharciga Maareynta Maaliyada Guud 2019 ayaa sheegaya in Wasiirka Maaliyaddu "soo saaro xeer hoosaadyo, tilmaamo, iyo hagayaal ah fulinta qodobadda sharcigan".

### Khaladka

**A. Xeerka uruurinta dakhliga oo aan jirin**

Intii aan ku guda jiray baarista ayaa la ogaaday in uusan jirin xeer ama habraac ay soo saartay Wasaaradda Maaliyadda oo ku aadan dakhli uruurinta Safaaradaha Dowladda Federaalka Soomaaliya.

### Talo soo jeedin

Wasaaradda Maaliyaddu iyada oo la tashaneysa Wasaaradda Arrimaha Dibadda waa in ay diyaarisaa xeerka dakhli ururinta Safaaradaha, waana in laga ansixiyaa Golaha Xukuumada Federaalka Soomaaliya.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Waxaan caddeyneynaa in aan isticmaalno xeer-hoosaad ay sameeyeen masuuliyiinta Safaaradda kaas oo lagu jaan-gooyay noocyada dakhliga iyo terifka qeexayana nooca howlaha ay Safaaraddu qabato, ayadoo ay sababtu tahay, in uusan sharciga kore jirin markii ay Safaraaddu biloowday u qidmeynta shacabka iyo jaangoynta aruurinta dakhliga.*

*Ayadoo maskaxda lagu hayo xeerka kor ku xusan, ayaan waxaan cadeyneynaa in uusan weli na soo gaarin sharcigaas la sameeyay 2019, ayadoo Safaaradu shaqeyneysay ilaa 2013. Waxaanse xaqiijineynaa in aan sharcigaas u hirgelin doonno siduu yahay marka ugu horreysa ee na loo soo gudbiyo, anagoo weliba ku dhiirra-gelineyna jihooyinka ay quseyso in ay noo soo dedejiyaan soo-gaarsiinta sharcigaas iyo dhamaan xuquuqaha iyo waajibaadka ku xeeran.*

### Jawaabta XHGQ

Mas'uuliyiinta Safaaradda oo uu ugu horeeyo Safiirka waxaan kula talinaynaa in ay raadiyaan/baaraan sidoo kalana akhriyaan shuruucda lagu daabacay Faafinta Rasmiga, Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, 2019, wuxuu beddelay sharci hore oo la ansixiyay 1961 Xeerka Maamulka Maaliyadda Guud.

### 1.1.2 SHARCIGA

Qodobka 27aad (6) ee Sharciga Maareynta Maaliyada Guud, ee 2019 ayaa sheegaya in "dhammaan macaamilada ku saabsan qabashada dakhliga iyo bixinta kharashka waa in la mariyaa nidaam-Xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS)".

Sidoo kale Qodobka 4aad (2) iyo (3) (b) (sh) ee Sharciga Maareynta Maaliyada Guud, ee 2019 ayaa sheegaya sidaan:

> 4(2) Dhammaan dakhliga Dawladda waxaa lagu soo xereynayaa lagana bixinayaa sanduuqa mideysan ee Qaranka taasi oo ka mid ah xeerka qoondada Miisaaniyadda qaranka.
>
> 4(3) Dakhliga Dawladda Federaalka waxa ku jira dhammaan lacagaha ay qabtaan hay'adaha Dawladda kana yimaadda:
>
> (b) Dakhliga Dawladda Federaalka waxa ku jira dhammaan lacagaha ay qabtaan hay'adaha Dawladda kana yimaadda.
>
> (sh) Ilaha kale ee dhaqaale ee lagu qeexo Miisaaniyadda qaranka.

Intaa waxaa dheer, Qodobka 42 (2) ee Sharciga Maareynta Maaliyada Guud, ee 2019 ayaa sheegaya in "dhammaan dakhliga Dawladda lagu soo xareeyo Xisaabta Khasnadda Mideysan ee Bangiga Dhexe ugu badnaan hal maalin shaqo gudaheed, marka la soo uruuriyaba".

## Khaladaadka

### A. Dakhli aan la soo marin Nidaamka Maaliyadda Dalka (SFMIS) sidoo kalana aan lagu soo shubin Khasnadda Dhexe ee Dowladda

Intii lagu guda jiray baarista, waxaa la ogaaday in Safaaradda Soomaaliya ee dalka Koonfur Afrika ay uruurisay dakhli dhan **US $134,183.82 (ZAR 2,196,134.60)** lacagtas oo lagu shubay koonto ka furan Absa Bank (40-8840-7525), lacagtaas oo aan lagu soo shubin Khasnadda Dhexe ee Dowladda (Treasury Single Account).

### B. Dakhliga la uruuriyay oo la isticmaalay

Intii lagu guda jiray baaritaanka ayaa la ogaaday in Safaaradda Soomaaliya ee Koonfur Afrika ay uruurisay dakhli dhan **US $134,183.82 (ZAR 2,196,134.60)** taas oo lagu shubay koontada ay ku leeyihiin bangiga Absa (40-8840-7525). Lacagta la qabtay ayaa laga isticmaalay **US $117,583.48 (ZAR 1,924,443.24).** Si kastaba ha ahaatee, lacagtan laguma wareejin Khasnadda Dhexe ee Dowladda waxaana loo isticmaalay kharash ahaan.

### C. Diiwaannada hawlaha Safaaradda oo aan baaris loo soo gudbin

Waxaa baarista lagu ogaaday in Safaaradda Soomaaliya ee Koonfur Afrika ay leedahay labo (2) koonto bangi oo ka kala furan Net Bank (1147241740) iyo Absa Bank (40-8840-7525). Maamulka Safaaradda xilligii baaristu socotay ma soo bandhigin macluumaadka koontada ka furan Net Bank (1147241740) oo loo isticmaalayey qabashada dakhliga baasaboorrada si loo baaro. Sidaa darteed, Xafiiska Hantidhawrka Guud ma xaqiijin karo macluumaadka lacagta ku jirta kontadaaas.

## Talo soo jeedin

Waa in maamulka Safaaraddu ay hubiyaan in dhammaan dakhliga lagu uruuriyo bangi sidoo kalena loo soo wareejiyaa Sanduuqa Mideysan ee Qaranka ee Bangiga Dhexe ee Dowladda..

Waa in maamulka Safaaraddu ay hubiyaan in dhammaan dakhliga la uruuriyay lagu shubo koonto bangi ay oggolaadeen Wasiirka Maaliyadda iyo Xisaabiyaha Guud kaddibna dakhliga lagu soo wareejiyo Sanduuqa Mideysan ee Qaranka.

Waa in maamulku uusan isticmaalin ilo dhaqaale kasta oo dakhli laga soo uruuriyay, Wasaaradda ku lamaanan iyo Wasaaradda Maaliyaddana la ogeysiiyo si waqtiyaysan.

Safaaraddu waa inay qaado tillaabo ay ku sharciyaynayso koontooyinka bangi iyadoo fasax iyo oggolaansho qoraal ah ka helaysa Xisaabiyaha Guud iyo Wasiirka Maaliyadda.

Waa in maamulka Safaaradda ay isla-xisaabtan ka muujiyaan dakhliga ay Safaaraddu uruuri-say sidoo kalena la hubiyo in hannaan isla-xisaabtan sax ah la sameeyay.

Waa in Wasaaradda Maaliyadda ay uruurinta dakhliga kala wareegto Safaaradaha iyadoo Wasaaraddu ay hirgalinayso nidaam islaxisaabtan oo hufan.

Wasaaradda Maaliyadda waa in ay dakhliga ay uruuriso marisaa nidaamka maaliyadda dalka (SFMIS), dakhligana lagu soo shubo Bangiga Dhexe ee Soomaaliya.

Sidoo kale, waa in Wasaaradda Maaliyadda ay xaqiijisaa in dhammaan Safaaradaha ay sii joogta ah u helaan miisaaniyaddooda iyadoo si rubucle ah (quarterly).

### Jawaabta maamulka safaaradda  la baaray

*Waxaan caddeyneynaa in aysan jirin lacag aan ku shubnay khasnadda Bangiga Dhexe sababtoo ah ma jirto nidaam ay dowladdu u qorsheysay oo ku wajahan soo xaraynta dakhliga Safaaradaha.*

*Sidoo kale waxaan saxaynaa isku-dheellitir la'aan ka timid sida aad iskugu bedesheen lacagta dalka Koonfur Afrika ee Rand-ga iyo tan Dollarka ee Maraykanka. Sababtoo ah [sannadkii 2020] wuxuu sarifka u dhexeyn jiray R13 ilaa R16, halka aad idinku ka soo qaadeen in 12-ka bilood ee sanadkii 2020 uu sarifku ahaa 16.39.  Taas oo idiin soo saartay lacag dhan US $133,747.54 ÷ ZAR 2,196,134.60 = ZAR 16.39. Sidaas awgeed, waxaan caddeyneynaa in aysan wadarta guud ee aad soo saarteen (xisaab ahaan) saxnayn, loona baahan yahay in aad ka qaadataan celceliska (aver-age)–ka u dhexeeya 13 illaa 16, kaas oo ah 14.5.*

*Waxaan caddeyneynaa in ay Safaaraddu qarashka ay qabato u isticmaasho socodsiinta howlaha lagama maarmaanka ah ee Safaaradda, maadaama aysan Dowladda Dhexe usoo dirin Safaarada dhaqaale joogto ah oo dabooli kara baahideeda bil-laha ah.*

*Markii ay howl-wadeenada XHGQ yimaadeen Safaaradda Koonfur Afrika, waxaa dalka ka maqnaa Danjiraha, markii Danjiruhu uu soo laabtay, waxaa dhacday in howl-wadeennada Safaaradda uu haleelay caabuqa COVID-19, taas oo sababtay in Safaaradda la xiro mudo ku siman 20 casho, taas oo adkeysay in lala xiriiro bangiga.*

*Waxaan idinku wargelineynaa in aan soo dhaweyneyno isla markaana hirgelineyno talooyinka Xafiiska XHGQ uu u soo gudbiyey Safaaradda Koonfur Afrika sida ugu macquulsan iyo waqtiga ugu munaasabsan.*

## 1.2 Hubinta kharash bixinta

### 1.2.1 SHARCIGA

Sida ay qabaan Qodobbada 31aad (1) iyo 32aad (4) ee Sharci Lr. 17 ee Maaraynta Maaliyadda Guud ee soo baxay 25 Diseembar 2019:

> 31(1) Wax kharash ah lagama bixin karo Miisaaniyadda qaranka, haddii aysan jiirin, qaansheegto ama caddeyn kale oo dheeraad ah oo looga baahan yahay sida ku xusan xeer-nidaamiyaha ama nidaamka xisaabaadku sheegayo.
>
> 32(4) Kharash bixin walba ee la oggolaaday waa in ay ku lifaaqan yihiin dhammaan dukumiintiyada kaabaya sida ku qeexan Xeer-nidaamiyaha Wasiirku soo saaray.

Dukumiintiyada caddeymaha way kala duwan yihiin iyadoo ay ku xiran tahay nooca lacag bixinta, waxaana ka mid ah; dalabka iibka, heshiis saxiixan, warqadaha qaansheegashada, alaab-keenidda, guddoonka alaabta, lacag qabashada, iwm.

### Khaladka

**A. Kharashaad dhan US $6,779.91 oo aan laheyn caddeymo dhammaystiran**

Intii lagu guda jiray baarista, ayaa la ogaaday in la bixiyay kharash hawl-maalmeed (running cost) oo dhan **US $6,779.91**, kharashkaas oo ka mid ahaa miisaaniyadda dowladda ayaan lahayn ama aan lagu xirin caddeymo dhammaystiran. Faahfaahinta kharashkaan ayaa ku cad shaxda hoose:

| TR. | MADAX-XIGE | CIDDA BIXISAY | CIDDA LA SIIYAY | BISHA | AMOUNT IN USD $ (AS PER ESTIMATED AVERAGE) | FAAHFAAHIN |
|---|---|---|---|---|---|---|
| 1. | 2211, 2213 & 2215 | DFS | Kala duwan | Jan - Dec 2020 | 6, 799.91 | Kharash bixintu malahen qanadaraasyo iyo riid lacag-qabasho |
| **WADAR** | | | | | **6, 799.91** | |

**Shaxda 1.1** Kharashaadka aan lahayn caddeymo ku filan

### Talo soo jeedin

Waa in dhammaan lacag bixinnada ay ku salaysnaadaan ama lahaadaan caddeymo dhammaystiran, si sax ahna ay u oggolaadaan saraakiisha sare ee mas'uulka ka ah iyo in hawlaha loo guddoomo iyadoo loo eegayo ama la raacayo shuruudo cayiman.

Waa in dhammaan dukumiintiyadda lacag bixinnada lagu tiimbareeyaa "la bixiyay" isla marka lacagahooda la bixiyo si looga hortago in mar kale loo isticmaalo kharash bixin kale.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Waxaan caddayneynaa in aan horey u soo gudbiney xisaab-xirkii qeybtii 1[aad] ee miisaaniyaddii 2020, taas oo aan la wadaagnay Wasaaradda Arrimaha Dibadda, isla markaana aan raacsinay dhammaan lifaaqyadii caddaynayey kharash-bixinta 3[dii] bilood ee Janaayo, Feberaayo iyo Maarso, 2020. Sidoo kale waxaan caddaymahaas gacanta ka saarnay howl-wadeennadii na soo booqday, anaga oo ku dirnay e-mail ahaan.*

*Waxaan sidoo kale caddaymahaas ku soo lifaaqeynaa warbixintaan.*

### Jawaabta XHGQ

XHGQ ku ma qancin jawaabta uu bixiyey maamulka safaaradda, khaladkanna sidiisa ayuu u taagan yahay.

## 1.3 Maamulka iibka iyo heshiisyada

### 1.3.1 SHARCIGA

Qodobka 27[aad] (1) iyo (4) ee Sharci Lr. 22 ee Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka oo soo baxay 2016, ayaa sheegaya sidaan:

> 27(1) Dhammaan Hay'adaha qandaraaska iibka ayaa sameynaya qorshaha qandaraaska Iibka ee sannadlaha, ee looga gol leeyahay si lagu gaaro in qiimaha ugu badan ee kharashka guud iyo waxyaabaha kale ee sharcigan. Qorshaha qandaraaska iibsiga wuxuu taageerayaa barnaamijka iyo miisaaniyadda ay ansixisay hay'adda qandaraaska iibka.
>
> 27(4) Qorshaha qandaraaska iibka waxaa la diyaarinayaa sannad walba iyadoo lagu saleynayo miisaaniyadda sannadka Xukuumadda, iyado la xisaabinayo miisaaniyad sannadeedka Xukuumadda.

### Khaladka

**A. Maqnaanshaha diyaarinta qorshaha iibka sannadka**

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in Safaaradda JFS ee Pretoria, Koonfur Afrika aysan lahayn qorshe sannadle ah ee iibka sannad maaliyadeedka dhammaaday 31[da] Diseembar 2020 kaas oo ku salaysan miisaaniyadda qaranka.

### Talo soo jeedin

Waa in Safaaraddu yeelataa qorshe sannadle ah oo ku aaddan iibka kaas oo ku saleysan miisaaniyadda la ansixiyay ee hay'adda.

Waa in maamulka safaaraddu ay hawlaha iibka u raacaan sida uu qeexayo sharciga iyo xeerka iibka qaranka.

### Jawaabta maamulka Safaaradda la baaray

*Waxaan qaadaneynaa talada XHGQ ee ku aaddan sameynta qorshaha sanadlaha ee iibka kaas oo ku salaysan miisaaniyadda qaranka.*

### 1.3.2 SHARCIGA

Sharci Lr. 17 ee Maareynta Maaliyadda Guud ee Dowladda oo soo baxay 25 Diseembar 2019, Qodobka 38[aad] (5) wuxuu dhigayaa dhammaan heshiisyada deeqaha hay'adaha dowladda, Maamul Goboleedyada iyo hay'adaha ganacsiga ee dowladda waa in laga diiwaan geliyaa Xafiiska Hantidhawrka Guud.

Intaa waxaa dheer, Qodobka 11[aad] (c) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee 2019 wuxuu awood u siinayaa Hantidhawrka Guud inuu diiwaangeliyo qandaraasyada iyo heshiisyada ay galaan hay'adaha dowladda. Qodobka 14[aad] (wax-ka-beddelka Qodobka 84[aad]) ee Sharciga Iibka Qaranka 2020 wuxuu sheegayaa in dhammaan hay'adaha dawliga ah ay qandaraasyada iyo heshiisyada ka diiwaan-galiyaan XHGQ.

### Khaladka

**A. Heshiisyada oo aan laga soo diiwaan gelin XHGQ - US $52,351.64**

Heshiisyo qiimahoodu dhan yihiin **US $52,351.64 (ZAR 856,819.00)** ayaan laga soo diiwaan gelin XHGQ, taas oo keentay in aan la caddeyn karin waxyaabaha heshiisyada ku xusan ee la xiriira hantida, maadaama aan laga soo diiwaan gelin XHGQ. Sidoo kale, diiwaan gelin la'aanta waxa ay keentay in XHGQ uusan xaqiijin karin in la fuliyay qodobbada heshiiska lagu galay, iyo in heshiisyadu ay waafaqsan yihiin shuruucda iyo xeer hoosaadyada danaha Soomaaliya. Macluumaadka ayaa ku xusan shaxda hoose:

| NO. TR | QANDARAASLAHA | UJEEDDO | MUDDADA | LACATA - ZAR | LACAGTA - USD $ (QIYAAS) |
|---|---|---|---|---|---|
| 1. | Isabel Jacobs Properties | Kiro guri | 3 years (2018-2020) | 595,800.00 | 36,403.38 |
| 2. | Isabel Jacobs Properties | Kirada guriga safaaradda | 1 year | 259,040.00 | 15,827.34 |
| 3. | Storage Properties Reit LTD | Kiro guri | N/A | 1,979.00 | 120.92 |
| **WADAR** | | | | **856,819.00** | **52,351.64** |

**Shaxda 1.2** Heshiisyada aan laga soo diiwaangelin XHGQ

### Talo soo jeedin
Waa in dhammaan qandaraasyada iyo heshiisyada laga diiwaangaliyaa Xafiiska Hantidhawraha Guud si waafaqsan shuruucda iyo xeerarka.

### Jawaabta maamulka Safaaradda la baaray
*Kirada bil kasta dhismaha Safaaradda laga bixiyey sanadkii 2020 ma ahan xisaabta ku qoran shaxanka kore taas oo macnaheedu yahay in sanadkii 2020 ijaarka iyo korontada Safaaradda Koonfur Afrika ahaa ZAR 45,500 × 12 = ZAR 546,000.00 ayadoo ay warbixintan ku xusan tahay in sanadkiiba ijaarka guriga uu yahay R259,040.00, cadadkaan oo ah mid aad iyo aad uga yar lacagta sanad walba Safaaradu ijaar ahaan u siiso mulkiilaha guriga.*

*Waxaan soo dhaweyneynaa oo qaadneynaa in aan sida ugu dhaqso badan ugu soo gudbin doonno XHGQ heshiisyada aan galno, anaga oo usii marsiineeyna Wasaaradda Arrimaha Dibadda.*

*Waxaa lagama maarmaan ah in aad maskaxda ku haysaan is-bedelka sarifka Doollarka iyo Rand-ga maadaama u uusan maalin walba ahayn mid hal meel taagan, ee uu yahay mid marna kaca marna dhaca. Sidaas awgeed, waa lagama-maarmaan in aad jaan-gooynta sarifka ku saleyso taariikhda markaas la xisaabinayo.*

### Jawaabta XHGQ
XHGQ ku ma qancin jawaabta uu bixiyey maamulka safaaradda, khaladkanna sidiisa ayuu u taagan yahay.

## 1.4 Maamulka hantida

### 1.4.1 SHARCIGA
Qodobka 11aad (1) (j) ee Sharciga Maamulka Maaraynta Maaliyadda Guud ee 2019 ayaa dhigaya in Xafiiska Hantidhawrka Guud uu mas'uul ka yahay diiwaangelinta dhammaan sharciyada iyo heshiisyada, diiwaangalinta waarannada (F16), hantida guurtada iyo maguurtadda, kala wareejinta miisaaniyadda, deeqaha, iyo dhacdo dhaqaale kasta oo kale sida ku cad sharcigan.

### Hannaanka la isku waafaqsan yahay
Waxaa jirta siyaasad, hagayaal iyo habraac loo ansixiyay in lagu maamulo hantida (guurto iyo ma-guurto) ee dhammaan hay'adaha kala duwan ee dowladda. Siyaasadda hantidu waa in ay ka kooban tahay xaaladda, isticmaalka, waxqabadka iyo dhaqan-ka-baxa.

Waxaa jira diiwaan guud oo lagu keydiyo hantida dowladda oo ay hayaan hay'adaha kala duwan. Diiwaanka waa in lagu sheego hanti waliba lamberka u gaarka ah, meesha lagu isticmaalo, xaaladda muuqaal ahaaneed IWM.

### Khaladaadka
**A. Diiwaanka hantida oo aan joogto loo cusboonaysiin**

Maamulka safaaradda ayaa ku guul dareystay in ay cusboonaysiiyaan diiwaanka hantida kaas oo ka kooban macluumaadka, lambarka aqoonsiga, qiimaha lagu iibiyay xaaladda hantida IWM.

Hubinta muuqaal ahaaneed ee hantida ayaa lagu ogaaday in hantida safaaraddu aysan wada lahayn lambarka aqoonsiga hantida (tag number) kaas oo ah lambar lagu aqoonsado oo gaar u ah si loo hubiyo loona dabagalo.

Intaas waxaa dheer, sida uu qabo Sharciga Maareynta Maaliyadda Dowladda Hantida lagama soo diiwaangalin XHGQ.

**B. Buugaagta lahaanshiyaha gaadiidka Safaaradda oo aan la soo bandhigin si loo hubiyo loona baaro**

Maamulka Safaaraddu baarayaasha lama aysan wadaagin buugaagta lahaanshiyaha gaadiidka Safaaradda. Safaaradda waxaa yaalay labo (2) gaari oo la sheegay in Safaaraddu leedahay balse ma jirin wax dukumiinti ah oo caddeynaya in mid ka mid ah gaadiidkaani ku diiwan gashan yahay magaca Safaaradda. Macluumaadka arrintaas ayaa ku xusan shaxda hoose.

| TR. | NOOCA GAARIGA | CIDDA BIXISAY | CAQAAYAD LR. | FAAHFAAHIN |
|---|---|---|---|---|
| 1. | Toyota Fortuner | Ganacsato Hindi ah | N/A | Malaha buugga lahaanshiyaha gaadiidka oo ku diiwaan gashan magaca Safaaradda |

**Shaxda 1.3** Gaadiidka hay'adda la baaray

### Talo soo jeedin

Waa in Maamulka Safaaradda ay diyaariyaan diiwaan dhammaystiran ee hantida oo leh tilmaamo cad si loo xaqiijiyo in dhammaan hantida hay'adda lagu diiwaan galiyo diiwaanka, sidoo kalana loo cusboonaysiiyaa xilliyo go'an ama cayiman.

Waa in Safaaradda la baaray ay hantida ku sameeyaan tirakoob waqtiyaysan isla markaana ay cusboonaysiiyaan diiwaanka hantida.

Waa in dhammaan gaadiidka iyo hantida kale lagu diiwaan geliyaa diiwaanka hantida, laguna qoraa magaca Safaaradda. Waa in gaadiidka lagu daraa diiwaanka hantida ee Wasaaradda Arrimaha Dibedda.

Waa in maamulka Safaaradda ay hantida ka soo diiwan geliyaan Xafiiska Hanatidhawrka Guud si waafaqsan Sharciga Maaraynta Maaliyadda.

### Jawaabta maamulka Safaaradda la baaray

*Waxaan xuseynaa in aan XHGQ u soo gudbinay liiska agabka Safaaradda oo dhamaystiran isla markaana cusbooneeysiisan. Sidaas awgeed, fadlan fiiriya lifaaqa 2aad ee aan soo raacinay warbixinta.*

*Waxay Safaaradda Koonfur Afrika isticmaashaa labo gaari, kuwaas oo ay midna ayadu leedahay (Mercedez-Benz) midka kalana ay isticmaasho laakiin mulkiyaddiisa aysan ayadu lahayn (Toyota Furtuner), baabuurkaan ma heli karno buuggiisaa maadaaama aanan mulkiyaddiisa lahayn, waanse isticmaalnaa oo qura taas oo ay nagu caawiyeen ganacsato South African ah.*

*Waxaan caddeyneynaa in aan dhammaan qaadanay talooyinka XHGQ ee ku aaddan maamulidda iyo diiwaan-gelinta hantida Safaaradda Koonfur Afrika.*

### Jawaabta XHGQ

XHGQ ku ma qancin jawaabta uu bixiyey maamulka safaaradda, khaladkanna sidiisa ayuu u taagan yahay.

## 1.5 Furitaanka iyo isticmaalka koontooyinka bangiyada

### 1.5.1 SHARCIGA

Qodobbada 42aad (3) iyo 9aad (7) ee Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud (Sharci Lr. 17) ee soo baxay 25 Diseembar 2019 wuxuu sheegayaa sida soo socota:

> 42(3) Hay'adaha Dowladda in aysan furi karin koonto bangi maxalli ah ama mid caalami ah iyada oo aan oggolaansho qoraal ah laga haysan Xisaabiyaha Guud.

> 9(7) Wasiirka (Wasiirka Maaliyadda) waa in uu ansixiyo furitaanka xisaab bangi ee hay'adaha Dowladda iyo qaabeynta saxiixa koontoyinka bangi.

## Khaladka

### A. Koonto bangi oo la furay iyadoo aan oggolaansho loo haysan

Maamulka Safaaradda Soomaaliya ee Koonfur Afrika ayaa furtay koontooyin bangiyada Absa Bank iyo Net Bank iyaga oo aan ka heeysan fasax iyo ogalaansho Xisaabiyaha Guud iyo Wasiirka Maaliyadda. Intaa waxaa dheer in bayaanka bangiga (bank statements) ee koontada ka furan Net Bank (1147241740) aan lala wadaagin baarayasha.

| TR. | BANGIGA | KOONTO LR. | TIRADA LACAGTA SOO GASHAY - ZAR | TIRADA LACAGTA SOO GASHAY - US $ | HARAA - ZAR (31/12/20) | HARAA - US $ (31/12/20) |
|---|---|---|---|---|---|---|
| 1. | Absa Bank | 40-8840-7525 | 2,196,134.60 | 134,183.82 | 271,691.36 | 16,600.34 |
| 2. | Net Bank | 1147241740 | | | | |
| **WADAR** | | | **2,196,134.60** | **134,183.82** | **271,691.36** | **16,600.34** |

**Shaxda 1.4** Furashada koontooyin bangi oo aan hay'addu oggolaansho u haysan

## Talo soo jeedin

Waa in maamulka Safaaradda ay koontooyinka Safaaradda u helaan fasax iyo oggolaansho ay waydiisanayaan Xisaabiyaha Guud iyo Wasiirka Maaliyada ka hor inta aysan furan koontooyin bangi oo maxalli ah ama caalami ah.

Waa in dhammaaddan bayaannada bangiyada (bank statements) ee ku furan magaca Safaaradda la soo gudbiyaa si loo baaro.

## Jawaabta maamulka Safaaradda la baaray

*Wuxuu Danjiraha Safaaradda Koonfur Afrika xafiiska la wareegay 29 Janaayo 2020, ayadoo ay markaas furnaayeen dhammaan akoonnada kor ku xusan. Laga bilaabo markii uu xilka la wareegay illaa iyo maanta lama furin akoonno cusub.*

*Waxaa kale oo aan ballan-qaadeynaa in aanan hadda kadib furi doonin akoon cusub ayada oo aanan fasax qoraal ah laga haysan jihooyinka ay quseyso.*

*Waxaan idinla wadaagi doonaa xogta akoonka maqan mar Alle iyo markii bangigu noosoo jawaabo.*

# 1.6 Maamulka shaqaalaha iyo bixinta adeegyada safaaradda

## 1.6.1 SHARCIGA

Qodobka 5aad I (2) iyo (4) ee Sharciga Shaqada ee Arrimaha Dibadda ee 2013 ayaa dhigaya in mas'uuliyadda xog-hayaha 1aad ay tahay:

> 5 I(2) Diiwaangelinta iyo tirakoobka jaalliyadda Soomaaliyeed ee ku nool dalka ay Safaaraddu ka furantahay iyo daryeelkooda.
>
> 5 I(4) La socodka hormuudka iyo waxbarashada ardayda Soomaaliyeed iyo gacan siintooda.

Sidoo kale, Qodobka 5aad II (1), (2), (3) iyo (4) ee Sharciga Shaqada ee Arrimaha Dibadda ee 2013 ayaa dhigaya in mas'uuliyadda xog-hayaha 2aad ay tahay:

5 II(1) Wuxuu qaabilsanyahay tirakoobka, diiwaangelinta iyo xannaanada dhammaan hantida Maguurtada iyo Guurtada ah ee Dowladda ee taal Xafiiiska Safaaradda, Ergada, Qunsuliyadda, guriga Danjiraha, Qunsulka guud iyo aqallada xubnaha kale ee diblomaasiyiinta oo ay dowladdu bixiso kiradooda qalabkana ay leedahay.

5 II(2) Maamulka xisaabaadka lacagta ee safaaradda ama Ergada, kharaj bixinta iyo xisaab celinta bil waiba, isagoo wixii lacag bixin ah la saaxiixaya Danjiraha ama ciddii markaas masuulka ka ah Safaaradda, Ergada ama Qunsuliyadda.

5 II(3) Kormeerka iyo lasocodka howsha shaqaalaha aan joogtada ahayn (local staff); isagoo si gaar ah isha ugu haynaya qorriinkooda, caymiskooda, fasaxyadooda, warbixintooda iyo marka ay shaqadu ka dhamaato siintooda, iyo

5 II(4) Ilaalinta, kaydinta iyo xannaanada dokumentiga, qalabka xafiiska iyo gaadiidka Safaaradda ama Ergada.

## Khaladaadka

### A. Maqnaanshaha gudashada waajibaadkii loo baahnaa

Waxaa baarista lagu ogaaday in Safaaraddu ay ka gaabisay tirakoobka, diiwaan gelinta iyo ka warqabka jaaliyadda Soomaaliyeed ee ku dhaqan dalka Koonfur Afrika iyo dalalka kale ay Safaaradda matasho.

Ka gaabinta tirakoobka, diiwaan gelinta iyo ka warqabka muwaadiniinta Soomaaliyeed oo ay Safaaraddu matasho ayaa sababi kara in lagu dhibtoodo hawlaha caawinta iyo badbaadinta haddii ay xaalad khatar ah wajahaan muwaadiniinta Soomaaliyeed.

Maamulka safaaradda waxa ay ku guuldareysteen in ay tarakoobaan sidoo kalena ay ilaaliyaan dhammaan hantida taalla safaradda.

Waxaa sidoo kale baaritaanka lagu ogaaday in Safaaradda aysan kormeer iyo qiimayn ku samayn shaqaalaha gudaha (ajaanibta) ee Safaaradda ka howlgala gaar ahaan qaabka shaqa siinta, caymiska iyo fasaxyada.

Maamulka Safaaradda ayaan kaydinta dukumintiyada shaqada iyo hantidaba u samayn si hufan oo hagaagsan.

## Talo soo jeedin

Wasaaradda Arrimaha Dibedda oo kaashanaysa Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda waa in ay sida ugu dhow marka warbixintan soo baxdo ay tirakaoob iyo diiwaan gelin ku samaysaa dhammaan muwaadiniinta Soomaaliyeed ee ku dhaqan dalka Koonfur Afrika iyo wadamada kale ay Safaaradda Soomaaliya ee Koonfur Afrika matasho.

Waa in Safaaraddu ay kormeer joogto ah ku samaysaa shaqaalaha gudaha (ajaanibta ah).

## Jawaabta maamulka Safaaradda la baaray

*Waxaan XHGQ la wadaageynaa in ay Masuuliyiinta Safaaradda Soomaaliyeed ee Koonfur Afrika mudooyin kala gedisan ka fariisteen qorshana u sameeyeen sidii loo tiro-koobi lahaa xubnaha jaaliyadda Soomaaliyeed ee ku dhaqan wadankan Koonfur Afrika iyo wadamada deriska la ah. Nasiib darro, wadamada oo aad u waaweyn, una kala fog, ayaa hakisay fulinta qorshe-howleedkaas maadaama aysan Safaaraddu awood dhaqaale u lahayn hirgelinta howshaas.*

*Waxaanse qireynaa in howshaasu tahay mid muhiim u ah Dowladda Soomaaliyeed iyo muwaadiniinteedaba. Hadaba, waxaan ka codsaneynaa jahooyinka ay quseyso in ay naga caawiyaan sidii aan uga mira-dhalin lahayn qabashada waajibkaas.*

*Waxaan fulineynaa talo soo jeedinta XHGQ ee ku aaddan kormeerka joogta ah ee shaqaalaha gudaha, (local staff) taas oo aan hadaba ka howl-galnay.*

## 1.7 Maamulka shaqaalaha iyo xeerka anshaxa

### 1.7.1 HANNAANKA LA ISKU WAAFAQSAN YAHAY

Xeerka anshaxa ee Safaaradda waa siyaasad qeexaysa mabaadii'da iyo hab dhaqanka ay tahay in dhammaan shaqaalaha iyo shaqsiyaadka matalaya safaaradda ay u hoggaansamaan. Xeerka anshaxu wuxuu isku xiraa himilooyinka iyo hadafyada safaaradda iyo hab-dhaqanka laga filaayo shaqaalaha. Xeerarka anshaxu waxa ay goobo shaqo oo badan u yihiin halbeegyada lagu cabiro waxqabadka.

Lahaanshaha xeer anshax oo sal adagi waxay aas-aas u tahay abuuridda hab-dhaqan u suuban u hoggaansaanta shuruucda ee hay'adda. Xeerka anshuxu waxaa uu ku hagaa maamulka hannaanka iyo qiyamka ay tahay in shaqaaluhu ay ilaaaliyaan xilliga shaqada.

### Khaladka

**A. Maqnaanshaha gudashada waajibaadkii loo baahnaa**

Intii lagu guda jiray baarista waxaan ogaannay in uusan jirin xeer anshax oo laga dhaqan geliyay Safaaradda. Si gaar ah waxaan u ogaannay in uusan jirin habraac qoran oo la ansixiyay, oo loo sameeyay in loogu maamulo wax qabadka iyo hab dhaqanka shaqaalaha ama kor loogu qaado dhaqan wanaaggaiyo anshaxa shaqaalaha goobta shaqada.

### Talo soo jeedin

Waa in maamulka Safaaradda ay sida ugu dhow u hirgaliyaan sidoo kalana dhaqan galiyaan xeerka anshaxa iyadoo laga saxiixayo dhammaan shaqaalaha gudaha (local) iyo diblomaasiyiinta ka shaqeeya Safaaradda.

Waa in Wasaaradda Arrimaha Dibedda ay diyaarisaa qaab lagu kor meeraayo dhaqan gelinta xeerarka anshaxa, waana in ay soo saarta warbixin sannadle ah oo ka hadleysa sida xeerka anshaxa loo dhaqangeliyay.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Waxaan soo dhoweyneynaa isla markaana aan qaadaneynaa talooyinka uu noo soo gudbiyey XHGQ ee ku kor ku xusan.*

## 1.8 Kaydka diiwaannada

### 1.8.1 HANNAANKA LA ISKU WAAFAQSAN YAHAY

Heerka Caalamiga ah ee ISO 30300 wuxuu ka hadla Nidaamyada Maareynta Diiwaannada (Management Systems for Records- MSR). Nidaamkaan maareynta diiwanada oo loo isticmaalo in lagu xakameeyo diiwaannada hay'ad ayaa loogu talagalay hay'ad kasta oo doonaysa in ay hirgeliso oo ilaaliso diwaannadeeda si ay kor ugu qaaddo hawlaheeda.

Nidaamku wuxuu dejiyaa ujeeddooyinka loo adeegsanaayo, wuxuuna sharraxaa hannaanka iyo tilmaamaha hirgelintiisa iyadoo la qeexayo doorka maamulka sare ay leeyihiin. Heerarku waxba kama beddelaan hannaanka maamulka diiwaannada hawlaha sida lagu qeexay ISO 15489 balse heerku waxuu sare u qaadaa wadada ay maamulka sare u marayaan maamulka diiwaannada ee heer siyaasadeed iyo qiimaynta khataraha iyadoo laga faa'iidaysanyo tiknoolajiyadda, la sameeynayo baaritaanno joogto ah (routine audit) iyo adeegsiga hababka sare u qaadista joogtada ah.

### Khaladaadka

**A. Maqnaanshaha in la dhiso nidaamka galalka oo sax ah**

Intii lagu guda jiray baarista, waxaan ogaannay in Safaaraddu aysan laheyn nidaam hufan ee diiwaannada maadaama diiwaannada maaliyadeed iyo kuwa maamulka ee Safaaradda aan si hagaagsan loo kaydin.

Majirin galal gaar ah oo qof kasta oo Safaaradda ka hawlgala xogtiisa si gaar ah galkiisa loogu kaydiyo basle Safaaradda waxaa yaalay hal gal oo ay ku jiraan xogta hawlwadeennada Safaaradda inkastoo halkaa gal aysan ku wada dhammaystirnay dhammaan macluumaadka shaqsiga eel aga rabo hawlwadeen walba sida xeerka anshaxa oo saxiixan, fasaxyada, taariikh nololeedka iyo warqadaha magacaabista.

### Talo soo jeedin

Safaaradda Soomaaliya ee Koonfur Afrika waa in ay hagaajisaa nidaamka diiwaannada si dukumintiyada shaqada Safaaradda ay u ahaadaan kuwa xafidan oo xili walba si fudud lagu heli karo.

### Jawaabta maamulka Safaaradda la baaray

*Maamulka Safaaradda Koonfur Afrika wuxuu soo dhaweynayaa talada wax-ku-oolka ah ee hagaajinta nidaamka diiwaannada dukumiintiyada shaqaalaha iyo/ama shaqaalaha Safaraadda, ayadoo xoogga la saari doono xafididdooda iyo dhameystirkooda.*

## 1.9 Warbixin maaliyadeedka sannadka

### 1.9.1 SHARCIGA

Qodobka 45[aad] (2) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Dowladda ee 2019 wuxuu sheegayaa in hay'adaha dawladda iyo dawlad Goboleedyadu ay diyaarinayaan warbixinta maaliyadeed ee sannadlaha ah una gudbinayaan Xisaabiyaha Guud iyo Wasiirka si waafaqsan qaabka iyo waqtiga uu dhigay Xisaabiyaha Guud".

### Khaladka

**A. Diyaarin la'aanta warbixinnada maaliyadeed ee sannadka**

Muddadii baaristu socotay waxaan ogaannay in maamulka Safaaradda Soomaaliya ee ka hawl-gasha dalka Koonfur Afrika aysan diyaarin soona gudbin xisaab xirkii sannadlaha ahaa (warbixin maaliyadeed) si loo baaro.

### Talo soo jeedin

Waa in maamulka Safaaraddu ay si waafaqsan sharciga diyaariyaan warbixinta maaliyadeed ee sannadka una gudbiyaan Xafiiska Xisaabiyaha Guud.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Waxaan ka hawlgalaynaa diyaarinta warbixin-maamliyadeedka sanadlaha ah, anaga oo u gudbin doonnaa dhinaca ay quseyso.*

# 2. Safaaradda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee Ankara, Turkiga

## 2.1 Maamulka dakhliga iyo isla-xisaabtanka

### 2.1.1 SHARCIGA

Qodobka 9aad (6) ee Sharciga Maareynta Maaliyada Guud 2019 ayaa sheegaya in Wasiirka Maaliyaddu "soo saaro xeer hoosaadyo, tilmaamo, iyo hagayaal ah fulinta qodobadda sharcigan".

Sidoo kale, Qodobka 50aad (f) ee Dastuurka Ku-meelgaarka ah ee Soomaaliya ayaa sheegaya in "Dakhli-ururinta oo loo xilsaaro hadba heer xukuumadeedka sida ugu wax-ku-oolsan u fulin karta".

### Khaladka

**A. Xeerka uruurinta dakhliga oo aan jirin**

Intii aan ku guda jiray baarista ayaa la ogaaday in uusan xeerka uruurinta dakhliga Safaaradaha oo jidaynaya noocyada dakhliga iyo terifada muujinaysa caddadka laga qaadayo hawlaha kala duwan oo ay Safaaraddu bixiso.

### Talo soo jeedin

Wasaaradda Maaliyaddu iyada oo la tashaneysa Wasaaradda Arrimaha Dibadda waa in ay diyaarisaa xeerka dakhli ururinta Safaaradaha, waana in laga ansixiyaa Golaha Xukuumada Federaalka Soomaaliya.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Safaaradda Soomaaliya ee Turkiga weli ma soo gaadhin xeerka uruurinta dakhliga. Laakiin marka uu xeerkaasi na soo gaadho, diyaar baanu u nahay in aanu dhaqan gelino.*

*Hadda waxaanu bixinnaa adeegyada muhiimka u ah dadweynaha ee hay'adaha kala duwan ee dalka Turkiga uga baahanyihiin. Waxaanuna tacrifadda ku salaynnay hadba duruufta dadka. Ardayda adeegyada aanu u qabannaa waa wada lacag la'aan.*

### Jawaabta XHGQ

Mas'uuliyiinta Safaaradda oo uu ugu horeeyo Safiirka waxaan kula talinaynaa in ay raadiyaan/baaraan sidoo kalena aqriyaan shuruucda Dalka oo ah hagaha shaqada hay'adaha Dowladda ee ku aaddan u qidmaynta ummadda Soomaaliyeed. Sharcigan hadda aan warbixinta ku xiganay waxaa jiray shuruuc iyo xeerar uu beddelay oo soo baxay 1961 oo lagu dhaqi jiray maaraynta maaliyadda dalka ka hor dhaqan galinta sharciga soo baxay 2019 taas oo caddeyn u ah in uu hore sharci aan kan ahayn oo dhaqangal ah.

### 2.1.2 SHARCIGA

Qodobka 27aad (6) ee Sharciga Maareynta Maaliyada Guud, ee 2019 ayaa sheegaya in "dhammaan macaamilada ku saabsan qabashada dakhliga iyo bixinta kharashka waa in la mariyaa nidaam-Xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS)".

Sidoo kale Qodobka 4aad (2) iyo (3) (b & sh) ee Sharciga Maareynta Maaliyada Guud, ee 2019 ayaa sheegaya sidaan:

> 4(2) Dhammaan dakhliga Dawladda waxaa lagu soo xereynayaa lagana bixinayaa sanduuqa mideysan ee Qaranka taasi oo ka mid ah xeerka qoondada Miisaaniyadda qaranka.
>
> 4(3) Dakhliga Dawladda Federaalka waxa ku jira dhammaan lacagaha ay qabtaan hay'adaha Dawladda kana yimaadda:
>
> b) Dakhliga Dawladda Federaalka waxa ku jira dhammaan lacagaha ay qabtaan hay'adaha Dawladda kana yimaadda.
>
> sh) Ilaha kale ee dhaqaale ee lagu qeexo Miisaaniyadda qaranka.

Intaa waxaa dheer, Qodobka 42 (2) ee Sharciga Maareynta Maaliyada Guud, ee 2019 ayaa sheegaya in "dhammaan dakhliga Dawladda lagu soo xareeyo Xisaabta Khasnadda Mideysan ee Bangiga Dhexe ugu badnaan hal maalin shaqo gudaheed, marka la soo uruuriyaba".

## Khaladka

### A. Dakhli la uruuriyey oo aan lagu soo shubin Khasnadda Dhexe ee Dowladda

Intii lagu guda jiray baarista, waxaa la ogaaday in Safaaradda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee Turkiga ay uruurisay dakhli dhan **US $101,229.77 (TL 703,962.21)** oo ka timid hawlaha qunsuliyada iyo baasoorrada ayaan la marin Nidaamka Maaliyadda Dalka (SFMIS). Sidoo kale dakhligaan ayaa si sharci-darro ah ay Safaaraddu u isticmaashay kharash ahaan.

## Talo soo jeedin

Waa in maamulka ay hubiyaan in dhammaan dakhliga la uruuriyay la soo mariyo Nidaam-Xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS) si waafaqsan sharciga.

Waa in maamulka ay hubiyaan in dhammaan dakhliga la uruuriyay lagu shubo koonto bangi ay oggolaadeen Wasiirka Maaliyadda iyo Xisaabiyaha Guud kadibna dakhliga lagu soo wareejiyo Sanduuqa Mideysan ee Qaranka.

Maamulka Safaaradda waa in uusan isticmaalin dakhliga uu arruuriyay isla markaana waa in uu dakhligaas si waqtiyaysan ugu wargeliyaa Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Wasaaradda Maaliyadda.

Waa in maamulka Safaaradda ay islaxisaabtan ka muujiyaan dakhliga ay Safaaraddu isticmaashay oo aan lagu soo shubin Khasnadda Dhexe ee Dowladda.

Waa in Wasaaradda Maaliyadda ay uruurinta dakhliga kala wareegto Safaaradaha iyadoo Wasaaraddu ay hirgalinayso nidaam islaxisaabtan oo hufan.

Wasaaradda Maaliyadda waa in ay dakhliga ay uruuriso marisaa Nidaamka Xogta Maaliyadda Dalka (SFMIS), dakhligana lagu soo shubo Bangiga Dhexe ee Soomaaliya.

Sidoo kale, waa in Wasaaradda Maaliyadda ay xaqiijisaa in Safaaradaha ay sii joogta ah u helaan miisaaniyaddooda iyadoo si rubucle ah (quarterly) loogu dirayo kharashaadka.

## Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Nidaamka Maareynta Xogta Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS) weli la ma soo gaadhsiin Safaaradda Soomaaliya ee Turkey. Marka nala soo gaadhsiiyo diyaar baanu u nahay in aanu dhaqan gelinno.*

*Maadaama nidaamka SFMIS uusan weli na soo gaadhin, annagu ma aaminsanin in aanu sifo sharci darro ah u isticmaalnay dakhliga Saraafadda soo galay. Sababta oo ah, sida aad ku aragteen galalka xisaabaha ee aanu idiin soo gudbinnay xilliggii aad baadhista ku guda jirteen, galalkaas oo u qaybsanaa dakhli iyo kharash bil waliba gaar u xidhan tahay, ma jirin dakhli aanu qabannay oo aan markhaati qoraal ah lahayn, sidoo kalana ma jirin kharash aanu bixinnay oo aan lahayn qoraal caddaynaya sababta aanu u bixinnay iyo waxa lagu bixiyey.*

*F.G: Sida aad ku sheegteen qodobka 1.2.1 faqraddiisa (t) xaddiga dakhliga iyo lacagta baasaboorrada lagu sameeyey ma waafaqsana xaddiga ama tirada xisaabtii sanadka 2020 ee aan idiin soo gudbinnay xilligii aad ku guda jirteen baadhista maaliyadda Safaaradda. Waxaan idinka rajaynaynaa in aad iska saxdaan tirada lacagta baasaboorrada lagu sameeyey inta aydaan ku darin warbixinta rasmiga ah.*

#### Jawaabta XHGQ

Safaaraddu ma soo gudbin caddeymo muujinya kala duwanashaha iyadoo waliba si qoraal ah loo waydiiyay in ay soo gudbiyaan kala duwanaashaha ay Safaaraddu sheegtay.

## 2.2 Maamulka iibka iyo heshiisyada

### 2.2.1 SHARCIGA

Qodobka 27[aad] (1) iyo (4) ee Sharci Lr. 22 ee Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka oo soo baxay 2016, ayaa sheegaya sidaan:

> 27(1) Dhammaan Hay'adaha qandaraaska iibka ayaa sameynaya qorshaha qandaraaska Iibka ee sannadlaha, ee looga gol leeyahay si lagu gaaro in qiimaha ugu badan ee kharashka guud iyo waxyaabaha kale ee sharcigan. Qorshaha qandaraaska iibsiga wuxuu taageerayaa barnaamijka iyo miisaaniyadda ay ansixisay hay'adda qandaraaska iibka.
>
> 27(4) Qorshaha qandaraaska iibka waxaa la diyaarinayaa sannad walba iyadoo lagu saleynayo miisaaniyadda sannadka Xukuumadda, iyado la xisaabinayo miiisaaniyad sannadeedka Xukuumadda.

Sidoo kale, Qodobka 61[aad] (1) iyo (2) ee Sharciga Iibka Qaranka, 2016 ayaa sheegaya sidaan:

> 61(1) Hay'ad kasta oo Iibin waa in ay dhistaa Waax Iib Qandaraas si waafaqsan Sharcigan.
>
> 61(2) Sarkaalka Xisaabaha ayaa go'aaminaaya inta xubnood ee ka mid noqoneysa Waaxda Qandaraaska Iibka, waana in laga shaqaaleyaa ugu yaraan hal (1) qof oo u tababaran aqoonna u leh Qandaraaska Iibka.

Qodobka 31[aad] (1) (9) ee Sharciga Iibka Qaranka, 2016 uu sheegayo sidaan:

> 31(1) Hay'adda Iibinta Qandaraaska ayaa keydineysa dhammaan dhokumiintiyada la xiriira heshiis kasta ee qandaraas iib iyo habraacyadeeda si waafaqsan xeerarka lagu dabaqi karo ee ku saabsan diiwaangelinta qoraallada Xukuumadda, laakin ugu yaraan dokumiintiyada waa in la hayaa muddo lix (6) sano ah ee soo raacda taariikhda ugu dambeysa ee dhammaadka heshiiska qandaraaska iibka ama laga soo billaabo taariikhda dhammaan la wada diido tartanka dalabka qandaraaska ama la baabi'iyo habraaca, ama sideey xaaladdu noqotaba.
>
> 31(9) Hay'adda Iibka waa in ay soo bandhigtaa:
>
> Warbixinnada iyo dokumiintiyada ay kaydiyaan Hay'adaha Qandaraaska Iibka si waafaqsan Sharcigan waa inay heli karaan markii ay u baahdaan Maamulka, Guddiga La Dagaallanka

Laaluushka, iyo Hantidhawraha Guud si ay u baaraan, Guddiga Baarlammanka uga wakiilka ah kormeerka fulinta shuruucda qaranka iyo xafiis dawladeed kasta ee lagu aaminay mas'uuliyaddaas marka la codsado.

## Khaladaadka

### A. Maqnaanshaha diyaarinta qorshaha iibka sannadka

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in Safaaradda JFS ee Ankara, Turkiga aysan lahayn qorshe sannadle ah ee iibka sannad maaliyadeedka dhammaaday 31[da] Diseembar 2020 kaas oo ku salaysan miisaaniyadda qaranka.

### B. Dukumintiyada iibka Safaaradda oo aan baaris loo soo gudbin

Intii lagu guda jiray baaritaanka, maamulka Safaaradda Soomaaliya ee Dalka Turkiga dukumintiyada iibka Safaaraddu samaysay looma soo gudbin kooxda baarayaasha si ay u baaraan.

## Talo soo jeedin

Waa in Safaaraddu yeelataa qorshe sannadle ah oo ku aaddan iibka kaas oo ku saleysan miisaaniyadda la ansixiyay ee hay'adda.

Waa in Maamulka safaaraddu ay hawlaha iibka u raacaan sida uu qeexayo sharciga iyo xeerka iibka Qaranka.

Waa in Maamulku ay baaris usoo gudbiyaan dhammaan dukumiintiyada iibka iyo adeegga ay sameeyeen.

## Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Safaaraddu sannadkii 2020 ma diyaarin "Qorshaha Iibka Sannadka" duruufo jirey awgood. Laakiin hadda wixii ka dambeeya waanu diyaar doonna. Waadna ku mahadsantihiin talo soo jeedinta wax ku oolka ah.*

*Dukumintiyada iibka joogtada ah ee yaryar ee Safaaraddu samaysay waxay ka mid ahaayeen galalkii aanu idiin soo gudbinnay ee kharashka. Sidoo kale dukumentiyada iibka ee waaweyn inkasta oo aysan badnayn, waxay ka mid ahaayeen galkii heshiiyada ee Danjirihu idiin soo gudbiyey. Markii loo baahdana waa nalalga heli karaa.*

## Jawaabta XHGQ

XHGQ ku ma qancin jawaabta uu bixiyey maamulka safaaradda, khaladkanna sidiisa ayuu u taagan yahay.

### 2.2.2 SHARCIGA

Sharci Lr. 17 ee Maareynta Maaliyadda Guud ee Dowladda oo soo baxay 25 Diseembar 2019, Qodobka 38[aad] (5) wuxuu dhigayaa dhammaan heshiisyada deeqaha hay'adaha dowladda, Maamul Goboleedyada iyo hay'adaha ganacsiga ee dowladda waa in laga diiwaan geliyaa Xafiiska Hantidhawrka Guud.

Intaa waxaa dheer, Qodobka 11[aad] (c) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee 2019 wuxuu awood u siinayaa Hantidhawrka Guud inuu diiwaangeliyo qandaraasyada iyo heshiisyada ay galaan hay'adaha dowladda. Qodobka 14[aad] (wax-ka-beddelka Qodobka 84[aad]) ee Sharciga Iibka Qaranka 2020 wuxuu sheegayaa in dhammaan hay'adaha dawliga ah ay qandaraasyada iyo heshiisyada ka diiwaan-galiyaan XHGQ.

## Khaladka

### A. Heshiisyada oo aan laga soo diiwaan gelin XHGQ - US $15,895.88

Maamulka Safaaradda ayaa baarayaasha la wadaagay sagaal (9) heshiis oo ay Safaaraddu gashay kuwaas oo aan laga soo diiwaan gelin Xafiiska Hantidhawrka Guud (XHGQ), taas oo keentay in aan la caddeyn karin waxyaabaha heshiisyada ku xusan ee la xiriira hantida, maadaama aan laga soo diiwaan gelin XHGQ. Sidoo kale, diiwaan gelin la'aanta waxa ay keentay in XHGQ uusan xaqiijin karin in la fuliyay qodobbada heshiiska lagu galay, iyo in heshiisyadu ay waafaqsan yihiin shuruucda iyo xeer hoosaadyada danaha Soomaaliya. Macluumaadka ayaa ku xusan shaxda hoose:

| TR. | DHINACYADA | TAARIIKHDA | NOOCA HESHIISKA | MUDDADA | QIIMAHA |
|---|---|---|---|---|---|
| 1. | Dowladda Soomaaliya iyo Dowladda Turkiga | 27 Jun 2013 | Iskaashiga Hawlaha Caafimaadka iyo Sayniska | 5 sano | N/A |
| 2. | Dowladda Soomaaliya iyo Dowladda Turkiga | 23 Feb 2016 | Iskaashiga Hawlaha Korontada | 5 Sano | N/A |
| 3. | Wasaaradda Waxbarashada ee Soomaaliya iyo Jaamacadda ATILIM | 18 Apr 2019 | Heshiis Iskaashi Waxbarasho | | N/A |
| 4. | Dowladda Soomaaliya iyo Dowladda Turkiga | 22 Feb 2016 | Iskaashiga Hawlaha Kalluumaysiga, Maalgashiga iyo Ganacsi | | |
| 5. | Dowladda Soomaaliya iyo Dowladda Turkiga | 3 Jun 2016 | Iskaashiga Hawlaha Tamarta iyo Qodista Macdanta | 5 sano | |
| 6. | Dowladda Soomaaliya iyo Dowladda Turkiga | Mar-19 | Isweydaarsi dhulal safaaradeed | N/A | N/A |
| 7. | Dowladda Soomaaliya iyo Dowladda Turkiga | | Sare-u-qaadista Iskaashiga Waxsoosaarka iyo Ganacsiga | | |

**Shaxda 2.1** Heshiisyada aan laga soo diiwaangelin XHGQ

## Talo soo jeedin

Waa in dhammaan qandaraasyada iyo heshiisyada laga diiwaangaliyaa Xafiiska Hantidhawraha Guud si waafaqsan shuruucda iyo xeerarka.

## Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Heshiisyada Safaaraddu gasho iyo kuwa hay'adaha kale ee dawladdu la galaan dhiggooda dalka Turkey, waxaanu u gudbinaa Wasaaradda Arimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ee Soomaaliya. Waxaanu rajaynaynaa in Wasaaradda Arimaha Dibaddu ka diiwaangelisay heshiisyadaa Hantidhawrka Guud, haddii aysan weli idiin soo gudbinna Wasaaradda waydiiya.*

## Jawaabta XHGQ

Dhammaan hay'adaha dowladda oo ay ka mid yihiin Safaaradaha JFS waa in dhammaan heshiisyada ay ka soo diiwaan-geliyaan Xafiiska Hantidhawrka Guud.

## 2.3 Maamulka hantida

### 2.3.1 SHARCIGA

Qodobka 11aad (1) (j) ee Sharciga Maamulka Maaraynta Maaliyadda Guud ee 2019 ayaa dhigaya in Xafiiska Hantidhawrka Guud uu mas'uul ka yahay diiwaangelinta dhammaan sharciyada iyo heshiisyada, diiwaangalinta waarannada (F16), hantida guurtada iyo maguurtadda, kala wareejinta miisaaniyadda, deeqaha, iyo dhacdo dhaqaale kasta oo kale sida ku cad sharcigan.

### Hannaanka la isku waafaqsan yahay

Waxaa jirta siyaasad, hagayaal iyo habraac loo ansixiyay in lagu maamulo hantida (guurto iyo ma-guurto) ee dhammaan hay'adaha kala duwan ee dowladda. Siyaasadda hantidu waa in ay ka kooban tahay xaaladda, isticmaalka, waxqabadka iyo dhaqan-ka-baxa.

Waxaa jira diiwaan guud oo lagu keydiyo hantida dowladda oo ay hayaan hay'adaha kala duwan. Diiwaanka waa in lagu sheego hanti waliba lamberka u gaarka ah, meesha lagu isticmaalo, xaaladda muuqaal ahaaneed IWM.

### Khaladaadka

**A. Diiwaanka hantida oo aan joogto loo cusboonaysiin**

Maamulka safaaradda ayaa ku guul dareystay in ay cusboonaysiiyaan diiwaanka hantida kaas oo ka kooban macluumaadka, lambarka aqoonsiga, qiimaha lagu iibiyay xaaladda hantida IWM.

Hubinta muuqaal ahaaneed ee hantida ayaa lagu ogaaday in hantida safaaraddu aysan wada lahayn lambarka aqoonsiga hantida (tag number) kaas oo ah lambar lagu aqoonsado oo gaar u ah si loo hubiyo loona dabagalo.

Intaas waxaa dheer, sida uu qabo Sharciga Maareynta Maaliyadda Dowladda Hantida lagama soo diiwaangalin XHGQ.

**B. Gaadiidka Safaaradda oo aan ku jirin diiwaanka hantida Wasaaradda Arrimaha Dibedda**

Maamulka Safaaradda baarayaasha lama aysan wadaagin buugaagta lahaanshiyaha gaadiidka Safaaradda. Safaaradda waxaa yaalay 2 gaari oo la sheegay in Safaaraddu leedahay balse ma jirin wax dukumiinti ah oo caddeynaya in gaadiidkaas ay ku diiwan gashan yihiin magaca Safaaradda. Macluumaadka arrintaas ayaa ku xusan shaxda hoose:

| TR. | NOOCA GAARIGA | CIDDA BIXISAY | CAQAAYAD LR. | FAAHFAAHIN |
|---|---|---|---|---|
| 1. | Mercedes Benz | Safaaradda | WDD2120671B092698 | Kuma jiro diiwaanka hantida Wasaaradda Arrimaha Dibedda |
| 2. | Jeep | Safaaradda | 3C4NJDCH5JT342222 | Kuma jiro diiwaanka hantida Wasaaradda Arrimaha Dibedda |

**Shaxda 2.2** Gaadiidka hay'adda la baaray

### Talo soo jeedin

Waa in Maamulka Safaaradda ay diyaariyaan diiwaan dhammaystiran ee hantida oo leh tilmaamo cad si loo xaqiijiyo in dhammaan hantida hay'adda lagu diiwaan galiyo diiwaanka, sidoo kalana loo cusboonaysiiyaa xilliyo go'an ama cayiman.

Waa in dhammaan gaadiidka iyo hantida kale lagu diiwaan geliyaa diiwaanka hantida, laguna qoraa magaca Safaaradda. Waa in gaadiidka lagu daraa diiwaanka hantida ee Wasaaradda Arrimaha Dibedda.

Waa in maamulka Safaaradda ay hantida ka soo diiwan geliyaan Xafiiska Hnatidhawrka Guud si waafaqsan Sharciga Maamulka Maaliyadda.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Hantida Safaaradda mar walba waanu u dirnaa waana ka diiwan gelinnaa Wasaaradda.*

*Waxaan rajaynaynaa in aad Wasaaradda kala xidhiidhaan liiska hantida Safaaradda Soomaaliya ee Turkey ee ugu dambeeyey, gaadiidka Safaaradduna wuu ku jiraa liiska hantida ee aanu mar walba u dirno Wasaaradda Arimaha Dibadda wuxuuna ku diiwaan gashanyahay magaca Safaaradda. Waxaanu halkan idiinku soo lifaaqnay caddaymo labo ah:*

*Liiska Hantida Safaaradda ee ugu dambeeyey ee aanu u dirnay Wasaaradda.*

*Caddaynta diiwaan gelinta labada gaadhi ee Safaaradda oo ay ku caddahay magaca Safaaradda.*

### Jawaabta XHGQ

Safaaradu waa in ay haysaa buugaagta diiwaan-gelinta baabuurta si ay u muujiso lahaanshaha waana in loo diyaariyaa baarita.

Sidoo kale, safaaradda ayaa laga rabaa inay dhammaan hantida safaaradda la wadaagto Wasaaradda Arrimaha Dibadda, Wasaaradda Maaliyadda iyo Xafiiska Hantidhawrka Guud si loo diiwaan geliyo.

## 2.4 Furitaanka iyo isticmaalka koontooyinka bangiyada

### 2.4.1 SHARCIGA

Qodobbada 42aad (3) iyo 9aad (7) ee Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud (Sharci Lr. 17) ee soo baxay 25 Diseembar 2019 wuxuu sheegayaa sida soo socota:

> 42(3) Hay'adaha Dowladda in aysan furi karin koonto bangi maxalli ah ama mid caalami ah iyada oo aan oggolaansho qoraal ah laga haysan Xisaabiyaha Guud.
>
> 9(7) Wasiirka (Wasiirka Maaliyadda) waa in uu ansixiyo furitaanka xisaab bangi ee hay'adaha Dowladda iyo qaabeynta saxiixa koontoyinka bangi.

### Khaladka

**A. Koonto bangi oo la furay iyadoo aan oggolaansho loo haysan**

Maamulka Safaaradda Soomaaliya ee Turkiga ayaa ka furtay koonto bangiga VakıfBank iyaga oo aan ka heeysan fasax iyo ogalaansho Xisaabiyaha Guud iyo Wasiirka Maaliyadda.

| TR. | BANGIGA | KOONTO LR. | LACAGTA SOO GASHAY - LIIRO (TR) | LACAGTA SOO GASHAY - US $ | HARAA - TL (31/12/20) | HARAA - US $ (31/12/20) |
|---|---|---|---|---|---|---|
| 1. | VakıfBank | 158007301686929 | 1,698,376.00 | 199,189.00 | 16,649.73 | 1,952.72 |
| **WADAR** | | | **1,698,376.00** | **199,189** | **16,649.73** | **1,952.72** |

**Shaxda 2.3** Miisaaniyad la kala wareejiyey oggolaansho la'aan

### Talo soo jeedin

Waa in maamulka Safaaradda ay koontooyinka Safaaradda u helaan fasax iyo oggolaansho ay waydiisanayaan Xisaabiyaha Guud iyo Wasiirka Maaliyada ka hor inta aysan furan koontooyin bangi oo maxalli ah ama caalami ah.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Waanu qaadannay talo soo jeedinta qiimaha leh ee aad noo soo jeediseen.*

*Xisaabta Safaaradda markii la furayey way ka horraysey Sharciga Wasaaradda Maaliyadda ee Maaraynta Maaliyadda Guud (Sharci Lr. 17) 25 Diseembar 2019.*

*Sidaas oo tahay, waxaanu rajaynaynaa in Wasaaradda Arimaha Dibaddu ay ka diiwaan gelin doonto Xisaabaha Safaaradda ee hadda jira Xisaabiyaha Guud. Sidoo kalana ka ansixin doonto Wasiirka Maaliyadda sida sharcigu farayo.*

## 2.5 Isticmaalka nidaamka maaliyadda dalka (SFIMS) ee ku aaddan lacagaha deeqaha dibedda

### 2.5.1 SHARCIGA

Qodobka 38[aad] (1) iyo (2) ee Sharciga Maareynta Miisaaniyadda (Sharci Lr. 17) ee soo baxay 25 Diseembar 2019 ayaa sheegaya sida soo socota:

> 38(1) Dhammaan deeqaha hay'ad Dowladeed ka hesho deeq bixiye ama cid kale waa in lagu daro Miisaaniyadda qaranka.
>
> 38(2) Looma oggola hay'ad Dowladeed iyo mid Shirkad ama Wakaalad Dowladdu leedahay toona in ay galaan heshiis ay ku helayaan deeq, taas oo ay ku jiraan deeqaha aan lacagta ahayn oo ka timid deeq bixiye ama shakhsiyaad gaar ah, iyada oo uu Wasiirku (Waasiirka Maaliyadda) la saxiixin.

### Khaladka

**A. Deeqaha hay'addu dibadda ka heshay oo aan la marin nidaamka maaliyadda dowladda**

Intii baaristu socotay ayaan ogaannay in Safaaradda Soomaaliya ay lacag doller ahaan u dhiganta **US $264,000.00** oo Safaaraddu ay ka hay'adda TIKA. Lacagtan deeqda ah ayaan lagu darin miisaaniyadda sannadlaha ah sidoo kalana lama soo marin nidaamka dalka. Heshiiska muujinaya bixinta lacagahan Safaaraddu ma soo bandhigin.

### Talo soo jeedin

Waa in dhammaan deeqaha Safaaraddu hesho lagu daraa Miisaaniyadda qaranka sidoo kalana la soo mariyaa nidaamka maaliyadeed ee dalka.

Waa in dhammaan heshiiyada hay'adda ay gasho oo la xiriira helitaanka deeq uu qeyb ka saxiixaa Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda si waafaqsan sharciga.

### Jawaabta maamulka Safaaradda la baaray

*Diyaar baanu u nahay in aan fulinno talo soo jeedinta Hantidhawrka Guud, marka Sharciga Maareynta Miisaaniyadda Dowladdu na soo gaadhana waanu dhaqan gelin doonnaa.*

*Kaalmada hay'adda TİKA Safaaraddu ka hesho waxaa lagu bixiyaa kirada xafiiska safaaradda, kirada guriga danjiraha iyo kabis gunnooyinka hawlawadeennada Safaaradda qaarkood. Hawladdeennada "ajnabiga ah" ee Turkidda iyo caymiskooda.*

*F.G: Maadaama kaalmada Safaaraddu hay'adda TİKA ka hesho qayb ka mid ah ku salaysantahay lacagta Turkiga ee Lira, waxaa mar walba is beddela sarifka Turkish Lira ee Dollarka. Sidaa darteed, xaddiga lacagta ee ku xusan qodobka 5.1.1 kama turjumayo xaddiga saxda ah ee Safaaraddu ka heshay hay'adda TİKA sanadkii 2020.*

### Jawaabta XHGQ

Maadaama uusan Xafiisku helin heshiiska dhabta ah ee lala saxiixday hay'adda TİKA wuxuu xogtaan ka uruuriyay dukumiintiyaddii ay Saraafaaraddu la wadaagtay intii ay baaristu socotay.

Sidoo kale, safaaraddu ka ma aysan soo jawaabin weydiimo la xiriiray arrinkan oo aan hore ula wadaagnay si qoraal ah.

## 2.6 Maamulka shaqaalaha iyo bixinta adeegyada safaaradda

### 2.6.1 SHARCIGA

Qodobka 3aad (b) (c) iyo 4aad (1) iyo (2) ee Sharciga Shaqada ee Arrimaha Dibadda Lr. 112 ee 2013 ayaa ka hadlaya:

> (b) In qofku uu ka diiwaan gashan yahay Guddiga Qaranka ee Shaqaalaha Dowladda Rayidka ah.
>
> (c) Haddii uusan ka mid ahayn in la diiwaangeliyo.

Qodobka 4aad (1) iyo (2) ee isla sharciga ayaa sheegaya in diblomaasiga dibedda loo beddelayo buuxiyo shuruudahan:

> (1) In uu buuxiyay shuruudaha ka mid noqoshada shaqaalaha Wasaaradda ee kuxusan Qodbka 3aad.
>
> (2) In uu ugu yaraan laba sano ka shaqeeyay xarunta Wasaaradda.

Qodobka 5aad I (2) iyo (4) ee Sharciga Shaqada ee Arrimaha Dibadda ee 2013 ayaa dhigaya in mas'uuliyadda xog-hayaha 1aad ay tahay:

> 5 I(2) Diiwaangelinta iyo tirakoobka jaalliyadda Soomaaliyeed ee ku nool dalka ay Safaaraddu ka furantahay iyo daryeelkooda.
>
> 5 I(4) La socodka hormuudka iyo waxbarashada ardayda Soomaaliyeed iyo gacan siintooda.

Sidoo kale, Qodobka 5aad II (1), (2), (3) iyo (4) ee Sharciga Shaqada ee Arrimaha Dibadda ee 2013 ayaa dhigaya in mas'uuliyadda xog-hayaha 2aad ay tahay:

> 5 II(1) Wuxuu qaabilsanyahay tirakoobka, diiwaangelinta iyo xannaanada dhammaan hantida Maguurtada iyo Guurtada ah ee Dowladda ee taal Xafiiiska Safaaradda, Ergada, Qunsuliyadda, guriga Danjiraha, Qunsulka guud iyo aqallada xubnaha kale ee diblomaasiyiinta oo ay dowladdu bixiso kiradooda qalabkana ay leedahay.
>
> 5 II(2) Maamulka xisaabaadka lacagta ee safaaradda ama Ergada, kharaj bixinta iyo xisaab celinta bil waiba, isagoo wixii lacag bixin ah la saaxiixaya Danjiraha ama ciddii markaas masuulka ka ah Safaaradda, Ergada ama Qunsuliyadda.
>
> 5 II(3) Kormeerka iyo lasocodka howsha shaqaalaha aan joogtada ahayn (local staff); isagoo si gaar ah isha ugu haynaya qorriinkooda, caymiskooda, fasaxyadooda, warbixintooda iyo marka ay shaqadu ka dhamaato siintooda, iyo
>
> 5 II(4) Ilaalinta, kaydinta iyo xannaanada dokumentiga, qalabka xafiiska iyo gaadiidka Safaaradda ama Ergada.

### Khaladaadka

**A. Sharciga Shaqada ee Arrimaha Dibadda oo aan loo hogaansamin**

Intii lagu guda jiray baarista, waxaan soo ogaannay in diblomaasiyiinta loo magaacabay safaaradda aysan buuxin shuruudaha lagu xusay Sharciga Shaqada ee Arrimaha Dibadda.

Waxaan baarista ku ogaannay in ay ka Safaaradda Soomaaliya ee Turkiga ay ka shaqeeyaan 3 diblomaasi oo aan ka diiwaan gashaneen Guddiga Qaranka ee Shaqaalaha Rayidka Dawladda arrinkaasoo aan sharciga waafaqsanayn.

Sidoo kale waxaa jiray 5 diblomaasi oo ka shaqaynayay Safaaradda Soomaaliya ee Turkiga kuwaas oo muddo labo (2) sano ah aan ka shaqayn Xarunta Dhexe ee Wasaaradda Arrimaha Dibedda taas oo lid ku ah sharciga.

### B. Sharciga Shaqada ee Arrimaha Dibadda oo aan loo hogaansamin

Waxaa baarista lagu ogaaday in Safaaraddu ay ka gaabisay tirakoobka, diiwaan gelinta iyo ka warqabka jaaliyadda Soomaaliyeed ee ku dhaqan dalka Turkiga iyo dalalka kale ay Safaaradda matasho.

Ka gaabinta tirakoobka, diiwaan gelinta iyo ka warqabka muwaadiniinta Soomaaliyeed oo ay Safaaraddu matasho ayaa sababi kara in lagu dhibtoodo hawlaha caawinta iyo badbaadinta haddii ay xaalad khatar ah wajahaan muwaadiniinta Soomaaliyeed.

Maamulka Safaaradda Soomaaliya ee dalka Turkiga ayaan si dhammaystiran u caawin ardada Soomaaliyeed ee ku dhaqan dalka Turkiga iyadoo Safaaraddu aysan macluumaad badan ka hayn xaalada ardada Soomaaliya ee ku dhaqan dalka Turkiga iyo dadlalka kale oo ay Safaaraddu matasho.

Intaa waxaa dheer in hawlaha xisaabaadka iyo maamulka maaliyadda oo ah mas'uuliyadda xog-hayaha 2aad Safaardda Soomaaliya ayaa loo dhiibay qof ajinabi ah oo ka hawlgala Safaradda taas oo lid ku ah sarciga.

Maamulka Safaaradda ayaan kaydinta dumintiyada shaqada iyo hantidaba u samayn si hufan oo hagaagsan.

Waxaa sidoo kale baaritaanka lagu ogaaday in Safaaradda aysan kormeer iyo qiimayn ku samayn shaqaalaha gudaha (ajaanibta) ee Safaaradda ka howlgala gaar ahaan qaabka shaqa siinta, caymiska iyo fasaxyada.

## Talo soo jeedin

Waa in Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyadoo la kaashaneysa Guddiga Qaranka Shaqaalaha Rayidka iyo Wasaaradda Shaqada & Arrimaha Bulshada ay hubiso in diblomaansiyiinta loo magacaabayo safaaradaha dibadda ay buuxiyaan shuruudaha sharciga ku xusan.

Maamulka Safaaradda Soomaaliya ee Turkiga iyaga oo kaashanaya Wasaaradda Arrimaha Dibadda waa in ay dib-u-eegis ku sameyso galalka diblomaasiyiinta aan ka diiwaan gashanayn Guddiga Shaqaalaha Rayidka ayna qaaddo tallaabooyinka habboon.

Wasaaradda Arrimaha Dibedda oo kaashanaysa Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadaha waa in ay sida ugu dhow marka warbixintan soo baxdo ay tikaoob iyo diiwaan gelin ku samaysaa dhammaan muwaadiniinta Soomaaliyeed ee ku dhaqan dalka Turkiga iyo wadamada kale ay Safaaradda Soomaaliya ee Turkiga matasho.

Wasaaradda Arrimaha Dibadda, Safaaradda Soomaaliya ee Turkiga iyaga oo la kaashanaya Wasaaradda Waxbarashada, waa in ay abuuraan nidaam ku caawinaya ardayda Soomaaliyeed in ay waxbarashadooda u dhammaystaan si habsami leh.

Waa in sida sharciga uu qabo hawlaha maamulka maaliyadda looga danbeeyaa loona madax baneeyaa xog-hayaha labaad ee Safaraadda.

Waa in Safaaradda ay si haggaagsan u kaydisaa dumintiyada shaqada iyo hantidaba Safaaradda.

Waa in Safaaraddu ay kormeer joogto ah ku samaysaa shaqaalaha gudaha (local) iyo hantida.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Shaqaalaynta iyo shaqo gelinta hawlwadeennada Safaraadda ka shaqeeya way ka baxsantahay masuuliyadda madaxda Safaaradda. Waxaanu rajaynaynaa in arinkan Hantidhawrka Guud kala xidhiidho Wasaaradda Arimaha Dibadda & Iskaashiga Caalamiga ah Waaxda Shaqada iyo Shaqaalaha.*

*Way jiraan hawlwadeenno ka tirsan Wasaaradda Arimaha Dibadda oo aan ka diiwaan gashanayn Guddiga Qaranka ee Shaqaalaha Rayidka Dawladda. Xubnahaa waxaa culaysku ka haystaa dhinaca Guddiga oo ka soo jawaabi waayey codsigii Wasaaradda.*

*Qorshaha lagu diiwaan gelinayo laguna tiro koobayo jaaliyadda waxaanu ka sugaynaa Wasaaradda Arimaha Dibadda Soomaaliya Waaxda Jaaliyadaha. Welina wax qorshe ah iyo awooddii lagu fulin lahaa nagama soo gaadhin Wasaaradda.*

### Jawaabta XHGQ

XHGQ ku ma qancin jawaabta uu bixiyey maamulka safaaradda, khaladkanna sidiisa ayuu u taagan yahay.

## 2.7 Maamulka shaqaalaha iyo xeerka anshaxa

### 2.7.1 HANNAANKA LA ISKU WAAFAQSAN YAHAY

Xeerka anshaxa ee Safaaradda waa siyaasad qeexaysa mabaadii'da iyo hab dhaqanka ay tahay in dhammaan shaqaalaha iyo shaqsiyaadka matalaya safaaradda ay u hoggaansamaan. Xeerka anshaxu wuxuu isku xiraa himilooyinka iyo hadafyada safaaradda iyo hab-dhaqanka laga filaayo shaqaalaha. Xeerarka anshaxu waxa ay goobo shaqo oo badan u yihiin halbeegyada lagu cabbiro waxqabadka.

Lahaanshaha xeer anshax oo sal adagi waxay aas-aas u tahay abuuridda hab-dhaqan u suuban u hoggaansaanta shuruucda ee hay'adda. Xeerka anshuxu waxaa uu ku hagaa maamulka hannaanka iyo qiyamka ay tahay in shaqaaluhu ay ilaaaliyaan xilliga shaqada.

### Khaladka

**A. Xeerka anshaxa oo aan la dhaqan galin**

Intii lagu guda jiray baarista waxaan ogaannay in uusan jirin xeer anshax oo laga dhaqan geliyay Safaaradda. Si gaar ah waxaan u ogaannay in uusan jirin habraac qoran oo la ansixiyay, oo loo sameeyay in loogu maamulo wax qabadka iyo hab dhaqanka shaqaalaha ama kor loogu qaado dhaqan wanaaggaiyo anshaxa shaqaalaha goobta shaqada.

### Talo soo jeedin

Waa in maamulka Safaaradda ay sida ugu dhow u hirgaliyaan sidoo kalana dhaqan galiyaan xeerka anshaxa iyadoo laga saxiixayo dhammaan shaqaalaha gudaha (local) iyo diblomaasiyiinta ka shaqeeya Safaaradda.

Waa in Wasaaradda Arrimaha Dibedda ay diyaarisaa qaab lagu kor meeraayo dhaqan gelinta xeerarka anshaxa, waana in ay soo saarta warbixin sannadle ah oo ka hadleysa sida xeerka anshaxa loo dhaqangeliyay.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Xeerka Anshaxu weli nama soo gaadhin, marka uu na soo gaadhana waanu ku dhaqmi doonnaa.*

### Jawaabta XHGQ

XHGQ ku ma qancin jawaabta uu bixiyey maamulka safaaradda, khaladkanna sidiisa ayuu u taagan yahay.

## 2.8 Warbixin maaliyadeedka sannadka

### 2.8.1 SHARCIGA

Qodobka 45$^{aad}$ (2) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Dowladda ee 2019 wuxuu sheegayaa in hay'adaha dawladda iyo dawlad Goboleedyadu ay diyaarinayaan warbixinta maaliyadeed ee sannadlaha ah una gudbinayaan Xisaabiyaha Guud iyo Wasiirka si waafaqsan qaabka iyo waqtiga uu dhigay Xisaabiyaha Guud".

### Khaladka

**A. Diyaarin la'aanta warbixinnada maaliyadeed ee sannadka**

Muddadii baaristu socotay waxaan ogaannay in maamulka Safaaradda Soomaaliya ee ka hawl-gasha dalka Turkiga aysan diyaarin soona gudbin xisaab xirkii sannadlaha ahaa (warbix-in maaliyadeed) si loo baaro.

### Talo soo jeedin

Waa in maamulka Safaaraddu ay si waafaqsan sharciga diyaariyaan warbixinta maaliyadeed ee sannadka una gudbiyaan Xafiiska Xisaabiyaha Guud.

### Jawaabta maamulka Safaaradda la baaray

*Maadaama Sharciga Maareynta Maaliyadda Dawladdu ee 2019 uusan weli na soo gaadhin, Sa-faaraddu waxay diri jirtey xisaab celinta hadba wixii "Running Cost" uga yimaadda Wasaaradda Maaliyadda.*

*Laakiin marka uu na soo gaadho Sharciga Maareynta Maaliyadda ee Dawladdu waan dhaqan gelin doonnaa. Warbixinta Maaliyadeed ee Sanadkana waanu u gudbin doonnaa Xafiiska Xisaabiyaha Guud.*

*F.G. Sanadkii 2020 waxaa na soo gaadhay 3 bilood oo kharash ka Safaaradda ah "Running Cost", waxaana aan na soo gaadhin oo naga maqan 9 bilood.*

### Jawaabta XHGQ

XHGQ ku ma qancin jawaabta uu bixiyey maamulka safaaradda, khaladkanna sidiisa ayuu u taagan yahay.

# 3. Safaaradda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee Kampala, Uganda

## 3.1 Maamulka dakhliga iyo isla-xisaabtanka

### 3.1.1 SHARCIGA

Qodobka 9aad (6) ee Sharciga Maareynta Maaliyada Guud 2019 ayaa sheegaya in Wasiirka Maaliyaddu "soo saaro xeer hoosaadyo, tilmaamo, iyo hagayaal ah fulinta qodobadda shar-cigan".

Sidoo kale, Qodobka 50aad (f) ee Dastuurka Ku-meelgaarka ah ee Soomaaliya ayaa sheegaya in "Dakhli-ururinta oo loo xilsaaro hadba heer xukuumadeedka sida ugu wax-ku-oolsan u fulin karta".

### Khaladka

**A. Xeerka uruurinta dakhliga oo aan jirin**

Intii aan ku guda jiray baarista ayaa la ogaaday in uusan xeerka uruurinta dakhliga Safaaradaha oo jidaynaya noocyada dakhliga iyo terifada muujinaysa caddadka laga qaadayo hawlaha kala duwan oo ay Safaaraddu bixiso.

### Talo soo jeedin

Wasaaradda Maaliyadda iyada oo la tashaneysa Wasaaradda Arrimaha Dibadda waa in ay diyaarisaa xeerka dakhli ururinta Safaaradaha, waana in lagu ansixiyaa si ugu dhow uguna kooban waqti ahaan.

Wasaaradda Arrimaha Dibadda waa in ay xeerka la ansixiyay la wadaagtaa Safaaradda Soomaaliya ee Uganda si loo hirgeliyo, sidoo kalana Safaaraddu waa in aysan qaadin dakhli dheeri ah oo aan ahayn kuwa uu tilmaamayo xeerka.

### Jawaabta maamulka Safaaradda la baaray

*Sida aad sheegteen ma jirto xeerka uruurinta dakhliga Safaaradaha oo jidaynaya noocyada dakhliga iyo tariifada, laakiin Safaaradu waxay muujisay dadaal arintaas ku saabsan waana la wadaagtay kooxda baarista. Sida talooyinka xafiiksa Hantidhawrka soo gudbiyey waxaan ka sugi doonnaa Wasaaradda Arrimha Dibadda marka ay ansaxiso xeerka dakhli uruurinta Safa-aradaha.*

### 3.1.2 SHARCIGA

Qodobka 27aad (6) ee Sharciga Maareynta Maaliyada Guud, ee 2019 ayaa sheegaya in "dham-maan macaamilada ku saabsan qabashada dakhliga iyo bixinta kharashka waa in la mariyaa nidaam-Xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS)".

Sidoo kale Qodobka 4aad (2) iyo (3) (b & sh) ee Sharciga Maareynta Maaliyada Guud, ee 2019 ayaa sheegaya sidaan:

4(2) Dhammaan dakhliga Dawladda waxaa lagu soo xereynayaa lagana bixinayaa sanduuqa mideysan ee Qaranka taasi oo ka mid ah xeerka qoondada Miisaaniyadda qaranka.

4(3) Dakhliga Dawladda Federaalka waxa ku jira dhammaan lacagaha ay qabtaan hay'adaha Dawladda kana yimaadda:

b) Dakhliga Dawladda Federaalka waxa ku jira dhammaan lacagaha ay qabtaan hay'adaha Dawladda kana yimaadda.

sh) Ilaha kale ee dhaqaale ee lagu qeexo Miisaaniyadda qaranka.

Intaa waxaa dheer, Qodobka 42 (2) ee Sharciga Maareynta Maaliyada Guud, ee 2019 ayaa sheegaya in "dhammaan dakhliga Dawladda lagu soo xareeyo Xisaabta Khasnadda Mideysan ee Bangiga Dhexe ugu badnaan hal maalin shaqo gudaheed, marka la soo uruuriyaba".

### Khaladka

**A. Dakhli dhan US $59,112.21 oo aan la soo marin Nidaamka Maaliyadda Dalka (SFMIS)**

Intii lagu guda jiray baarista, waxaa la ogaaday in Safaaradda Soomaaliya ee Dalka Uganda ay uruurisay dakhli dhan **US $59,112.21** iyadoo lacagta aysan marin nidaamka maaliyadda Dalka (SFMIS) sidoo kalana safaaraddu ayaa dakhligan u isticmaashay kharash ahaan.

### Talo soo jeedin

Waa in maamulka ay hubiyaan dhammaan dakhliga la uruuriyay in la soo mariyo Nidaam Xisaabeedka Maareynta Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS) si waafaqsan sharciga.

Waa in maamulka ay hubiyaan in dhammaan dakhliga la uruuriyay lagu shubo koonto bangi ay oggolaadeen Wasiirka Maaliyadda iyo Xisaabiyaha Guud kadibna dakhliga lagu soo wareejiyo Bangiga Dhexe ee Dowladda.

Waa in maamulka Safaaradda ay islaxisaabtan ka muujiyaan dakhliga ay Safaaraddu isticmaashay oo aan lagu soo shubin Khasnadda Dhexe ee Dowladda.

Waa in Wasaaradda Maaliyadda ay uruurinta dakhliga kala wareegto Safaaradaha iyadoo Wasaaraddu ay hirgalinayso nidaam isla-xisaabtan hufan.

Sidoo kale, Wasaaradda Maaliyadda waa in dakhliga ay uruuriso marisaa Nidaam Xisaabeedka Maareynta Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS), dakhligana lagu soo shubo Bangiga Dhexe ee Dowladda.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Ma jirin cid la wadaagtay Safaarada JFS ee Uganda Nidaam Xisaabeedka Maareeynta Maaliyada Somaaliyeed SFMIS). Safaaraddu waxay leedahay koonto bangi ku furan magaca Safaaradda.*

*Lacagta Safaarada uruurisay sanadkii 2020 oo dhan $144,603.06 waxay ka kala timid dhammaan howlaha khunsuliyada sida Baasaboorada iyo Gudbiyaha.*

- *Lacagta samaynta baasaboorada ku baxday waa $85,490.85 rasiidyada waxaan u gudbinney baarayaasha Xafiiska Hantidharwka Qaranka.*
- *Lacagta soo hartay oo dhan $59,112.21 waxay ku baxday sida hoos ku qoran;*

*Lacagta ay Safaaradu aruurisay waxay ku baxday; mushaaraadka shaqaalaha gudaha, qarashka hawl-maalmeedka Safaaradda (running costs), gunno diblomasiyiinta, uqaybsanayasha iyo shaqaalaha waaxda baasaboradda, kiradda hoyga Danjiraha, Dayactir qayb kamida dhismaha Safaaradda.*

*Waxaa xusid mudan in Safaaradda aynan helin qarashka howl maalmeedka (Running costs) 9 bil oo ka mida sanadkii 2020.*

*Sidoo kale waxaan halkaan ku cadaynaynaa in dakhliga Safaaradu uruuriso uu ku filnayn baahida Safaarada.*

*Safaaradu waxay halkan ku cadaynaydaa in dhammaan kharashaadkaas baxay ay la socdaan caddaymihii loo baahnaa iyadoo ay ku cadyihiin waxa loo isticmaalay lalana wadaagtay baarayashii ka socday Xafiiska Hantidhawrka Qaranka.*

## 3.2 Maamulka iibka iyo heshiisyada

### 3.2.1 SHARCIGA

Qodobka 27aad (1) iyo (4) ee Sharci Lr. 22 ee Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka oo soo baxay 2016, ayaa sheegaya sidaan:

> 27(1) Dhammaan Hay'adaha qandaraaska iibka ayaa sameynaya qorshaha qandaraaska Iibka ee sannadlaha, ee looga gol leeyahay si lagu gaaro in qiimaha ugu badan ee kharashka guud iyo waxyaabaha kale ee sharcigan. Qorshaha qandaraaska iibsiga wuxuu taageerayaa barnaamijka iyo miisaaniyadda ay ansixisay hay'adda qandaraaska iibka.
>
> 27(4) Qorshaha qandaraaska iibka waxaa la diyaarinayaa sannad walba iyadoo lagu saleynayo miisaaniyadda sannadka Xukuumadda, iyado la xisaabinayo miiisaaniyad sannadeedka Xukuumadda.

### Khaladka

**A. Maqnaanshaha diyaarinta qorshaha iibka sannadka**

Intii lagu guda jiray baarista ayaa waxaa la ogaaday in Safaaradda JFS ee Kampala, Uganda aysan lahayn qorshe sannadle ah ee iibka sannad maaliyadeedka dhammaaday 31da Diseembar 2020 kaas oo ku salaysan miisaaniyadda qaranka.

### Talo soo jeedin

Waa in Safaaraddu yeelataa qorshe sannadle ah oo ku aaddan iibka kaas oo ku saleysan miisaaniyadda la ansixiyay ee hay'adda.

Waa in maamulka safaaraddu ay hawlaha iibka u raacaan sida uu qeexayo sharciga iyo Xeerka Iibka Qaranka.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Waa qaaddanay talo soo jeedinta Xafiiska Hantidhorka Qaran, waana diyaari doonaa qorshaha iibka Qarabka.*

## 3.3 Furitaanka iyo isticmaalka koontooyinka bangiyada

### 3.3.1 SHARCIGA

Qodobbada 42aad (3) iyo 9aad (7) ee Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud (Sharci Lr. 17) ee soo baxay 25 Diseembar 2019 wuxuu sheegayaa sida soo socota:

> 42(3) Hay'adaha Dowladda in aysan furi karin koonto bangi maxalli ah ama mid caalami ah iyada oo aan oggolaansho qoraal ah laga haysan Xisaabiyaha Guud.
>
> 9(7) Wasiirka (Wasiirka Maaliyadda) waa in uu ansixiyo furitaanka xisaab bangi ee hay'adaha Dowladda iyo qaabeynta saxiixa koontoyinka bangi.

### Khaladka

**A. Koonto bangi oo la furay iyadoo aan oggolaansho loo haysan**

Intii aan ku guda jirnay baarista ayaa waxaan ogaannay in maamulka Safaaradda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee Uganda ka furteen koontooyin bangiyada Tropical Bank Ltd iyo Absa Bank iyaga oo aan ka heeysan fasax iyo ogalaansho Xisaabiyaha Guud iyo Wasiirka Maaliyadda.

| TR. | BANGIGA | KOONTO LR. | LACAGTA - UGX | LACAGTA - US $ | HARAA - UGX | HARAA - US $ |
|---|---|---|---|---|---|---|
| 1. | Tropical Bank Ltd | 00-10245362 | 28,720.00 | | UGX 28,720.00 | |
| 2. | Absa Bank Ltd | 001-0245397 | | 13,135.00 | | US $318.06 |

**Shaxda 3.2** Miisaaniyad la kala wareejiyey oggolaansho la'aan

### Talo soo jeedin

Waa in maamulka Safaaradda ay koontooyinka Safaaradda u helaan fasax iyo oggolaansho ay waydiisanayaan Xisaabiyaha Guud iyo Wasiirka Maaliyada ka hor inta aysan furan koontooyin bangi oo maxalli ah ama caalami ah.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Ma jirin wax ogaysiin ah oo Safaaradda ka soo gaaray Xafiiska Xisaabiyaha Guud iyo Wasaaradda Maaliyadda oo ku saabsan Sharciga Lr. 17 ee soo baxay 25 Diseembar 2019. Waxa aan qa-addannay dhammaan talooyinkii muhiimka ahaa ee Xafiiska Hantidhawrka Qaranka noo soo jeediyey.*

## 3.4 Maamulka shaqaalaha iyo bixinta adeegyada safaaradda

### 3.4.1 SHARCIGA

Qodobka 4aad (1) ee isla sharciga ayaa sheegaya in diblomaasiga dibedda loo beddelayo buux-iyo shuruudahan:

> 4(1) In uu buuxiyay shuruudaha ka mid noqoshada shaqaalaha Wasaaradda ee kuxusan Qodbka 3aad.

Qodobka 5aad I (2) ee Sharciga Shaqada ee Arrimaha Dibadda ee 2013 ayaa dhigaya in mas'uuli-yadda xog-hayaha 1aad ay tahay:

> 5 I(2) Diiwaangelinta iyo tirakoobka jaalliyadda Soomaaliyeed ee ku nool dalka ay Safa-araddu ka furantahay iyo daryeelkooda.

Sidoo kale, Qodobka 5aad II (2) iyo (3) ee Sharciga Shaqada ee Arrimaha Dibadda ee 2013 ayaa dhigaya in mas'uuliyadda xog-hayaha 2aad ay tahay:

> 5 II(2) Maamulka xisaabaadka lacagta ee safaaradda ama Ergada, kharaj bixinta iyo xisaab celinta bil waiba, isagoo wixii lacag bixin ah la saaxiixaya Danjiraha ama ciddii markaas masuulka ka ah Safaaradda, Ergada ama Qunsuliyadda.

5 II(3) Kormeerka iyo lasocodka howsha shaqaalaha aan joogtada ahayn (local staff); isagoo si gaar ah isha ugu haynaya qorriinkooda, caymiskooda, fasaxyadooda, warbixintooda iyo marka ay shaqadu ka dhamaato siintooda.

### Khaladaadka

**A. Sharciga Shaqada ee Arrimaha Dibadda oo aan loo hogaansamin**

Intii lagu guda jiray baarista, waxaan ogaannay in diblomaasiyiinta loo magaacabay safaaradda aysan buuxin shuruudaha lagu xusay Sharciga Shaqada ee Arrimaha Dibadda.

Intaa waxaa dheer in sharciga uu kaliya qorayo Xoghaye 1aad iyo Xoghate 2aad, balse waxaan soo aragnay Xoghaye 3aad oo ku magacaaban safaaradda taas oo aan waafaqsanayn Sharciga Shaqada ee Arrimaha Dibadda.

**B. Maqnaanshaha gudashada waajibaadka loo baahan yahay**

Waxaa baarista lagu ogaaday in Safaaraddu ay ka gaabisay tirakoobka, diiwaan gelinta iyo ka warqabka jaaliyadda Soomaaliyeed ee ku dhaqan dalka Uganda.

Ka gaabinta tirakoobka, diiwaan gelinta iyo ka warqabka muwaadiniinta Soomaaliyeed oo ay Safaaraddu matasho ayaa sababi kara in lagu dhibtoodo hawlaha caawinta iyo badbaadinta haddii ay xaalad khatar ah wajahaan muwaadiniinta Soomaaliyeed.

### Talo soo jeedin

Wasaaradda Arrimaha Dibadda waa in aysan magacaabin diblomaasi xilkiisa aan sharci ahaan ku jirin Sharciga Shaqada ee Arrimaha Dibadda.

Wasaaradda Arrimaha Dibedda oo kaashanaysa Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda waa in ay sida ugu dhow marka warbixintan soo baxdo ay tirakaoob iyo diiwaan gelin ku samaysaa dhammaan muwaadiniinta Soomaaliyeed ee ku dhaqan dalka Uganda.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray

*Diblomasiyiinta ka howlgala Safaaradda qaar badan ayaa buuxiyey shuruudaha sida uu qabo sharciga shaqada ee Arrimaha Dibaddaee 2013 qodobka 4aad (2) ee sheeagaya diblomaasiga dibadda loo beddelayo in uu ugu yaraan laba sano ka shaqeeyo xarunta Wasaaradda. Sida aad ku taliseen Wasaaradda Arrimaha Dibada ayaan ka sugaynaa habka ama nidaamka tirakoobka iyo diiwaangelinta muwadiniinta.*

## 3.5 Maamulka shaqaalaha iyo xeerka anshaxa

### 3.5.1 HANNAANKA LA ISKU WAAFAQSAN YAHAY

Xeerka anshaxa ee safaaradda waa siyaasad qeexaysa mabaadii'da iyo hab dhaqanka ay tahay in dhammaan shaqaalaha iyo shaqsiyaadka matalaya safaaradda ay u hogaansamaan. Xeerka anshaxu wuxuu isku xiraa himilooyinka iyo hadafyada safaaradda iyo hab-dhaqanka laga filaayo shaqaalaha. Xeerarka anshaxu waxa ay goobo shaqo oo badan u yihiin halbeegyada lagu cabiro waxqabadka.

Lahaanshaha xeer anshax oo sal adagi waxay aas-aas u tahay abuuridda hab-dhaqan u suuban u hoggaansaanta shuruucda ee hay'adda. Xeerka anshuxu waxaa uu ku hagaa maamulka hannaanka iyo qiyamka ay tahay in shaqaaluhu ay ilaaaliyaan xilliga shaqada.

### Khaladka

**A. Xeerka anshaxa oo aan la dhaqan galin**

Intii lagu guda jiray baarista waxaan ogaannay in uusan jirin xeer anshax oo laga dhaqan geliyay Safaaradda. Si gaar ah waxaan u ogaannay in uusan jirin habraac qoran oo la ansixiyay, oo loo sameeyay in loogu maamulo wax qabadka iyo hab dhaqanka shaqaalaha ama kor loogu qaado dhaqan wanaaggaiyo anshaxa shaqaalaha goobta shaqada.

### Talo soo jeedin
Waa in maamulka Safaaradda ay sida ugu dhow u hirgaliyaan sidoo kalana dhaqan galiyaan xeerka anshaxa iyadoo laga saxiixayo dhammaan shaqaalaha gudaha (local) iyo diblomaasiyiinta ka shaqeeya Safaaradda waqtiga ugu dhaw uguna habboon.

Waa in Wasaaradda Arrimaha Dibedda ay diyaarisaa qaab lagu kor meeraayo dhaqan gelinta xeerarka anshaxa, waana in ay soo saarta warbixin sannadle ah oo ka hadleysa sida xeerka anshaxa loo dhaqangeliyay.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray
*Waxa aan qaaddannay dhammaan talo jeedinta Xafiiska Hantidhawrka Qaranka waxaan Wsaarada Arrimha Dibadda ka sugeynaa qaabka dhaqan gelinta xeerka anshaxa.*

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray
*Howshaas waan saxaynaa sida ugu dhakhsaha bandan waana hagaajinaynaa nidaamka diiwaanka Safaaradda, waana la wadaagi doonnaa Xafiiksa Hantidhorka Qaranka.*

## 3.6 Warbixin maaliyadeedka sannadka

### 3.6.1. SHARCIGA
Qodobka 45[aad] (2) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Dowladda ee 2019 wuxuu sheegayaa in hay'adaha dawladda iyo dawlad Goboleedyadu ay diyaarinayaan warbixinta maaliyadeed ee sannadlaha ah una gudbinayaan Xisaabiyaha Guud iyo Wasiirka si waafaqsan qaabka iyo waqtiga uu dhigay Xisaabiyaha Guud".

### Khaladka
**A. Diyaarin la'aanta warbixinnada maaliyadeed ee sannadka**

Muddadii baaristu socotay waxaan ogaannay in maamulka Safaaradda Soomaaliya ee ka hawl-gasha dalka Uganda aysan diyaarin soona gudbin xisaab xirkii sannadlaha ahaa (warbixin maaliyadeed) si loo baaro.

### Talo soo jeedin
Waa in maamulka Safaaraddu ay si waafaqsan sharciga diyaariyaan warbixinta maaliyadeed ee sannadka una gudbiyaan Xafiiska Xisaabiyaha Guud.

### Jawaabta maamulka hay'adda la baaray
*Safaarada ma jirin cid la wadaagtay sharciga warbixin maaliyadeed ee sanaddka, Qodobka 45[aad] (2). Waxaan Wasaaradda Arrimaha Dibadda u gudbinnay warbixin Maaliyadeedka 3-dii bil kaliya ee aan ka helnay Wasaaradda Maaliyada ee loogu talagalay in lagu bixiyo qarashka howl maalmeedka Safaaradda (Running Cost), mana helin wax ogaysiin ah oo sheegaya in nuqul kale loo gudbiyo Xafiiska Xisaabiyaha Guud.*

# Gunaanad

**Sida ku cad Sharciga Xafiiska Hantidhawrka Guud, 1972 iyo Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, 2019 Xafiiska Hantidhawrka Guud wuxuu awood buuxda u leeyahay in uu baarista u hoggaansanaanta sharciga ku fuliyo dhammaan hay'adaha Dowliga ah. Sidaas darteed, XHGQ wuxuu baarista u xushay 25 hay'adood iyo 3 safaaradood; kuwaas oo isugu jira Wasaarado iyo Hay'adaha kale ee qoondada ku leh miisaaniyadda Dowladda, waxaana la baaray waxyaabaha hoos ku xusan (Subject Matters):**

1. Hubinta kharashaadka;
2. Maamulka iibka iyo heshiisyada;
3. Furashada koontooyinka bangiyada;
4. Deeqaha dibadda oo lagu maamulo nidaamka maaliyadda dalka;
5. Diiwaangalinta iyo bixinta shatiyada hubka shakhsiyaadka iyo shirkadaha amniga ee gaarka loo leeyahay;
6. Maamulka shaqaalaha iyo fulinta adeegyada ee safaaradaha;
7. Maamulka dakhliga iyo isla-xisaabtanka;
8. Maamulka hantida;
9. Maamulka canshuur-dhaafka; iyo
10. Maamulka mushaaraadka.

Waxyaabaha baarista lagu sameeyay ee kor lagu xusay waxaa lagu qiimeeyay u hoggaansanaanta qodobbada sharciga ah ee ku xusan warbixinta, macluumaadkaas oo faahfaahsanna waxaa laga heli karaa warbixinta guud iyo waxyaabaha la baaray (Subject Matters). Caddeymaha la helay ama la ogaaday intii baaristu socotay waxay ku filan yihiin kuna habboon yihiin in aan gunaanad ka gaaro waxyaabaha la baaray in aysan u hoggaansanayn dhammaan qodobbada sharciga iyo Hannaanka la isku waafaqsan yahay.

Qadarin,



**Md. Maxamed M. Cali "Afgooye"**
Hantidhawraha Guud, JFS

Nofeembar, 2021

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Hantidhawrka Guud
Muqdisho, Soomaaliya

oag@oag.gov.so / www.oag.gov.so